

QIIMAHA: ETB 13.85
ISBN: 978-99944-2-110-7

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA BUUGA ARDAYGA FASALKA 7aad


JDFI WW



# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA

## FASALKA 7aad




Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada



## Daryeelka haboon ee Buuga Ardayga

Buugani waa hantida dugsigaaga si haboon u daryeel, ha u geysan waxyeelo hana xoorin buugan.

Waa kuwan 10 siyaabood oo kaa caawin karra daryeelista buugan:-

1. Buuga ku jaldiyee walxo adag sida bacda balaastigada jaraa'idka duugaaha ama wargeysyada oo kale.
2. Buuga dhig had iyo jeer meel qalalan oo nadif ah.
3. Xaqiiji iney gacmahaaga yihiin nadiif marka aad isticmaalayso buugan.
4. Waxba ha ku qorin jaldiga kore iyo gudaha hoose ee boggaga buuga.
5. Astaynta buuga bogagiisa u isticmaal jeex waraaq ah ama callamad-xadhig yar.
6. (Bataatan), mar naba ha ka jeexin buuga wax sawir ah ama waraaq ah.
7. Hadii ay jeexanto waraaq ka mida ah boggaga buuga fadlan isku dhaji adiga oo isticmaalaya xabag/koolo.
8. Si taxadar ku jiro buuga u geli boorsada
9. Si taxadar ku jiro u maaree marka aad cid kale u dhiibuyso/u gudbinayso buuga
10. Isticmaalka ugu horeeya ee buuga cusub fadlan u/jiifi dhinaca bogiisa dambe, islamarkaana markiiba fur dhawer bog adigoo si tartiib-tartiib ah u kala qabanaya boggaga. Taasina waxay jaldiga buuga u horseedi doontaa xaalad wanaagson.

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA
## FASALKA 7aad

**Qraha Buuga:**
**Maxamed Faarax Cabdulaahi**
**Xuseen Bille**

**Tafatirayaasha :**

**Deeq Axmed**
**Maxamed Cabdi Rooble**

**Jamhuuriyda Dimuqraadiga Federaalaka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada**

**Laxmi Publications**

## Mahadnaq

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka ,-J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska , Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya,Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero  dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa.Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No.ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay.Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare. Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare liyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobar iyo kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka dimuqraadiyada | 1 |
| Cutubka 2: | Saraynta Sharciga | 19 |
| Cutubka 3: | Sinnaanta | 32 |
| Cutubka 4: | Caddaalada | 41 |
| Cutubka 5: | Wadaniyada | 58 |
| Cutubka 6: | Masuuliyada | 69 |
| Cutubka 7: | Dhaqan Hawl-Karnimo | 80 |
| Cutubka 8: | Isku-Filnaanshaha | 91 |
| Cutubka 9: | Kaydsashada | 99 |
| Cutubka 10: | Ka Qayb Galka Fir-fircoon Ee Bulshada | 107 |
| Cutubka 11: | Baadi Goobka Xikmada Aqoonta | 117 |

CUTUBKA 1

# NIDAAMKA DIMUQRAADIYADA

## Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Qeexaan mabaadii'da Aasaasiga ah ee dimuqraadiyada.
- Taxaan/liisgareeyaan xuquuqaha aadamiga shakhsi ahaaneed iyo kuwa wadar ahaan.
- Kala saaraan hawlaha dawlada Federaalka iyo kuwa degaamada.
- Fahmaan qaab-dhismeedka iyo awoodaha qaybaha dawlada.
- Gartaan faa'iidada uu leeyahay isku-dulqaadashada wada noolaashuhu.
- Gartaan Dawlada Itoobiya waxyabaaha ay Afrika u qabatay.

## 1.1. Mabaadii'da Nidaamka Diimuqraadiga

### 1.1.1. Tartan siyaasadeed oo xor ah

- Waa maxay muhiimada ay leedahay awooda siyaasadeed ee tartanka xorta ah?

Tartanka doorashooyinka Madaxa banaan ee xorta ahi waa mid ka mid ah mabaadii'da Aasaasiga ah ee dimuqraadiyada.Doorashooyinka dhawrkii sanaba mar la qabto waxay la xidhiidhaan habka xisbiyada badan ee nidaamka dimuqraadiyada ah. Doorashadan waa nidaam dimuqraadiyadeed oo mas'uuliyiinta xafiisyada kala duwan ee dawlada loogu doorto boosaska mas'uuliyadeed mudo cayiman marka la joogaba. Iyaga oo raacaya nidaamka muwaadiniintu waxay doortaan cidda wakiilka u noqonaysa, islamarkaana hogaaminaysa.

Doorashooyinka loo adeegsado ujeedooyinkan aynu soo tilmaanay waa kuwa ku sifoobay xoriyad kana madaxbanaan madmadaw iyo musuq-maasuq, cadaalad ah siinayana fursada dadka sharciga ah ee mutaystay in la doorto. Doorashooyinka xorta ah waxay u baahanyihiin in ay si buuxda uga qaybqaataan muwaadiniinta dalku. Ka qaybqaadashada doorashadu waa fursad muwaadiniintu ay ku muujinayaan xuquuqdooda, islamarkaana kuna gutaan mas'uuliyada muwaadin ahaan saaran. Waa xuquuqda qofka muwaadinka ah ku ogolaado in la hogaamiyo islamarkaana ku doorto ama la doorto cidda hogaaminaysa.

Mas'uuliyiinta ay bulshadu soo wakiilatay waxay ku shaqaynayaan ama ay ku qasban yihiin in ay ku dhaqmaan sharciga, awoodoodana waxaa xaddidi kara sharciga u yaala dalka. Awooddana masuuliyadeed waxaa lagula kala wareegaa doorasho si nabadgalyo leh loo qabtay islamarkaana dhawr kii sanaba mar la

qabto . Tanina waxay astaan muhiim ah u tahay saraynta sharciga ama sharcigu inuu wax walba ka sarreeyo.

## Hawl-galka 1aad

Si kooban uga Jawaaba su'aalahan.

1. Tartanka siyaasadeed ee xorta ah muxuu u noqdey mid ka mid ah mabaadii'da nidaamka dimuqraadiyadeed?
2. Maxaa loogu baahdey in la sameeyo tartan siyaasadeed oo xor ah?maxayse tahey faa'iidadiisu?

### 1.1.2. Saraynta Sharciga

- Maxaynu ka wadnaa marka aynu leenahay sareenta sharciga?
- Maxay tahay sababta loo leeyahay saraynta sharcigu waa mid udub-dhexaad u ah nidaamka dimuqraadiyada?

Nidaamka dimuqraadigu waxyaabaha uu ku caan baxay waxaa ka mid ah saraynta sharciga. Nidaamka diimuqraadiga, dawlada dastuuriga ah ayaa hogaamisa geedi-socodka arimaha siyaasadaha. Xaaladahan, wakiilada bulshada iyo muwaadiniintuba waxay ku noolyihiin, islamarkaana u dhaqmaan kolba sida uu dhigayo sharciga dalka u yaala.

Xildhibaanada ama mas'uuliyiinta xafiisyada kala duwan ee dawladu waxay ku shaqeeyaan ama ku xidhan yihiin sharciga . Sida sharcigu dhigayo oo kali ah ayey ku qasban yihiin in ay ku shaqeeyaan, islamarkaana u adeegsadaan awood xileedka uu sharcigu siiyey.Sidoo kale Waxay leeyihiin awoodo dhammaystiran oo sharcigu xadeeyey. Awooddahana waxaa lagula kala wareegaa doorasho nabadgalyo ah oo dhawrkii sanaba mar la qabto .

Doorashooyinkan madaxa banaan ayaa waxay tahay astaan laf-dhabar u ah saraynta sharciga. Muwaadiniinta dhexdooda iyada oo aan laga abuurin wax kala duwaanaasho ah shayga lagu sugo sinaanasho iyo midnimada muwaadiniinta oo dhan ayaa waxaa la yidhaahdaa saraynta sharciga.

## Hawl-galka 2aad

1. Sheeg islamarkaana faahfaahiya laba tusaale oo qeexaya saraynta sharciga.
2. Sharaxaad ka bixiya,waxtarka uu leeyahay taabagalka saraynta sharciga

### 1.1.3 Cadcadaanta iyo La xisaabtanka

Nidaamka dimuqraadiyada ah qodobka saddexaad ee aas'aaska u ah waa xubnaha bulshadu doorato ama dawladu magacawdo ee masuuliyiinta ah shaqooyinka ay qabtaan waa in ay noqdaan kuwo cad-cad islamarkaana si ay masuuliyadi ku dheehan tahay ay uga soo baxaan xilkii iyo waajibaadkii saarnaa ,islamarkaana waa in ay si cad bulshadu u aragto.

Sidaa darteed,

1. Hogaaminta iyo hawlaha ay fulinayaan masuuliyiintu dhammaantood waa in ay bulshada u caddaadaan. Maadaama

ay bulshada u adeegayaan awooda masuuliyadeed ee la siiyey in ay danahooda gaar ahaaneed ku fushadaan waa mamnuuc. Awoodahooda masuuliyadeed haddii ay si aan habboonayn u isticmaalaan islamarkaana lagu helo ama lagu qabto waxaa si toos ah loo horkeenayaa sharciga. Haddii dambi ay galaana waa la dacweyn karaa waana lagu ciqaabi karaa.

2. Iyada oo lagu salaynayo qodobka cad-caddaanta,bulshada waa in la wargaliyaa talaabo kasta oo ay dawladu qaaadayso iyo xaqiiqda dhabta ee uu ku suganyahay dalku.Siday doontaba ha ahaatee, waxaa jirta xogo ka reeban in la ogaado.

Faa'iidada ay leedahay cadcadaantu waa bulshada oo ku kalsoonaata dawladooda.Sababtuna waxay Tahay dadku waxay noqonayaan kuwo markasta qiimeeya hawlaha dawladu ay wado.Dhinaca kale markaaney jirin Cadcadaan oo bulshadu hawlaha dawladu fulinayso haddii ayna ka warhaynin waxaa dhici karta in ay bulshadu awoodi weydo in ay ogaato sababaha dawladu shaqada u fulinayso ama kaalinta ay ku leedahay fulinta hawlahaas. Sidaa daraadeed, haddii xataa dawladu si haboon mas'uuliyada ay bulshada u hayso uga soo baxdo haddii ayna ka warhaynin waxaa ay dawladu samaynayso waxaa lumaysa kalsoonida ama aaminsanaanta bulshadu aaminsan tahay dawlada. Guud ahaan muwaadiniinta dalka oo dhan oo ay ka mid yihiin mas'uuliinta dawladu hawlaha ay fulinayaani waa in ay noqdaan hawlo cad-caddaansho ku dheehan yahay islamarkaana ay diyaar u noqdaan mas'uuliyada hawlaha ay qabanayaan.

### Hawl-galka 3aad

Si kooban uga jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Qodobada cad-caddaanshaha mas'uuliyad qaadida waxyaabaha muujinaya labo ka mid ah tilmaama.
2. Waa maxay waxtarka ay leedahay dhaqangalinta cad-caddaanshaha iyo mas'uuliyadu?
3. cad-caddaanshaha iyo mas'uuliyadu waa tiir ka mid ah tiirasha nidaamka dimuqraadiada.waayo?ka wada hadla.

### 1.1.4. Codka Aqlabiyada iyo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay

Waa Maxay macnaha Codka Aqlabiyada iyo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay?

Tiirka kale ee nidaamka dimuqraadiyadu waa Codka Aqlabiyada iyo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay.kuwa lagu qoray nidaamka dimuqraadiyadeed waxaa ka mid ah:-

b) wada hadal furan

t) iswaydaarasashada fikradaha

j) Dood

x) ku xalinta khilaafaadka si nabadgelyo ah

Sidaa daraadeed markasta suurta gal ma aha khilaafaadka in laguma xaliyo heshiis qoraal ah oo lakala saxeexdo,ee waxa laysku hayo waxaa lagu go'aminkaraa iyadoo loo codeeyo.

Nidaamka dimuqraadiyada ah inta badan go'aanada waxaa gaadha codka dadka intiisa badan ama go'aan ka bulshada inteeda badani taageersantahay. Fikradaha ama aragtida ay soo

jeediyaan, islamarkaana ay tageeraan bulshada inteeda badan ama xubnaha kooxda inta badan ayaa la qaadanayaa ama la raacayaa.

Marka ay arintan oo kale timaado waxaa jiraya dad ama xubno ka tirsan koox oo tiro ahaan aad u yar oo laga yaabo in ay ka soo horjeedaan ama aan raacsanayn go'aanka bulshada ama xubnaha kooxdu intooda badani taageersanyihiin. Laakiin iyaga oo tixgalinaya aragtida tirada badan ee bulshada ama xubnaha kooxda adeecaya, hadana, go'aankaasi waa in uuna noqonin mid ku xadgudbaya xuquuqda iyo xoriyada dadka laga tirada badanyahay iyada oo loo danaynayo tirada badan .

Si uuna u dhicin xadgudubkaasi, waxaa lagama maarmaan ah in nidaam iyo qorshe ama diyaargaraw cadaalad ku dhisan la adeegsado sidaas daraadeed, xuquuqaha asaasiga ah ee kooxaha laga tirada badanyahay loo illaalino ama la dhawro, adeeg wafaqsan xuquuqdoodana waa in la siiyo islamarkaana codkooda ayaa la maqli ama la tixgalin.

## Hawl-galka 4aad

Si kooban uga jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Sharaxaad ka bixi codka aqlabiyada tusaale la taabankarona ka sheeg.
2. Waa maxay faa'iidada ay leedahay dhaqangalinta tiirka xukunka codka aqlabiyada?
3. Codka Aqlabiyada iyo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay wa tiir ka mid ah tiirasha nidaamka dimuqraadiyada.maxaa loo yidhi.waayo?

Ardey,waxaan kor ku soo sheegnay Afar tiir oo ah tiirasha ugu muhiimsan ee nidaamka dimuqraadiyada.waxaan rajaynaynaa Afartan tusaale inay kaa caawinayaan sidaad si fiican ugu fahmi lahayd tiirashaas.waxaa lagaa rabaa inaad si degan u akhrisid kana jawaabtidna su'aalaha ku xiga Tusaalayaasha.

### Arrinta 1aad

Wuxuu warbixin ku sheegay Komishanka ka hortaga musuq-maasuqa in Shirkadi ay gashey musuq-maasuq balaadhan,maamul xumo, si xuna ula dhaqantay shaqaalaheedii.Markii uu Komishinku ku sameeyey baadhitaana wuxuu helay cadeemo la taabankaro oo ah ku takrifalid awoodeed,taasoo ay galeen maamulka shirkadaas. Ka dibna waa la xidhxidhay.

### Arrinta 2aad

Joornaaliiste ka mid ah shaqaalaha wargayska la yidhaahdo ayaa wuxuu helay xog ku saabsanxafiis dawladeed oo ay Saraakiisha xafiiskku in ay xaqiraan xuquuqda shaqaalahooda.Wariyuhu wuxuu isku dayey inuu ka helo saraakiisha xog dhab ah,laakiin way diideen in ay warbixin siiyaan wariyaha waxayna u sheegeen in aaney waxba ka galin.

### Arrinta 3aad

Deegaan ahaan doorashadii sanadkii 2000 TI waxaa ka qayb qaatey xisbiyo siyaasadeed oo badan.Dadkuna waxay doorteen si madaxbanaan cida ay rabeen.

### Arrinta 4^aad

Shacabka degan xaafad ayaa waxay iska ururiyeen lacag si ay u helaan laydh(Koronto) iyo Biyo. Sidaa daraadeed lacagtey ururiyeen waxay noqotey mid ku filan hal mashruuc oo kaliya.Shacabkii xaafadu waxay go'aansadeen in ay mashruuc sanadkan hirgaliyaan ka kalena sanadka dambe hirgaliyaan.Inkastooy si qoto dheer leh uga wada hadleen,lakiin kumay heshiin mashruuca ugu horeeya ee sanadkan hore la hirgalinayo midka uu noqonayo,ma ka biyaha mise ka korontada?ka dib waxay isla garteen in ay u codeeyaan.waxayna ahaayeen 520 qof, codayntii ayaa 130 waxay tageereen in mashruuca Biyaha sanadkan laga dhigo,Halka 390 qofna ay u codeeyeen in mashruuca Korontada la soo horaysiiyo.Iyadoo la eegayo codkii badnaa ayaa waxaa laysku raacey in Korontada sanadkan la hirgaliyo.

### HAWL-GAL KOOXEED

Idinkoo u adeegsanaya ama ka tixraacaya Arrintaska sare ka wada shaqeeya su'aalahan soo socda.

(B) mikasta u dooro tiirka uu ka hadlayo ee nidaamka dimuqraadiyadeed ee hore aan uga soo hadalney

(T) Midkasta oo aad u dooratey, ma sideedaa loogu dhaqmaa mise waa la xaqiraa.

Si noocma ah?

(J) Hadii aad u malaynaysid in la xaqiray tiirasha nidaamka dimuqraadiyadeed. maxaad sameen kari lahayd?

## 1.2. Xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyadeed.

### 1.2.1. Xuquuqaha aadamaha ee shakhsiga.

- Xuquuqaha aadamaha ee shakhsiga kuwa lagu tilmaamo labo ka mid ah sheeg?

Xuquuqaha bini aadanimo ee shakhsiga waxaa ka mid ah kuwan hoos ku xusan;

(B) Xuquuqda in la noolaado

Qofka bini' aadamka ah inta uuna raadsanin xuquuqaha iyo xoriyadahooda kale ka hor waa in uu marka hore noolaado isaga oo xor ah. In uu qofku noolaado isaga oo xor ah waa xuquuqda koobaad ee asaaska ah sababta loo leeyahay waa sidan;

Noloshu waa wax mudo kali ah jirta ma aha wax kolba sida aad rabto u lunta ama u timaada ama loo helo. Ilaahay ka sakow ma jirto cid kale oo nolol (naf) ku siin karina kaama qaadi karto. Si kastaba ha ahaatee nolosha shakhsigu waa shayga sharafta iyo qiimaha ugu sareeya qofka siisa.

Hase yeeshee, waxaa sharcigu mamnuucay falalka ama fal dambiyeedyada ay ka mid yihiin;

- In dadka kale naftooda ama xaqa ay u leeyihiin in ay u noolaadaan, si ula kac ah loogu xadgudbo.
- In faldanbiyeed khatar ama aad u daran bulshada lagula kaco.

Falalkan oo kale waxay sabab u noqon karaan in qofka ku kaca uu ku waayo xaqa uu u leeyahay in uu noolaado. Sababta oo ah faldambiyeedyada qaarkood waxaa laga yaabaa in ay sabab u noqdaan in qofka la yimid xukun dil ah lagu xakumo.

(T) Xaqa qofku u leeyahay in uu xubnihiisa dhaawacyada soo gaadhi kara ka ilaashada.

Xuquuqdani waa mid ka soo asaasantay xaqa qofku u leeyahay in uu noolaado. Haddii la daryeelo xaqa qofku u leeyahay in uu noolaado laakiin aan la daryeelin xubnaha wax macna ah ma yeelanayso. Isaga oo cubnihiisa falal halis galinaya lagula kacayo qof ogolaanaya ma jiro. Sidaa darteed, nolol aan lahayn dhib iyo waxyeelo xubnaha qofka bini' aadamka soo gaadha ayuu u baahan yahay. Guud ahaan qof kasta oo bini aadam ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu helo nabadgalyo si uu u noolaado islamrkaana xubnihiisa u helo xoriyad uu ku daryeelo maadaama xubnuhu lagama maar-maan u yihiin jiritaanka qofka bini' aadamka ah.

(J) Xaqa qofku u leeyahay in aan loo qaban, loo dacweynin islamarkaana aan loo xidhin si sharciga ka baxsan.

Qof kasta si ka baxsan si uu dhigayo sharciga dalka u yaala in loo eedeeyo in ay khalad tahay ayuu qodobkani muujinayaa. Sidaa daraadeed, qof kasta haddii aan loo haynin caddaymo iyo qoraalo taageeraya ama lagu xoojinayo lama soo qaban karo haddii ay maxkamadu amrin.

### Hawl-galka 5[aad]

Su'aalahan soo socda si kooban uga jawaaba idinka oo koox-koox u wada shaqaynaya.

1. Waxtar intee le'eg ayey u leedahay in qofka bini' aadamka ah loo daryeelo xuquuqdiisa bini aadamnimo?
2. Si xuquuqdiina bini adamnimo la idiinku tixgaliyo waa maxay kaalinta la idinka sugayo in aad buuxiso.

### 1.2.2. Xuquuqaha Aadamnimo ee Koox ahaaneed

- Labo ka mid ah xuquuqaha bini' aadamnimo ee kooxda sheeg?.

(B) Xuquuqda sinaanta

Xuquuqaha sinaantu waxay ka mid tahay xuquuqaha asaasiga ah. xuquuqda sinaanta waa in si cadaladi ku dheehantahay loo simaa xuquuqda wadarta. Qoomiyado iyo shucuubo kala duwan oo dal ku wada nool xuquuqdooda sinaanta si loo xaqiijiyo waxay gacan ka gaysanaysaa in xuquuqaha bini' aadamnimo ee kooxaha ama ururada la daryeelo. Tanina waxay kaalin muhiim ah ka qaadanaysaa in nabadgalyo, horumar la gaadho islamarkaana la xoojiyo dhismaha nidaamka dimuqraadiyada.

(T) Xoriyada diimaha,Aaminaada iyo aragtiyada.

Si kooxdu xor u noqoto raacida diimaha ama wax kasta oo ay aaminsanyihiin isla markaana ku xidhnaadaan iyaga oo ku salaynaya rabitaankooda gaar ahaaneed.

Qofna laguma qasbi karo in uu aamino diin uuna rabin ama raali ka ahayn.

Tusaale ahaan; carruurta laguma qasbi karo in ay wax ka bartaan dugsiyo lagu dhigo maadooyin diimo ah.

Xoriyada Diinta macnaheedu waa Madax banaanida diinta iyo waxyaabaha kale ee dadku aaminsanyihiin waxaa laga yaabaa in ay lidi ku noqdaan deganaanshaha, nabad galyada, xuquuqaha asaasiga ah ee dadka kale si loo sugo sharci loo dajiyey

## Hawl-galka 6aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Sharaxaad ka bixiya waxtarka ay leedahay daryeelida xuquuqaha bini' aadamnimo ee kooxaha.
2. Ma dhici kartaa in xuquuqaha bini' aadamnimo ee kooxaha xad loo yeelo ama Sharcigu xadeeyo? Sabab?

### 1.2.3. Xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee shakhsiga.

- Sheeg mid ama labo ka mid xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee shakhsiga?

(B) Xaqa qofku u leeyahay in uu aragtida iyo fikradihiisa in u qaato una sharaxo ama uu dhiibto.

Xaqa qofku u leeyahay in uu aragtida iyo fikradihiisa in u qaato una sharaxo ama uu soo bandhigo waa mid ka mid ah laf dhabarka iyo jiritaanka xuquuqda bini'aadanimo.

Xaqa qofku u leeyahay in uu yeesho aragti iyo fikrado u gaar ah isla markaana xor u noqdo in uu dhiibto. aragtida iyo fikradihiisa waxaa laga yaabaa in la xadido si loo ilaaliyo sharafta dalka iyo dadka loona dajiyo sharci loogu talagalay in lagu ilaaliyo magaca dalka.

In uu qofku lahaado aragti iyo fikrado u gaar ah isla markaana si cad u sharaxo ama u dhiibto waa xuquuqaha qofka bini'aadamka ah noloshiisa iyo moraalkiisaba lagama maarmaan u ah, mid ka mid ah xuquuqdani kuma koobna oo kali ah in aad fikradaada iyo aragtiyadaada si cad u soo jeediso laakiin waxaa kale oo ka mid ah in aynu xaq u leenahay in aan helno wixii xaq ah ama xog ah ee aynu u baahanahay in aynu weydiikarno islamarkaana aynu helno.

Sidaa darteed, qof kasta oo jooga dalka gudihiisa iyo dibadiisaba wuxuu xaq u leeyahay in uu urursado nooc kasta xog ama warbixin ah haddii ay tahay qoraal ah iyo haddii ay tahay mid afka ahba.

(T) Xoriyada Dhaq-dhaqaaqa.

Qofka muwaadinka ah wuxuu xaq u leeyahay in uu ka guuro goob ama gobal una guuro gobal ama goob kale oo ka mid ah ah dalka. Qofkastaa wuxuu xaq uu leeyahay in uutago dalka dibadiisa hadana uu ku soo noqdo dalkiisa. Waxaa kale oo ka mid ah in uu qofku doorankaro meel kasta oo uu dalka ka dagi karo kuna noolaan karo.

## Hawl-galka 7aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Qeex in qofka xuquuqihiisa dimuqraadiyadeed la dhawro maxay waxtar u leedahay?
2. Si aad u heshaan tixgalin xuquuqihiina dimuqraadiyadeed maxaa marka hore idinka la idinka sugayaa in aad la timaadaan?
3. Ma dhici kartaa xuquuqihiina in sharci ahaan la xaddido? Sabab?

### 1.2.4. Xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee koox ahaaneed.

Maxaa ka mid ah xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee koox ahaaneed?

(B) Quruumaha, Qowmiyadaha iyo shucuubtu xaqa ay u leeyihiin in ay iskood isku maamulaan.

Xuquuqaha muwaadinka dalku leeyihiin kuwa ugu muhiimsan ee ka tirsan xuquuqaha bulshadu waa xaqa Qoomiyadaha,Shucuubtu iyo Dadyowgu u leeyahay in mid walba iskeed isku-maamusho iyo in ay aayahooga ka tashadaan. xuquuqdani waxay bulshooyinka ka caawinaysaa in ay rabitaankooda ku wada noolaadaan.

Xuquuqdani waxay qoomiyadaha,shucuubaha iyo dadyowgu dalka u horseedaysaa in ay yeeshaan maamul u gaar ah, fursado ay luqadahooda iyo dhaqankooda ku kobciyaan, haddii ay rabaana samaysan kara maamul badax banana. Waxaa kale oo waliba intaa dheer xaqa ay u leeyihiin in ay deegsadaan xuquuqahooda dimuqraadiyadeed masuuliinta dawlada ee ay doorteen haddii ay ka aamin baxaan in ay ku bedeshaan cidaha kale ee ay danaynayaan. Bulshadu in ay xuquuqdan oo kale adeegsadaan waxa ka hor joogsan kara ma jiro.

(T) Xuquuqda is abaabul,isku imaatin iyo qabanqaabinta mudaharaadyo kudhisan hab nabadgelyo

Qodobkani wuxuu kahadlaya xaqa ay muwaadiniintu u leeyihiin in ay is-abaabulaan, isku-tagaan,qabsan karaana banana baxyo-nabadgalyo ah isla markaana sheegtaan waxyaabaha ay tabanayaan.

Xuquuqahanina waa kuwo ahmiyad gaar ah siinaya bulshada si ay u helaan waxyaabaha ay xaqa u leeyihiin. Si waxyaabaha noloshooda ka dhiman ay u buuxiyaan waxay dadku xaq u leeyihiin in ay meelo kala duwan isaga yimaadaan isna abaabulaan isla markaana si wada jir ah dhibaatooyinkooda u wada xaliyaan ayaa looga baahan yahay.

Qofna laguma qasbi karo in uu xubin ka noqdo urur ama koox uuna rabin ama raali ka ahayn. Inla is-urursado, la ishabeeyo, banana baxyo nabad ah la fuliyo IWM. Waxay ka mid yihiin xuquuqaha kale ee dadku leeyahay. Sharciga dawlada iyo sharciyada kale ee dalka dhexdiisa ka jira xuquuqaha ay u jideeyeen wax hor istaagi kara ma jiro.

(J) Madaxbanaanida Bulshada.

Bulshada dalku waa awooda ugu saraysa cida ay ka timaado. Haddii aynu hadalka si kale u nidhaahno bulshooyinka dalku waa ilaha ay ka timaado awooda xubnaha kala duwan ee haya mas'uuliyadaha dawlada. Awooda bulshadu ma aha mid sharciga lagu qeexay oo la isa-siiyey waa awood ka timiday bulshooyinka dalka ku nool. Marka aynu leenahay awooda bulshadu way jirtaa waa marka bulshadu iskeed u go'aansato wixii u dan ah ama ay danaynayso ama awood ay danahooda kaga tashadaan helaan. Waa marka ay helaan madaxbanaani ay ku doortaan cida maamulaysa isla markaana ay wakiilanayaan. Waxa ay yeeshaan awood ay mas'uuliyadaha kaga wareejiyaan wakiiladoodii horay u maamulaysay. Qaranimada bulshooyinka si loo sugo waa in si buuxda loogu tixgaliyo xuquuqahooda bini'aadamnimo iyo kuwooda dimuqraadiyadeed lana siiyo mudnaanta koobaad.

## Hawl-galka 8[aad]


Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Sharaxaad ka bixiya muhiimada iyo faa'iidooyinka bini'aadamka ay u leedahay in la daryeelo xuquuqaha dimuqraadiyadeed ee koox ahaaneed?

2. In si habboon looga faa'iidaysto idinka maxaa la idinka sugayaa in aad samaysaan?
3. Si sharci ah miyaa loo mamnuuci karaa xuquuqda dimuqraadiyada ee koox ahaaneed?waayo?

## 1.3. Udulqaadashada kala Duwanaanshaha

### 1.3.1. Udulqaadashada kala Duwanaanshaha Faa'iidada u u leeyahay wada Noolaanshaha



Jaantuska 1.1. Ardey muslim ah iyo kuwo kiristi-yaan ah oo si wada jir ah casharo u wada akhri-sanaya.

1. Sawirka korka ku xusan si fiican u fiiriya(eega) kadibna saddex arrimood oo caruurta sawirka ka muuqata ku kala duwan yihiin ka soo saara.
2. Sawirku muxuu tilmaamayaa? Maxaadse ka fahanteen?

Faa'iidooyin aad u badan ayey leedahay in la sku dulqaato isla markaana la wada noolaado. Sababta oo ah goob kasta iyo wakhti kasta oo la joogo shakhsi, bulshaba ama qoysba ha ahaatee in lawada noolaado oo laysku dulqaato ayaa loo baahanyahay. In waxyaabaha lagu kala duwan yahay ama la isku-maan dhaafsan yahay laga heshiiyo la iskuna tanaasulo waxay kaalin weyn ka qaadanaysaa nabadgalyada, in la is-jeclaado la iskuna soo dhawaado iyo waliba in la is-taakuleeyo.

Qoysku waa qayb ka tirsan bulsho weynta. Waxaa suurto gal ah ama dhici karta in xubno qoyska ka tirsan ay yeeshaan aragtiyo,diimo iyo fikrado kala gedisan. Iyada oo kala duwanaanshahoodu sidiisaa uu yahay waxaa hadana lagama maar maan ah in la isku dulqaato oo lawada noolaado, tanina waxay suuragalinaysaa in si nabadgalyo iyo is-jacayl ku dheehan yahay loogu wada noolaado. Xubnaha qoysku si ay isu-waafajiyaan faraqyada u dhexeeya waxaa lagama maar-maan ah in qofkastaa ilaaliyo xidhiidhka walaalnimo, qoysnimo isla markaana ku dadaalaan in ay istixgaliyaan si ay u noqdaan qoys isku-xidhan si is-qadarin iyo isjacayl ku dheehan yahayna u wada noolaadaan.

Bulshada dhexdeeda haddii aynu ku soo noqono waxyaabaha la isku-maan dhaafsan yahay oo laga heshiiyo waxay sahlaysaa in midba midka kale xidhiidh wanaagsan la yeesho iyo in la abuuro jawi si wada jir ah loogu wada shaqaysto. Si bulshada dhexdeeda ayna uga abuurmin isu-dhac iyo iskhilaaf waa in la isku-soo dhaweeyo, la wada hadlo, la isku-tanaasulo isla markaana fikradaha iyo aragtiyada lagu kala duwanyahayna si nabadgalyo ah lagu xaliyo lagana heshiiyo.

Waxyaabaha la isku-khilaafsanyahay oo laga heshiiyo waxay bulshada u fudaydinaysaa in ay yeeshaan xidhiidh midnimo, nabadgalyo iyo is-jacayl ku dheehan yahay isla markaana ay ku wada noolaan karaan.

### Hawl-galka 9aad

Su'aalahan soo socda ka wada hadla.

1. Isku dulqaadashada kaladuwanaanshahu macnaheedu waa maxay?
2. Dadka kale ee aynu waxyaabo badan ku kala duwanahay sideen ula heshiin karnaa si nabad galyo ahna ugu wada noolaan karnaa?
3. Waa maxay waxtarka ay leedahay in si nabadgalyo iyo is-jacayl ku dheehantahay loo wada noolaado?

## 1.4. Hawlaha Shaqo ee Dawlada

### 1.4.1. Hawlaha Shaqo ee Dawlada Federaalka Itoobiya

- Sheeg ugu yaraan saddex ka mid ah hawlaha ay fuliso dawlada dimuqraadiyada fedaraalka Itoobiya.

Waxaa jira hawlo tiro badan oo ay fuliso dawlada dimuqraadiyada Fedaraalka Itoobiya. Kuwa ugu muhiimsanina waa kuwan soo socda;

1. Waxay ilaalisaa dhaqan galisaana Dastuurka.
2. Guud ahaan waxay soo saartaa isla markaana fulisaa istaraatiijiyadaha iyo qorshaha dalka ee dhaqaalaha; arrimaha bulshada iyo barnaamijyada siyaasada.
3. Waxay aasaastaa isla markaana dhaqangalisaa gundhiga siyaasada heer qaran ee ku waajahan xaga caafimaadka,w axbarashada,sayniska iyo tiknoolajiyada iyo sidoo kale waxay ilaalisaa ama ay kaydisaa hidaha iyo dhaxalka taariikhda ah.
4. DDFI waxay maamushaa bangiga qaranka, waxay kaydisaa lacagta; waxay daymisaa lacag, waxay ilaalisaa sarifka lacagta iyo xaaladaha dhaqaale ee dibada iyo kala bedelka lacagta, waxay sharci u dajisaa xaaladaha dawlad goboleedyadu ilaha wax soo saar ee dhexdooda dayn uga heli lahaayeen.
5. Waxay go'aamisaa siyaasada xidhiidhka dibada isla markaana wey dhaqan galisaa. Heshiisyada caalamiga ahna way gashaa wayna ansixisaa.
6. Waxay ballaadhisaa, ilaalisaa ama maamushaa diyaaradaha, Tareenada, badaha, adeegyada boosaha iyo war is-gaadhsiinta, jidadka isu-xidha dawlad goboleedyo ka badan labo-IWM.
7. Waxay go'aamisaa arrimaha la xidhiidha soo galida iyo bixida dalka sida qaxootiga iyo arrimo siyaasadeed.

### Hawl-galka 10aad

Ka wada hadla su'aalahan soo socda;

Hawlaha dawlada federaalku fuliso kuwa ugu muhiimsan ka doorta labo ka mid ah kadibna ka wada hadla sababaha ka wada hadla sababaha ay u noqdeen hawlo dawlada Federaalku fuliso ee ay u noqon waayeen hawlo dawlad goboleedyadu fuliyaan.

### 1.4.2. Hawlaha Shaqo ee Dawlad-degaanada

- Sheeg ugu yaraan saddex ka mid ah hawlaha ay dawlad deegaanadu qabtaan?

Dawlad-deegaanadu waxay leeyihiin hawlo tiro badan oo ay qabtaan. Waxaa ka mid ah kuwan soo socda;

(B) Iyaga oo fulinaya ujeeddooyinka ah in ay iskood isku-maamulaan waxay asaasayaan is-maamul u gaar ah. Waxay dhisayaan nidaam dimuqraadiyadeed oo mudnaanta koobaad siinaya ku xukunka sharciga,saraynta sharcigasidoo kalena difaacaya Dastuurka Federaalka.

(T) Waxay dajinayaan Dastuurka iyo sharciyada kale ee ay leeyihiin Dawlad-deegaanadu kadibna wey dhaqan galinayaan.

(J) Waxay dajinayaan isla markaana dhaqan galinayaan barnaamijyada istraatiijiyada iyo qorshaha horumarinta nidaamka dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasada Dawlad-deeganadooda.

(X) Iyaga oo ku salaynaya sharciga ay dajisay dawlada dimuqraadiyada Fedaraalka waxay maamulayaan dhulka iyo khayraadka dabeeciga ah.

(Kh) Ilaha dhaqaale ama dakhliga ee Dawlad-deeganadoodu go'aamiyay ayey canshuur ku soo rogaan, ururinayaan, go'aaminayaan miisaaniyad sanadeedka kadibna way dhaqan galinayaan.

(D) Sharci lagu maamulo shaqaalaha iyo xaaladaha shaqada ayey soo saarayaan kadibna dhaqan galinayaan. Hase yeeshee, aqoonta waxbarasho, tababarka iyo waayo aragnimada looga baahan yahay in uu yeesho boosaska shaqo ee kala duwan lagu meelaynayo sharciyada lagu miisaamayo waa in ay noqdaan kuwa ay isku-dhawyihiin lana xidhiidha sharciga guud ee dalka ayaa waxay masuuliyadeedu saaran tahay Dawlad-deeganadooda.

(R) Waxay isku-habbaynayaan awooda siyaasadeed ee dawlada-deegaanka. Way maamulayaan waxayna suggayaan iyagoo sameesanaya Boolis u gaara nabadgalyada iyo amniga guud ee Dawlad-deeganadooda.

**Hawl-galka 11aad**

Ka wada hadla su'aalahan soo socda

1. Ugu yaraan saddex ka mid ah Dawlad-deeganadu ay qabtaan kadibna ka wada hadla sababta ay u noqdeen hawlaha Dawlad-deeganadooda.

### 1.4.3. Maamulka Magalooyinka iyo Cida ay hoostagaan

- Waa maxay macnaha maamulka magaalooyinka?

Dawlad-deegaaneed kastaa wuxuu leeyahay magaalooyin iskood isku-maamula oo aqoonsi sharci ah la siiyey. Magaalooyinkani waxay leeyihiin maamul bulshadu soo doortay oo ka masuul ah horumarka, amniga, bilicda IWM ee magaalada. Waxaa waliba intaa dheer waxay leeyihiin guddiyo ama maamul hawl fulineed iyo baarlamaan u gaara. Maamulka magaalooyinka Addis-ababa iyo Diri-dhaba ee bulshadu doortay ka sokow waxaa kale oo masuuliyada magaalooyinkan saaran

tahay dawlada dimuqraadiyada Fedaraalka Itoobiya.

Addis-Ababa waxay saldhig u tahay Dawlada Jamhuuriyada dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya waana magaalo madaxda koobaad ee dalka. Tusaale-ahaan waxay leedahay xafiiska ama maamul guud oo qaybaha kala duwan ee magaaladu hoos yimaadaan. Marka hoo loo sii dhaadhacana waxaa jira xafiisyo laga maamulo degmooyinka ay magaaladu u qaybsan tahay. Marka mar labaad hoos loo sii degana waxaa jira qaybo ama waax hoosaadyo xafiisyo laga maamulo leh (Kifla Katama mikir beetooj) kadib waa is-maamul xaafadeed. Waxaa jira hawlfulino ay maamulaan is-maamulada heerarka kala duwan leh ee magaaladu.

**Hawl-gal Kooxeed**

Idinka oo koox koox u shaqaynaya ka wada hadla qodobadan hoos ku xusan;


(B) Hawlaha dawlada Fedaraalku ay qabtaan?

(T) Hawlaha dawlada Deegaanadu ay qabtaan

(J) Waa maxay sababaha uu ula xisaabtanto dawlada dimuqraadiyada Fedaraalka Itoobiya magaalooyinka Addis-ababa iyo Diri Dhaba.

## 1.5. Qaab-dhismeedka Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Fedaraalka Itoobiya

- Sawirka hoos ku xusan ku rogta buugtiina idinka oo tixraacaya ama ku salaynaya tusaalooyinka la idin siiyey calaamad su'aasha xariiqyada dhexdooda waaxyaha awooda Dawlada dimuqraadiyada Fedaraalka shacabka Itoobiya ee ay u




Sawirka 1.2. Waaxyaha ay u kala baxdo awooda Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Fedaraalka Itoobiya.

Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya waxay leedahay saddex waaxood oo awoodeedu kala baxdo. Sidoo kale awooda dawlad deegaaneedyaduna waxay u qaybsamaan saddexdaa waaxood. Waxayna kala yihiin waaxda Sharci Dajinta, waaxda Sharci Fulinta iyo waaxda sharci Ilaalinta.

### 1.5.1. Golaha Sharci Dejinta.

Waaxda sharci dajintu waa waaxda dawlada Fedaraalka awood ahaan ugu saraysa waana dawlada Fedaraalka golaha wakiilada shacabka Dawlad deegaanada awooda ugu saraysa waa golaha maamulka dawlada ee heer gobal. Heer Federaalwaaxda sharci dejintu waa golaha wakiilada shacabka. Dawlad deegaanada waaxda sharci dajintu waa mikirbeedka dawlad gobaleedka. Sidaa daraadeed, hawlaha sharci dajinta dalka iyo dawlad gobaleedyadu waxay dhaqan galayaan marka nabadgalyada bulshada iyo amniga loo soo saaro sharci isla markaana qorshe loo dajiyo.sharciyadanina waxay noqon karaan bayaano, nidaamyo, qaynuuno IWM.

### 1.5.2. Golaha Sharci Fulinta

Heer Federaalsharci fulintu waa golaha wasiirada dalka. Heer dawlad deegaana sharci fulintu waa golaha maamulka dawlad-deegaanada . Hawsha ugu muhiimsan ee golaha sharci fulintu waa dhaqan galinta sharciyada ay soo saarto waaxda sharci dejintu. Sidaa daraadeed, sharciyadu waxay sida ugu wanaagsan uguna habboon loogu adeegsanayaa shaqada. Hawlahan wasaaradaha kala duwan, xooga booliska, Xafiisyada sharciyada iyo goobaha dhaqan celinta ayaa la aas'aasayaa shaqooyinkoodana dabagalbaa lagu samaynayaa. Heer Fadaraalna waaxda koobaad ee fulinta sharciga waxaa maamula/hogaamiyda ra'isal wasaaraha Dawlad deegaanada. Waaxda ugu muhiimsan ee sharci fulinta waxaa hogaamiya madaxweynaha dawlad gobaleedka.

### 1.5.3. Golaha Sharci ILaalinta

Heer Federaal marka laga hadlayo Sharci ilaalintu waa maxkamada Guud ee heer fadaraal. Marka hoos loo sii galo laakiin maxkamadaha heerarka kala duwan loo sameeyey ayaa ka tirsan waaxdan. Dawlad deegaanada sharci ilaalintu waa maxkamada guud ee ismaamul gobaleedka waxaana hoos yimaada maxkamadaha heerarka kala duwan leh ee ka jira ismaamulka.

Waaxdan sharci ilaalintu sharciyada soo baxa ee ay turjumaan waxaa loo adeegsadaa in lagu sugo nabad galyada iyo amniga dalka. Hawsha ugu muhiimsan ee waaxda sharci ilaalintu qabato waa bixinta adeegyo sharciga waafaqsan.

Sida aynu korka ku soo tilmaamnay hawlaha sharci dajinta, fulinta iyo sharci ilaalinta waxaa laga fuliyaa qaybo kala gadisan. Waxaa waliba intaa sii dheer si waaxi ugu xadgudbin waaxaha kale islamarkaana waax kasta xadka loo sameeyey awoodeeda, waxaa la saaray mas'uuliyad iyo waajibaad lagu sugayo in ay dhammaantood ka soo baxaan.sababta ugu muhiimsan ee awooda dawlada saddex waaxood loogu qaybiyey waa inayna awoodu meel kali ah isugu soo wada ururin iyo in la iska ilaaliyo kali talisnimada.

#### Hawl-galka 12aad

Su'aalahan soo socda ka wada hadla.

1. Waa maxay baahida keentay in awooda dawladaha ku dhaqma nidaamka dimuqraadiyada saddex waaxood loogu qaybiyay?

## 1.6. Xidhiidhka Arrimaha Dibada ee Itoobiya

### 1.6.1. Itoobiya Hawlaha ay Dalalka Afrika u qabatay



Jaantuska 1.3. mas'uuliin Itoobiyaan ah oo heshiis caalami ah la saxeexanaya dalalka dibada.

- Sawirka korka ku xusan maxaad ka fahanteen?
- Sharaxa inta aad ka garanaysiin hawlaha taariikhiga ah ee Itoobiya u qabatay dalalka Afrika.

Dalka Itoobiya wuxuu tusaale u noqday wadanadii Afrikada ka tirsanaa ee gacanta u galay ama ku hoos jiray dalalkii midab takoorka ahaa sidii ay uga hoos bixi lahaayeen. Waxay qayb laxaadle ka qaadatay sugida nabadgalyada iyo sidii nabad waarta looga abuuri lahaa dalka dhexdiisa.

Dagaaladii lagu raadinayey xoriyada ama madax-banaanida xiliyadii ay socdeen Itoobiya dhexdeeda ayaa ciidamada xoriyad doonka ahaa tababaro lagu siin jiray waxayna taageero ka gaysatay sidii dalalka Afrika madax-banaanidooda u heli lahaayeen.

Dadaalada loogu jiro in dalalka Afrika nabadgalyo looga abuuri lahaana kaalin heer sare ah ayey ka ciyaaraysaa ama kaga jirtaa. Waxaa intaa dheer jimciyada quruumaha ka dhaxaysa ay Itoobiya ciidan nabadgalyo u dirtay si ay nabad uga dhaliyaan dalalka Koongo, Ruwaandha, Burundhi iyo Laybeeriya oo dhammaantood ka tirsan Afrika.

Ciidamada Itoobiya looma dirin oo kali ah in ay ka qayb-qaataan sugida nabadgalyada wadanada aynu korka ku soo sheegnay waxaa kale oo ay door muhiim ah ka soo qaateen taakulaynta dadka ku bara kacay dagaalada sidii ay deegaanadoodii ugu soo noqon lahaayeen islamarkaana dib u dajin loogu samayn lahaa. Arrintanina waxay tilmaamaysaa sida ay Itoobiya uga go'antahay in ay qayb weyn ka gaysato sugida nabadgalyada iyo horumarka. Guud ahaan, sanadihii 1950 meeyadii waxay ka qayb-gashay quwadihii loo diray dalka Kuuriya si ay nabad uga dhaliyaan. Arrintanina maaha mid Itoobiya kaligeed u gaar ah waxay ahayd arrin Afrika oo dhan ay ku faanto islamarkaana taariikhda u gashay. Waxay dhacdadanina muujinaysaa sida ay Itoobiya uga go'antahay sugida amniga iyo dejinta ay ka gaysatay dalalka Afrika.

#### Hawl-galka 13aad

Idinka oo koox-koox u wada shaqaynaya ka jawaaba su'aalahan hoos ku xusan

1. Sheega magacda iyo jihada ay khariirada Afrika kaga jiraan ugu yaraan afar ka tirsan dalalka Afrika Itoobiya ciidamo nabadgalyo ay u dirtay.
2. Sheega taariikhjda xiligii ay ciidamada dalkeenu ay afarta dal tegeen si ay nabad ugu dhaliyaan.

## Gunaanadka Cutubka 1aad

Nidaamka dimuqraadiyadu wuxuu leeyahay tiirar badan oo aasaas u ah sida tartanka doorasho ee xorta ah,saraynta sharciga iyo la xisaabtanka iyo cadcadaanta .Waa hanaan dhawraya ama xurmaynaya xuquuqaha aadamaha iyo tan dimuqraadiyadaba, sidoo kale waa mid ilaalinaya xuquuqda sinaansho ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta kala duduwan ee dalka kuwada nool. Dhismaha, hanaqaadka iyo ku dhaqanka nidaam dimuqraadiyadeed, waa hawl adag oo u baahan dadaalo fir-fircoon oo lala yimaado. Haddaba, isku doo wada duuboo, dhismaha nidaam dimuqraadiyadeed, waa mid lagu doonayo in la abuuro muwaadiniin dimuqraadiyadeed iyo waliba dhaqaajinta dhaqan dimuqraadiyadeed oo laga hirgasho dalka oo wax katara arrimaha maamulka suuban, sareynta sharciga, sinaanta, cadaalada, dhawrista xuquuqaha Aadamaha, iyo tan dimuqraadiyada Afkaartaada oo aad six or ah u dhiibato xuquuqda cod-dhiibasho iyo tan tartanka doorasho ama musharaxnimo.

Qodobadaasina, waa kuwo aas'aas u ah dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed.

Aslixinta xuquuqaha Aadamaha iyo tan dimuqraadiyada waa xaalado u baahan jiritaanka hay'ado dawli ah iyo kuwo aan dawli ahaynba. Hay'adaha dimuqraadiyada ah ee dawliga ah waxaa ka mid ah; sida: Maxkamadaha, Booliska (Bilayska), hay'ada cabasho dhagaysiga, koomishinka xuquuqda Aadamiga, koomishinka ka hortaga musuqa, iyo hay'adaha warbaahinta ee ay dawladu gacanta ku hayso.Kuwa aan dawliga ahayna waa hay'ado dimuqraadi oo iskugu jira kuwo caalami ah iyo kuwo wadani ah, iyo waliba hay'adaha warbaahinta ee aan dawliga ahayn.

Waa arrimo aas'aas u ah xalinta farqiga ama Isfahan la'aanta soo kala dhaxgali karta laba shaqsi, laba dhinac ama laba-dalba. Astaanta midnimo ee ka dhaxeysa xukuumada Federaalka iyo kuwa deegaanada, kow labaduba waxay ka tirsan yihiin qaab dhismeedka dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya (J.D.F.I). Sidoo kale, labaduba waxay leeyihiin saddexda gole awoodeed ee dawliga ah sida golaha sharci dajinta, golaha hawlfulinta iyo golaha garsoorka & maxkamadaha. Masuuliyada koobaad ee xukuumada dhexe iyo kuwa deegaanaduba, waa difaacida & ilaalinta Dastuurka.

Farqigooduna ama kala duwanaantooduna, xukuumada dhexe (federaalka) oo masuuliyad gaar ah u leh arrimaha caalamiga ah sida (lacagta, difaaca) xidhiidhka dibada) iyo Deegaanada oo masuuliyad khaas ah u leh arrimaha la xidhiidha ismaamulkooda.

Awooda wada jirka ah ee ka dhexaysa xukuumada dhexe iyo kuwa Deegaanada waxaa weeyi waa iyaka oo si wadajir ah oo soo roga Canshuuraha Macaashul Macaashka ee la saaro hay'adaha horumarinta ee ay sida wadajirka ah u wada aas'aasaan, cabshuur saarista shaqooyinka culus ee macdan qodista, Batroolka iyo gaaska dabiiciga ah, canshuurta ku soo rogida macaashul-macaashka faa'iidada ganacsiga, shaqada, tan iibka, dakhliga canshuur ee loo yaqaano 'royalty' ururinteeda.

Xilka iyo waajibaadka maamulada magaalooyinka waxaa ka mid ah canshuur saarista ilaha dakhli iyo ururinteeda, maamulista dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah ee ka jira goobaha hoos yimaada Maamulkooda, suggida Amniga iyo nabadgelyada oo loo dhiso xog boolis u ku filan aslixinteeda, goobaha hoos yimaada maamulkooda oo ay ka soo saaraan shuruuc awaamiir, islamarkaana dhaqangeliyaan heshiisyo iyo mucaahadooyin ay la galaan magaalooyinka dalalka dibada sida arrimaha farsamada, dhaqaalaha iyo kuwo dhaqanba.

Itoobiya waxay hada ku hawlan tahay xoojinta xidhiidhka dalal kala duwan oo caalamka ka tirsan. Xidhiidhkaasna waa mid lagu doonayo in hawlaha horumar lagaga dhigo kuwo taabagal ah, islamatkaana loo abuuro fursad suuq balaadhan oo xoojin kara dhaq-dhaqaaqyada horumar, xoojinta & dhismaha hanaan dimuqraadiyadeed, abuurista maamulo iyo hay'ado dimuqraadiyadeed oo wax ka tari doona gargaarka & amaahda (daymaha) iyo waliba taageerada farsamo kasbashadeeda. Guud ahaan, xidhiidhka caalamiga ee itoobiya waa mid ku dhisan xoojinta hawlaha horumar, dimuqraadi iyo ka soo hoynta natiijo wax ku ool ah.

## Layliska Guud ee Cutubka 1aad

### I. Weedhahan soo socda ku qor 'Run' ama 'Been' hadba ta ku haboon.

1. Doorshada madaxbanaan ee xorta ah waa mid ka mid ah tiirasha aas'aaska u ah dhismaha hanaanka dimuwqraadiyada .
2. Nidaamka dimuqraadiyada,waligeed lama xaddidin xuquuqda noolaanshaha.
3. Xidhiidhka dibada ee Itoobiya wuxuu u soo hooyay faa'iido ah inay hesho taageerada ay ugu baahan tahay horumarka & dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed.
4. U dulqaadashada kala duwanaansha waxay dhiiri galisaa jiritaanka istixgalinta,nabada iyo isjeclaanshaha bulshada.

### II. Isku aaddi erayadan ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T' midba ta ku haboon.

| 'B' | 'T' |
|---|---|
| 1. Waa hay'ad ka shaqeysa ilaalinta xuquuqaha Aadamiga iyo tan dimuqraadiyada | B) Qalabka warbaahinta |
| 2. Waa hay'ad hubisa shuruucda qaynuunka iyo Awaamiirta kaleba inaysan ahayn kuwa ka hor imaanaya aadamiga | T) hay'ada dhagaysiga cabashooyinka |
| 3. Waa hay'ad dabagal ku sameysa inay Qaybaha fulintu dhawreen iyo in kale Dhaqangelinta xuquuqaha & danaha Shaqsi ee lagu xusay sharciga. | J) ururada bulshada rayidkaah |
| 4. Wa hay'ad shaqeysa xoojinta ka qayb-galka Dadweynaha si cadcadaan iyo la xisaabtan shaqo leh. | X) Komishinka xuquuqda Aadamiga |
| 5. Waa hay'ad xogta dhabta ah wakhtiga ugu haboon u soo gudbisa dadweynaha. | Kh) hay'ad federaalka ee qaabilsan Anshaxa |
| | D) Booliska |

### III. Meelaha banaan ku buuxiya erayada ku haboon.

1. Tiirasha ugu muhiimsan Nidaamka Dimuqraadiga waxaa ka mid ah_____________,______________ iyo _______________.
2. Saddexda Gole ee ay dawladu u qaybsanto waa _________,_________ iyo _________.

## IV. Ka Dooro

1. Kuwan soo socda teebaa leh go'aanka ay gaadhaan maamulku waa in uu yahay mid u danaynaya rabitaan bulshada laakiin aanu noqon mid danahooda gaarka ah?

   B) Cadcadaanta T) La xisabtanka J) Saraynta sharciga X) Dhamaantood

2. Kuwan soo socda midkee ayaan ahayn hawlaha iyo shaqada Dawlada Federaalka?

   B) Daabacaada Lacagaha

   T) Difaaca Dalka,sugida nabadgalyada iyo Bangiga Dhexe

   J) Boostooyinka iyo Isgaadhsiinta

   X) Midnaba

3. Waa maxay muhiimada ay leedahay u dulqaadashada kala duwanaanshaha?

   B) Horumarinta xidhiidhka shaqsiyadeed

   T) Wada shaqeenta shaqo wax ku ool ah

   J) Ku wada noolaanshaha si nabadgalyo ah

   X) Dhamaantoodba

## V. Jawaabo koo-kooban ka bixiya su'aalahan soo socda;

1. Ugu yaraan sheeg saddexda qaybood ama Gole ee ay dawladu ka koobantahay?muhiimada ay leeyihiin kala saaristoodu?Sharaxaad tusaalayaal wata ka bixiya.
2. Sharaxa hawlaha waxqabad ee ay ku kala duwanyihiin ama iskaga midka yihiin xukumada Federaalka & kuwa Deegaanada.

CUTUBKA 2

# SARAYNTA SHARCIGA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Kala saaraan Dastuurka iyo sharciyada kale.
- Sharxaan arrimaha uu sharcigu ilaalinayo iyo muhiimada uu leeyahay.
- Gartaan sida sharcigu u xadiday Awooda kuwa la soo doortay iyo maamulka la magcaabey

## 2.1. Dastuurka

### 2.1.1. Macnaha Dastuurka Federaalka Ethiopia

- Dastuurka Itoobiya maxaa looyidhi waa mid federaaliya?




Jaantuska 2.1.Dasturka Jamuuriyada imoqaadig Federaalka Itoobiya

Dastuurka Federaalku waa sharciga ugu sareeya sharciyade kale ee ka jira dalka. Marka aan leenahay dastuurka federaalka waxaan ujeednaa bulshooyin, dhaqan, taariikh iyo deegaanada kala duwan leh ayaa wadar ahaan ugu heshiiyay islamarkaana wuxuu tilmaamaya, wada noolaanshaha bulshooyinka iyo danaha wadar ahaaneed ee ay leeyihiin.

Dalalka ku dhaqma Dastuurka Federaalka,qaar ka mid ah ayaa laga yaabaa inay yeeshaan Hal iyo in ka badan.Tan macnaheedu waxay tahay marka uu yeesho mid ka mid ah kuwa ku bohoobey Federaalka uu yeesho Dastuur u gaara ayey Dawlada Dhexe yeelaneesaa Dastuurkeeda,sidaaseyna ku noqonayaan Dhawr dastuur oo uu hal dal leeyahay.

Dastuurku waa sharciga ugu sareeya shuruucda dalka. Sharciyo kasta oo ay soo saaraan golaha Wakiilada shacabka iyo kuwa xukuumadaha Deegaanaduba ha noqdo mid bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeedba waxaa saldhig u ah dastuurka. Mar kasta oo qoraal dastuur la samaynayana waxaa haboon in xooga la saaro arrimaha laf-dhabarka ama udub-dhexaadka u ah. Dastuurkuna waa mid ku dhisan mabaadida aasaasiga ah.

Guud ahaan dastuurkan 1995 (1987 T.I) ee Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya waa mid dimuqraadi ah. Taasna waxaa loo cuskanayaa waa iyada oo u ka koobnaa mabaadi'yo iyo xuquuqo si cad loogu qeexay, sidaasna ay ku ansixiyeen wakiilo-badan oo u dadweynuhu soo doortay. Sidoo kale, taas waxaa dheer, waa dastuurka oo eray-eray u xusaya/

qeexaya sinaanta muwaadiniinta iyo shucuubtaba. Sharciguna ilaalo (damaanad) isku mid ah ayuu siinayaa dhammaantood iyaga oo aanan lakala-soocin. Sidaas awgeed, dhammaan dadku iyaga oo aanan loo eegayn ama loo fiirinayn kala-duwanaanshahooda isireed, qoomiyadeed, midabeed, jinsiyeed (lab ama dhadig), luqadeed, diineed, siyaasadeed, hab-dhaqameedkooda-bulsho, hantiyeed, dhalasho ama aragtiyadooda kalaba, waxay xuquuq siman u leeyihiin inay helaan damaanad-qaad-sharciyeed oo la taaban karo".

## Hawl-galka 1aad

Su'aalahan soo socda ka wada hadla.

1. Imisa Dastuur ayuu leeyahay Dalkeenu?
2. Haddii ay jiraan dalkeena Hal Dastuur iyo in ka badan.Sharaxaad ka bixi sababta keentay?
3. Haddii uu dal leeyahay Hal Dastuur in ka badan,Dastuurkeebaa noqonaya midka ugu sareeya dalkaas?
4. Haddii Dastuurka Federaalka iyo Dastuurka Dawlad-deegaanada iyo Sharciyada kaleba ay iska horyimaadaan,keebaa la raacayaa?sababma?

### 2.1.2. Muhiimada Uu Leeyahay Dastuurka Federaalka

- Sheeg muhiimada uu leeyahay Dastuurka Federaalku.

Maamulka dawlada Federaalku waxaa uu kaga duwan yahay kuwa kale waa awood qaybsiga u dhexeeya dawlada fedaraalka iyo dawlad deegaanada. Sharciga dawlada Federaalku wuxuu si cad u qeexaa ama u sharaxaa faraqa awoodeed ee labadan waaxood (dawlada Fedaraalka iyo dawlad deegaanada), waxyaabaha ay isaga midka yihiin iyo xidhiidhka u dhexeeya waxaa kale oo intaa dheer Dastuurka Federaalku wuxuu waxtar yeelanayaa marka uu buuxiyo ujeeddooyinkan hoos ku xusan sharcigu waa in uu xaqiijiyo in;

- Bulshooyinku arrimahooda u gaarka ah in ay iyagu go'aansadaan isla markaana iyagu iskood isu maamulaan.
- Waaxyaha maamulka iyo waaxyaha cadaaladu adeegyada ay bixiyaan in ay isu-dhawaadaan islamarkaana isu-dabagalaan.
- Bulshooyinku si fir-fircoon uga qayb-qaataan maamulada kala gedisan, si ay u xaqiijiyaan xaqa ay u leeyihiin in ay wakiilo yeeshaan iyo in ay waliba xoojiyaan wakiilada heer Federaaliyo kuwa heer gobalba.
- Dawlada gobaleedyadu awood u helaan in ay gaadhaan horumarin ku salaysan ama waafaqsan kartiyadooda ama kolba dadaalada ay muujiyaan.
- La xoojiyo xidhiidhka u dhexeeya bulshooyinka isla markaana uu noqdo mid ku salaysan isu-ogolaansho, midnimo iyo sinaansho
- La helo nidaam fudaydinaya sidii Dawlada Fedaraalka iyo dawlada gobaleedyadu si cadaalad ah oo miisaamaan isla markaana ugu qaybsan lahaayeen masuuliyadaha iyo khayraadka.

- La xaqiijiyo xuquuqaha awoodeed ee ay leeyihiin qoomiyadaha, shucuubta iyo dadyowga Itoobiya.
- Awoodaha dawlada iyo majuuliyadaha, isu-dheelitirka ama kala wareejinta awooda, xuquuqaha bulshooyinka iyo xornimadooda, wakiilada bulshooyinka IWM in la xaqiijiyo weeyaan.

### Hawl-galka 2aad

Si kooban uga jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Dawlad deegaanada ka jira dalkeena Itoobiya haddii ayna lahayn Dastuur oo u dhexeeya dhibaatooyin noocee ah ayaa ka dhalankara?
2. Sheeg faa'iidooyin noocee ah ayuu keenayaa Jiritaanka Dastuurada heer Federaal iyo heer deegaanba?
3. Sharaxaad ka bixi waxa dhici kara hadii mid ka mid ah Dastuurka uu leeyahay Dawlad-deegaanada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya ay is yeelan(noqon) waayaan ka Federaalka.

## 2.1.3. Muhiimada Sharcigu uu u leeyahay Muwaadiniinta

- Maxaa dadka loo horgeeyaa Xarumaha sharciga marka la is khilaafo ama marka ay isku xadgudbaan waxa ay iska codsanayaan?

### Khadar iyo Jaamac

Dugsiga khadar iyo Jaamac ay wax ka bartaan dhexdiisa waxaa laga fuliyaa falal musuq-maasuq oo siyaabo kala duwan loo sameeyo. Haddaba, in kasta oo ay ku heshiiyeen go'aan ku gaadheen in ay musuq-maasuqa dugsiga dhexdiisa laga fuliyo soo bandhigaan waxay hadana ku guuldaraysteen in ay gaadhaan fakir ay isu-raacsan yihiin. Khadar wuxuu leeyahay haddii uuna dugsigu sharci xadaysan noo sammaynin dhibaatooyin in ay naga soo gaadhaan ayaa laga yaabaa soo bandhigida musuq-maasuqa ka jira dugsigeena. Jaamac laakiin rayiga ma qabo. Wuxuu aamin-san yahay in aan loo baahnayn xadayn sharci si loo caddeeyo musuq-maasuqa dugsiga dhexdiisa ka jira. Sidaa daraadeed, waxaa la idinka codsanayaa in aad fikradihiina ku darsataan.

Isla markaana dhexdhexaadisaan khadar iyo Jaamac.

### Hawl-galka 3aad

Idinka oo sheekada kor ku xusan ku salaynaya su'aalahan soo socda ka jawaaba;

1. Haddii aad idinka ku jiri lahaydeen kaalinta khadar iyo Jaamac sideed u xalin lahaydeen dhacdadan ay isu-hayaan.
2. Fashilinta musuq-maasuqa darteed si ayna dhibaato uga soo gaadhin waa maxay taageerada sharcigu uu siin karo labada wiil?
3. Si aad u fashilisaan musuqmaasuqa ka jira dugsiyadiina ilaalada sharciga ee loo baahanyahay in uu dugsigu idin siiyo weydiiya ardayda kale ee dugsiga in ay idiin sharaxaan.

Badbaadada sharciga macnaheedu waa muwaadiniinta dalka iyaga oo aan la kala soocin noloshooda iyo hantidoodaba dammaanad qaad sharciga waafaqsan la siiyo. Xadaynta sharciga waxaa loola jeedaa in dadka leh hantida iyo xoogu ayna dhib ama xadgudub u geysanin dad kale oo aan lahayn awood xubno iyo aqood hantiyeed islamarkaana laga ilaaliyo.

Badbaadada sharcigu waxaa looga baahan yahay in uu sugo muwaadiniinta dalka oo dhani si xor ah kolba goobta ay rabaan u aadaan, in sida ay doortaan iyo kolba sida ay tahay awoodoodu si buuxda uga qaybgalaan arrimaha dhaqaale, siyaasadeed iyo kuwa bulsho ahaaneed ayuu sharcigu xoriyad buuxda u siinayaa,

### Hawl-galka 4aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba

1. Waa maxay macnaha damaanad-qaadka sharcigu?
2. Waa maxay baahida keentay in muwaadiniinta sharcigu damaanad-qaado?
3. Liisgareeya Dastuurka Federaalku ilaalada sharciga ee carruurta loo dajiyey.

## 2.2. Anshaxa

### 2.2.1 Anshaxa ay Bulshadu ka filayaan ardayda

Jaantuskan soo socda buugiina ku guuriya

| | Lidi ku ah dumarka | Anshaxa wanaa -gsan | Anshaxa aan wanaag -sanayn |
|---|---|---|---|
| 1 | Inay caawiyaan kuwa Liita ama dhibaataysan | | |
| 2 | Agagaarka oo si is-xilqaan ah lagu nadiifiyo | | |
| 3 | Si dhibaatooyinka Deegaanka ka jira in si wada jir ah loogu xaliyo marka laguugu yeedho oo si muwaadinimo leh loo aqbalo loogana qayb galo | | |
| 4 | Respecting the elderly and caring for the young | | |
| 5 | Dadka waaweyn oo la ixtiraamo iyo dadka yar-yar oo la bar-baariyo ama la daryeelo. | | |
| 6 | Dadka baahan oo aad caawisaan | | |
| 7 | Dadka kaa waawayn oo aad Kursiga uga kacdaan | | |
| 8 | Wakhtiga dheeriga ah ee la haysto oo dhammaantiiba ciyaar lagu lumiyo | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 9 | Barayaasha oo la qadariyo | | |
| 10 | Faldambiyeedka aan sharciga ahayn marka la fulinayo oo aan la is hortaagin | | |
| 11 | In aan laga qayb qaadan fal-dambiyeedka sharci darada ah | | |
| 12 | Imtixaanada oo ardeyda kale aan laga qishin | | |
| 13 | Xuquuqaha dadka kale oo aan lagu xad gudbin. | | |

Anshaxa muwaadinka:- Anshaxa qofka muwaadinka ah waxaa lagu sharaxaa iyada oo loo eegayo goobta uu ku noolyahay; waxa looga baahan yahay in uu fuliyo ama fulinin, waxyaabaha fiican ama xun; wanaagsan ama aan wanaagsanayn farsamo lagu qiimeeyo weeyaan. Bulsho dhexdeed haddii laga waayo anshax wanaagsan waxaa lagama maarmaan ah in uu ka dhex abuurmo nidaam qof kasta fursad u siinaya in uu ama ay danihiisa gaarka ah ka fushado, la isku-itaalsheegto, la is xado IWM. Falalkanina waxay bulshada u horseedayaan saboolnimo iyo kala bur-bur.

Dhaqamada wanaagsan ee dalkeenu caanka ku yahay waxaa ka mid ah wax wada cun, qofka dhibaataysan oo la caayin, dadka waayeelka ah iyo kuwa kaa waaweyn oo la ixtiraamo. Xiliyada farxadaha iyo xiliyada dhibaatooyinku ay jiraan oo la istaageersado iyo waxyaabaha kale ee la midka ah ayaa ka mid ah anshax wanaaga qofka muwaadinka ah looga baahan yahay in uu la yimaado.

Ardeyda waxay bulshooyinku ka sugayaan in ay yihiin madaxda Barri dalka la wareegi doona. Sidaa darteedna, waxaa looga baahan yahay in shaqooyinka iyo hawlaha ay fulinayaan ku salaysnaadaan anshaxa wanaagsan ee qofka muwaadinka ah loo baahan yahay in uu ku socdo. Ardeyda waxaa looga baahan yahay in ay noqdaan kuwo ixtiraama shaqadooda, la aamini karo, xaqa ilaaliya ama daacad ah, ku dadaala in ay xaliyaan dhibaatooyinka deegaankooda iyo deegaanada dariskooda ah ka dhaca, aqbala masuuliyadaha saran iyo waajibaadkooda si wanaagsana u guta, jecel bulshadooda iyo dalkooda, daryeela xuquuqaha dad ka kale IWM.

Waxaa haddaba looga baahan yahay ardeyda in anshaxan wanaagsan ee korka aynu ku soo tilmaamnay iyo kuwa kaleba ku dhaqmaan isla markaana daryeelaan. Marka la fuliyo ama lagu dhaqmo waxyaabahan aynu soo tilmaamnay ayey suurto gal noqonaysaa in dib-dhacnimada iyo saboolnimada dalkeenu ku sugan yahay laga saaro. Cida laga sugayo in ay anshax wanaagsan yeeshaana ay tahay muwaadiniinta dalka u dhalatay waa in ay ardeydu fahmaan ayaa lagama maarmaan ah.

## Hawl-galka 5aad

Kuwan soo socda buugiina ku guuriya.

1. Ardayeey,waligiin deegaanada aad ku nooshihiin ma aragteen ardey anshax wanaagsan oo dadka waawayni ay u ducaynayaan ama kuwo anshax xun oo ay Inkaarayaan(habaarayaan)? Sharaxaad ka bixi qaar ka mid ah kuwa aad maqlaysey ducooyinka iyo habaarka dadkaasi lahaayeen?

| Ducooyinka | Sababta keentay |
|---|---|
| Tusaale:- | |
| Inay u Duceeyaan | In aad adeecdo waayeelka |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |
| Habaarka | Sababta keentay |
| Tusaale:- | |
| In la Habaaro | markey caayeen waalidkood |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |
| ___________________ | _____________________ |

2 Qaar ka mid ah dadka waxaa la maqlaa iyaga oo leh waalidiinta la caawiyo, la ixtiraamo dadka waaweyn IWM waa dhaqano laga tegay. Idinku fikrada ma ku raacsan tihiin? Sabab? Sharaxa sababaha?

## 2.3. Xadaynta Awoodeed

### 2.3.1. Muhiimada ay Leedahay Awood-Xadaynta Masuuliyiinta Dawlada

Su'aalaha soo socda ka jawaaba

- Kuwa mass'uuliyiinta dawlada lagu yidhaahdo waa kuwee?
- Waa maxay baahida keentay in la xaddido awoodaha mas'uuliyiinta dawlada?

#### Mudane Cumar

Mudane Cumar wuxuu mas'uul ka yahay ama maamulaa xafiis ka mid ah xafiisyada dawlada. Xafiiska dhexdiisa waxaa loogu yaqaanaa in shaqa kasta oo jirta in uu fara galiyo isla markaana ixtiraamin shaqaalaha u xilsaaran shaqada. Shaqaalaha Xafiisku u baahan yahay isaga dalbada, shaqaalaha Siminaarada isaga kaligii ayaa soo bixiya intuu lacagta qaado una soo diyaariya. Waa qofka shaqaalaha abaalmarinta mutaystay soo xula, siiya abaalmarinada islamarkaana hormoodka u ah gudiga abaalmarinta shaqaalaha. Isaga laftiisana labo jeer ayuu loo xushay in uu yahay shaqaale hawl kar ah lana siiyey abaalmarin.

Waa qofka go'aamiya qalabka xafiisku uu u baahanyahay, goobaha laga soo gadayo iyo waliba tayada alaabada loo baahan yahayba. Sidaa darteed, shaqaalaha Xafiisku waxay u qaybsameen labo kooxood oo labo talo oo kala gadisan qabta. Qayb ka mid ah shaqaaluhu waxa ay soo jeediyeen fikrada leh Cumar waxaa lagama maar-maan ah in abaalmarin la siiyo isla markaana loo mahad celiyo. Qaybta labaadna waxay soo bandhigeen fikrada ah haddii Cumar awoodiisa xad haddii loo yeeli waayo waxaa lala kulmi doonaa dhibaatooyin xun-xun.

### Hawl-galka 6aad

Idinka oo sheekada kor ku xusan ku salaynaya su'aalahan soo socda ka jawaaba;

1. Fikradee ayaa taageeraysaa?waayo? Ka dhiibo taladaada la gudboon kuwii hore.
2. Mudane Cumar ma wax khalada ayuu sameeyey?Sidee?
3. Talaabo nooceeya ayaa lagaga hortagi karaa khaladdaadka sida ka Mudane Cumar oo kale?

Nidaamka dimoqraadiyadu wuxuu ku saleysan yahay sareynta shacabka. Awoodda maamulkana waxaa iska leh shacab waynaha. Madaxda maamulka haysaa waxaa magacaaba ama doorta shacabka, wuxuuna shacabku awood buuxda u leeyahay in uu xilka ka qaado madaxda iyo masuuliyiinta sare ee xilkooda iyo waajibaadkooda waddaninimo sida larabey uga soo bixiwaayey.

Heerkastaba ha'joogaane madaxda iyo masuuliyiinta shacabku soo doortay waxayna ka sareyn kareyn xeerka iyo sharciyada bulshada u degsan, mar'ala markay dambi bulshada ka galaan waa lala xisaabtamayaa isla markaana maxkamad ayaa la'soo taagi karaa. Waddan kasta oo nidaamka dimoqoraadiyadu ka jiro awoodda maamul waxaa loo dhiibaa dad shacabku soo doortay. Hase yeeshee, awoodda loo dhiibay madaxdaas waa mid sharci ahaan xad leh ama xaddidan. Qofkastaa oo madax ah wuxuu ku qasbanyahay in uu ilaaliyo xadka awooda loo dhiibay. Haddiise ujeeddooyinka awooda loo dhiibtay uu ku xad gudbo oo uu u fuliyo wax lid ku ah dalka iyo danaha shacbi waynaha soo doortey waxaa lagu khasban yahay in laga qaado talaabo sharciga waafaqsan.

### Hawl-galka 7aad

Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixiya.

1. Yaa u soo doortey Maamulaha dugsigiina in uu hogaamiyo hawlaha baris-barasho?
2. Sheeg laba awoodood iyo shaqo oo ay leeyihiin Maamuluhu.
3. Sheeg saddex dhibaato oo ka dhalan kara haddii Sharciguu aanu xaddidayn maamulka dawladu.

## 2.4. Sirta

### 2.4.1. Sirta Qoyska

- Waligaa ma maqashey maahmaahda Soomaaliga ah ee odhanaysa "Sir maqabe Allaa u sahana ". odhaahdani maxay sharaxaysaa?
- Ma garanaysaa maahmaah kale oo lagaga hadlayo Sirta Qoyska? La qaybso fikradaha saaxiibadaa aad isku Fasalka tihiin. Sharaxaadna ka bixiya hadey jirto sababta loo isticmaalo.

Qoysasku had iyo jeer waxay ka tashadaan nolol maalmeedkooda,sida ay u korin lahaayeen caruurtooda,tarbiyadooda u hagaajin lahaayeen,waxbarasho u gayn lahaayeen,shaqada waalidku hayo iyo ka qaybgalka bulshada,siyaasada, iwm.

Mararka qaarkood waxaa dhici kara in Qoyska dhexdiisa in uu khilaaf yimaado,khilaafkaa inaad

dadka kale u soo bandhigtaan ma wanaagsana mana fiicna. Arrimaha ka jira dhexjira qoyska cid ka baxsan qoyska in loo sheego ama la ogaysiiyo looma baahna mana habboona. Laakiin, waxaa weeye arrimaha sirta ah haddii la ogaado waxaa laga yaaba in qof kale dhibaato soo gaadho ama waa in ay ujeedadu noqoto waxaa suurto gal ah in qofka sirta leh wax yeelo gaadho haddii sirtu ka baxdo. Sidaas darteed, marka aynu leenahay in sirta la qariyo waa lagama-maar maan waa in ayna saamayn ku yeelanin cad-cadaanshaha iyo waxtarka ay leeyihiin in arrimaha qaarkood aan la daboolin . Haddii aynu hadalka si kale u dhigno arrimaha qaarkood ayaa lagayaaba in ay qarin ama asturid ku habon halka qaar kalena ku fiicanyihiin aan la daboolin.

### Hawl-galka 8aad

Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixiya.

1. Waa maxay Sirta qoysku?
2. Yaa dhowri kara Sirta Qoyska?
3. Maxay Tahay muhiimada in la dhawro Sirta Qoyska?

## 2.4.2. Dhibaatada ka dhalankarta xafidaad la'aanta Sirta Qoyska

- Waa maxay faa'iido darada marka la ilaalin waayo Sirta Qoyska?
- Ma garanaysaa xaafad dhibaato ay kaga timi ilaalin la'aanta Sirtooda?Haddii aad aragtey ka wada dooda dhibaatadaas adiga iyo asxaabtaada.

### Sheekadii Furaha

Ka dib marka ay albaabkooda ay qufilaan Xaawo iyo xaafadooda waxay ku furaha hoos galin jireen dhagax u dhaw albaabkooda,Xubnaha xaafada ka tirsan oo dhamina way yaqaaneen halka furaha la dhigo.Arintanina waxay ahayd Sir ay isla ogaayeen Qoyska oo dhami.siday doontaba ha ahaatee Xaawo waxay u sheegtay saaxiibadeed Sirtii xaafadooda,sheekadiina waxay gaadhey Tuugtii joogtey suuqa,Hadaba,maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxay ku soo noqdeen Gurigii oo albaabku furanyahay oo wixii alaab ay lahaayeen la sii gurtey,Qoyskii dhamaantood aad ayey uga xumaadeen arintii ku dhacdey.waxayna wargaliyeen Booliskii,markii la baadhey sababta keentay in la xado gurigooda waxay Boolisku ogaadeen in Sirtii ay isku ogaayeen la bixiye sidaasna lagu xadey.

### Hawl-galka 9aad

Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixiya.

1. Sidaay u sheegtey Sirta Qowskooda?
2. Maxay Xaafadu sameen lahayd hadii fashilinta sirtooda aaney dhibaato ka iman lahayn?
3. Yaa Maasuul ka ahaa fashilinta Sirtooda?

Ilaalinta sirta Qoyska oo la ilaaliyo waxaa loo arkaa dabeecad geesinimo iyo waliba wadanimo xambaarsan oo lagu kalsoonaan karo. Siraha Qoyska oo la ilaalin waayo waxaa ka dhasha dhibaatooyin badan oo halis noqon karaa. Waxaa ka mid ah in dadku isku-dhaco, bulshada

iyo qoysaska ayey waxyeelo gaadhsiin kartaa. Qarinta siraha macnaheedu ma aha in arrimaha shakhsiyaad, bulshada iyo dalka dhibaatooyin u keeni karaa oo aan la sheegin ama la qariyo.

Haddii siraha Qoyska qaar ka mid ah marka la ogaado dhibaatada ka soo gaadhaysa tan shakhsi, ummad ama dalka waxaa wanaagsan in la ilaaliyo. Haddii laakiin, waxtar ama faa'iido ku jirto in sirta la bixiyo, waxaa wanaagsan in la bixiyo. Dugsiga aad wax ka baratataan, agagaarka goobaha aad degentihiin, caafimaadkiina dhibaatooyinka aad kale kulantaan inaad si cad ugala sheekaystaan qoysaska ama waaxyaha ay khusayso ayaa loo baahanyahay.

### Hawl-galka 10$^{aad}$

Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixiya.

1. Arin nooceeya ayaa loo tixgaliyaa Sirta Qoyska?
2. Sheeg dhibaatooyin kale oo ka dhalan kara fashilaada Sirta Qoysku?

## 2.5. Musuq-maasuqa

### 2.5.1. Musuq-maasuqa laga geysan karo Hay'adaha Dawliga & kuwa aan dawliga ahaynba.

- Waxaad sheegtaan hay'adaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn ee degaankiina musuqmaasuqa ka dhici kara?
- Haddii uu qoyskiina qof ka mid ah ama idinku xafiis aad dan ka yeelateen kadibna ay dhibaato idinka soo gaadhay saxiibadin uga shekeeya.

### Guddiga Dugsiga

Qaar ka mida ah hay'adaha aan dawliga ahayn ayaa waxay fursad shaqo siyaan ardaydooda si ku meel gaadha iyagoo uga shaqaynaya xilliga fasaxa lagu jiro.waxaana lagu xushaa shuruudaha ah in ardaygu sagaalaad yahay celcelis-sanadeedka dhibcihiisuna yihiin 85% iyo wixii ka sareeeya, kaalinta koobaad ama kaalinta labaad waa in uu fasalkiisa ka gala.Hadaba dugsigii ayaa wuxuu sameeyey guddi soo xula ardayda,waxayna u kala saareen sidan hoos ku xusan:-

2.3. Shaxdani waxay tilmaamaysaa Liiska sida loo kala xushay ardayda xilliga fasaxa shaqeenaysa

| No. | Magacyada Ardayda | Fasalka | Da'da | Kaalinta | Dhibcaha fasalka 8aad |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Maxamed Cabdi | 9 | 16 | 1$^{aad}$ | 90% |
| 2 | Sahra Cumar | 10 | 17 | 5$^{aad}$ | 88% |
| 3 | Xaawo Muuse | 9 | 17 | 1$^{aad}$ | 92% |
| 4 | Aamiin Faarax | 10 | 15 | 1$^{aad}$ | 94% |
| 5 | Axmed Geedi | 9 | 15 | 2$^{aad}$ | 86% |

Ka bacdi wuxuu talo ku bixiyey in la qaato Maxamed Cabdi oo uu dhaley mid ka mid ah gudiga.sidoo kale waxay soo gudbiyeen magaca Axmed geedi oo ay ilmaadeer yihiin xubin kale oo gudiga ka mid ah. Ardaydii waxaa shaqaalaystey hay'adii. Laakiin Gudoomiyaha guddiga ardayda ee dugsiga ayaa aad uga doodey arintaas wuxuuna u sheegay in shuruudihii sharciga waafaqsanaa la garab marey Markii u horaysayba.Ka dib iyadoo laga duulayo arintaas ayaa waxaa la sameeyey guddi daba gala oo soo baadha xaqqiiqda jirta.

## Hawl-galka 11aad

Idinka oo sheekada kor ku xusan ku salaynaya su'aalahan soo socda ka jawaaba;

1. Miyey u badheedheen Musuq-maasuqa sida ku cad sheekada?
2. Haddii Musuq-maasuq uu yahay,mid nooceeya ayuu noqonayaa?
3. Yaa galey musuq-maasuqan?
4. Yuu waxyeeleeyay Musuqmaasuqani?
5. Maxaad u malaynaysaa sharci nooceeya in lagu xusho ardaydaas?

Inta badan musuq maasuqa iyo in la fuliyo fal ama arrin ama in si sharciga ka baxsan lacag ama dano gaar ahaaneed loo fushado, lacag la bixiyo ama la qaato ama fal gunada la isa siiyo toos ula xidhiidhaa weeye. Si kastaba ha ahaatee, musuq-maasuqu wuxuu leeyahay noocyo tiro badan .

Qaar musuq-maasuqa kamid ah waa ayaa hoosta lagu xusay;

- Musuq-maasuqa ka dhaca xafiisyada ama macadyada dawlada iyo kuwa aan dawlada ahayn awoodda mas'uuliyadaha ama xilalku u yihiin sabab , islamarkaana si sharciga ka baxsan oo dano gaar ahaaneed.
- Iyada oo muwaadiniinta xadgudub loo gaysanayo haddii nidaam xal noqon karin loo adeegsado si faa'iidooyin gaar ahaaneed loo helo waa musuq-maasuq.
- Haddii xadgudubyo la gaysto iyada oo la adeegsanayo awood xileedka dawladdu saartay. Tusaale haddiiyad qofka mas'uulka ah qaato iyada oo lagaga bedelaanayo adeegyada dawlada.
- Iyada oo la adeegsanayo habab kala gedisan in hantida bulshada la boobo,la lunsado ama lagu takrifalo , islamarkaana si gaar ahaaneed looga faa'iidaysto.
- In qof dambiile ah oo si sharci ah u xidhan ama xabsiga ugu xidhan la sii daayo mas'uuliyiintana lacag ama alaab la siiiyo.
- In saacadaha shaqada la ilaalin waayo ama la dhawrin goobta shaqada aan laga helin.
- Ardeynimada laftigeeda imtixaanka oo la qisho iyo in ardeyda loo ogolaado in ay kala eegtaan ama kala qishaan. Waxay ka mid tahay musuq-maasuqa.

## Hawl-galka 12aad

Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixiya.

1. Sheeg shaqooyinka aad u malaynaysid in ay ku salaysanyihiin musuq-maasuq?
2. Idinkoo ka matalaya Riwaayad,waxaad ka doorataan mid ka mid ah kuwan soo socda;
   (b) Dhakhtar
   (t) Dugsi
   (J )Xarunta Telefoonada ee Degmadiina
   (x) Xaafiiska Maamulka

## Gunaanadka Cutubka 2aad

Saraynta Sharciga waa arrin aas'aas u ah Jiritaanka Nidaamka dimuqraadiyada. Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, iyo kuwa Deegaanada, waa Sharci ay ansixiyeen wakiilo ay dadku soo doorteen. Dastuurka Federaalka waxaa ansixiyay wakiilo ay soo xusheen dhammaan qowmiyadaha dalku. Kan Deegaanadana, waxaa ansixiyay wakiilo ay soo xusheen dhammaan qowmiyadaha ama qabaa'ilada deegaanka kuwada nool.

Xaqiijinta sareynta sharciga waxaa fure u ah anshaxa suuban, sidaas awgeed, qaran ahaan ardayga waxaa laga rabaa asluub wanaagsan sida dhagaysiga qofka hadlaya, dulqaadka, farqiga oo hab nabad gelyo lagu xaliyo, Wadaniyad iwm.

Awood-xadayntuna waxay waxtar u leedahay xaqiijinta sareynta sharciga.Awood-xakamayn la'aantuna waxay khatar ku tahay jiritaanka sareynta sharciga. Marka aysan jirin sareynta sharciga waxaa meesha soo gala mubdi ah cad-cadaan la'aan iyo la xisaabtan la'aan la iska caadeysto, kadibna, halkaas waxaa lagu xadgudbayaa xuquuqihii dadweynaha.

Xafidaad la'aanta sirtuna dalka maadaama ay u daran tahay, waxaa haboon in si taxadar ku jirto loo xafido sirta musuquna waa fal dambiyeed loo baahan yahay in lala tacaalo. Wuxuuna u baahan yahay in la iska kaashado ka hortaga musuqa, haday tahay dawlad & shacaba, waxaana loo baahan yahay hay'ado la dagaalama sida qaybaha cadaalada iyo kuwa kaleba ( sida booliska, koomishinka ka hortaga musuqa & anshaxa, xeer ilaalinta, garsoorka IWM. Sidoo kale waxaa loo baahan yahay kaalinta shacabka eek u aadan la dagaalanka musuqa.

## Layliska Guud Ee Cutubka

### I. Run ama Been.

Tilmaan: Weedhahan soo socda tii run ah ku qor "Run" tii been ahna ku qor "Been" kadibna sababaha sharaxa.

1. Dastuurka dawlad deegaanadu marnaba isma khilaafaan ka Federaalka.
2. Hadii la xaddidey awooda maamulka dawladu,looma baahna in sharcigu ilaaliyo muwaadiniinta.
3. Madaxda dawladu waa kuwa la soo doortey ama dawladu u magacawdey boosaska

### II. ISku Aadi:

| B | T |
|---|---|
| 1. Dadka la soo xidho waxay xaq uu leeyihiin in lagu ogaysiiyo Luuqada ay fahmayaan Dambiga lagu soo eedeeyey | (b) Xuquuqda caruurta |
| 2. Awood xileedka sharcigu xaddidey ee lagu shaqeeyo | (t) Xuquuqda Haweenka |
| 3. Xaqa uu qofku u leeyahay in laga ilaaliyo wax kasta oo dhibaateenaya sida caafimaadkiisa, naftiisa iyo wanaagiisa iyo Wixii waxbarashada u diidaya. | (j) Xuquuqda Maxbuuska |
| 4. Shati been abuura oo kaa soo gala lacag si beena lagu lunsadey | (x) Xaddida Awooda |
| 5. Xeerarka,caadooyinka iyo dhaqada takoora haweenka Khatarna galiya caafimaadkooda kula Kacana jidhdilka | (kh) Musuq-maasuqa |
| | (d) Awooda aan la xaddidin |

### III. Buuxi meelaha banaan

1. __________ waa baahida loo qabo ilaalada hantida iyo xuquuqda muwaaadinka iyo walibaba inay si xor ah uga tagi karaan goob oo u tagi karaan goobta ay rabaan.
2. __________ waa si aaney maamulka dawladu ugu takri falin awoodooda masuuliyadeed.
3. __________,____________, iyo ____________ waa qaar ka mid ah tusaalayaasha Ardeyga dhaqanka(tarbiyada) wanaagsan leh.

## IV. Ka Dooro

1. Ka soo saar Kuwan soo socda tii si Sax ah u habaysan
   - (B) Shuruucda Dugsiga→Dastuurka Federaalka→Dastuurka Dawlad-deegaanka→Shuruucda Xafiiska Waxbarashada
   - (T) Shuruucda Xafiiska Waxbarashada→Dastuurka Dawlad-deegaanka→Shuruucda Dugsiga → Dastuurka Federaalka
   - (J) Dastuurka Federaalka→Dastuurka Dawlad-deegaanka→Shuruucda Xafiiska→Waxbarashada Shuruucda Dugsiga.
   - (X) Shuruucda Dugsiga→Dastuurka Dawlad-deegaanka→Shuruucda Xafiiska→Waxbarashada Dastuurka Federaalka.
2. Kuwan soo socda kee ayaan ka mid ahayn Sirta Qoyska?
   - (B) Sirta Xaaska iyo Sayga
   - (T) Sirta walaalaha
   - (J) Sirta Saaxiibadaa iyo Taada kuu gaara
   - (X) Sirta Hooyada iyo Aabaha
3. Kuwan soo socda teebaan laga rajaynaynin Anshaxa Ardyega wanaagsan?
   - (B) Ka qayb qaadashada horumarka Agagaarka
   - (T) Caawinta kuwa kaa yaryar
   - (J) Ka qayb qaadashada nadaafada Deegaankiina
   - (X) Kali sheekaynta adigoo diidan kuwa kale inay kula qaybsadaan

## V. Jawaab Kooban ka bixi

1. Sheega sababta loogu baahdey in dawlada Fedaraalku Dastuur ay yeelato?
2. Sharax xidhiidhka ka dhexeeya Dastuurka Dawlada Federaalka iyo Kan Dawlad-deeegaanada.
3. Waa maxay muhiimada ay leedahay in sharci ahaan loo Xaddido awooda masuuliyiinta dawladu?
4. Sidee ayaan u kala garan karnaa Sirta Qoyska iyo kuwa kale?
5. Sheeg labo ka mid ah musuq-maasuqa ka dhaca xarumaha dawlada?

CUTUBKA 3

# SINNAANTA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Gartaan sinnaanshaha qowmiyadaha shucuubta iyo dadyowga Itoobiya iyo xuquuqda siman ay leeyihiin.
- Sharaxaan xuquuqda sinnaanshaha dadka naafada ah.
- Fahmaan Sinaanshaha Jinsiga.

## 3.1. Sinaanta iyo Xuquuqda si siman uga faa'iidaysiga

### Waa maxay faa'iidooyinka ay u leedahay in ay si nada kuwada noolaadaan qowmiyadaha shucuubta iyo dadyowga Itoobiya?

Dastuurka Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya wuxuu dhigayaa in muwaadiniinta oo dhami in ay helaan xuquuqo siman iyo fursado ay kaga qaybqaataan arimaha siyaasada iyo dhaqaalaha bulshada ku saabsan iyda oo aan la takoorayn. Sinaanshaha muwaadiniinta bulshada dhexdeeda waxaa macnaheeda loola jeeda waa in aan jirin kala takoorid bulshada dhexdeeda ka dhacda oo ku salaysan lab ama dheddig, diin, midab alaab, fikrad, arragti--iwm Sidoo kale waxaa la soo saaray wareegtooyin taageeraya qodobkaa.

Hadaba,waxaa kulmey labo ardey oo fasalka Todobaadka ah oo lakala yidhaahdo Xaliimo iyo Dahabo.waxayna ka doodeen qodobka aan kor ku soo sheegney iyagoo hadalkoodii isku waydaarsadey sidan:

Xaliimo: Dastuurka Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya wuxuu dhigayaa in muwaadiniinta oo dhami in ay helaan xuquuqo siman.sidaa daraadeed,Saw isma khilaafayaan haddii muhiimad gaara la siiyo qaar ka mid ah kuwa kalena la xaqiro isla qodobkaa Dastuurku dhigayo.

Dahabo: Taageero gaara lama oo la siiyey ma keenayaan khilaaf ku yimaada Dastuurku qodobka uu dhigayo eel eh sinaanshaha muwaadiniinta oo dhan. Sababtoo ah,iyadoon qodobada kale ee sinnaanshaha la xaqirayni,ayaa waxaa jira takoorid xaga Caadooyinka,Taariikhda. Jinsiga iyo kuwa kale ay sababeen.Sidaa darteed, taageero gaara oo la siiyaa wax khilaafa ma keenayso ee waa xaqiijinta xuquuqda sinnaanshaha oo lagu dhaqmo.

### Hawl-galka 1aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba idinkoo ku salaynaya Dooda Xaawo iyo Dahabo.

1. Ma waxaad taageeraysaa dooda Xaawo mise tan Dahabo?Sharaxaad ka bixi sababtaad ku taageertey.

2. Dastuurka,qodobo kala duwan ayaa hoos u dhigaya Haweenka,Deegaanada dib u dhacey, Dadka naafada ah iyo kuwa dhibaatada gaarka ah ee taageerada u baahan.Sideed u aragtaa is barbardhiga leh xuuquuqda sinnaanshaha?

Dhaqan galinta xuquuqaha sinaanta siyaabo kala duwan ayaa loo macneeya . Kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah xoriyada siyaasada iyo dhaqaalaha, xuquuqda qofka muwaadinka ah u leeyahay ay in uu lahaado aragti kasta, islamarkaana xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa. In hanti ama alaab la yeesho, in la shaqaysto oo la noolaado, in aad wax daceyso laguna dacweeyo xuquuqaha qofka u leeyahay in la sugo talaaboyinka lagu xaqijiyo ayay ka mid yihiin. Waxaa jira waxyaabo badan oo ay ku kala duwanyihiin muwaadiniintu waxaana ka mid ah hantida, aqoon ama xirfadaha, awooddaha indheergaradnimo, muqaalka xubnaha ama shakhsiga,--iwm. Laakiin, marka la dhaqan galinayo nidaamka diimuqraadiga lama tixgalinayo waxyaabahan aynu soo tilmaanay oo dhan.

Dalal badan oo dunida ka jira waxay cadeeyaan dadka oo dhan in ay ka simanyihiin abbuurkooda bini'aadanimo. Si arrintan loo xaqiijiyana waxaa la soo saara sharciyo, siyaasado iyo nidaamyo kala duwan. Tusaale ahaan, dalkeena xuquuqaha shakhsiga, qoomiyadaha iyo shucuubta itoobiya, diimaha iyo waliba kuwa jinsiga) labka iyo dheddiga) waxaa lagu tilmaamay Dastuurka dawlada.

## Hawl-galka 2aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Maxaad u malaynasiin in ay yihiin siyaabaha loogu dhaqmo xuquuqda sinnaanshaha deegaan ahaan?
2. Si degan u akhri qodobka 25aad ee Dastuurka Itoobiya sharaxaadna ka bixi macnaha xuquuqda sinnaanshaha.
3. Sharax muhiimada ay leedahay xuquuqda sinnaanshaha .

### 3.1.1. Muhiimada ay u leedahay Xuquuqda Sinaanshaha ka

### Wada Faa'iidaysiga Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Dadyowga



Jaantuska 3.1. Wajiyada qowmiyada, Shucuubta iy dadyowga Itoobiya

- Maxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan?
- Maxaa loola jeedaa marka la leeyahay itoobiya waa "Musyamka Dadka"

Dastuurka dawladda Itoobiya xuquuqaha lagu qeexay kuwa ugu waaweyn waxaa ka mid ah xaquuqaha qoomiyadaha iyo shucuubta dalka la siiyay, xuquuqahan waxaa ka mid ah in ismaamul

dawlad goboleedyo xor ah la samaysto iyo in ismaamul walba xaq u leeyahay in uu go'aansado arrimiisa u gaarka ah.

Qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya oo ka faa'iidaysanaya awoodahooda qaranimo waxay samaysteen dawlad dhexe oo faderaal ah, maadaama hadda la dejiyay qaab dhismeed federal ah waxaa abuurmay midnimo, sinaan iyo cadaalad ku salaysan, sharciga dawladuna waa cahdi si wadajir ah ay qoomiyadaha iyo shucuubta itoobiya u dhexeeya, maadaama xuquuqdooda sinaansho loo xaqiijiyay, itoobiya waxay noqotay dal si wadajir ah qoomiyadaha ku nooli uga wada faa'iidaystaan.

Waxaa kale oo ka mid ah calaamadaha muujinaya sinaanta qoomiyadaha iyo shucuubta itoobiya xubno waafaqsan bulshooyinkooda ayaa wakiil u ah oo ka tirsan golaha federaalka ee dawlada dhexe.

Sida lagu xaqiijiyey sharciga dawlada muwaadiniinta itoobiya oo dhan in ay simanyihiin siyaabo kala duwan ayaa loo sharaxay.Xuquuqahan sinaashaha iyada oo laga shidaal qaadanayo kala duwan aanshaxa abbuurka ah ee u dhexeeya dadka qofka go'aan ama aragti kasta oo dabeeci ah uu lahaadaba kala duwaanaanshahan, abbuurka ah waxay asaas u tahay nidaam ay isku waafajiyaan fikradaha ay ku kala duwan yihiin. Daryeelida xuquuqahan in ay sii xoogaystaan waxaa asaas u ah midnimo ama sinaan. Tusaale ahaan dadku waxyaabaha daceeciga ah ee ay ku kala duwan yihiin waxaa ka mid ah lab iyo dhaddiignimada. Qoomiyado iyo shucuub kala duwan dal ay ku noolyihiin, islamarkaana ah muwaadiniin ayaa ah xaalad kale oo ay ku kala duwan yihiin. Luuqadaha kala duwan dadka ku hadla, in diimo kala duwan la aamino, xirfadaha iyo aqoonta kala duwan oo la yeesho,khayraadka dalkeenana si siman looga wada faa'idaysto waxay ka mid yihiin waxyaabaha la xidhiidhaa xuquuqaha bini adamka.

### Hawl-galka 3$^{aad}$

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Waa maxay faa'iidooyinka ismaamul hoosaadka Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Dadyowga?
2. Sharaxa sida loo tixgaliyo xuquuqda sinnaanshaha Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Dadyowga.

## 3.2. Muhiimada ay leedahay Sinnaanshaha Tixgalinta Luuqadaha iyo Dhaqamada Qoomiyadaha, Shucuubta iyo Dadyowga

- Xuquuqaha oo la dhawri waayo dhibaato noocee ah ayaa ka iman karta?

Sanado badan ayaa qowmiyado kala duwan oo ku soo wada noolaa dalka itoobiya ma ay heli jirin xuquuqda sinnaanshaha. Taas macnaheedu waxaa weeye qoomiyadaha iyo shucuubta itoobiya si siman uma wada heli jirin xuquuqahooda muwaadinimo sida ka wada faa'iidaysiga khayraadka dalka, si isku-mid ah oo loo qadariyo diimaha iyo dhaqanada kala duwan, fursadaha waxbarasho, ka qayb qaadashada arrimaha siyaasada, iyo helitaanka fursada ay isku maamulaan.

Waqtigan aan joogno dadyowga kale duwan ee ku nool deegaanada kala duwan cid walba waxay u muujiyaan si xor ah dhaqamada iyo hidaha ay leeyihiin.. In kasta oo laga yaabo in qoomiyadba qoomiyada kale waxyaabo ka mid ah dhaqankooda oo ay isaga mid yihiin jiraan hadana waxaa badan waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin loona baahanyahay in mid walba dhaqanada iyo nidaheeda u gaarka ah loo tixgaliyo lana qadariyo . Itoobiya waxaa ku nool qoomiyado iyo shucuub ka badan sideetan (80) oo ka badan sideetan. Marka hadaba loo eego sida sharciga iyo dastuurka dalku dhigayo qoomiyadahan iyo shucuubta oo dhani way simmanyihiin . Qof walba luuqada uu doorto in uu adeegsado xaqbuu u leeyahay.

## Hawl-galka 4aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Liisgareeya faa'iidooyinka ay leeyihiin xuquuqaha Qoomiyadaha,shucuubta iyo dadyowga Itoobiya?.
2. Waa maxay Khasaaraha ka iman kara haddii la tixgalin waayo Xuquuqahaas?
3. Idinka oo kooxo ah ka soo ururiya xogo kala duwan macalinkiina maadada Taariikhda idiin dhiga ama idinkoo ka tixraacaya buugaag kaleba waxaad soo akhrisaaan sidii ay ula dhaqmi jireen Qowmiyada Soomaalida iyo kuwa kaleba dawladihii hore ee ka jiray Itoobiya.

## 3.3. Sinaanshaha Jinsiga ( Labka iyo Dhediga)

### 3.3.1. Xuquuqda Sinaanshaha Haweenka.



Jaantuska 3.2. Wiilal & gqabdho cilmi baadhis samaynaya

- Maxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan?

Faraqa labka iyo dhidiga ay ku kala duwan yihiin waxaa ugu muhiimsan abbuurka ama sida ilaahay u abuuray. Laakiin, wax aan abuurka ilaahay ahayn oo ay ku kala duwanyihiin ma jiro. Waxay ka simanyihiin, cuntada, waxbarashada, shaqada iyo inay mushahar isku mid ah helaan, arrimaha ka dhexeeya ama udhexeeya oo si isku-mid ah uga w ada hadlaan go'aan midaysana ka soo saaraan. Gabadhuu waxay xaq u leedahay in ay danaheeda, arrimaha qoyskeeda, ama waxyaabaha kale ee xuquuqda u leedahay in ay ka hadasho ama xor u ahaato, kala tashato qoyskeeda, waalidiinteeda --iwm, Waxaa kale oo ay xaq u leedahay gabadhu in ay hesho waxbarasho xor ah, guursato cidda ama ninka ay rabto, u shaqaysato sida ragu u shaqaystaan si la mid ah.

Wadanada qaarkood waxaa jira xeer ama sharci odhanaya raga iyo dumarku in ayna sinayn. Dumarka xuquuqo dhawr ah ayey siiyaan halka ragana xuquuqo badan ayey siiyaan. Sharciga cusubee dawlada Itoobiya soo saartay wuxuu dhigaya in rag iyo dumarku u siman yihiin guurka, qoyska, maamulka, alaabada iyo adeegsigeeda, shaqada iyo wax yaabaha kale ee la midka ah .Wiilasha iyo gabdhuhu xuquuqda ay uleeyihiin in ay go'aan qaataan awooddahaan halka ay gaadhsiisantahay ma tilmaami kartaan?

## Hawl-galka 5aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Maxaad ka fahmaysaa weedha tidhaahda Dumarku waa Hooyadii Aduunka?
2. Miyaad u malaynaysaa in lagu guulaysankaro horumarka dalku haddii Haweenku aaney ka qaybqaateen? Sharaxaadna ka bixi jawaabtaadana.
3. Miyaad sheegi kartaa haweenay tusaale fiican u noqotey deegaankiina?u soo bandhig Ardeyda galaaskiina.

### 3.3.2. Astaamaha muujinaya xuquuqda sinaanshaha dumarka.

- Sheeg Saddex tusaale oo ka hadlaya xuquuqda sinaanshaha Haweenka.

Wakhtigii hore ee la soo dhaafay xuquuqaha dumarka waxay ka hooseeyeen kuwa ragga ee dalkeena, waxaa jiray fal dhaqameedyo aad u tiro badan oo badankoodu xaqiri jiray xuquuqaha dumarka in kasta oo hadda isbedel la taaban karo la arkayo haddana weli waxaa jira waxyaabo badan oo loo baahan yahay in wax laga qabto xilligan aynu ku joogno laftiisa waxaa jira falal meel kaga dhacaya xuquuqaha dumarka iyo nidaamyo hoosta ka xidhiidhsan oo lidi ku ah xuquuqaha dumarka oo aan wali wax laga qabanin, guud ahaan si falalkan aragtiyadan dib u dhacnimo loola halgamo waxaa lagama maarmaan ah in la tixgeliyo sinaanta dumarka, isla markaana qof walba xil iska saaro sidii uu u daryeeli lahaa mas'uuliyada saran.

Waxaa jirta odhaah tidhaahda haddii dumarka wax la baro waxay la mid tahey dhamaan dadkoo dahn in wax la barey.

Dastuurka Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya wuxuu dhigayaa inay Dumarku xuquuq la mid ah tan raga sida ta guurka,lahaanshaha hantida gaarka ah,in shaqo ay helaan.sidoo kale waxay xaq u leeyihiin in laga badbaadiyo caadooyinka xun-xun,cadaalad darada iyo dhaqanka ka hor imanaya sinnaanshahooda.

## Hawl-galka 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Qeex xaalada Dumarku ay kula simanyihiin Raga.
2. Sheeg qaar ka mid ah Caadooyinka xun-xun ee lagula dhaqmo haweenka

   Soomaaliyeed iyo Maahmaahyo Lid ku ah ee deegaankiina laga isticmaalo.
3. Sharax waxa lagaa rabo sidii aad uga badbaadin lahayd Haweenka Caadooyinka xun-xun.

## 3.4. Xuquuqda dadka Naafada ah



Jaantuska 3.3. Dadka naafada Taakuleyn haddii la siiyo hawl walba way qaban karaan

- Maxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan?

Dadka naafada ah sida muwaadiniinrta kale waa in xuquuqahooda si buuxda loogu tixgeliyo, islamarkaana daryeel ku haboon loo fidiyo, dhanka dadka xubnaha jidhka iyo Maskaxda dhaawacu ka soo gaadhay waa in ay daryeel ku filan la siiyo, iyada oo loo eegayo kolba awooda dhaqaale ee dalku inta uu la'eg yahay, marka xuquuqahooda loo tixgeliyo waxaa la suurto gelin karaa in horrumar la taaban karo la gaadho.

### Hawl-galka 7aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Qor dhammaan noocyada ama magacyada loogu yeedho dadka naafada ah?.
2. Waa maxay xuquuqaha gaarka ah ee dadka naafada ah?

### 3.4.1. Dhibaatooyinka ka dhalan kara haddii aan la tixgelin xuquuqaha dadka naafada ah.

- Waa maxay Xuquuqaha dadka Naafada ah oo la dhawri waayo dhibaato noocee ah ayaa ka iman karta?

Dadka naafada ah waxay leeyihiin dhammaan xuquuqaha dadka aan naafada ahayn ay leeyihiin, waxaa intaa u dheer xuquuqaha ay ku heleen naafinimadooda.Sidaa darteed, waxaa lagama maarmaan ah in loo tixgeliyo lagana dhawrsanaado in naafanimada loo aaneeyo nasiib daro waa dad muwaadiniin ah. Xurmaynta/dhawrista xuquuqda dadka dhibanayaasha xaga xubnaha jidhkooda haday tahay curyaan, indhoole, dhagoole, laangadhe, IWM, waa waajib saran dhammaan shacab & xukuumadba xanaaneynta/daryeelista dadkan aynu kor ku soo sheegnay. Waayo waa qayb ka mid ah bulsho-weynta dalka markaas dalkana xuquuq bay ku leeyihiin in loo fidiyo adeegyada aas'aasiga ee sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha nadiifta, isgaadhsiinta.

Gaar ahaan dadkan dhibanayaasha ahi waxay leeyihiin baahi gaar ah tan bulshada kale ka duwan. Sidaa awgeed, waxaa waajib muqadas dhaqamiyan & diiniyan in taakulo-gaar ah loo fidiyo si ay u dareemaan jacaylaha, taageerada, walaaltinimada iyo soo dhawaynta loo hayo iyaka. Sidoo kale, xubnahan bulshada ka tirsani, waa in la tusaa inaysan ka garaad & karti hoosayn bulshada inteeda kale, markaasna ay tartan la sameyn karaan arimaha dhaqaale, bulsho iyo kuwa siyaasadeedba.

Marka si wanaagsan oo ay walaaltinimo ku dheehan tahay marka loola dhaqmo, ama loola macaamilo dadkan, waxay qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada inteeda kale, waxayna qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada caadiga ah, islamarkaana waxay yeelanayaan dareen ah dad & Wadaniyaday u qabaan.

### Hawl-galka 8aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Waa maxay dhibaatada ka dhalan karta haddii la dhawri waayo xuquuqda sinnaanshaha bulsha ahaan iyo dhaqaale ahaanba dadka naafada?
2. Sharaxa siyaabaha loo taageeri karo dadka naafada?

3. Waa maxay doorka iyo masuuliyada kaa saran inaad tixgalisid dadka naafada?
4. Sheega faa'iidooyinka tixgallinta dadka naafada ah.

## 3.5. Faa'iidooyinka ay Leedahay Sinaanshaha Diimaha

- Waa maxay faa'iidooyinka ay leedahay tixgalinta Diimuhu?

Xaaladaha ugu muhiimsan ee dadka isku-soo dhawayn karaa waa mudnaanta ama tixgalinta qofba qofka kale u muujiyo . Aragtidan oo kalena waxaa saamayn weyn ku leh kolba goobta la joogo xaalada dhabta ah ee ka jirta. Dadka deegaanka ku nool waxay isku yaqaanin dhaqan iyo waxyaabaha (diimaha) ay aaminsan yihiin . Ma fiicna aragti, diinamaaaminsanaan iyo dhaqan shakhsi kali ah u gaar ah . Arrimahanina waa waxyaabaha dadka deegaanka ku wada nool awood u siiyaa in ay isku-fikiraan, midba midka kale qadariyo si wada jir ahna u noolaadaan. Waa waxyaabaha suurto galiya in xubnaha bulshada isku-deegaanka ah is-ixtiraamaan, wada noolaadaan, islamarkaana aragtiyo midaysan yeeshaan.

Sida uu dhigayo sharciga dawlada itoobiya diin kasta qofka ha aaminsanaada waxaa loo tixgalinaya xoriyadiisa. Haddii aynu si kale u dhigno. Sida uu dhigayo sharciga itoobiya u yaala qof kasta wuxuu xor u yahay in uu aamino ama raaco diin kasta oo uu rabo.



Jaantuska 3.4. Tixgelinta diimaha kala duwan sida uu dhigayo J. F.D.Itoobiya

### Hawl-galka 9^aad^

Koox-koox kaga wada shaqeeya

1. Waa maxay Faa'iidooyinka xoriyada Dadku in ay aaminaan ama qaataan diinta ay doortaan?
2. Sheeg xaalada sharcii ee lagu xaddidayo diimaha sida Dastuurka Federaalka uu dhigayo

## Gabagabada Cutubka Saddexaad

Dastuurka dawlada itoobiya xuquuqaha dadku in ay simanyihiin ama dadku leeyahay xuquuqo siman ayaa siyaabo kala gedisan loogu qeexay. Sinaanshaha xuquuqahan waxaa loo kala qeexay heer shakhsi ahaaneed, koox ahaaneed iyo heer bulsho ahaaneed . Waxaa kale oo si cad loo qeexay xuquuqaha muwadinimo, lab ama dhignimo, kuwa qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshonimo . Xuquuqaha dhaqan ahaaneed , luqadaha iyo diimaha in ay sinaadaan waxay ku cadahay sharciga dawlada in la adkeeyoamadhawro sinaanshaha bulsho ama dal waxaa saamayn weyn ku leh dareenka muwaadinінta dalku qabaan.

Markasta oo ay midnimadu ama sinaanshuhu si xoogaysataba, waxaa sii fiicnaanaya is-qadarinta iyo istaageersiga , rabitaan midaysan oo la yeesho wuxuu fudaydinaya ama abbuuraya xaaladamajawi lagu wadashaqayn karo. Sidaas daraadeed, sharciga hortiisa qabiil, diin, aqoon ama xirfad (ixtiraan aqoonyahanimo) midna xuquuq dheeri ah ama ka yar ta qofka kale lama siinayo. Ixtiraamka xornimo ama biniadanimo laguma kala duwana . Si nabadgalyo loogu wada noolaado qofkasta oo muwaadin ah waxaa looga baahan yahay in uu qadariyo midba midka kalena taageero. Dadka bini adamka ah dhamaantood muwaadin qadariya in aad noqotid ayaa waajib kugu ah.

## Layliska Guud Ee Cutubka Saddexaad

### I. Run ama Been

1. Dastuurka dawlada JDFI waa dhikumanti ka mid ah dhikumantiyada si la taabankaro u xaqira xuquuqda sinaanshaha.
2. Kuwa ka midka xuquuqaha uu dhigayo Dastuurka Itoobiya waxaa gundhig u ah xuquuqda sinaansho ee Qowmiyadaha,shucuubta iyo Dadyowga.
3. Dhibaatooyika ka dhalankara takoorku ma'aha mid waxyeelo keenaya.
4. Bixinta canshuurtu waa waajibaadka muwaadinka.

### II. Sida ay iskugu habboon yihiin iskugu aadi qaybta B iyo qaybta T.

| B | T |
|---|---|
| 1. xuquuqda is-maamul | B. Masuuliyada dawlada iyo shacabkaba |
| 2. Xiligii murugada | T. Dhaqanka iyo caadooyinka xun-xun |
| 3. Af-duubasho iyo guurka lagu degdego | J. Madaxbaanida dadwaynaha |
| 4. Daryeelka dadka naafada | X. Xasuuqii foosha xumaa |
| | kh. Xukunka Aqlabiyada yar |

### III. Buuxi Meelaha Banaan

1. __________________ iyo _______________ waa Laba loo tixgaliyo xuquuqda muwaadinka.
2. Dalkeena qaybinta xarumaha u adeega bulshada waa in ay noqdaan ___________________ .
3. Xarumaha Cadaalada ee u adeega bulshada waxaa loo qabiyaa __________ iyo __________.

### IV. Ka Dooro.

Su'aalaha soo socda mid walba jawaabta ku habboon dooro.

1. Kuwan soo socda mida sinaanshaha muwaadinimada aan lagu qeexi karin waa midee?
   B. In qofka yeesho takhasuus cilmiyeed.
   T. Baahiyada dabeeciga ah oo dhammaantood qofka u buuxsama
   X. In aad go'aansato in aad nasiibkaaga beegsatid.
   Kh. Xuquuqda qofku leeyahay in uu xornimadiisa ka fikiro.
2. Kuwan soo socda midka sida aadka u fiican u muujinaya sinaanshaha labka iyo dhaddiga waa kee?
   B. Xuquuqda uu leeyahay qofka dalka u dhasho.
   T. Shaqo isku-mid ah (isku-darajo ah) islamarkaana leh mushahar isku-mid ah oo la helo.
   J. Qofkasta diinta uu doorto oo uu raaco.
   X. Luqada qofka doono oo uu adeegsado.

3. Astaamahan ama dabeecadaha dadka lagu kala saaro ee soo socda midka aan doorasho lagu go'aamin karin waa midkee?

   B. Ku dhaqan diimeed

   T. Muwaadin dal u dhashay.

   J. Aqoon ku kala saraan.

   X. Ka dhalasho qabiil ama beel.

V. ka dooro jawaabaha saxda ah ama ku habboon mid walba oo kamid ah su'aalahan soo socda. Xarfahaad dooratidna goobo gali.

1. Nidaamka diimuqraadiga ah maxay yihiin xubnaha haya awooddaha maamulka iyo mas'uuliyada?

   B. Waa ciddaamaxubnaha hela dhammaan codadka ay bixiso bulshada ee codeeyey.

   T. Waax ka tirsan hesha codka codadka shacabka.

   J. Ciidamada difaaca codadka ay bixiyeen dhammaantood cidda hesha.

   X. Mucaaradka iyo musharaxiinta madaxa banaan kuwa taageera waax ka mid ah .

2. Kuwan soo socda midkee leh awoodda lagu soo saarayo sharciga lagu dhisayo dawlada dalkeena.

   B. Ras'iiskul -wasaaraha dalka

   T. Golaha wasiirada.

   J. Shirgudoonka garsoorayaasha iyo madaxweynaha.

   X. Golaha wakiilada bulshada.

3. Waa maxay waxtar ama faa'iidooyinka ugu muhiimsan ee ay leedahay in awooddaha dawlada loo kala qaybiyo waaxyaha kala ah sharci dejinta, dhaqan galinta sharciga iyo ilaalinta sharciga?

   T. Awooddaha iyo mas'uuliyadaha si heer fadaral loogu kala saaro.

   J. In awooddaha iyo mas'uuliyadaha loogu kala qaybiyo mid kilil iyo mid dhexe.

   X. In awooddaha iyo mas'uuliyadaha si cad loogu qaybiyo, islamarkaana loo helo waaxyo laga xisaabtamo.

VI. Sharaxaad gaaban.

Tilmaan : Su'aalaha soo socda jawaabo cad- cad iyo sharaxaado ku haabboon ka bixiya

1. Qeex muhiimada ay leedahay tixgalinta xuquuqda sinaanshaha
2. Sharaxa waxa ay la micno tahay marka la leeyahay "horumarku ma suurta gali karo ilaa ay haweenku ka qaybqaataan mooyaane".
3. Sharax siday bulshadu u daryeelid lahayd dadka naafada ah.

CUTUBKA 4

# CADDAALADA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib, ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- Gartaan In muwaadniinta dhexdooda laga dhexsameeyo nidaam cadaalad ku dhisan.
- Fahmaan geedi socodka garsoorka.
- Gartaan macnaha xarumaha adeeg bixinta iyo sida cadaalada ah ee ay u qaybsanyihiin.

## 4.1. Jiritaanka Nidaam Caddaaladeed oo ka Madax-banaan Eexda

- Nidaam cadaaladeed oo ka hufan dhinac u xaglin muxuu yahay ama waa maxay?
- Ka dooda falalka tilmaama nidaamyada dulmiga iyo dhinac u xaglinta intiina leh u sharaxa ama u sheega saaxiibadiina fasalka.

### Xaafadaha is-kaashadey.

Xili hore waxaa jiray xaafado iskaashaday oo loo yaqaanay "xaafadaha iskeenay" deegaanka ay ka tirsanaayeena aad looga yaqaanay. Sababaha ay ku gaadheen darajadan iyo sumcadana waxaa ka mid ahaa bulshaddii deganayd goobaha ka tirsan deegaanka ayaa waxay sammaysteen ururo iskaashato ah ay ka mid yihiin kuwo ganacsi, kuwa hanti isku gaysta ka dibna is-daymiya, iyo goobo waxbarasho ka dibna sidaa u wada shaqaysan jiray. Xaafadaha kale ee deegaanka ka tirsan bulshada degani aragti fiican islamarkaana hawl karnimo ku dheehantahay ayey ka qabeen bulshada ka tirsan xaafadaha iskaashaday.

Sidaa darteedna " nololba waxay ku hadhay xaafadaha iskeenay" in la yidhaahdo ayey mutaysteen. Hasa ahaatee, tobankisano ee tegay sababo kala gedisan awgood dhaqaalihi iyo goobihii dhaqanka, sharafti ama qadarinti ay horay u lahaan jireen wday iska-lumiyeen. Waa goobo aan laga shaqaysan karin ama ayna suurto gal ahayn in laga shaqaysto laguna noolaad in la yidhaahdo ayey gaadheen. Laakiin labo sano wixii ka dambeeyey xaafadihii iskeeni waxay awood u heleen in ay marka kale isku-soo abaabulaan una soo ceshadaan dadaaladi ay horay u sammaynamajireen. Waxaa sababa u ahaa xaafado dhawr ah oo dadaalo badan sammeeyey shirar ay ku wada doodaaan kagana doodaan arrimahooda islamarkaana ku go'aansadeen in ay dib u soo ceshadaan sumcadoodi iyo wax wada qabsigoodi qabtay.

Waxay awoodi u heleen in ay qeexaan waxyaabihi sababta u ahaa bulshada xaafaduhu in ay caajisaan

kadibna amnigi iyo kala dambaynti bur-burto kadibna waxay islagarteen farsamooyinka loo xalin karo loona soo noolayn lahaa iskaashigi iyo barnaamijyadi horrumarineed ee ay fulini jireen. Waxay ku dadaaleen sidii ay u soo celin lahaayeen nidaamyadi cadaaladda ahaa ee u wada shaqaysan jireen una wada noolaan jireen. Wada hadaladi ay yeesheen go'aanadi ka soo baxay waxaa ka mid ahaa dhibaatooyinka horay u dhacay in ayna dib u soo noqonin. Si ay uga digtoonaadaana waxay qorsheeyeen hawlo kala duwan kuna heshiiyeen in sidooda loo fuliyo. Si nabad galyada loo sugo loona xoojiyo waxaa la abuuray nidaam laga bilaabo qoyska illaa iyo ururadaamawaaxyaha dawladdu u wada shaqeeyaan islamarkaana u wada xisaabtamaan ayaa loo dejiyey.

Si loo dhaqan galiyana waxaa la sammeeyey gudi ka kooban xubno laga soo xulay dhalinyarada, gabdhahaamadumarka, shaqaalaha dawlada, ururada diimaha iyo odayaasha beelaha. Hawlaha gudigu u xilsaaran yahay waxaa ka mid ah in ay qaban qaaybiyaan kulano lagu wada dooda islamarkaana la isku-calool xaadho iyo bulshada oo la gaadhsiiyo waxbarasho ku saabsan dabad galyada iyo cadaaladda. Waxaa kale oo inta u dheer, maamulka qosyka iyo bulshada, qaybinta dhulka, isticmaalka hantida --lwm in laga tirtiro eexda, ama dhinac u galinta , xuquuqda uu qof leeyahay oo la siiiyo qof kale oo an xaq u lahayn, islamarkaana in la helo habab ama farsamooyin loo dhaqan galiyo loona xoojiyo cadaaladda ayaa waxay ka mid yihiin mas'uuliyadaha saaran gudiga.

Kadib marki ay bilaabeen dhaqan galinta qorshaha ay diyaarsadeen marba marka ka dambaysa waxaa soo xoogaysanaysaay xaaladaha nabadgalyo ee xaafadaha iskeenay. Sidaa darteed, waxay awood u heleen in ay dib u soo ceshadaan ururadi ganacsi, dhaqan iyo goobihi waxbarasho ee horay u jiri jiray laakiin bur-buray. Nabad galyadan ay dib u soo celiyeen islamarkaana xoojiyeen xaafadaha iskeenay ka sokow waxaa ka faa'iidaystay bulshaddii ay dariska ahaayeen. Sida daraadeed, xaafadaha iskeenay iyo bulshada degan xaafadaha la dariiska ah waxay garteen, waxtarka ay leedahay cadaalad ka hufan dhinac u xaglin iyo kala shiki iyo in nabad galyada la adkeeyo.

## Hawl-galka 1$^{aad}$

Idinka oo ku salaynaya sheekada korka ku xusan su'aalahan soo socda jawaabo ku habboon ka bixiya.

1. Xaafadaha iskaashadey dhibaatooyinki sida xun u saammeeyey sharaxa.
2. Si ay dhidibada ugu aasaan nidaam cadaaladeed oo ka hufan khiyaamo iyo danaysi bulshada degan xaafaduhu hawlihi ay fuliyeen hal-hal u tilmaama. Waxqabadyadan aad tilmaanteen kuwa ama ta aad isleedihiin faa'iidooyin aad u wanaagsan bay leedahay waa kuwee?
3. Sharax nidaamka cadaaladeed ee ka hufan khiyaano iyo madmadaw waxtarka heer qaran (dal) ee uu leeyahay.

Nidaamka cadaaladda ah ee ka hufan khiyaamada iyo cadaalad darada in uu jiro iyo in kale siyaabo kala duwan ayaa loo sharaxi karaa. Muwaadiniinta oo si siman loogu adeego ama wax loogu qabto

iyo xuquuqaha oo la dhawro ayaa waxay ka mid yihiin nidaamyada cadaaladda ah. Masuuliyiinta dawlada iyo shaqaalaha dawladdu xilka la saaray marka ay si firfircoon, daacad ah uga soo baxaan islamarkaana si daacadnimo leh oo xumaan ka maydhan ugu adeegaan bulshada waxaa xoogaysanaysa cadaaladda. Guud ahaan, jiritaanka cadaalad ka hufan daacad darada, dulmiga iyo danaysiga waxay sababaysa in la helo bulsho si toos ah isku-hortaagta, daacad darada iyo khiyaanada neceb kadibna la dagaalanta.

Cadaaladda ka hufan dhinac u xaglinta, dulmi iyo danaysiga nidaam ahaan jiritaankiisa faa'iidooyinka aad u tiro badan ayuu leeyahay. Waxaana ka mid ah kuwa ugu muhiimsan kuwan soo socda:

- Wuxuu xoojiyaa dhismaha nidaamka diimuqraadiyada ah.

jiritaanka nidaamka ka hufan daacad darro oo cadaalad ah maadaama lagu xaqiijiyey xuquuqaha sinaanta iyo midnimada ee bulshada wuxuu gacan ka gaysanayaa adkaynta nidaamka dimuqraadiyada ah. Cadaaladda ka hufan xummaanta iyo dimuqraadigu waa fikrado siyaabo badan iskugu iskugu dhafan. Waxyaabaha lagu garto inuu dal ka jiro nidaamka dimuqraadigu kuwa ugu muhiimsan waxaa ka mid ah marka maamulka dawladdu dhaqan nidaam cadaalad ah oo ka hufan dhinac u xaglin, khiyaamo--iwm oo muwaadiniinta oo dhana u simanyihiin.

- Nabadgalyada ayuu xoojiyaa.

Nidaamka cadaaladda ah ee nadiifta ka ah kala dhawaysiga wuxuu ka illaaliyaa dhammaan arrimaha is-faham darro iyo isku-dhac ka dhex abbuurmi kara bulshada islamarkaana wuxuu xoojiya ama adkeeya xidhiidhka bulshada oo uu ka dhigo mid caafimaad qaba ahna joogto. Muwaadiniintu in ay sharciga u hogaansanto lagana illaaliyo waxyaabaha dhib u keeni kara aalad loo adeegsado weeyaan. In dalka laga dhaqan galiyo nabad waarta kaalin aad u weyn ayuu ka qaata.

- Wuxuu xaqiijiyaa horrumarka deg-dega ah.

Nidaamka ku salaysan cadaalada wuxuu xaqiijiyaa in muwaadiniinta kolba in ay awoodoodu u saamaxdo iyo nooca shaqada ay doortaan ka shaqaystaan xaq u leeyihiin iyo waliba in ay xaq u leeyihiin in ay si firfircoon uga qayb qaataan dadaalada ama dhaqdhaqaaqyada lagu horrumarinayo dalka islamarkaana wuxuu door laxaad leh ka qaata horrumarinta dalka iyo barnaamijyada maal-gelinta ee laga fuliyo deegaanada kala duwan ee dalka.

## Hawl-galka 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Waa maxay nidaamka cadaaladeed ee ka hufan daacad daradu waxtarka uu u leeyahay fulinta barnaamijyo horrumarineed oo deg-deg ah?
2. Tax Qodobada korka ku xusan marka lagu darro nidaamka diimuqraadiga ah iyo nidaamka cadaaladeed ee ka hufan takoorida sida ay u xidhiidhaan yihiin leeyihiin.
3. Sharaxaad ka bixi nidaamka cadaaladeed ee xuquuqda ah iyo nabad galyadu waxyaabaha ay isaga midka yihiin ama meelaha ay iskala xidhiidhaaan.

## 4.2. Dhibaatooyinka ka dhalan kara Nidaamka Cadaalad darada ah

### 4.2.1. Dhibaatooyinka Nidaamka Shaqo ee Eexda iyo Cadaalad-darada Kudhisan

- Sheega dhibaatooyinka aad is-leedihiin waxay ka dhalan karaan nidaamyada aan cadaaladda ahayn.

Waxaa jiri jiray shan beelood oo mudo aad u dheer dal maamuli jiray (qoomiyado shan ah oo hal dal oo ka dhexeeyey wada maamuli jiray). In kasta oo beelahan ay hal maamul uu ka dhexeeyey, wax nabad galyo ah iyo wax jacayl ah ma dhex oolin. Haddii ayna kaba badnayn labo ka mid ah beelahan waxaa loo gaystey xadgudubyo iyo dulmi badan, in badana baana lagu adeegtay lana xaqiray. Masiibooyinka dabeeciga ah iyo kuwa dadku keeno ee dalka ka dhaca ayaa ka mid ahaa dhibaatooyinka ay la kacaa kufayeen labadan beelood. Tusaale ahaan haddii ay roob la'aan iyo macluuli saamayso , ama xanuunada faafa ku dhacaan, ma jirin cid u caawinjirtey. Sidaas daraateed, markasta oo dhibaatooyinkani soo noqdaan si gaar ah oo islamarkaana aad iyo aad u daran ayey u saammayn jireen labadan beelood.

Guryahooda waa la gubaa; hantidooda waa la dhacaa ama boobaa, goobaha ay ku noolyihiina waa laga masaafurin jiray. Beelahan iska daa in laga guursadee in wax lala cuno ama lala cabo waxaa loo arki jiray dambi. Falalkan xun-xun ee beelahan loo gaysanayo in kasta oo ay si tallaabo-tallaabo ah u soo yaraanayeen hadana looma ogolayn in ay ka qaybqaataan arrimaha siyaasada, iyo dhaqaalaha ee dalka ka socda . Goobaha ama deegaanada ay ku noolaayeen wax barnaamijyada horrumarineed ah iyo adeegyada bulsho oo laga fulin jiray haba yaraatee ma jirin . Labada beelood si ay isku-hortagaan ama isaga difaacaan xadgudubyada loo gaysanayo waxay adeegsan jireen habab ama farsamooyin kala duwan . Tusaale ahaan, goobaha ay ku noolyihiin khayraadka dabeeciga ah ee ka jira lama daryeelo.

Ma lahayn dareen lahaansho ah oo ay u qabaan deegaanada ay ku noolyihiin iyo dalkaba . Waxaa lagu yaqaana dhirta oo ay jaraan islamarkaana gubaan. Waxay taageersanayeen in ay dabar go'aan xayawaanka duur-joogta ah . Xiliyo kala duwana dadka ka yimmaada dalalka dibada islamarkaana soo weerara ayey gacan siin jireen. Xiliyo ama muddooyin dhaw wixii ka soo dambeeyeyna waxaa xoogaystay dadaaladi ay bulshooyinku u galeen in ay is-hortaagaan kana dagaalamaan cadaalad-daradi dhexdooda ka jirtay. Banaan baxyo ka dhan ah dawlada oo ay sammeeyaan inta ay dhaafeen ayey galeen doodo iyo dalaalo kala duwan oo ay kaga hortegayeen cadaalad darada. mas'uuliyiinta dawladdu awood ay banaan baxa ay bulshadu qaban ayso kaga hortagaan way waayeen maaliba maalinta ka dambaysa dhaqdhaqaayada ay meelaha kala duwan ka sammeeyaan ayaa aad u dhibay. Maadaama goobihi ganacsiyada oo dhani xidhmeen dhaqaalihi hoos u dhac aad u daran ayaa ku yimiday. Nabad galyadi horayba aan u jirin maadaama ay sii baa'baday firxadka iyo kala fogaanshaha dadkuna maalinba maalinta xigta tiradoodu aad bay u sii biiraysay.

## Hawl-galka 3aad

Idinka oo sheekada korka ku xusan ku salaynaya su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Sharaxa dhacdooyinka ka tirsan sheekada ee tilmaamaya nidaamka cadaalad darada ah.
2. Labada beelood taageerooyinka ay siinayaan dadka dibada ka soo weerara dalka ma waxaad leedihiin way ku saxsan yihiin ? waayo?Ma waxaad u malaynaysiin sababtu inay tan tahay?
3. Waa maxay sababaha labada beelood u yeelan waayeen dareen lahaansho ah oo la xidhiidhaa deegaanadooda iyo waliba dalkooda?

Nidaamyada cadaalad darada ah dhibaatooyinka ka dhasha ama sababta u ah kuwa ugu waa weyn waxaa ka mid ah :

- Dareenka muwaadiniintu u qabaan shaqada oo ay isxilqaankooda iyo firfircoonidooda oo yaraata. Falalka cadaalad darada ah ee goobaha iyo marxaladaha kala duwan laga fuliyo waxay keenaan dhibaatooyin kala gedisan. Tusaale ahaan, waxay burburinayaan dareenka wadaniyada ee ay muwaadiniintu leeyihiin; hantida bulshada oo la burburiyo ama lagu takri falo, in la tir-tiro dareenki daljacaylka ee lagu daryeelayey --Iwm. Nidaamyada cadaalad daradu waxay dhaawac weyn ugaystaan firfircoonaanshaha shaqo ee muwaadiniinta waxayna sii xoojiyaan aragtida ah maxaa iga galay ama waxba igama khuseeyaan.
- Banaanbaxyo sharci darro ah oo la abaabulo iyo nabad galyada iyo deganaanshaha oo la waxyeeleeyo. Nidaamyada aan cadaaladda ahayn dhibaatooyinka halista ah ee ay sababaan kuwa ka midka ah uguna khatarta badan waxaa ka mid ah kuwa sababa in bulshadu ku kacdo dawlada . Marka banaan baxyadu bataan ama ballaadhaan islamarkaana sharciga iyo kala dambayntana baabi'iyaan , waxaa meesha ka baxaya nabadgalyadi iyo degaan aanshihi. Waxay socdaanba ha socdaane waxay sabab u noqdaan in dalku burburo.

## Hawl-galka 4aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Deegaanadiina iyo dalkaba ha ahaatee si looga hortego cadaalad darada hawlaha loo baahanyahay in la fuliyo sharaxaad ka bixiya.
2. Sheega qodobada korka lagu soo sheegay marka lagu darro nidaamyada cadaalad darada ah haddii ay dalka ku faafaan dhibaatooyinka asaasiga ah ee ka dhalan karaa.

## 4.3. Xarumaha Bixiya Adeegyada Bulshada.

### 4.3.1. Nidaamka Caddaaladeed ee ay adeegsadaan xarumaha bixiya adeegyada bulshada.

- Ururada bixiya adeegyada bulshadu waa kuwee?
- Waa maxay macnaha nidaamka cadaaladeed ee ay ku dhaqmaan ururada bixiya adeegyada bulshadu?

## Gobolada Koorabliit iyo Warkaambiit

Gobolada loo yaqaano Koorablit iyo Warkaambit kaanoo oo dal yar ku dhex yaala islamarkaana ah labo gobal oo daris ah ayaa jiray . Labadan gobal waxyaabo badanbay isaga mid ahaayeen. Midabka dhul ahaan sida uu u yaalo ama qaabka iyo xaaladaha cimilooyinka ayey isaga mid ahaayeen. Marka taa laga yimmaado xaga tirada ama cadadka bulshadana way isku-dhawaayeen. Maadaama labada gobal aad iskugu ekaayeen ama iskugu mid u ahaayeen dad badan waxaa ku adkaan jirtay in ay kala saaraan. Laakiin sanado dhaw wixii ka soo dambeeyey faraqyada u dhexeeya labada gobal in aysoo shaac baxaanbay bilaabeen. Iyada oo ay sabab u tahay kala duwanaanshahaamafaraqa u dhexeeya labada gobal ururadi bixinayey adeegyada bulshadu waxay ku guul daraysteen in iswaafajiyaan gobalka adeegyada uu u baahan yahay  kala duwanaanshaha warbinta soo socota ayaa laga fahmi karaa.

Table 4.1 Distributions of social services in Woreda A and Woreda B

| M a g a c a gobalada | Cadadka xaafada | Xafiisyada xaafada | Dugsiyada | Goobaha ama x a r u m a h a caafimaad | X a r u m a h a beeraha |
|---|---|---|---|---|---|
| Koorbaatit | 80,000 | 25 | 46 | 26 | 18 |
| Warkaambit | 75000 | 12 | 14 | 10 | 2 |

### Hawl-galka 5aad

Idinka oo ku salaynaya jaantuuska korka ku xusan ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Adeegyada bulshada ee noocan ah ee ururada kala duwan bixiyaan qodobada aad is-leedihiin waxay sabab ama asaas u yihiin kala duwanaanshaha liis gareeya.
2. Ka wada doodaaamahadla nidaamyada ururada bulshadu ay hawlahooda u fuliyaan ee aan ahayn cadaaladda siyaabaha loola dagaalami karo.
3. Ururada bulshadu nidaamyada ay wax u fuliyaan haddii ay iswaafaqi waayaan waxyeelooyinka ka dhalan karaaa liss gareeya.

Ururada bulshadu adeegyada ay dadka siiyaan waxay hormood u yihiin adeegyada muhiimka u ah ama asaaska u ah nool-maal meedka bulshada. Sida daraadeed, muwaadiniintu si ay ururada uga helaan adeegyo ku habboon waxaa loo baahanyahay in farsamooyinka ay adeegsadaan laga dhigo kuwo cadaalad ah. Cadaaladnimada siyaabaha ururada bulshadu u siiyaan adeegyada macnaheedu waxaa weeye in iyada oo goobna goob kale laga takoori si cadaalad ah kuna salaysan kolba sida ay tahay baahida ka jirta iyo baaxadeeda ama saammaynta ay ku yeelan karto nolol maal-meedka bulshada goobta degan loogu adeego. Sida darteed, cadaalad ma aha in adeegyo dhammaystiran la siiiyo goobaha qaarkood halka goobo kalena aan habayaraatee wax adeeg ah la siiinin ama adeegyo kooban oo aan dabooli karin baahida bulshada la siiiyo.

Sanadihi tegay ururadi bulshada ee ka jiri jiray dalkeena si cadaalad ah ama siman deegaanada, miyi iyo magaalaba uguma adeegi jirin. Goobaha qaarkood waxaa la siiin jiray adeegyo tiro-badan halka goobo kalena aan haba yaraatee wax adeeg ah aan laga bixin jirin. Xiligan aynu joogno laakiin nidaamyadi la khalday ama aan , cadaalad ku salaysnayn sidii loo hagaajin lahaa ama loo sixi lahaa ayaa dalaalo aad u waa weyn loogu jira. Kuwan iyo ururada bulsho si cadaaladda loo waafajiyo muwaadiniintu in ay taageerada looga baahan yahay in ay ku deeqaan islamarkaana si firfircoon looga qaybgaliyo.

### Hawl-galka 6aad

Su'aalaha soo socda  ka jawaaba.

1. Hal dal haddii lagu arko xarumaha ururada bixiya adeegyada bulshada oo aan si cadaalad ah wax u qaybinaynin dhibaatooyinka aad isleedihiin way ka dhalan karaaan taxa.
2. Ururada adeegyada bulshada farsamooyinka loo bixiyo in la hagaajiyo ama la saxo waayo cidda iska leh ama ay saaran tahay mas'uuliyadu?
3. Urarada bixiya adeegyada bulshada si cadaalad looga dhigo arrimaha loo baahanyahay in wax laga qabto sheega.

## 4.4. Waaxyaha Cadaaladda ee heerarka kala duwan

### 4.4.1. Waaxyaha Cadaaladda ee ka jira Deegaanada Baahida loo qabo in ay Adeegsadaan Nidaam Cadaalad ah.

- Ururada u qaabilsan adeegyada bulshada ee ka jira goobaha aad degan tihiin magacdooda qora.
- Waa maxay faa'iidada ay leedahay in nidaamyada waaxyaha adeegsadaan noqdaan kuwo cadaalad ku salaysan?

### Muhiimada ay leeyihiin waaxyaha cadaaladda ee dhaqanka ka soo jeeda.

Bulsho walba waxay yeelan kartaa waaxyo ama ururo cadaaladeed oo ay dhaqan u lahayd. Xarumahan cadaaladda u qaabilsan ee bulshadu waxay u kala qaybtamaan kuwo dhaqameed iyo qaar casri ah ama cusub. Tusaale ahaan , dalkeena waxaa degan ama ku nool qoomiyada iyo shucuub aad u badan. Qoomiyadahan, shucuubta iyo bulshooyinkan asal ahaan waxay leeyihiin nidaam cadaaladeed oo isku-dhaca iyo khilaafyada soo dhex gala ay iskaga dhex qaadaan iyo xarumo ama waaxyo illaaliya islamarkaana ballaadhiya nidaamka cadaaladeed ayey leeyihiin. In kasta nidaamka wax loo xaliyo gooba-goobta ka duwan yihiin xadgudubyada ka dhanka ah xuquuqaha iyo gafafka bulshada dhexdeeda ka dhaca oo lagu xaliyo iyo nabadgalyada iyo amniga oo la adkeeyo kaalin aad u weyn ayey ka qaataan. Ururadan ama xarumahan dhaqameed oo dhaqanka iyo in daha goobaha ku salaysan ayaa waxaa loo adeegsada xalinta arrimaha bulshada. Si ay bulshadu u hesho waaxyo cadaaladeed oo ay garanayso, fahmayso, lagana fahmayo deegaanka oo ay wax ku xalisato ayuu waxtar weyn ku leeyahay . Xiliyadan hada aynu joogno tixgalinta ama mudnaanta la siiiyo waaxyaha dhaqanka ee cadaaladda u qaabilsan marba marka ka dambeeya way sii weynaanaysa.



Jaantuska 4.1. Waaxyaha Cadaalada ee ka jira deegaanada waxtarka ay leeyihiin

Hase yeeshee waxaa loo baahanyahay in qaar ka mid ah . Nidaamyada wax loo xaliyo ee dhaqanka ka soo jeeda in ay la jaanqaadaan ama iswaafaqaan farsamooyinka xaadirka ah ee wax loo xaliyo ama loo cadaalad falo. Tusaale ahaan , marka loo fiiriyo labka iyo dhaddiiga gafafka la xidhiidhaa guurka ee dumarka ama gabdhaha ka soo gaadha waxaa ka mid ah si cadaalad ah aan loogu gar qaadin, mararka qaarna dad awoodda dawladeed ee ay leeyihiin iyo maal-qabeenimadooda lagu ixtiraamo oo xadgudubyo ama gafaf u gaysanaya dadka oo ka soo jeeda dhaqanka oo ururada dhaqanku adeegsadaan ayaa la arkaa-iyo waliba qofka lagu xadgudbay oo loo helo xal u dhigma gafka loo gaystay iyo falal kale oo la mid ah in dib u habayn lagu sammeeyo ayay u baahanyihiin.

## Hawl-galka 7aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Bulshada aad ku dhex nooshahay waaxyaha cadaaladda u qaabilsan ee xaga dhaqanka ka soo jeeda liisgareeya.
2. Ka qaybgalka waaxyaha cadaaladda ugu muhiimsan , dhinacyadooda liita iyo dhinacyadooda adag kala saara kadibna fasalka u soo badhiga.

Xarumaha cadaaladda ee dalkeenu leeyahay waxay u kala baxaan labo waaxood waxaana ay kala yihiin:-

1. Xarumaha cadaaladda ee dhaqan ahaaneed. Waxaa weeye bulshada dhexdeeda xadgudubyada ka dhaca, cabashooyinka iyo khaladaadka oo xal loo helo iyo in nabadgalyada lagu xoojiyo macadyo kaalin muhiim ah ka qaata. Odayaal wax heshiisiiyaa, shirarka beelaha, aabayaasha diimaha waxay tusaale u yihiin waaxyaha dhaqanka ah ee cadaaladda.
2. Waaxyaha cadaaladda ee casriga ah waaxyahani nabadgalyada iyo amniga bulshada in ay sugaan waaxyo ama macadyo dawladdu sammaysay awood iyo mas'uuliyad la siiiyey oo cadaaladda in ay dhaqan galiyaan islamarkaana xoojiyaan loogu talagalay weeyaan. Tusaale ahaan, maxkamada, xafiisyada booliska ama asluubta iyo maamulka xaafadaha ayaa ka mid ah kuwa ugu horreeya ee ka tirsan qaybtan.

Dhacdada koobaad: Xubno ka tirsan dad degan xaafad go'aan ay soo saareen oo ku saabsan biyo la'aan ka dhacday si wax looga qabto waxay dhiseen barkad biyo aad u badan qaadi karta. Marki la bilaabay in laga cabo barkada dadkii ka qaybgalay dhismihi barkadu waxay si adag isku-hortaageen dadki aan ka qaybgalin dhismaha barkadu in ay ka cabbaan. Sida darteed, xaafadi wdaxaa ka dhacay murame iyo rabshado aad u xoogbadan. Qaybihii ka qayb galay dhismaha barkada iyo qaybihii aan ka qayb qaadanin doodihii

ka dhex qarxay ka sokow, waxay bilaabeen in midba midka kale la coloobo hanjabaad iyo ka cabsiin kula kacay iyo waliba in midba midka kale duqeeyo . Xaaladani labada qaybood ee ka wada tirsan xaafada iskuna haya biqaha barkada ka sokow dadki kale ee agagaarka degana ayey cabsi iyo deganaansho la'aani ku dhacday.

Dhacdada labaad : mudane Cumar lacag aad u badanbu ka soo musuqmaasuqay bangiga kadibna waa la bedelaay. Si loo soo qabtoamaxidho dambiilaha marki la bilaabay in caddaymihii loo baahna la soo ururiyo waxaa lagu soo oogayamadacweeyey in uu yahay dambiile. Maxkamaduna waxay amar ku bixisay in meel kasta oo laga helo laga soo qabto. Mudo dheer marki baadhitaan lagu jiray kadib mudane Cumar maxkamada la hor keenay ka sokow in uu dambiile yahay ayaa la xaqiijiyey . Gabagabadiina maadaama musuqmaasuqi lagu cadeeyey maxkamadi waxay ku xakuntay.

## Hawl-galka 8aad

Idinka oo ku salaynaya labada dhacdo ee korka ku xusan su'aalahan ka jawaaba.

1. Labada arrimood ee korka lagu tilmaamay midkeed isleedihiin waxay ku roontahay in waaxyaha cadaaladu fiiriyaan ama xaliyaan? Sabab?
2. Idinka oo u fiirinaya kolba sida ay xal-cadaalad ah loogu heli lahaa labada arrimood waaxyaha cadaaladda ee ka qaybqaadan karaa iyo mas'uuliyadaha ay ka soo bixi karaaan kala saara kadibna soo bandhiga.
3. Dhibaatooyinka dhacay oo loo raadiyo xal waxtarka ay leeyihiin liis gareeyaamaqora.

Xarumaha cadaaladda ee deegaanka ka jira faa'iidooyinkooda waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

1. Inla helo garsoor sax ah kana hufan garabaysi ama dhinac u xaglin: Hawlgalka ugu horeeya ee looga baahan yahay in waaxyaha cadaaladu fuliyaan waxaa weeye in ay mushtamaca dhexdiisa arrimahaamafalalka ama dhacdooyinka lidiga ku ah cadaaladda ee ka dhaca go'aano xaq ah islamarkaana ku habboon ama u dhigma xal cadaalad ku salaysana u noqda ka soo saaraan. Sidana waxaa la sammayn karaaa marka la helo oo kali ah garsoor dhab ah kana maydhan ama madaxbanaan dhinac u xaglin iyo garabaysi. Nidaamka ay garsoorayaashu go'aanada uga bixinayaana waa in uu noqdo mid waafaqsan sharciga iyo nidaamka uyaala dalka.
2. Nabadgalyo waarta lagu asaaso laguna xaqiijiyo barnaamijyo horrumarineed oo deg-deg ah .Nidaamka cadaaladda ah waa aladaamaqalabka lagu sugo xuquuqaha sinaanshaha. Nidaamka cadaaliga ah waxaa lagu tir-tira xadgudubyada iyo falalka dhanka ka ah sharciga waxaana lagu xoojiya nabadgalyada. Amniga iyo nabada oo dhidibada loo aso iyo in horrumarka dalka la de-dejiyo ayuu kaalin muhiim ah ka qaataa. Nidaamka cadaaladda ah nolosha iyo hantida daryeelkooda ayuu dammaanad qaadaa muwaadiniina wuxuu siiyaa fursado ay shaqooyinka horrumarinta si firfircoon ugu fuliyaan. Sida darteed, horrumar deg-deg ah si loo gaadho wuxuu dhibada u aasa islamarkaana fudaydiya in la ballaadhiyo ururada bulshada iyo dhaqan galinta barnaamijyada horrumarinta ee asaasiga ah.

### Hawl-galka 9aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Waaxyaha cadaaladda oo heerar kala duwan leh in la sammeeyo maxay faa'iido leedahay?
2. Sheega sababaha waaxyaha cadaaladdu ku qasbi kara in ay ku dhaqmi waayaan nidaamyada cadaaladda ah.

## 4.5. Tallaabooyinka loo Baahanyahay in la Qaado Marka Xuquuqaha lagu Xad-gudbo Lagana Horyimaado Nidaamka Cadaaladda

### 4.5.1. Tallaabooyinka Xaqiijinta iyo Sugida Xuquuqaha Cadaalada

- Marka la jabiyo sharciga xuquuqaha cadaaladdana meel lagaga dhaco tallaabooyin noocee ah ayaa la qaadi karaaa baad leedihiin?

#### Kaalinta muwaadiniintu ku leeyihiin daryeelka Xuquuqaha iyo adkaynta cadaaladda

Xuquuqaha xiliyo kala duwan iyo goobo kala duwan iyo waliba sababo kala duwan dartood ayaa loogu xadgudbi karaa. In la xoojiyo cadaaladda ururada cadaaladda oo heerar kala duwan leh oo la sammeeyo iyo jiritaanka sharci iyo anshax wanaagsan oo kali ah kuma filna. Dhab ahaan arrimaha lagama maar-maanka u ah adkaynta cadaaladda weeyaan. Laakiin si loo sugo cadaalad waarta waxaa jira mas'uuliyado badan oo saaran. Qof kastaa oo muwaadin ah si xuquuqdiisa u baahanyahay in la mid ah waa in uu xuquuqaha dadka kalena daryeelo. Sida aad u jeceshahay in xuquuqahaaga loo daryeelo kuwa dadka kalena u daryeel.

Hase-ahaatee , sababo badan islamarkaana kala duwan dartood ayaa loo jabin karaa xuquuqaha loogana hor imman karaa cadaaladda. Mar walba muwaadiniintu inay leeyihiin xuquuq ama xoriyad ay arrimahooda u hor dhigaan waaxda cadaaladda siday u mutaysteen: labo qayboodamasiyaabood ayaa loo sharaxi karaa arrintan. Marka hore adigu shakhsi ahaan marka dhibaato ama meel ka dhac lagu gaysto waa in aad ka wargaliso waaxda u xilsaaran cadaaladda . Sida ay tilmamayso odhaahda : <<Nimaan hadlan habartii qadisay >> muwaadiniintu haddii ayna mas'uuliyiinta dawlada, ururada cadaaladda (bulsho ahaan iyo shakhsi ahaanba) xad-gudubka loo gaystay ayna ka wargalinin ma heli karaaan wax xal ah. Marka labaad, ka sokow gafka adiga shakhsi ahaantaada loo gaystay xadgudubyada dadka kale loo gaystayna waaxyaha cadaaladda in aad ka wargalisid ayaa lagaaga baahanyahay.

### Hawl-galka 10aad

Idinka oo ku salaynaya qoraalka korka ku xusan su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Qor mas'uuliyadaha muwaadiniinta ka saaran taabogalinta nidaamka cadaaladeed ee jira.
2. Taabo-galinta nidaamka cadaaladeed idinku doorka aad ku leedihiin sharaxa.

Marka la buriyo lana dhinac maro sharciyada xuquuqaha waxaa lagama-maar maan ah in lagu dhaqmo tallaabooyinkan sharciga ah ee soo socda.

1. Fursadaha xuquuqdaada aad ku sugi karto oo aad ka faa'iidaysato muwaadin kasta gafka iyo xadgudubyada loo gaysto iyo xukun ama go'aan cadaalad darro ah oo loo gaysto in uuamaay waaxyaha ay khusayso ka wargaliyo islamarkaana helo bedel u dhigma gafki loo gaystay ama in tallaabo ku habboon laga qaado codsado xorbuamabay u tahayamayahay.
2. Dambi soo bandhiga ( in la soo dacweeyo). Muwaadiniinta xuquuqahooda gaar ahaaneed iyo xuquuqaha waaxyaha kale haddii loo daryeeli waayo gafafka , falalka lidiga ku ah xuquuqahooda ee la gaadhsiiyo waa in ay waaxyaha cadaaladda ee ay khusayso u soo badhigaan. Run ahaan , heerkaamadarajada waaxda cadaaladda ee arrimahaamafaldambiyeedyada loo bandhigayo iyo nooca ay yihiin waxay ku kala duwanaan karaaan kolba xaalada ama sida ay yihiin arrimaha la tabanayo. Ka hor inta arrimaha dacwadaha aan loo gudbinin waaxyaha sare ee dawlada ee u xil-saaran arrimaha cadaaladda waxaa wanaagsan in la adeegsado waaxyaha cadaaladda ee ka jira goobaha aad ku sugantahay.
3. Rafcaan oo la qaato. Inta badan go'aanada maxkamadu ka soo saartoamaka qaadato dacwadeena haddii ay no cuntami waayaan ama aynu ku qanci weyno waxaa noo caado ah Rafcaan in aynu ka qaadano. Laakiin maxkamad hoose tusaale ahaan maxkamad degmo go'aanka ay ka gaadho dacwada aynu wadano haddii aynu ku qanci weyno waxaan xaq u leenahay in aynu dacwadeena u gudbisano maxkamad ka darajo saraysa ta aynu rafcaanka ka qaadanay ee heerka degmo. Tan waxaa loo yaqaana rafcaan qaadasho . Rafcaan qaadashadu wdaxay noo tilmaamaysaa. Maxkamada ugu horrayn aynu dacwadeena u soo bandhignay go'aanka ayna siiso xuquuqda aynu u leenahay in aynu is hortaagno islamarkaana maxkamada ka saraysa ka codsano in ay mar labaad dib noogu fiiriso dacwadeena. Qofka rafcaanka qaadanaya ma aha oo kali ah qofka dambiga lagu helay laguna xukumay in la ganaaxo. Qofka loo xukumay laftigiiskuamalaftigeedu wuxuu ama waxay xaq u leedahayamaleeyahay in uuamaay ku qanciweydoamawaayo ganaaxa ama xukunka lagu riday qofka ka soo horjeeda ama eedaysanaha. Tusaale, wuxuuamawaxay ku dacwiyi kartaamakaraaa xukunkan maxkamadu ku riday eedaysanaha ma aha mid u dhigma faldambiyeedka u gaystay waa in lagu xakumo mid ka ciqaab xun, iskuma dhigmaan qofka eedaysanaha igaystay iyo xukunka lagu riday. Sidaa darteed waxaan jecelahay in aan rafcaan ka qaato inta uuamaay yidhaahdoamatidhaahdo ayaa maxkamada sare loogudbisan karaaa. Maxkamada sare ee dacwada loo soo gudbistayna marka ay si buuxda u baadho dhacdadaamadawada kadib waxaa suurta gal ahamadhici karta in ay go'aanki horray maxkamada hoose u soo saartay mar labaad ugu celiso ama ku taageerto go'aanki maxkamada hore ay qaadatay, in go'aanki maxkamada hore si buuxda loo tuuro, iyo wax laga bedelo islamarkaana sidi hore si ka sii wanaagsan loo soo dhigo.


### Hawl-galka 11aad

Su'aalaha soo socda ka wada hadla.

1. Maxay dadku u adeegsadaan farsamada rafcaan qaadashada?
2. Xarrumaha cadaaladda ee ka jira deegaanka ama goobaha aad degantihiin inta la buuqdo lana weydiisto rafcaan laga qaato go'aan ay riday si xuquuqaha aynu leenahay loo daryeelo islamarkaana loo xoojiyo cadaaladda faa'iidooyinka ay leedahay koox-koox warbixin uga soo diyaariyo kadibna fasalka u soo badhiga.

## 4.6. Canshuurta

### 4.6.1. Xuquuqda iyo Masuuliyada Canshuur Bixiyayaasha.



Jaantuska 4.2. qof kasta oo muwaadin ah waxa waajib ku ah in uu dakhliga soo gala ka bixiyo Canshuurta dawladda

- Tax faa'iidooyinka canshuurta ama waaxtarka ay leedahay .
- Cashuur bixiyayaashu maxay xuquuq leeyihiin? waajibaad kooduse muxuu yahay ?

Bulshada degan xaafada wada hadalkii ay yeesheen wuxuu ku saabsanaa islamarkaana culays badan saarayey arrimaha la xidhiidha ururinta cashuuraha .Qabanqaabiyayaasha ama xubnaha shirka daadihinayeyna waxay ahaayeen mudane Faarax iyo marwo Xaawo Cilmi oo laga soo wakiishay xarunta gudiga u qaabilsan ururinta canshuurta. Gudoomiyaha xaafadu marki uu isbaray martidi kadib wada hadalka waxaa lagu bilaabay sharaxaad ay bixinayaan dad khibradlayaal ah . Geedi -socodka wada hadalka si kooban ayaa loo soo bandhigay.

***Mudane: Faarax:-*** Subax wanaagsan walaalayaal? maanta waxaa halkan iskugu-keen keenay waxaa weeye si aynu uga wada hadalno xaaladaha hada ay ku sugan tahay cashuur ururintuamasiyaabaha loo soo ururiyo canshuurta. Wada hadalkii kanka horeeyey in uu ku saabsana macnaha ama canshuurtu waxaa ay tahay waad wada xasuusantihiin. Sidaad wada garanaysaan canshuurtu ma aha wax dalkeena ku cusub. Canshuurtu asal ahaan waa arrin ahayd soo jireen oo ah go'aan sharci ah oo dhigaya in dakhliga muwaadiniinta soo gala cashuur laga jaro islamarkaana dawlada la siiiyo. Xiliba xiliga ka dambeeya bulshadu in ay fahamtoin cashuuraha ay bixiso ama dawladdu ka qaado lagu fuliyo mashruucyo horrumarineed, oo ay ka mid yihiin dhaqaalaha nabadgalyada, caafimaadka, waxbarashada--IWM ayey bilawday . Sida daraadeed , canshuurtu in ay tahay lacag laga bixiyoamajaro dakhliga qofka soo gala islamarkaana lagu fuliyo barnaamijyada maal galinta iyo horrumarinta dalka in aan fahamno kadibna bixino islawakhtiga ay ku habboontahay ayaa waajib nagu ah.isaga oo leh marki uu qudbadiisi ku soo bandhigay kadib waxaa uu

faah-faahin ka bixiyey in wada hadalka dulucdiisku tahay siyaabaha canshuurta loo bixiyo, xuquuqda cashuur bixiyayaasha iyo mas'uuliyada ama waajibaadka saaran bulshada.

***Su'aasha ka qaybgalayaasha:-*** Hada sharaxaada aad noo soo jeedisay si cad ama wanaagsan ayaan u fahmay. Laakiin nidaamka canshuurta loo bixiyo mas'uuliyada saaran iyo xuquuqda bulshadu waxaa ay yihiin in aad noo faahfaahiso ayaan ka codsanayna kuwan iyo su'aalo kale oo ku saabsan waajibaadka iyo xuquuqaha dadka cashuuraha bixiya si ballaadhan ayaa looga wada hadlay. Waxyaabihii la faahfaahiyey qaar ka mid ah oo ay soo jeedisay marwo Xaawo kuna saabsana muwaadiniintu xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha laga sugayo in ayka soo baxaan sidan soo socota ayaa loo soo bandhigay:

***B. Waajibaadka saaran canshuur bixiyayaasha.***

- Waxyaabaha laga sugayo in ay ka soo baxaan dadka bixiya canshuuraha waa in ay gartaan bixinta canshuurtu in ay waajib ku tahay, wakhtiga loo baahanyahay iyo cadadka ku waajibayba in ay bixiyaan ayaa laga sugaya.
- Warbixino dhammaystiran oo ku saabsan ururinta canshuurta oo dhab ah kana hufan buun-buunis iyo danaysi in la siiiyo.
- Alaab aan canshuur laga bixinin in aan la gadin ama aan la soo qaadan karin ama aan la iibsanin lana iibinin, waxyaabaha carqalad u keeni karaa ururinta cashuuraha oo laga digtoonaado iyo qodobo kale oo muhiim ah ayey sharaxday.

***T. Xuquuqaha canshuur bixiyayaasha.***

- Canshuurta la saaray wax u dhigma oo ay weydiistaan, in la hubiyo, haddii cabasho aad qabtid oo cabashadaada soo jeedisid --Iwm.
- Xarumo adeega bixiya oo si siman looga wada faa'iidaysto.
- Lacagaha laga soo ururiyo cashuuraha hawlaha lagu fuiyo in ay kula xisaabtamaan iyo in ay gartaan ayaa ka mid ahaa waxyaabaha la soo qaatay.

***J. Waajibaadka laga sugayo bulshada.***

- Waajibaadka bulshada waxaa ka mid ah in ay canshuurta sida ugu habboon u bixiyaan.
- Alaabta sida sharci darada ah u soo gasha iyo kuwa aan laga bixinin canshuurta oo aan la ibinin ama la ibsanin, ganacsi sharci darro ah in aan la sammaysanin.
- Dadka canshuurta musuq-maasuqa galiya iyo kuwa aan bixinin oo fagaaraha lagu khashifo, la ishortaago, warbixino dhmmaystiran oo ku saabsan ururinta canshuurta oo la siiiyo iyo waxyaabo kale oo badan ayey marwo Xaawo tilmaamtay. Sidaa daraadeed, bulshada xaafadaha degan waxay faham wanaagsan ka heleen in canshuurtu asaas u tahay horrumarka bulshada iyo dalka. Markii ay faham dheeri ah ka heleen waxa ay tahay canshuurtu iyo waxtarka ay leedahay waxay bilaabeen in ay waajibaadka saaran si habboon uga soo baxaan. Maadaama ay hawlgaladan firfircoon abaal gudyo ku heleen waxay tusaale u noqdeen kuwa kale.

## Shaqo kooxeed.

1. << Dawladdu canshuurta ay bulshada ka qaado iyada oo loo eegayo kolba dakhliga qofka soo gala siida uu yahay waxay dib ugu noqota bulshada oo loogu adeego si loogu faa'iideyo guud ahaan bulshada, fikrada leh ma taageersantihiin? sadee? koox-koox uga wada hadla kadibna fasalka u soo bandhiga.
2. Idinka oo fikradaha hoos ku xusan dadka kale weydiinaya su'aalaha ka hooseeya ka shaqeeya:

Marwo Rooda sanadkii waxay bixisa lacag gaadhaysa afartan kun oo birr. Mudane Cabdilaahi canshuurta uu sanadki bixiyo waxaa ay dhan tahay saddex kun oo birr mudane Jaamac canshuurta uu bixiyo waa kun birr . Mudanaha magaciisku la yidhaahdo Aw Cilmi laakiin wax cashuur ah ma bixiyo. Wuuba ka siidaray oo dawlada wuu ka duunta, wuu musuq-maasuqa. Iyaga oo talo ka bixinaya siyaabahan canshuurta loo celiyo looguna ururiyo waxay khibradla yaashu sheegeen in ay sidani sax tahay.

B. Talada ay khibradlayaashu ka bixiyeen ururinta cashuur sabab? ma saxba?

T. Maadaama muwaadiniintu bixiyaan cashuuro kala duwan kuna salaysan kolba dakhliga soo gala inta uu dhan yahay waa in adeegyada dawladdu siiso bulshada kala duwanaadaan? sabab?

## Gabagabada Cutubka 4^aad

Xiliyo iyo goobo kala duwan nidaamyada aan cadaalad ahayn oo garabaysi ku salaysan oo laga dareemo nabadgalyada dalka iyo horrumarka waxyeelo aad u weyn ayey soo gaadhsiinayaan. Sida daraadeed, bulshada dhexdeeda in laga hirgaliyo nidaam cadaalad ah oo ka hufan garabaysi iyo dhan u xaglin hawlaha gacanta ka gaysanaya in la fuliyo ayaa loo baahanyahay . Nidaamka cadaaladda ah ee ka maydhan kala takoorida iyo garabaysiga islamarkaana ah nidaam cadaalad ah wuxuu kaalin muhiim ah ka qaataa dhismaha nidaamka diimuqraadiyada : Bulshada dhexdeeda in nabad waarta laga dhaqan galiyo iyo cadaalad ka madax banaan garabaysi in la abbuuro ayuu door weyn ka ciyaara .

Si loo dhaqan galiya nidaam daacadnimo iyo cadaalad ku dheehantahay in la aas'aaso ayuu door weyn ka ciyaara. Si loo dhaqan galiyo nidaam daacadnimo iyo cadaaladi ku dheehan tahay waa in la abbuuro nidaam sharci ah oo lagu sugo cadaaladda. Nidaamka cadaaladda ah wuxuu bulshada muwaadinka ah ka caawiya in ay gartaan sababaha ay cashuuraha u bixinayaan iyo cidda ay siinayaan. Sida daraadeedna waa in ay bixiyaan canshuurta waajibka ku ah, islamarkaana bixiyaan wakhtiga ugu habboon. Hawlahanina horrumarka dalka iyo maalgalinta door fiican ama weyn ayey bulshadu ka qaadanaysaa.

## Su'aalaha Layliska Gagabada Cutubka 4aad

### I. Weedhaha soo socda tii run ah ku qora "Run" tii been ahna ku qora "Been".

1. Adeegyada ururada bulshadu bixiyaan lagama dhigi karo cadaalad ( si cadaalad ah looma bixin karo).
2. Nidaamyada ururada adeegyada bulshada bixiya ee dalkeenu isticmaali jireen waxay ahaayeen kuwa aan cadaalad ahayn.
3. Dhibaatooyinka ay sababeen nidaamyadii cadaalad darada ahaa ma aha kuwa aad u khatar badan.
4. Waaxyaha cadaaladda oo leh marxalado ama heerar kala duwan oo laga sammeeyo dalku faa'iidooyin tiro badan ayey leeyihiin.
5. Bixinta canshuurtu waa xuquuqda iyo waajibaadka muwaadiniinta.

### II. Qaybta B iyo qaybta T kolba sida ay iskugu habboonyihiin iskugu aadiya.

| B | T |
|---|---|
| 1. Dareen is-xilqaan oo la yeelan waayo ama la iska waayo. | B. Canshuurta oo wakhtigeeda la bixiyo<br>T. Cashuur |
| 2. Waajibaadka cashuur bixiyayaasha | J. Racfaan |
| 3. Go'aan maxkamadeed oo lagu gacan seedho | X. Cadaalad darro<br>Kh. Xaafad |
| 4. Asaas u ah horrumarka | D. Maxkamada ugu saraysa. |
| 5. Waax sare oo ka mid ah waaxyaha cadaaladda. | |

### III. Meelaha banaan ee soo socda erayga ama weedha (odhaah dhiman0 ku buuxiya .

1. Hababka ama siyaabaha xuquuqaha sharciga ah ee muwaadiniinta lagu daryeelo ___________________________ iyo _______________________ weeyaan.
2. Ururada bulshada ee ka hawlgala dalka dhexdiisa nidaamyada ay adeegsadaan in ay noqdaan _____________________ ayaa looga baahanayahay.
3. Dhibaatooyinka cadaalad darada ah ee laga dhex abbuuro bulshada dhexdeeda wdaaxyaha cadaaladda ee xalintooda u qaabilsan __________________ iyo ___________ ayaa loo kala saaraamakala qaybiyaaa.

## IV. Su'aalaha soo socda mid walba jawaabta ku habboon u doorta.

1. Cadaaladnimada xarrumaha ama ururada waxqabadyada lagu garto kuwan soo socda waa mid ka mid ah.

   B. Adeeg bixinta ay ku leeyihiin goobaha kala duwan oo ay saxaan ama hagaajiyaan.

   T. Xuquuqda ay u leeyihiin in ay helaan adeegyo siman oo la illaaliyo.

   J. Maal-qabeenada iyo mas'uuliyiinta oo mudnaanta koobaad la siiiyo.

   X. Jawaabtu waa B iyo T

2. Muwaadiniinta hoos ku xusan si ay cadaaladda u illaaliyaan ama u sugaan hawlaha ay adeegsan karaaan waa kuwee?

   B. Faldambiyeed la soo bandhigo.

   T. Rafcaan la qaato

   J. Xoog la adeegsado

   X. Dhammaantood waa sax.

   Mid ka mid ah.

3. Waaxyaha cadaaladda ee soo socda kaalinta ama doorka ugu horreeya ma  aha in uu go'aan cadaaladeed soo gudbiyo .

   B. Xaafadaamaxarunta xaafada laga maamulo

   T. Maxkamada

   J. Xarunta booliska

   X. Macad waxbarasho

4. In xarumaha cadaaladda oo heerar kala duwan leh la sammeeyo faa'iidooyinka noocee ah ayey leeyihiin?

   B. Lacagta iyo xooga ku lumaya ayey yaraynayaaan.

   T. Wakhtiga ayey yaraynayaaan

   J. Cadaaladda oo soo dhawaata

   X. Dhammaan waa sax.

5.Waa kee midka aan ahayn natiijada nidaamyada cadaalad darada ah?

   B. Dareenka is-xilqaanka oo ka maqan

   T. Rejo beelamaniyad jab

   J. Nabada iyo deganaanshaha oo la xoojiyo

   X. Xidhiidhka midba midka kale uu la leeyahay oo aan adkayn.

V. Su'aalaha soo socda sharaxaad kooban ka bixi.

1. Nidaam cadaaladeed oo ka hufan garabaysi iyo daacad darro in la dhaqan galiyo waxaa mas'uulka ah mwuaadiniinta intiina leh ama aminsan qodobeeya fikradihiina.
2. Nidaamyada cadaalad darada ah goobaha soo socda dhibaatooyinka ay ka abbuuri karaaan liisgareeya .

   B. Dugsiga dhexdiisa

   T. Qoyska

   J. Xaafada dhexdeeda

   X. Maxkamada dhexdooda.

CUTUBKA 5

# WADANIYADA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Fahmaan taariikhda iyo dhaqanka dalka iyo dadweynaha waxayna yeelanayaan wadaniyad.
- Ogaanayaan dhaqamada iyo caadooyinka xun-xun ee waxyeelaynaya horumarka bulshada.

## 5.1. Wadaniyad

### 5.1.1. Astaamaha Dareenka Wadaniyadeed ee cusub

- Sheeg qaar ka mid ah astaamaha wadaniyadada?

Wadaniyad ama dalka oo la jeclaado way ku kala duwanyihiin sharaxaadaha ay ka bixiyaan saynisyanadu. Nidaamka diimuqraadiga wadaniyada ka sokow, wakhtiga, xooga iyo aqoonta oo dalka loogu adeego, waxaa ka dhigan yahay nafta oo loo huro iyada oo mudnaanta la siinayo faa'iidada bulshada, horumarka dalka iyo in laga saaro saboolnimada --Iwm. Dalka oo la jeclaado waxaa lagu macnayn karaa in la qayb-qaato difaaca, cilmibaadhis, anshax iyo asluub wacan, mas'uuliyad shaqo, maamul, dareen mas'uuliyadeed iyo waxyaabaha la midka ah oo lala yimmaado . Mas'uuliyadahan iyo hawlahan dalka loo qabanayo ma aha wax mar iyo labo jeer oo kali ah la fulinayo. Laakiin, waa in ay noqdaan hawlo ama mas'uuliyado joogto ah, islamarkaana si xidhiidhsan loo qabanayo .

Ummad walba oo dal leh waxay leedahay sharciyo iyo nidaamyo kala gedisan oo ay isku-maamulaanamaisku-maamusho. Qar ka mid ah nidaamyadan ama sharciyadan haddii aynu tilmaano waxaa weeye: xuquuqda muwaadiniinta iyo waajibaadka saaran. Qofka muwaadinkaamamuwaadinimadiisa wax uu ku helo, islamarkaana uu mutaystay waxaa ka mid ah xuquuqdoodaamawaxyaabaha ay mutaysteen in loo tixgaliyo oo ay ka mid tahay xuquuqdoodu. Waxyaabaha ay ku qasban yihiin in ay sammeeyaana waxaa loogu yeedhaaa waajibaad.

Xuquuqda muwaadiniinta iyo mas'uuliyadaamawaajibaadka saaran wuxuu ku xidhan yahay kolba nidaamka ay dawladdu ku maamusho bulshadeedu sida uu yahay. Maamulka iyo nidaamku haddii uuna ku salaysan yahayama ama yahay mid ogol dimuqraadiyada oo kali ah ayey muwaadiniintu heli karaaan xuquuqo iyo waajibaad cadaalad ah . Haddiii aan la helin nidaam diimuqraadi ah oo cadaalad ah waxaa lagu xadgudbiyaa ( la jobinaya xuquuqo tiro badan oo muwaadiniinta lahaayeen, islamarkaana waxaa dayacmaya waajibaad ka saaran bulshada muwaadinka ah.

Nidaamka diimuqraadiga ah, laakiin, xuquuqaha iyo waajibaadka bulshadu wuu ka duwan yahay ka aynu korka ku soo tilmaanay ee diimuqraadiga aan ku salaysnayn. Nidaamka dimuqraadiyadeed xuquuqaha muwaadiniinta iyo waajibaadka bulshada ayaa raali ka noqotay ka dibna sharcigaamadastuurka dawlada ayaa si cad oo aan mad-madaw ku jirin loogu tilmaamay. Sidaas daraadeed, faraqkasta u dhexeeya iyada oo uuna jirin in ay si isku mid ah (sinaan ah) xuquuqahooda isku-tixgaliyaan, islamarkaana si buuxda u gutaan waajibaadkooda ayaa loo baahan yahay.

## Hawl-galka 1aad

Qodobadaamawaqabadyada soo socda ka soo dhex saara waxyaabaha sharaxayaamatilmaamaya xuquuqahiina iyo waajibaadka idin saaran.

1. In la ilaaliyo xuduudaaha dalka
2. Xoriyad laga soo ururiyo fikradaha, islamarkaana lagu sharaxo.
3. In cashuuro la ururiyoamaqaado si dakhli loo helo.
4. In la isticmaalo adeegyada macayada amaururada bulshadu ay bixiyaan
5. Khayraadka dalka iyo qalabka dawlada oo la daryeelo.
6. Caruuraha oo si habboon loo barbaariyo islamarkaana wax la baro.

Wada xaajood

1. Kooxo isku-qaybiyaaa kadibna (anshaxa) sharciga lagu maamulo shuruucda bulshada ee ka jirta agaa gaarkiina xuquuqda iyo waajibaadyada saaran xubnaha intaad kala saartaan kalana soo baxdaan u soo jeediya fasalka, ka wada hadla.

## Hawl-galka 2aad

1. Qodobada soo socda ee ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka ka soo dhex saara idinka oo ku salaynaya ama tixraacaya tusaalaha la idin siieyey. Qodobada xuquuqaha iyo waajibaadka aad ka soo saartiin sharciga waafajiya

| *Tirada* | *Sharciga* | *Xuquuqda.* | *Waajibaadka.* |
|---|---|---|---|
| *Tusaalaha la raacayo* | *Adeyga tixgalin waayo sharciga iyo anshaxa dugsiga waxaa lagu qaadaya anshax xumo. waxbarashadana ma wadanayo ee waa laga joojinayaa.* | *In waxbarashaddiina aad heshaan.* | *In uu/ay sharciga iyo nidaamka dugsiga u hogaansamo/hogaan sanaato.* |
| *1* | *Ardeyga aan ixtiraamin xuquuqaha dadka kale xuquuqdiisa waa lama ixtiraamayo.* | | |
| *2.* | | *Cunida cuntada* | *Shaqaynta.* |
| *3.* | *Qofka muwaadinka ah ee canshuurta sharciga ah bixin waaya dawlada, ma helayo dammaanad qaad sharci ah oo uu ku shaqaysto.* | | |
| *4.* | *Qof kasta oo qaba fayraska dhaliya cudurka Aydhiska haddiii uu iska ilaaliyo in uu fayraska dadka kale u gudbinaynin xorbuu u yahay in u kolba meesha uu rabo tago kuna noolaado.* | | |

Dareenka daljacaylka cusub ee Itoobiyaanimada : xuquuqaha iyo waajibaadka muwaadiniinta waxaa asaas looga dhigaya qodobadaamanidaamka korka aynu ku soo xulnay. Marka loo eego nidaamyadii hada ka hor soo jiray muwaadiniinta iyo bulshooyinka Itoobiya dareenka jacaylka dalka iyo sida ay u turjuman jireen sax ma ahayn.


Waxaa jira dhacdooyin iyo xaalado badan oo lagu sharaxi karo dareenadi hore ee la xidhiidhaay dal jacaylka. Intooda badan marka dhinacyo kala gedisan laga eego waxay u adeegi jireen muwaadiniinta iyo bulshooyinka kala duwan ee ka jira dalka. Ka sokow waxyaabaha aynu soo sheegnay dareenka dal jacaylku wuxuu mudnaan siinaya qaabka dhulka, baaxadiisa iyo xuduudaha qaabka dabeeciga ah ee uu u yaalo, khayraadka, buuraha iyo badhtamaha, wabiyada dalka, carada dalka, guud ahaan dadka (bulshada ) iyo dhaqanka iyo diimaha la amiisan yahay ---iwm.

Haddiii ay tahay qaabka khariirad ahaan dalku u yaalo iyo quruxda abbuurka ah ama dabeeciga ah ee uu leeyahay waa dareenka dal jacaylka ah ee muwaadinku qabo shayga ugu horeeya ee muujinaya. Sida runta ah dareenka dal jacaylka ee ugu fiicanamasaxsan waa ka mudnaanta koobaad siiyaa muwaadiniinta iyo bulshooyinka dalka ku nool. Dadku waa ilaha ugu sareeya ee asaaska u ah dal jacaylka. Si kastaba ha ahaatee, dareenka dal jacaylku waa shayga ugu horeeya, islamarkaana ugu sareeya marka la leeyahay waxaa kaalinta koobaad kaga jira muwaadiniinta iyo dadka dalka u dhashay. Nidaamka cusub ee diimuqraadiga itoobiya , waxay adeegsata nooc cusub oo ku saabsan Wadaniyad iyo dareen dal lagu jeclaado. Noocyadan dal jacaylkana siyaabo badan ayaa loo muujin karaaa. Waxaana ka mid ah kuwan soo socda;

- In si dhammaystiran loo dhawro xoriyada ama madaxbanaanida iyo xuquuqaha muwaadiniinta.
- In la ixtiraamo xuquuqaha ay u leeyihiin qoomiyadaha iyo bulshooyinka dalku.
- In la xaqiijiyo in la dhaqan galiyey dhammaan nooc kasta oo ka mid ah sinaanshaha .
- In dhidibada loo aaso lana balaadhiyo sareynta sharciga laguna maamulo sharciga dalka u yaala.
- In ficil lagu muujiyo dhaqan galinta maamul suuban oo nadiif ka ah ama ka hufan musuqmaasuq iyo waxyaabaha la xidhiidhaa.
- Sido kale si dalka looga bixiyo saboolnimada iyo dib u dhaca dadaalada loogu jiro kuwa ugu muhiimsan ayey ka mid yihiin waxyaabaha aynu korka ku soo tilmaanay . Xuquuqaha muwaadin itoobiya u dhashay iyo waajibaadyada kuwan aynu soo tilmaanay iyo kuwa la midka ah si ficil loogu bedelo waxaa lagama maar maana ah in go'aano wax ku ool ah la qaato.

## 5.2. Falalka Xun-xun

### 5.2.1. Falalka Xun-xun ee Degaankeena ka Jira



Jaantuska 5.1. Dhaqamada xun xun ee Afrika ka jira

- Sawirka maxaad ka fahanteen?
- Miyay jiraan deegaankiina dhalinyar ku dhaqanta ficiladan sawirka ka muuqata oo kale?

### Asli Iyo Ardo

Ardo iyo Asli waa labo gabdhood oo walaalo ah ahna, Lixdii sano ee ugu horaysay ayey wada noolaayeen. Ardo laga bilaabo xiligii ay ahayd lix jir waxay la noolayd habar yaraheed oo meel fog ku noolaa. Mudo shan sano ah markay la noolayd habar yaraheed kadib waxay ku soo noqotay goobti waalidiinteedu ku noolaayeen mudo hada laga joogo lix bilood. Islmarkii ay timid waxay isdabeecad garan waayeen walaasheed Asli oo ay soo wada noolayeen. Ardo waa gabadh danaysato ah ama ka shaqaysa wixii danaheeda la xidhiidhaa. Waxay ku dadaashaa in ay hesho xuquuqaheeda oo kali ah. Laakiin, ma gudato waajibaadka saaran. Xidhiidhka ay la leedahay xubnaha qoyskooda sida walaalaheed iyo waalidiinteeda ee ugu weyn waa isfaham darro. Haddii aynu si kale u dhigno xidhiidhka ka dhexeeya Ardo iyo qoyska ay ka tirsantahay ma hagaagsana waxaana hadheeyey isfaham darro. Had iyo jeerna way murmaan ama way doodaan.marka shaqo loo dhiibana ma maqasho waalidkeed mana fuliso hawlaha loo diro.

Mana jirto cid kale oo ay talo ka qaadato. Inta badan waxaa loo diro wax ka soo horjeeda ayey sammaysaa. In ay haye tidhaahdo waxaa uga fudud in ay maya tidhaahdo. Shaqadeedu inta badan waa xin, iyada oo qofkale ku xininaysa ayey qabata saddexdi bilood ee ugu horaysay dabeecado qalafka ayey ku soo dhaqmaysay. Saddexda bilood kadib, laakiin talaabo-talaabo ah in ay dabeecadeedii adkayd u bedesho ayey bilawday. Ardo isbedelka dabeecadeeda waxaa qayb weyn ka qaatay Aabahaad. Laga bilaabo marki uu arkay ama fahmay in gabadhiisa Ardo akhlaaqdu ama dabeecadu ka xuntahay ayaa wuxuu bilabay sidii uu dabeecad fiican ugu yeeli lahaaamaugu bedeli lahaa. Sidaas daraadeed, wuxuu bilaabay in uu toosiyoamasaxo dabeecadaha xun-xun ee Ardo. Mudo saddex bilood dhan ayuu si fiican ugu kuurgalay kadibna wuxuu si buuxda ugu guulaysto in uu bedelo dabeecadihii xuma Ardo uguna bedelo dabeecado fiican.

Hada laakiin dabeecadaheedi xuma oo dhan way wada bedeshay. Kudamiin oo ay ka mid ahaayeen danaysi, cadho badan, buuq iyo muramo badan, diidmadi ay abaheed diidi jiray waxay bilawday in ay xidhiidh walaalnimo iyo waalidnimo oo jacayl ku dheehanyahay la yeelato xubnaha qoyskooda. Sidaa xaqiiqda ah maanta Ardo waxay leedahay ixtiraan iyo qadarin. Hase yeeshee, qaabka ay dadka kale ula dhaqanto waa qaab aan kala sooc lahayn. Tusaale, ma jirto kanayaar xiga, igafog, ama sidan ah.

Maadaama hada noqotay qof toosan oo aan weec-weecad lahayd una qabsatay dhabada runta ah, akhlaaqda fiican ee ay sammaynayo waa mid ka dhab ahamaficilada ay sammayso waa ka dhab laakiinse ma aha mid ay iska yeelyeelayso ama dadka kale isku-tusayso. Maanta ardo waali dinteeda way xushmaysa waxayna muujisa naxariis iyo baarinimo ay ku adeecdo waaldiinteeda.

Deegaanta ay ku nooshahay, meelaha ay ku ciyaarto nabad galyo iyo degaansho ayaa lagu yaqaana. Waalidiinteeda, iyo bulshada deegaanka

ku nool, dugsiga ay wax ka barato nidaamkiisa si buuxda ayey ugu hogaansantahay mana bixiso siraha dugsiga.

Ardo waxay noqotay qof xaafada iyo deegaanka ay ku nooshahay dadka gala ku faano. Dugsiga ay wax ka baratana waxay tusaale u tahay akhlaaq wanaaga . In ay akhlaaq fiican leedahay dugsiga ay wax ka barato ayaa siiyey abaalgud ama abaalmarinti ugu saray say ee xaga akhlaaqda. Sido kale, abaalmarinti la siiiyey waxay ka bixisay maal qaadhaan ah oo ay ku taakuleyso dadka saboolka ah ee xaafadoda ka tirsan. Sidaas daraadeed, maamulka qabalaha ayaa u cadeeyey in ay Ardo tahay ardeyad akhlaaqaha fiican tusaale u aha. Taasina waxay keentay in laga soo dhex doorto xaafada oo dhan.

Imikana gabadha qabaleega ay Ardo ka tirsan tahay ku noola waxay noqotay mid yaraanta lagu qadariyo. Waxay hada ka qayb qaadata dhammaan hawlaha horumarinta xaafada ay ka tirsan tahay sida ciyaaraha isboortiga, caafimaadka, waxbarashada, nabadgalyada waxayna hormood u tahay dadka u jajaban taakulaynta dadka baahan ama dhibaatooyin kala gedisan hayaan

## Hawl-galka 3[aad]

Idinkoo ku saleenaya sheekada korka ku xusan ka jawaaba su'aalahan

1. Taariikhda Ardo dabeecadaha (habdhaqanka) wanaagsan iyo waxyaabaha midhaha ah ee lagu tilmaamay maxay yihiin ?
2. Dugsiyada dhexdooda iyo agagaarada guryaha aad ku nooshihiin ka raadiya qaar la fac ah oo tusaalooyin wanaagsan u noqon karaa dabeecada suuban kadibna sharaxaad ka bixiya sababaha aad tusaalooyinka u soo qaadateen.
3. Indinka oo isbarbar dhigaya habdhaqanki horay ee ay lahayd iyo sida ay hada wax uga badashay, sharaxaad ka bixiya.

## 5.3. Siyaasadaha iyo Istaraatiijiyada Barnaamijyada Horumarinta

### 5.3.1 Doorka ay Siyaasadaha iyo Istiraatiijiyadaha Wadankeenu ku Leeyihiin Dhimista Saboolnimada



Jaantuska 5.2. Shaqo wanaagaaga waxaad ku mutaysan abaal mari wanaagsan



Jaantuska 5.3. Xoogiina ku baahi baxa



Jaantuska 5.4. Qaybtaada ka qaado horumarka dalka

- Maxay ka turjumayaan sawiradan korka ku xusan?
- Saboolnimo macnaheedu waa maxay? maxaa lagu qeexi karaaa, sideese loo qeexi karaaa? Fasalka dhexdiisa kaga wada doodaa.

Si dalkeena looga saaro saboolnimada loona buuxiyo baahida cuntada iyo kuwa kale ee asaasiga ah waxaa loo baahan yahay in la dejiyo siyaasad maal-galineed oo natiijo wanaagsan laga gaadhi karo. Waxaa waliba aad muhiim u ah in si weyn loogu hawlgalo korna u qaadida xaaladaha wax soo saar ee beeraha iyo miyiga. Waxtarka waxyaabahan aynu soo sheegnay si loo xaqiijiyo, farsamooyinka la adeegsan karo waxaa ka mid ah :

- Qaybta beeraha dhaqaalaha oo la kobciyo waxaa looga jeeda in dadka sida tooska ah maal-galinta ugu xidhan kor loo qaado awoodda ay kaga faa'iidaysanayaan. Tani macnaheeduna waxaa weeye heerka nolosha bulshada itoobiya ayaa kor loo qaaday.
- Marka dhaqaalaha beero qodatada miyiga ah kobcoamakor u kaco waxaa biiraya midhaha shinida cuntadaamawaxaa kor u kacaya baahida beerashada midhaha cuntada ah . Waxaa kale oo kor u kacaya wax soo saarka warshadaha oo dhaqaalaha miyiga u adeegsada. Marka sidan la yeelo waxaa la awoodi karaaa in dalka laga l saaro saboolnimada.

## Hawl-galka 4[aad]

1. Jaantuuskan hoos ku xusan waxaa lagu tilmaamay midhaha beeraha ee caydhiin. Waxaad magacawdaa saddex warshadood oo isticmaala midhahan caydhiin.

Dadka deegaanka ku nooli intay istaageersadaan

| *Tirada* | *Midhaha caydhiin ee beeraha* | *Wax soo saarka midhaha* | | |
|---|---|---|---|---|
| | | *1* | *2* | *3* |
| *Tusaalaha laga shaqaynayo* | *Baaridaamaabuurka aalasonkoorka* | *sonkor* | *waraaq* | *shidaal* |
| *1.* | *Abbuurida arabikhida midhaha arabikhida* | | | |
| *2.* | *Midhaha qamadiga* | | | |
| *3.* | | | | |
| *4.* | | | | |

### 5.3.2. Doorka Samafalka ee ay Muwaadiniintu ku leeyihiin Si Xal loogu helo Dhibaatooyinka Guud

- Dhibaatooyinka wadar ahaaneed waa kuwee?

Siyaasadaha iyo Istaraatiijiyada ay dawladu soo saarto ee ku aadan dadajinta barnaamijyada horumarinta waxaa lagama maar maan ah in la helo is-xilqaan ay muwaadiniintu muujiyaan si loo dardar galiyo dhaqan-galinta mashruucyada horumarinta. Dhibaatooyinka bulshada dhexdeeda ka jira dawlada oo kali ah in loo daayo ma ahee bulshaduna waa in ay la timmaado is-xilqaan iyo in ay u hurto aqoonteeda, lacagteeda iyo wakhtigeedaba si loo gaadho horumar wada jir ah oo dhinac walba leh.tusaale ahaan haddii xaafad dhexdeed dab ka kaco Gaadhigii ciidamada dabdamisku inta uu imaanayo ma sugayo.

islamarkaana adeegsadaan kolba habka ay awoodi karaan ku dadaala sidii ay u damin lahaayeen ayaa loo baahan yahay. Dhibaatooyinka uu dabku geystay iyo haddii ay jiraan dad wax ku noqday ilaa iyo inta taageero rasmi ah loo helayo bulshada ayaa looga baahan yahay in ay taageero ku meel gaadh ah u sii fidiso dadka dhibaatooyinku ka soo gaadheen. Dhibaatooyinka guud ee sidan oo kale ah haddii ayna bulshadu iska kaashanin isla markaana xal u helin taageerada dawlada oo la sugo xal ma noqonayso.

Shakhsi kasta oo muwaadin ah waa in ay is-xilqaan gaar ahaaneed la yimaado si uu uga qayb-qaato xal u helida dhibaatooyinka guud ee bulshada ku yimaada. Waxaa loo baahan yahay in is-xilqaan dhammaystiran lala yimaado islamarkaana lala kaashado xarumaha ugu dhaw ayaa la awoodi karaa. Tusaale ahaan, inta aad xubin ka noqotid hay'ada bisha cas hawlaha bulshadu fulinayso si fir-fircoon islamarkaana is-xilqaan ku dheehan yahay loogu adeego ayaa loo baahan yahay.

### Hawl-galka 5[aad]

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Waa maxay macnaha dhibaatooyinka guud?
2. Suurto gal ma tahay in dhibaato kasta oo dhacda xalkeeda laga sugo dawlada?
3. Waa maxay maxnaha siyaasad iyo xeelad?
4. Maxaynu u jeednaa marka aynu leenahayhorumarin?
5. Sharaxaad kooban ka bixiya doorka bulshadu ku leedahay horumarka dalka? Tusaalooyin ka bixiya.

## 5.4. Muwaadinimo

### 5.4.1. Xuquuqda iyo Waajibaadka Muwaadiniinta.

*"Inaad tidhaahdid ma'aha dalkaygu muxuu Aniga ii qabtey, Waa inaad is waydiisaa maxaan Anigu dalkayga u qabtay, "*

(Madaxweynihii Maraykanka Joon Ef kenedi)

- "Odhaahda korka ku xusan waa maxay fariinta ay gudbinayso?".

Qof kastaa oo muwaadin ah maadaama uu yahay biniaadam waxaa jira xuquuqo ay tahay in loo tixgaliyo. Tusaale ahaan muwaadiniinta oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay six or ah dalkooda ugu noolaadaan. Qof kasta oo muwaadin ah wuxuu xaq u leeyahay in si sharci daro ah aan loo xidhin loona dacweynin. Wuxuu xor u yahay in u raaco diinta uu rabo isla markaana aamino waxa uu doono. Waxaa intaa dheer nidaamka dimuqraadigu muwaadiniinta xuquuqdooda bini aadanimo iyo ta dimuqraadiyadeedba si habboon ayuu u tixgalinayaa. Xuquuqaha ama waxyaabaha qofku u madaxbanaan yahay waxaa ka mid ah in uu qofku si xor ah u sharaxo fikirkiisa, ku socda aragtidiisa u gaarka ah, urur u samaysto ama xubin ka noqdo iskii isu-maamulo. Iyada oo muwaadiniinta loot ix-galinayo xuquuqdooda bini'aadanimo iyo tooda dimuqraadiyadeed waxaa hadana waajib ku ah in qof kasta oo muwaadin ah ka soo baxo ama guto masuuliyadaha saran. Muwaadin kasta xuquuqaha bini'aadanimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed ilaa iyo inta uu rabo in loo tixgaliyo in le'eg in uu xuquuqaha dadka kale isna tixgaliyo ayaa waajib ku ah. tusaale ahaan Ilmuhu waalidkiisa, cida korinaysa ama taageerta kolba inta ay awoodoodu tahay inay u buuxiyaan baahida asaasiga ah in uu weydiisto xaqbuu u leeyahay. Ilmuhuna masuuliyada ka saran arrimaha guriga in uu ka soo baxo waajib bay ku tahay.

Muwaadiniinta qaarkood si loo dhawro xuquuqdooda waxaa looga baahan yahay in ay si fir-fircoon uga qayb-qaataan arrimaha bulsho ee laga fulinayo agagaarka. Hantida bulshada ka dhaxaysa in si haboon loo daryeelo iyo dalku waxyaabaha qofka muwaadinka uu uga baahan yahay oo dhan in uu buuxiyo ayaa ah masuuliyadaha kale ee saaran mid ka mid ah.

Waxay muwaadiniintu xaq u leeyihiin in ay dawlada weydiistaan taageerooyin lagu fuliyo barnaamijyada horumarinta sidoo kale waxaa muwaadiniintana dhinacooda waajib ku ah in ay door muhiim ah ka qaataan. Tusaale ahaan inta mas'uuliinta nabad galyada la garab galo in nabadgalyada iyo amniga deegaanka si habboon loo sugo waa mas'uuliyad qof kasta oo muwaadin ah saaran lagana sugayo in uu ka soo baxo.

### Hawl-galka 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba

1. Maxaa dhici kara haddii muwaadiniinta xuquuqahooda oo kali ah loo tixgaliyo laakiin ay ka soo bixi waayaan ama gudan waayaan waajibaadkooda?
2. Waa maxay waxyaabaha muwaadinimada ay ku weydiisan karaan dawlada?

## 5.5. Calanka Qaranka

### 5.5.1. Xaaladaha Taariikheed ee uu Soo maray Calanka Qaranka Itoobiya



Jaantuska 5.5. Calanka dalkeena Itoobiya wuxuu astaan u yahay Madax banaanida dalkeena

- Maxaad ka fahanteen sawirkan kor ku xusan?

Calanka qaranka Itoobiya waa astaan madax banana oo xornimada dalkeena muujinaysa.

Calanka qaranka dalkeena midabyada aynu hada ku naqaano oo ka kooban saddex kalar oo kala ah;Cagaar, Huruud iyo Casaan oo kali ah ma ahayn.

Sida ay xaqiijiyeen sanadihii kala duwanaa ee la soo dhaafay maamuladii ama hogaamiyayaashii dalka soo hogaamin jiray marka ay awooda dalka la wareegaan waxay samayn jireen calano midabyo kala duwan leh.

Tusaale ahaan xiligii Tadharoos calanka dalkeenu midabyada uu ka koobnaa ay ahaayeen Casaan, Caddaan iyo Buluug halka calanka dalkeenu midabyadii uu ka koobnaa xiligii Yohanis ay ka ahaayeen Cagaar, Huruud iyo Casaan ayey qaar ka mid ah cadaymaha taariikhuhu tilmaamayaan.

Boqorkii Millilik bishii diqimti 25/1889 maamulkii loogu yeedhi jiray boqorka boqorada (Nugus-negast) midabyada calanku ka koobnaayeen waxay ahaayeen Cagaar, Huruud iyo Casaan. Xiligii boqorada ee Sawdhitu wuxuu ka koobnaa Cagaar, Huruud & Casaan.

Calanka qaranka Itoobiya midabyada uu ka koobnaa iyo sida loo dhigayo ayaa markii ugu horaysay la awooday in sharciga dalka lagu muujiyo xiligii boqorkii Haile Salaase dawladiisu jirtay ee 1948.

Hadda oo aynu ku dhaqano nidaam dimuqraadi ah oo dalkeena ka hana qaadayna waa Cagaar, Huruud iyo Casaan. Waxaa dheeri ku ah xiddig laga sameeyey labo xariiq oo dherer ahaan isle'eg oo muujinaya midnimada ama sinaanta qoomiyadaha iyo shucuubta Itoobiya ayaa la diyaariyay.

### Hawl-galka 7aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Imisa jeer ayaa isbedel lagu sameeyey midabyada calanka dalkeena Itoobiya?
2. Goormaa sharci laga dhigay midabyada calanka dalkeenu ka kooban yahay?

## Gabagabada Cutubka 5aad

Si aad dalkiina aad u jeclaatiin waxaa loo baahan yahay in la daryeelo xuquuqaha, nabad-galyada iyo xoriyada ay muwaadiniintu ku noolaato waa in la helo. Taariikhaha la khalday oo la hagaajiyo, islamarkaana la sugo midnimada iyo sinaanshaha qoomiyadaha iyo bulshooyinka oo dhan ayaa laga sugaya. Waxaa kale oo loo baahan yahay in muwaadiniintu midba-midka kale qadariyoamajeclaado, isku-fikiraan, is-qadariyaan, istaageeraan. Guud ahaan , muwaadiniintu waa in ay sammeeyaan dhammaan hawlaha suuban laga bilaabo aqoontaamacilmiga la xidhiidhaa sumcadamaanshax wanaaga oo la adeegsado, islamarkaana la siii kobciyo ayaa looga baahan yahay : Dal marka la yidhaahdo waxxaa ugu horeeya ee laf-dhabarta ah waa bulshada ku dhaqan.

Bulshooyinka oo la isku-soo dhaweeyo la isna jeclaysiiyo ayaa ah arin aad u waxtar badan islamarkaana ah siyaabaha ugu muhiimsan ee wada shaqayn iyo horumar la taaban karo loo gaadhi karo. Ardayey maadaama aad baranaysaan xaalado awood idin siinaya si aad dalkiina ku jeclaataan waxaa la aminsan yahay in aad asaas u tihiin horumarka dalka iyo dadkiina. Marka aad istaageertaan, isqadarisaan, islamarkaana si wada jir ah ugu shaqaysaan dalkiina iyo dadkiina waxaad noqon-naysaan muwaadiniin dhaqaalahoodu aad u kobco, islamarkaana mas'uuliyada dalkooda iyo dadkoodaba daryeela. Marka sidan la helana ma dhici karto in qalbigiina ay ku soo dhacdo in dalal kale oo xoriyad adan ku heli karin ka dooraataan dalkiina hooyo. Marka aad shaqo ku tartantaan waxaa hubaal noqonaysaa in saboolnimada nihaysa ka baxdaan dhaqaalahiinana kor u qaadaan .

Marka aad leedahay dalkayga waan jecelahay waa in aad qadariso dhaqanada iyo taariikhaha qoomiyadaha ama shucuubta dalka ku nool: waxaa la idinka sugaya inaad gashataan shaadhka muwaadinka suuban kadibna la timaadaan isxilqaan aad u heer sareeya dhiir anaan si aad dalkiina saboolnimada uga saartaan, islamarkaana u noqotaan xooga ugu muhiimsan ee u dhaqdhaqaaqa dhaqan galinta mashruucyada lagu horumarinayo dalka . Waa in aad daryeeshaan ama dhawrtaan waxyaabaha asaaska u ah taariikhaha (sawirida iyo calaamadaha taariikhiga ah), islamarkaana aad noqotaan muwaadiniin leh dareen mas'uuliyadeed iyo mid lahaansho.

## Layliska Guud Ee Cutubka 5aad.

### I. Run ama Been.

Tilmaan: Si degan u akhriya weedhahan soo socda si aad ku fahan taan nuxurkaamadulucda ka-dibna weedhi run ah ku qor 'Run', tii been ahna ku qor 'Been', kadibna sharax sababaha aad run ama been ugu qortayamatidhi.

1. Qofkastaa oo muwaadina waa inuu xaqiijiyaa Itoobiya tahay dal bulshada ama qoomiyadaha ku nool oo dhani leeyihiin taariikho isku-mid ah (bulshada itoobiya oo dhan waxay leedahay taariikho isku-mid ah).
2. Si loogu hogaansamo sharciga waa in muwaadiniinta ay leeyihiin waxbarasho sharciga.
3. Saboolnimada ama macaluusha ku soo noq-noqota dalkeena inta badan waxaa sababa u ah dhibaatooyinka dadku gaystaan ama keenaan.
4. Calanka qaranku wuxuu ka makhraati kacayaa madaxbanaanida dalka iyo taariikhda soo jireenka ahayd.
5. Sixida taariikhda la buunbuuniyey waa waajibaadka kaliya ee taariikhyahanada saran.

### II. Sida ay iskugu habboon yihiin iskugu aadi qaybta B iyo qaybta T.

| "B" | "T" |
|---|---|
| 1. Astaamaha tilmaama qofka waxaa uu yahay | B. Ilaalinta sirta |
| 2. Garashada waajibaadka iyo masuuliyada | T. Ficilada xun-xun |
| 3. Siyaasada iyo Istaraatiijiyada horumarka | J. Dhaqanka burburinta |
| 4. Daacadnimo | X. Tusaalaha lagu dayankaro |
| 5. Caadaysiga Daroogada | Kh. Xeeladah lagu yareenkaro saboolnimada |
| 6. Burburinta aragtida qaranka | D. Xuquuqda dumuqraadiyadeed |
| 7. Ilaalinta hantida shacabka | R. Masuuliyada muwaadinka |
| | S. Xilka wanaag farista |

### III. Ka Dooro

Tilmaan: Su'aalaha soo socda mid walba u doorta jawaabta ku habboon kadibna goobo galiya xarafka aad doorataan, buugtana iska laaba.

1. Kuwan soo socda ka dooro ka ugu muhiimsan ee asaas u noqon karaa muwaadinimada suuban.

B. Aqoon lagu helo iyo waayo aragnimo la yeesho .

T. Aqoonta lagu helo waxbarasho.

J. Isxilqaanamago'aan gaar ahaaneed oo wax lagu fuliyo.

X. Lahaansho awood mas'uuliyadeed.

2. Si muwaadiniintu iyaga oo siman dalkooda uga wada faa'iidaystaan, islamarkaana u yeeshaan dareen siman oo lahaansho ah waxyaabaha noo sahlaya loona baahan yahay in aynu la nimaadno waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

   B. In la garto taariikhda dalka.

   T. Xuquuqaha la xidhiidhaa in la yeesho ismaamulo gaar ahaaneed oo laqadariyo.

   J. In la noqdo xubin ururo ama xisbi ka tirsan.

   X. In la noqdo ka si ka fiican kuwa kale uga faa'iidaysta ( in la noqdo kuwa sida ugu fiican uga faa'iidaysta).

3. Iyada oo lagu salaynayoamaasaas looga dhigayo sharciga ururka hanti dhawrka (ilaalinta kharashka) waxyaabaha xuquuq u noqon karaaa waa kuwee ardeyda ku nool meelaha la tilmaamay?

   B. In ay ka mid noqdaan xubnaha ururka.

   T. Kuwa lagu xadgudbay macal dhalshadooda la celiyo.

   J. Kharash ilaalinta ( ururinta ) oo marka ay rabaan bixiyaan ama ka qaybqaataan ururinta qaadhaanada.

   X. Arin kasta oo jira oo la is-hor-taago.

   Sharax shuruudaha looga baahan yahay in uuamaay buuxisoamayo qofka raba in uu bixiyo canshuurta_________________

4. Sharax xuquuqaha lagu helo xubinimada ururka kaydinta .___________________________ ____
_____________________________________________________________________________

## IV. Sharaxaad kooban ka bixi su'aalahan.

Tilmaan: Su'aalahan soo socda sharaxaad cad, islamarkaana ku habboon ka bixi.

1. Fal dhaqameedyada deegaanadiina laga yaqaano u kala saara kuwa xun iyo kuwa fiican.

   B. Xaaladahaamawaxyaabaha aad isleedihiin waxay ka mid yihiin astaamaha dhabta ah ee lagu garto in dalkeenu yahay sabool dinba u dhacsan yahay sharax.

   T. Waxyaabaha aad liis garayseen ee aad isleedihiin calaamad bay u yihiin saboolminada iyo dib u dhaca dalka idinka u eegayaamasharaxaad ka bixiya xalka dawlada, bulshada iyo ururada kala duwan u yaala ama ay u heli karaaan iyada oo lagu salaynayo xaaladaha dhabta ah ee ka jira deegaanada.

CUTUBKA 6

# MASUULIYADA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Fahmaan heerarka kala duwan ee masuuliyada.
- Gartaan masuuliyada ka saaran ilaalinta khayraadkeena iyo taariikhdeena.
- Dareemaan HIV/AIDS oo la iska ilaaliyo.

## 6.1. Gudashada Xilka Masuuliyadeed

### 6.1.1. Heerarka iyo Noocyada Masuuliyada



Jaantuska 6.1. Ilaalinta Nadaafada Deegaanka

- Maxaad ka fahanteen sawirkan kor ku xusan?

Waax kasta waxaa looga baahan yahay in ay diyaarsato dhammaan hawlaha ay mas'uulka ka tahay una diyaargarawdo sidii ay u fulin lahayd. Tusaale ahaan,waalidnimadu waa mas'uuliyad gaar ah oo ka mid waaxyahaamalaamaha mas'uuliyadaha . Mas'uuliyadaha waaxdan hoos yimaada waxay u kala baxda hawlo aad u tiro badan oo u baahan in la faah-faahiyo.Waalidiintu dakhliga ay ku quudiyaan qoyskodoa waxay kaamahelaan hawlo badan oo ay fuliyaan . Si ay u helaan dhaqaale ay ku maamulaan qoysaaskooda waalidiintu waxay fuliyaan hawlo tiro badan . Si ay nolosha qoyska u kobciyaan waxay sammeeyaan waxyaabaha lagama maar-maanka ah oo dhan kolba inta ay awoodoodu u saamaxdo. Si habboon iyo si nidaamamaanshax wanaagsan leh ayey qoysaskooda u maamulaan. Si ay kor ugu qaadaan nolosha qoyska ee mustaqbalka waxay sammeeyaan dhammaan wixii dadaalo ah ee awooddaan.

## Hawl-galka 1aad

1. Waxqabadyada mas'uuliyadeed ee ku qoran jaantuuska dhexdiisa tusaalaha la socda idinka oo adeegsanaysa qodobeeya mas'uuliyadaha beera-qodatada, askarta, ardeyda iyo ganacsadayaasha.

| *Tirada* | *waxaa ay tahay mas'uuliyadu* | *Qodobada mas'uuliyada loo baahan yahay in la aqbalo.* |
|---|---|---|
| | *Dhakhtar* | - *Xanuunka si jacayl iyo foojignaan ku dheehantahay ayuu u fuliya .*<br>- *Sirta xanuunka wuu qariya .*<br>- *Wuxuu ka digtoonaada in xanuunkaagu gaadhsiinin in wax dhib ah nooc kasta oo ay Tahay* |

Mas'uuliyada oo laqaato ka ma dhigna mas'uuliyada oo la fuliyo. Fulinta mas'uuliyadu marka hore waxay ubaahantahay in mas'uuliyada la aqbaloamaqaato. Tusaale, bilawga sanad dugsiyeedka baraha fasalkiinu wuxuu idin amray in aad doorataan horjooge fasal idinka oo waliba nidaamka loo dooranayo horjoogaha ilaalinaya islamarkaana ardeyda fasalka ka dhex xulanaya ardeyda noqonaya horjoogaha.Baruhu faadumo ayuu magacaabay in ay fuliso farsamada horjooge loogu dooranayo fasalka, sidaas daraadeed, si horjooge loo doorto faadumo waxaa la siiiyey mas'uuliyad ay hawlo tiro badan ku fuliso waxay ilaalinaysa nidaamka fasalka iyo geedi-socodka doorashada. Waxaa kale oo ay ku dadaalaysa in ay xuquuqaha ardeyda sugto si ay u gutaan waajibaadka saaran, waxaa laga sugaya in ay mas'uuliyadeeda si habboon u wado fulisana waajibaadka saaran. Haddii ay awoodi weydo in ay fuliso hawlaha loo xil-saaray,waxay ka dhigantahay in ay ka soo bixi weyday mas'uuliyadi saaranayd. Mas'uuliyada oo aad ka soo baxdo macnaheedu waxaa weeye mas'uuliyadi aad qaaday oo sidii loo baahna aad u fulisay ama gudato.

## Hawl-galka 2aad

Jaantuska soo socda waxaa lagu qodobeeyey noocyada mas'uuliyada . Idinka oo ku salaynaya tusaalaha la idin siiyey hawlaha loo baahan yahay in la fuliyo, sharax waxaa ay kala yihiin. Haddiii la fulin waayo waxqabadyada, arimaha dhici karaana qodobeeya.

| ***Tirada*** | ***Noocyada mas'uuliyada*** | ***Hawlaha la fulinayo*** | ***Mas'uuliyadaada oo aad gudan weydo arimaha ka iman karaa.*** |
|---|---|---|---|
| | *Ganacsato* | - *Midho tayadoodu wanaagsan tahay oo in la gado loo soo diyaarshay .*<br>- *Qiimo kala gedisan oo lagu gado .*<br>- *Ganacsi sharci ah oo la samaysto.*<br>- *Dawlada oo la siiiyo canshuurta alaabta iibka ah iyo dakhliga.* | - *Bulshada loo adeegayo caafimaadkeeda iyo akabadeeda ayuu dhibaato soo gaadhsiinaya .*<br>- *Bulshada loo adeegayo ayuu ka dhigaya .*<br>- *Niyada ganacsatada sharciga ah ayey khatar galinaysa.*<br>- *Dakhliga dawlada ee sharciga ah ayaa la waayaya.* |
| *1.* | *Boolis* | | |
| *2.* | *Waalid* | | |
| *3.* | *Bare* | | |

***U fiirso sheekadan oo tusaale u ah isxilqaanka Farxiya.***

Farxiya waa gabadh dhigata fasalka todobaad oo waxbarashadeedana aad ugu fiican . Mar kasta oo ay ka soo laabato dugsiga waxay caawin jirtay hooyadeed oo ay tukaan u iibin jirtay. Maalin maal-maha ka mid ah waxaa dhacay iyada oo tukaanka iibinaysa ayey hooyadeed oo leh faxtixay waxbaa inagu; dhacay Farxiya iyada oo naxsan ayey weydisay; hooyo maxaa dhacay? Dhaadhici alaabta, dhaadhici alaabta mafrashka saaran dhammaanteed oo qari, dhakhso faaruqi tukaanka ayey ku tidhi Farxiya .Farxiya way fahamtay maadaama ay marar badan alaabta tukaanka taala kolba sida ay tahay iyaga oo eegaya in ay qofka ka qaadaan lacagta canshuurta iyo macaashul-macaashka marka ay yimmaadin shaqaalaha ururiya iyo dakhliga in ay hooyadeed muujiso wal-walkan oo kale . Iyada oo ay jirtay wakhtiyadi la soo dhaafay in ay Farxiya hooyadeed la qarin jirtay alaabta tukaanka marka ay yimmaadaan dakhli ururiyayaasha dawladdu.

Maanta laakiin ma rabto in ay sidii hore yeesho iyada oo ay ka muuqatay deganaansho iskuna dayeysay in ay dejiso hooyadeed ayey 'tidhi;' hooyo sug, hooyo sug.Hooyadeed waxay ku jawaabtay: hooyo maxaan suga way inagu yimmaadeene . Iyada oo alaabta si degdeg ah u dhaadhicinaysa. Farxiya hooyadeed alaabta ay soo dhaadhicnayso ma noqonin mid meeshi cid laysa taaso ay ka cadhootay. Marka ay dib u soo jeesatay waxay isha la heshay oo alaabti ay soo dhaadhicisay halkeedi ku celinaysa.Farxiya hooyadeed laakiin waxaa ka dhammaaday dulqaadkii kadibna intay soo booday ayey tidhi naa ma waxaan anigu hagaajinayo ayaad adna xummaynaysa, iyada oo aad ugu qaylinaysa. Farxiya iyada oo deganaansho ka muuqdo wajigeeda ayaa waxay ugu jawaabtay: hooyo wax-ma xummaynayee waxbaan hagaajinayaa . Markasay hooyadeed tidhi: soo dhaadhici baan ku idhi eh goormaan ku idhi rasee? si cadho leh ayey ugu tidhi qaad alaabta oo xaga dambe ku qari.Farxiya, laakiin fikirkeedi ma bedelin . Iyada oo cadaynaysa in fikrada hooyadeed ayna ku raacsanayn ayey waxay sii waday in alaabta meelihii laga soo dejiyey ay ku celiso. Markaasay hooyadeed ku tidhi; maxaad sida u sammaynaysa? waxaa ay la yaabtay degananshaha ka muuqda gabadheeda. Farxiyana wixii niyadeeda ku jiray iyado oo cadaynaysa ayaa waxay hooyadeed ku tidhi: xaqbaan hooyo u leenahay in aynu ganacsano balse waxaa waajib nagu ah in aynu ka bixino canshuurta dawlada iyo waliba lacagta macaashul-macaash ka. Hooyo waxaa sharci ahaan waajib nagu ah in aan ganacsigeena daacad u noqono.

Nayaahee : naagtadan yari : miyaadan rabin in aan dhaxal kaaga tagoamaama wax iga dhaxashid? Maah-maahba tidhaa "dammeerka marka cawus loo goglo ayu dambas raadsada", adiga daraada ayaan u daalaya ayey ku tidhi Farxiya . Sidaas daraadeed ayaan tukaankana magacaaga ugu qoray aniga oo isleh haddii aad dhimatid ha kaa dhaxasho oo ayeyna cidlo ku dhicin adigu laakiin ---- Farxiya waxay tidhi inaad hooyo daraaday u garanaya waan garanaya hase ahaatee haddiii aynu maanta aan raacin dawga sharciga ah bari waxaa

u noqonaye dayn waxaa aad idhaxalsiinaysid. Dawlada oo la khaa'imo waa naftaada oo aad khaaintid. Haa adiguna maanta maxaad ku keentay in aad dawlada u doodid? iyada oo il shaki ku jiro ku eegaysa. Marka Farxiya waxay tidhi miyaanan karaaynin inaan anigu dantayda u doodo? Dhabahaan, hada ka hor waxaan aan moodi jiray lacagaha canshuurta ah ee la qaado in ay galaan shakhsiyaad jeebkooda . Hada, laakiin dakhliga dawladdu ururiso in lagu fuliyo danaha gaarka ah ee bulshada ayaa waxaan ku ogaaday waxbarashada ku saabsan muwaadinka dhabta ama hab dhaqanka wanaagsan ee qofka wadaniga ah looga baahan yahay in uu la yimmaaado. Islaantii intay soo booday ayey Farxiya ku tidhi: iga bax; hada iga bax iyada oo hal alaab ah soo dejinin in waxaa isa soo taagay tukaanka hortiisa cashuur qaadayaashi dawlada ka socday ka dibna wixii cashuur ku waajibtay ayaa barti lagaga qaaday.

## Hawl-galka 3aad

1. Maxaa keenay in Farxiya iyo hooyadeed aad ugu kala fogaadaan aragtida ku saabsan bixinta cashuuraha dawlada?
2. Farxiya iyada oo rabta in ay hooyadeed u muujiso tixgalinta ay u qabto haddii ayna ka soo horjedsan fikirka hooyadeed miyeynu odhan lahayn waajibaadkeedi way gudatay? sabab?.
3. Dakhliga dawladdu ururiso siduu ku noqonayo hanti bulshadu leedahay?

Masuuliyada gaar ahaaneed waxaa ay tahay tan qofkastaaba u adeegsanayo shakhsi ahaantiisa qaabki uu u qaadan lahaa taas oo macnaheedu yahay waxyaalaha asaasiga u ah nolosha sidii uuamaay u buuxin lahaydamalahaa . Waxaa kale oo ka mid ah sidii uu qofka amnigiisa u ilaalin lahaa iyo kuwa la mid ah. Sidii qofka lacagtiisa sida ugu haboon uga faa'iidaysan lahaaiskagana illaalin lahaa dhaqanada xun xun iyo balwadaha, waxay noqonaysaa in uu qofka ka soo baxay mas'uuliyadi shakhsi ahaaneed ee saarnayd. Tusaale ahaan, nadaafadaada oo aad ilaalisid waxaa ay dan u tahay shakhsi ahaantaada . Qofka nadaafadiisa ilaalin waaya dhibaatadu isaga ayey ku horaynaysa. Mas'uuliyada shakhsi ahaaneed iyada oo qofka u gaar ah hadana dhinaca kale natiijadu waxay ku dambaysa dhibaato guud ahaaneed. Tusaale ahaan, arday ka mid ardayda nadaafadiisa shakhsi ahaaneed isaga oo ilaalin waayey awgeed haddiii uu duray ku dhaco isaga oo aan laga daaweynina uu soo dhex galo fasalka si uu u sii wato waxbarashaddiiisa waxay sahlaysa in uu duraygaasi si dhib yar ugu dhaafo ardeyda caafimaadka qabta . Sidaas daraadeed duraygi hayey shakhsiga kali ah maadaama uu u gudbay ardeydi kale wuxuu noqonayaa xanuun guud ahaaneed. Si ayna taasi u dhicin shakhsigu nadaafadiisa in uu ilaaliyo waa waajibaad saaran loona baahan yahay in uu u guto si hagar la'aan ah.

Dhinaca kale waxyaalaha dadku u adeegsadaan ujeedo mid ah in uu qofka ka soo baxo mas'uuliyada guud ahaaneed ee saaran. Tusaale ahaan, farshaxanada taariikhiga ah ee ay ka midka yihiin waxyaabaha dabeeciga ah iyo kuwa dadku sammeeyey in la daryeelo, in aad ilaalisid nadaafada agagaarkaaga, xarumaha bixiya adeegyada bulshada in aad sugtid nabadgalyadooda,

hantida dawlada iyo tan bulshada ka ilaalisid dayacnaanta iyo dhibta soo gaadhi karta kana hor tegtid dambiyada islamarkaana la dagaalantid xag-jirnimada, ilaalisid xoriyada dalkaaga hooyo ----iwm waxay noqonayaan kuwa hoos yimmaada mas'uuliyada guud ahaaneed.

## Su'aalo wadaxaajood

ka dooda qodobada hoos ku xusan.

- Waxaa horaysa mas'uuliyada shakhsi ahaaneed
- Mas'uuliyada guud ahaaneed ayaa horaysa.
- Labaduba waxay mudanyihiin in si isku-mid ah loogu wada hawlgalo.

## CEEBLA

Ceebla abaheed isaga oo taagan albaabka ayuu yidhi : ceeblay hooyada aaway? Ceebla hooyadeed waxaa ay ku maqnayd in ay qaraabadeeda soo eegtoamadaydo. Hooyo waxay la kulantay bulshada xaafada oo aan u kala hadhin ku yar, ku weyn, wiil iyo gabadh--Iwm oo is urursaday si ay u xaadhaan tuunbooyinka biyaha roobka maraan kadibna waxay tidhi :sideen u dhaafi, weyna ku biirtay, ayey ku tidhi iyada oo soo galaysa gudaha daraada. Aabaheed wuxuu weydiiyey su'aal ah: adigu maxaad uga qayb qaadan weyday? Inta ay dhexda qabsatay gundhisayna garbaha ayey tidhi: maxad noqotay Aabo iska da inaan ku biire waxaaban aad uga xummaaday hooyo oo ku biirtay dadkan bila camalka ah . Aabaheed wuxuu yidhi :dawgan uu daadku xummeeyey waa hanti gaar ahaaneed. Ceebla waxay ku jawaabtay: ha ahaato aniga maxaa iga galay. Kadib Aabaheed wuxuu u yidhi sidayna wax kaaga galin dan guud ahaaneed? waxay ku jawaabtay : dawladdu maxay qaban? wuxuu ku yidhi ; ceeblay hawshani ma aha mid dawlada oo kali ah khusaysa laakiin waa waajibaad qofkasta oo muwaadin ah saaran. Anigu laakin had iyo jeer waxaan maqla waxaa guud ahaaneed cid leh in ayna jirin. Adigu miyaanad maqlin Aabo? Aabo hadalkaasi sax ma aha ayuu ku yidhi ceebla. Inta badan waxyaabaha la wada leeyahay ayaa mudan in tixgalin la siiiyo. Garabka ayuu qabtay wuxuuna u soo ceshay albaabki ay ka soo gashay waxayna tidhi: xagee tegaysa Aabo oo aad igu celinaysa ? Anigu inta aan tego ayaan qaybtayda ka qaadan adiguna qaybtaada kugu habboon in aad ka qaadatid ayaa waajib kugu ah. Waxyaabaha inoo dhimana hadhaw ayaan ka shekaysanayna inta uu yidhi ayuu u kexeeyey goobti shaqadu ka socotay.

## Hawl-galka 4aad

1. Iyada oo mas'uuliyadaha shakhsi ahaaneed iyo kuwa guud ahaaneed istaageersanayaan sharaxa idinka oo tusaale ku xoojinaya. Tusaale, deegaanku haddiii uuna nadiif ahayn lama awoodi karo in la ilaaliyo caafimaadka shakhsi ahaaneed.
2. Siduu Ceebla Aabaheed tusaale ugu noqday gabadhiisa waa sidee?
3. Shaygaamawaxaa dadka oo dhan ka wada dhexeeya cidna ma laha odhaahda tidhaahda waxyeelada ay leedahay sharax. Hantida iyo alaabada dawlada iyo bulshada oo laga ilaaliyo khasaaraha .

### SU'AALAHAN KA DOODA.

Hantida, alaabada dawlada, bulshada iyo shakhsiga waxyaabaha lagu tilmaamo qodobeeya idinka oo barahiina la kaashanaya.

### Maxaa Iga Galay:

Waxaa jiray wiil yar oo 14 jir ah oo ku magac dheeraa (lagu naan aysi jiray) " maxaa iga galay", wuxuu aminsana in magacan loogu yeedho fiican yahay wuuna ku farxi jiray marka loogu yeedho. Waxaa caado u ahayd in uu had iyo jeer bur-buriyo waxyaabaha hantida badan ku baxday oo ay ka mid yihiin dugsiyada iyo qalabyadooda wuxuu ficiladaas sammayn jiray ilaa iyo intii u ka gaadhayey doob ama nin weyn oo oday ah. Hantida, alaabada dawlada iyo dadweynaha haba yaraatee wax xil ah iskama saari jirin. Ma tixgalin jirin saacadaha shaqada si aan caadi ama sharci darro ah ayuu u isticmaali jiray laydhka xafiiska. Habeen iyo dharaarna wuxuu u ordi jiray sidii uu u soo boobilahaa hanti iyo qalab uuna lahayn islamarkaana u noqon lahaa maal qabeen weyn. Dambiyadan iyo kuwa kale oo badan isaga oo caado ka dhigtay ayuu mar kasta waxaa laga joojin jiray shaqada uu hayo ugu dambayna waxaa laga eryey dhammaan mas'ulliyadihii uu ka hayey oo dhan . Ninkii naanaystiisku ahayd maxaa iga galay faadhigiisii wuxuu noqday gidaarada. Naftiisiina wuu nacay. Maanta wuxuu haysta magacii caruuraha xaafaduhu ugu yeedhi jireen oo kali ah waana maxaa iga galay.

### Hawl-galka 5aad

1. Maxaa iga galay wuxuu noqday meesha ay ka yimmaadaan dhibaatooyinka lala kulmay ee laxidhiidhaa isticmaalka alaabada goobta uu mas'uuliyada shaqo ee dawlada ka hayo. Waa maxay sababtu?
2. Maxaa sabab u noqon karaaa in laabada, hantida dawlada, iyo bulshadu u dayacanto?
3. Hantida, alaabada dawkada iyo ta bulshadu siyaabaha ay u dayacmi karaaan sharaxa?

### Daraasad

Deegaanka aad degantihiin gaar ahaana goobaha dawlada iyo kuwa bulshada sida macadyada iyo goobaha shaqada intaad soo koor meertaan daraasad ku soo sammeeya hantida iyo alaabada bulshada iyo dawladdu siyaabaha ay u dayacmaan. Indinka oo waliba tilmaamaya waxyaabaha xal noqon karaa mudo dhawr maal-mood ah gudahood ku soo dhammaystira daraasada kadibna iyada oo qoraal ah fasalka dhexdiisa ka soo jeediya.

## 6.2. AXDIGA

- Su'aalo wada dooda.

"Balan darro waa diin darro, balanti uu qaaday ma buuxinin' ka wada hadla dulucda ay xambar san yihiin weedhahan kor ku xusan.

Dadka marka ay rabaan in ay fuliyaan ama dhaqan galiyaan arin ama hawl waxyaabaha lagu amini karo in ay hawlaha fulinayaan oo ay ka hor sheegaanamacaddeeyaan waalidiintooda, saaxiibadood, bulshada deegaanka, bulshada ay wakiilka u yihiin, odayaasha dalka --- IWM. ayaa la yidhaahdaa balan qaad. Balan qaadka dalkeena in uu yahay sharaf tusaalooyin lagu xaqiijiyo ayaa jira.

### Tusaale ahaan:-

- Balan intuu jabin lahaa kay dhaleeni ha jabo
- Balanku waa daynta aaminaada .
- Balanku waa sharaf .

Balan qaadku wuxuu u kala baxaa labo nooc. Balan qaad la fulin karo iyo mid aan la fulin karin. Balanka la fulin karo labo siyaaboodba loo macnayn karaaa. Mida hore waa balan ku salaysanamaxidhan is-xil qaan iyo karti ama awood shaqada lagu fuliyo oo la helo kadibna lagu fuliyo. Sida labaad ee loo qeexi karo balanta la fulin karo waxaa weeye. Is-xil-qaanka iyo hawl karnimada waxaa dheeri ku ah shuruudo kale oo loo baahanyahay in la buuxiyo ka hor inta aan la fulinin. Nooca labaad,maadaama xaqiiqada dhabta ah ee jirta aad uga fogyahay fasarsamo kasta oo la adeegsado iyo xaalad kasta oo loo adeegsado marna suurtagal ma noqonayso in balanka la fuliyo. Shakhsiyaadka qaarkood si ay u helaan faa'iido yar oo gaar ahaantoodu ah waxay galaan ama qaadaan balan ayna fulin doonin laakiin balan u gala kali ah si ay faa'iido shakhsi ahaaneed u helaan.

Balan-qaad aan la fulina wuxuu keena ama sababa amin-darro, mas'uuliyad darro, iyo been kala disha qaybaha kala duwan ee bulshada . Dhaqankeenuna ka mid ma aha balan daradu. Balse, waa dambi weyn oo diinta aynu haysano iyo dhaqankeenaba xaaraan ka ah.

## Hawl-galka 6aad

1. Qora saddex tusaale oo ku saabsan balan qaadyada la fulin karo .
2. Sheeg saddex tusaale oo ku saabsan balan qaadyada aan la fulin karaayn.
3. Waliga balan aad qaaday oo aanad fulin ma jira? Haddii uu jiro maxad u malaynaysa in ay tahay sababta aad u fulin kari weyday? maadama aad fi weydayna maxaad dareen tay? sabab?

## 6.3. Khayraadka Dabiiciga ah iyo Hadhaaga Taariikhiga ah

B. Sheeg khayraadka dabeeciga ah ee ay Itoobiya caanka ku tahayamalagu yaqaano.

T. Khayraadka dabeeciga ah ee laga helo deegaankiina shan ka mid ah sheeg.

J. Hantidaamakhayraadka dadku sammeeyo ee lagu tilmaamo hantida dalku leeyahay maxay yihiin.

X. Qor magacda hantida dalka ee dadku sammeeyo ee laga helo deegaanadiina.

Khayraadka dabiiciga ah waxyaabaha la yidhaahdo waxaa ka mid ah wabiyada, dur-durada, dixahaamadhulka god-godan, buuraha, haraha dabeeciga ah, xayawaanada duurjoogta ah, iyo kuwa dadka dhaqdo sida geela, lo'da, adhiga, dammeeraha--iwm. Waa dhammaan. khayraadka ama hantida aan dadku sammayn karin.




Jaantuska 6.2. Waxaa waajib ah in la ilaaliyo kheyraadka dabiiciga ah & astaamaha dhaqanada ma guuraanka ah

Hantida dalka ee dadku sammeeyo sida waxyaabaha farshaxanka ah ee dhaqanka, falashada beeraha, mashruucyada lagu sammeeyo biyo xidheenada ama haraha, warshadaha, tiknoolojiyada kala duwan, dhismaha iyo jidadka, isgaadhsiinta awoodda laydhka lagu dhaliyo, biyaha nadiifta ah --iwm. Hantidan dabeeciga ah iyo ta dadku sammeeyaba waa hanti dalku

leeyahay, islamarkaana u baahan in la daryeelo. Marka si adag loo daryeelo lana kaydiyo xiligi la sammeeyey iyo sanadihii ay kaydsanayeen taariikhahooda ayey caddaymo u noqonayaan, islamarkaana jiilba jiilka ku xiga iskugu gudbinaya. Taariikh muhiim ah ayey noqonayaan. Waxtarka dhaqanahaaneed ee ay yeelanayaan ka sokow, waxay noqonayaan astaamo muujiya waxaa ay tahay bulshadu, dareen dal. Waxaa kale oo ay noqonayaan waxyaabo lagu faano laguna qadariyo, midnimada iyo waliba waxyaabo dalka lagu garto ayey noqonayaan . Sababahan aynu soo sheegnay awgood, maadaama ay dal u yihin astaamo taariikheed aan guurin waxaa ilaa xad aad kor ugu kacaya qiimahooda.

Khayraadka dabeeciga ah wuxuu gacan ka gaysanaya in dadku ka tusaale qaato marka ay rabaan in ay soo saaraan khayraad ay gacantooda ku sameeyeen. Khayraadkaas dadku sameeyana waxay ka mid noqonaysaa hantida dalku leeyahay . Hawada aynu neefsano, ta aynu ku noolnahay, dharka aynu xidhano, biyaha aynu cabno, macdanta cimilada agagaarka aynu ku noolnahay,dhulka aynu qodano, adeegyada kale ee aynu isticmaalo sida farsamooyinka tiknoloojiyada iyo waxyaabaha la midka ah oo dhan maadaama ay ka soo asaasmeen khayraadyada dabeeciga ah iyagana waxaa loogu yeedhaaa khayraad dabeeciga ah.

Hase ahaatee, dadaalka aan ugu jirno in aan nolosheena maamulo inaga oo adeegsanayna khayraadyada dabeeciga ah waa in aynu ka diktoonaano in ay nolosheena dhib ka soo gaadho islamarkaana ku guuldaraysano in aynu ka faa'iidaysano . Inaga oo isleh ka faa'iidaysta khayraadka dabeeciga ah waxaa laga yaaba in aynu waxyeelo weyn u gaysano khayraadka dabeeciga ah, islamarkaana nolosha dadka khatar galino ay sidaas daraateed,waxaa loo baahanyahay in aad looga fiirsado.

## Hawl-galka 7[aad]

1. Meelaha banbanaan ee jaantuuska hoos ku xusan dhexdiisa walba jawaabta ku habboon ku buuxiya .

| *Tiro* | *Hantida dabeeciga ah ee dalka* | *Adeega* | *Sababaha khaladaadku u gaadho* | *Taxadarka loo baahanyahay in la muujiyo* |
|---|---|---|---|---|
| | *Hawada* | *B. Dadka xayawaanka naflayda ah si ay u noolaadaan ayey u neefsadan .* | *B. Qaaca gaadhiyada iyo warshadaha ka baxa.*<br>*T. Kimikaal* | ☐ *Dhir kala duwan aad beertid .*<br>☐ *Warshado qaac badan oo la balaadhiyo .*<br>☐ *Kimiko aan dhibaatoo keeni kerin iyo adeegyada tiknoloojiga oo la isticmaalo.* |
| *1.* | *Seero caro cad ku yala* | | | |
| *2.* | *Hawltiga aksum* | *78* | | |
| *3.* | *Qiimo* | | | |

## 6.4. Cudurka Dilaaga ah ee HIV/AIDS

### 6.4.1. Cudurka HIV Aydhisku Waxyeelooyinka uu Bulshada Ku hayo iyo Siyaababa uu u Faafo.

Su'aalahan kawada dooda.

- HIV Aydhis maxaa la yidhaahdaa?
- Siyaabaha la iskugu gudbiyose waa sidee?

HIV Aydhisku waa xanuun dilaa ah oo dadka aan u kala soocin da'lab ama dhidig, midab, darajada aqoonta ama waxbarashada. Haddii aynu si kale u dhigno xanuunkani wuxuu ku dhacaa caruurta, dadka waa-weyn, rag iyo dumar, mid madaw iyo qof cas, mid aqoon leh mid aan lahaynba. Ma aha xanuun ku dhaca qayb kali ah oo ka mid ah kuwa aynu soo tilmaanay. Ej,Ay,Fi Aydhisku wuxuu muwaadiniinta u horseeda dhibaatooyin aad u badan oo ay ka mid yihiin kuwo bulsho iyo kuwo dhaqaala haaneedba.

Xaalada hada dalkeenu ku suganyahay inaga oo wax ka tilmaamayna Ej,Ay,Fi Aydhisku wuxuu hada si ba'an ugu faafaya bulshada gaar ahaana dhalin yarada oo ah waax ka mid ah qaybaha bulshada. Dhalin yaraduna maadaama ay tahay xooga ugu muhiimsan ee shaqeeya, marka uu xanuunku ku dhaco waxaa marba uu xanuunku dambeeya sii yaraanaya xooga dhalinyarada shaqadada haysa. Cidhibta dambe waxay waxyeelo soo gaadhi doonta dhaqaalaha dalka kaas oo isna si xoojin doona in uu dalku saboolnimo aad u daran soo food saarto.

Xanuunka wuxuu bur-burinaya waaxyaha kale duwan ee shaqada aqoonyahanada iyo shaqaalaha ka hawlgala. Aqoon yahanadan iyo shaqaalahan oo la waayo waxay iyana meesha ka saaraysa aqoonta, xirfadaha iyo waayo aragnimadi dadka xanuunku dilayna waa la waayaya. Aqoontuna maadaama ay asaas u tahay kobaca iyo maal-galinta lumida aqoonta iyo dadka ee xanuunku sababta u yahay dhibaatooyinka ka dhasha waxay dib u dhac ku noqonaya horumarka dalka.

Bulshada Itoobiyada boqolkiiba 85 dad gaadhaya ayaa ka shaqaysta ama ku xidhan beeraha iyo shaqooyinka la xidhiidhaa. Marka xanuunku faafo bulshadan ka shaqaysa waaxdana xoog muhiim ah oo ka qayb qaadanayey soo saarka cuntada ayuu shaqada ka kaxaynaya. Tanina waxay dalka iyo bulshadaba u horseedaysa saboolnimo iyo macaluul. Xanuunka Aydhisku caruurta wuxuu ka dhiga bilaa waalid, waalidiintana wuxuu ka dhiga bila caruur.

Tanina waxay sabab u noqonaysaa in dhibaatooyin aad u daran oo bulsho ahaaneed iyo kuwo dhaqaale ahaaneed ka abbuurmaan. Si kastaba ha ahaatee, qof kasta ama waax kasta oo ka mid ah waaxyaha dawlada iyo bulshada dadaalada ay kula jiraan la dagaalanka iyo tirtirida xanuunka Aydhiska waa in ay sii laban laabaan qof walbana iskii isku-xilsaaro ugana soo baxo mas'uuliyada saran.

#### Daraasad

Deegaankiina maah-maahyada, odhaahyada, kaftan ah.... Iwm ee lagutilmaamo xanuunka Aydhiska mudo hal todobaad ah gudaheed ku soo ururiya idinka oo sharaxaya waxyeelada iyo dhinacyada adagamawanaagsan odhaahyada, kalmadaha soo qora kadibna fasalka dhexdiisa ku soo bandhiga.

#### Hawl-galka 8$^{aad}$

1. Qalabka fayrasku ku faafi karo waa kuwa sidee loo adeegsado?
2. Siyaabaha la isaga ilaalin karo Ej,Ay, Fi ama Aydhiska idinka dhexdiina iyo barihiinaba ka wada sheekaysta.
3. Maxaad u malaynaysiin in ay tahay sababta dhalinyaraada uu ugu dhaco xanuunkani? Maxaase xal u noqon karaa?
4. Dhibaatooyinka bulsho ahaaneed iyo kuwa dhaqaale ahaaneed ee uu sababo

Aydhisku ee aynu horay u soo tilmaanay ka sokow, maxay yihiin kuwa kale ee uu keeni karo? sidayse dhibaatooyinku ku yimmaadeen?

5. Xubnaha bulshadeena ka tirsan ee la nool fayraska dhaliya xanuunka Aydhiska taageerooyinka ay u baahan yihiin in la siiiyo maxay yihiin?

6. Dadaalada loogu jiro sidii loo cidhib tiri lahaa xanuunka aydhisa idinku doorka aad ku leedihiin muxuu noqon karaaa?

## Gabagabada Cutubka Lixaad

In kasta oo ay ku kala duwanyihiin baaxada iyo nooca ay leedahay, qof kasta wuxuu leeyahay mas'uuliyada. Qof kastana in uuamaay gutoamagudato ayaa laga sugaya. Waxaa waliba aad tixgalin u mudan mas'uuliyada muwaadinimoamamas'uuliyadaha saaran qofka muwaadinka ah. Qof kasta oo muwaadin ah, Waxaa saaran mas'uuliyado wadaninimo. Taas oo qof walba inti awoodiisaamadeeda ah looga baahan yahay. In uuamaay ficil ku muujiyoamaso isaga ama iyada oo ku salaynayaamasa firfircooni, isxilqaan iyo shaqo jacayl xageedaamaxagiisa ka yimid.

Mas'uuliyadahan muwaadinimo ee noocan ah dareenkooda iyo firfircooni shaqo oo ku salaysan, is-xilqaan qofka leh waxaa lagu tilmaami karaaa muwaadin dhab ah oo leh astaamo xoriyadeed iyo dabeecado firfircooni, geesinimoiyo shaqo jacayl ku dheehan tahay. Astaamahan, dareenadan ama dabeecadahan wanaagsan ee uu ku sifoobay muwaadinka wanaagsan waxay u horseedayaan in uuamaay u gudbo dhaqan galinta mas'uuliyadba mas'uuliyada kale ee ay ka muhiimsan tahayamaka waxtar badan tahay oo uuamaay sida ugu waxtarka badan uga midho dhaliyo, islamarkaana si muwaadinimo iyo Wadaniyadku dheehan tahay uga soo baxoamabaxdo waajibaadka saaran.

Marka dhinac kale laga fiiriyo qofka muwaadinka ah waxaa looga baahan yahay in ayamauu garatoamagarto in hantidaamakhayraadka dalka iyo astaamaha dhaqanka ma guuraanka ah tahay hanti iyo dhaqan u gaarka ah oo bulshada dalka. Muwaadiniinta dhammaantood waxaa looga baahan yahay in ay yeeshaan dareen lahaansho, islamarkaana hantida dalka iyo dhaqanada ma guuraanka ah ilaalintooda iyo daryeelkooda si toos ah iskugu xil saaro. Sidaa- daraadeed, mas'uuliyada lagu daryeelayo hantida iyo dhaqanka dalka in ayna ahayn mid saaran oo kali ah dawlada in uuamaay dareemo ama dareento qofkasta oo u dhashay dalka ayaa lagama maar maan ah.

Muwaadinkasta mid u dhaw iyo mid ka dheerbaamaka fog mid ay ahaataba hantida iyo alaabada uu leeyahay shakhsi qoys, saaxiibka, dariskaagu, bulshada deegaanka ku nool, macad, urur --iwm waxaa looga baahan yahay in uuamaay qaatoamado mas'uuliyad taxadar iyo dareen uu ku daryeelayo ku dheehanyahay oo uu ku guto mas'uuliyada muwaadinimo ee saaran. Mas'uuliyada saaran qof kasta oo ah muwaadin darajo ama baaxad kasta ha lahaatee haddiii uu rabo in uu si habboon uga soo baxo waxyaabaha nolosha ama jiritaanka dadka lagama -maar maan ka u ah in uu si wanaagsan uga faa'iidaysto, islamarkaana si taxadar leh u maamulo ayaa waajib ku ah .

Shaqada uu qabanayo maadaama ay tahay mid waxtarkeedu aad u badan yahay waxxaa u fududaanaysa in faa'iidada u soo xeroonaysa sida ugu habboon ugu maamulo qoyskiis . Isaga laftigiisku wuxuu awood u helayaa in uu si fiican uga faa'iidaysto. Hantida dabeeciga ah iyo kuwa dadku sammeeyey in aan la tir-tirin, islamarkaana la siii wanaajiyo si ay u sii jiraan ayaa lagama-maar maan ah . Tanina waxay gacan ka gaysanaysaa in falashada beeraha iyo dhaqaalaha dalku u kobco. Guud ahaana wuxuu yaraynayaa saboolnimada dalkeena. Bulshada muwaadinka ahna waxay ku noolaanaysa nolol ka fiican tii hore.

## Layliska Guud ee Cutubka Lixaad

### I. Run ama Been.

Tilmaan : Weedhahan soo socda akhriya kadibna tii sax ah ku qor "Run " tii been ahna ku qor "Been" ka dibna sababaha aad run ama been u tidhaahdeen sharaxa.

1. Qofka masuulka ahi waa ka kasoo baxa hawsha loo diray .
2. Xanuunka dilaaga ah ee Aydhiska waa la iska ilaalin karaa.
3. In mas'uuliyadaha si habboon looga soo baxo waa natiijo wanaagsan oo la soo saaray ama la gaadhay.

### II. Isku Aadi

Tilmaam: kalmadaha soo socda kolba sida ay iskugu habboon yihiin iskugu Aadiya:

| A | B |
|---|---|
| 1. Mas'uuliyada oo la fuliyo | B. Xuquuq |
| 2. In la isku-diyaariyo sidii si habboon loo gudan lahaa | T. Balan qaad lahaa waxbarashada |
| | J. Mas'uulliyada la aqbalo |
| 3. Fursado waxbarasho oo la helo | X. Mas'uuliyada guud. |
| 4. In la dhawro caafimaadka iyo sixada | |

### III. Ka Dooro

Tilmaan: Iska laaba buugtiina kadibna su'aalaha soo socda mid walba jawaata ku habboon u doorta.

1. Waxyaabaha soo socda mida ah mas'uuliyad dadka oo dhan u dhaxaysa waa midee?.
   B. Shakhsi ahaantaada oo aad isku-kalsoonaatid
   T. Qalabka dusiga oo aad ka ilaalisid dayacnaanta iyo waxyeelo soo gaadha.
   J. Buugta casharada lagu qorto oo nadiif ah, islamarkaana taxadar leh loo illaaliyo.
   X. Hawlaha guriga in aad kaga soo shaqayso laguugu soo dhibay oo ugu horayn aad ka shaqaysid.
2. Mas'uuliyada oo la qaato, islamarkaana sida ugu habboon loo guto shayga boqolkiiba boqol fudaydiya ee ka midka ah kuwan soo socda waa midkee?.
   B. Shakhsi ahaantaada oo aad isku-kalsoonaato.
   T. Aqoon iyo xirfad buuxa oo aad leedahay .
   J. Suurto galnimo .
   X. In aad noqotid qof la amini karo.
3. Waxyaabahan soo socda mida aan ahayn hanti dabeeci ah waa midee?
   B. Harta loo yaqaano tana.
   T. Goodiramawaaliya
   J. Wabiga hadamiinharci
   X. Biyo xidheenkaamaharta loo yaqaano qooqaa ee quwada dabkaamalaydhka laga dhaliyo.

CUTUBKA 7

# DHAQAN HAWL-KARNIMO

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka.

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan ka dib, ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:-

- Fahmaan In aan shaqo kasta la quudhsan.
- Gartaan muhiimada shaqada iyo wakhtiga.
- Dareemaan anshaxa xirfadu sida uu aasaaska ugu yahay wax soo saarka iyo horumarka.

## 7.1. Habdhaqanka Hawlkarnimada Shaqo

### 7.1.1. Shaqadu in ayna kala fiicnayn oo la aamino

- Sharaxa shaqo si ayna uga liidanin shaqo kale sharax adiga oo tusaalooyin adeegsanaya.
- "Shaqo oo dhan waa in aan si siman u wada qadarino" marka la leeyahay maxaa loo jeedaa?

#### XIRFADA FAARADA

Geedi iyo Faarax waxaa weeye ardey fasalka todobaad dhigata oo ku nool magaalo madaxda ismaamulka deegaanka Gambella. Maadaama ay xaafadahoodu isku dhawyihiin inta ay isu-tegaan ayey wax wada akhrisan jireen. Waxay ku heshiiyeen in xiliyada ay fasaxa yihiin ay wada ciyaaraan, waxayna ka wada xaajoodaan xiisahooda mustaqbalka. Geedi wuxuu ku taamaa in uu mustaqbalka noqdo aqoonyahan ku takhasusay Farshaxankahalka Faaraxna ku taamo in uu noqdo aqoonyahan ku xeel dheer farshaxanka dhirta. Faarax had iyo jeer marka uu u tego Geedi si uu wax u akhristo waxyaabaha aadka u soo jiita islamarkaana farxad geliya Geedi Aabihii iyo hooyadii oo si aad u taxadar badan oo wada jir ah uga wada shaqaysta waxyaabaha geedaha laga sameeyo.

Faarax xilliyada uu fasaxa yahay saaxiibkii labadiisa waalid Farshaxan gacmeedka ay geedaha ka sameeyaan maadaama uu aad ugu bogay alaabada ay geedaha ka sameeyaan goobaha lagu gadointa uu tego ayuu khaanadaha alaabada lagu sharaxay ayuu kala wareejin jiray. Marka uu buuqdo goobaha lagu gado alaab dhaqameedyada indhihiisa soo jiidan jiray waxaa ka mid ahaa qalabka muusikada sida kiraarka, Narsada, gobayska foodhinta loogu talagalay iyo waxyaabo kale oo la mid ah farshaxanada kale

ee taariikhiga ah waxaana ka mid ah dhismaha dawlada ee loo yaqaano Fasila-Dhes ee ku yaala magaalada Goondhar, taalada Aksum iyo kuwo kale.Faarax cilmiga bulshada qayb ka mid ah oo ku saabsan farshax dhaqameedyada dalka ee taariikhiga ah maadaama uu u riyaaqay waxaa galay xiise ku saabsan sidii uu qaybtan u baran lahaa mustaqbalka. Geedi Aabihii wuxuu ogolaaday in uu Geedi iyo kuwo kale oo saaxiibadii ah siiyo tababar ku saabsan farshaxankan geedaha laga sameeyo. Faarax isaga oo aan yaraysanin shaqadan geedaha sida tababarka iyo iskii isugu soo diyaariyay ayuu Geedi Aabihii ugu hambalyeeyey. Xiligan Faarax iyo saaxiibadii inta ay dhammaysteen tababarkii ayaa waxay qorshaysteen in ay warshadan farshaxan dhaqameedkan gaadhsiiyaan agagaarada deegaanka ay ku noolyihiin. Shaqadan farshaxanka geedaha oo ay meel hoose ka bilaabeen ayey dhawr sano kadib waxa ay gaadheen in ay tababaro casri ah siiyaan bulshada deegaanadooda degan. Waxaa kale oo ay awood u heleen in ay warshada farshaxanka geedaha ku ballaadhiyaan deegaanada dariska la ah Gambeella.

## Hawl-galka1aad

Idinka oo ku salaynaya sheekada korka ku xusan su'aalaha ka jawaaba.

1. Faarax siduu ku galay ururka ka ganacsatada Farshaxanka geedaha?
2. Waa maxay sababta Geedi Aabihii ugu hambalyeeyey Faarax?
3. Waa maxay sababaha dadku iyaga oo aan u kala saarin waa mid yar iyo mid weyn ay u doortaan waa maxay?
4. Taariikh-ahaan, nin ama naag midkuu doono ha ahaado qofku leh, hal shaqo inuu qaban karayo weedho aan tilmaamaynin waa tee? Buugtiina ku qora kadibna barihiina u akhriya.

Marka aynu leenahay ha la aamino in hal shaqo ayna ka liidanin shaqo kale waxaan u jeednaa waxaa habboon in la garto shaqo kasta ujeeddadeeda iyo hadafkeeda oo aad ku guulaysato si aad isku filnaasho u gaadhid ka sokow, waa doorka aad ku leedahay dardargelinta barnaamijyada lagu horumarinayo dhaqaalaha dalka islamarkaana laga sugayo in aad fahamtid. Waxaa suurto gal ah in uu qof shaqo ka mid ah shaqooyinka kale ku helo tababar uu u soo galay ama si lama filaan ah in uu kartidiisa ku helo. Sidaa daraadeed, shaqaalaha oo dhan haddii ay si sax ah u gutaan faa'iidooyinka ay ka helayaan marka laga reebo waxay qabteen shaqo dalka iyo dadka si siman ay uga wada faa'iidaystaan. Sidaa daraadeed, muwaadin kasta waxaa looga baahan yahay in uuna/ ayna odhan shaqadani waa mid liidata ama waa mid weyn, shaqada uu/ay hayo/haysana si wanaagsan uga soo baxdo wakhtigana si habboon uga faa'iidaysato si dadka iyo dalkana horumar iyo barwaaqo u gaadhsiiso.

## Hawl-galka 2aad

Su'aalahan soo socda akhriya kadibna jawaabo gaagaaban kaga jawaaba.

1. Waa maxay sababaha loo yidhi shaqadu mid yar iyo mid weyn ma'laha?

2. Shaqooyinka kala duwan oo dhan in ay door ku leeyihiin horumarka ama kaalinta ay ka qaataan horumarinta maxaa lagu garanayaa?
3. Shaqadu mid yar iyo mid weyn ma laha marka la leeyahay macnuhu ma aha shaqooyinku ma kala duwana, fikradan fasalka dhexdeeda kaga wada hadla idinka oo koox-koox ah.

## 7.1.2. Wakhtiga, Shaqada iyo Horumarka



Jaantuska 7.1. dad dhul kala fog dhir ku beeraya.

- Sawirka maxaad ka fahamteen? Qof walba waxaa uu dareemay baraha ha uga sheekeeyo.
- Hadda ka hor hawl gal dhir lagu beerayo oo aad ka qayb-gasheen haddii ay jirto saaxiibadiina aad isu-fasalka tihiin uga warama.
- Dhirta oo la beero waxtarka laga helo kuwa ugu muhiimsan sharaxaad ka bixiya?

### Shaqada Iyo Wakhtiga

Waxaa jirtay xaafad ka tirsanayd xaafadaha magaalada Jaagni oo ka tirsan gobolka Matakal oo ah dhul buuralay ah. Deegaankani wuxuu ahaa goob kayn ah oo gobolka loogu magac daray islamarkaana ahayd goobta kali ah ee kayn ah ee ku taala deegaanka. Maadaama ay ahayd goobta kali ah ee agagaarka ku taala dadka deegaanka degani ma ayna ogayn sababta oo ah roob yari ayaa la soo gudboonaatay. Dhirtan cagaarani laakiin ma dhicin in ay sii jirto. Bulshada deegaanka degan badankoodu in kasta oo ay dadaalo badan u galeen sidii ay dhirtooda cagaaran u sii jiri lahayd ma awoodin in ay badbaadiyaan wanaaga deegaanka ka jira. Maadaama ayna dan ka galaynin in yar oo ka mid ah dhirta ku taalay kaynta ayaa ka badbaaday sababta oo ah waxay jar-jari jireen kaynta oo marba marka ka dambeeya sii dabar go'aysay.

Dhirtii kaynta ahayd ee goobta ka jirtay way soo yaraatay. Sodon sano ka hor xaafadan cidi ogayd dhirtii kaynta ahayd ee ku taalay haddii uu hada ku noqdo xaafada ma rumaysteen kayntii oo ayna waxba ka jirin marka uu arko. Si uuna dhibkani u sii soconin talaabo deg-deg ah ayey dadkii xaafada deganaa qaateen si ay dawlada uga wargeliyaan. Sidaa daraadeed, si goobtii loogu beero waxaa agagaarka laga aas'aasay dad u xilsaaran daryeelka iyo dib dhiraynta deegaanka.

Bulshada degan xaafadu inta ay koox-koox isu-qaybisay islamarkaana qorshaysatay xiliyada ama saacadaha iyo sida ay u kala shaqaynayaan kadibna, dawlada la kaashadeen dad khibrad u lehna ay u yeedheen ayey dib u beereen dhir tiro badan. Si ay dib ugu soo celiyaan dhirtii cagaarnayd ee horay uga bixi jirtay goobta bulshada ayaa muujisay is-xil qaan iyo fir-fircooni. Xiliga roobka inta uuna dhaafin ayaa dhirtii horay uga bixi jirtay loogu beeray.

Muwaadiniinta deegaanku waxay dejisteen jadwal qof walba xiliga uu ku qoran yahay uu

kala socdo si uu uga soo baxo masuuliyada saran. Dhirtii xaafada ku taalay meel fog ayaa laga arki karaa waxaana lagu soo leexiyey dur-dur kadibna kayntii waxay ku soo noqotay sidii ay horay u ahaan jirtay.

## Hawl-galka 3aad

Idinka oo ku soconaya kolba amarka la idinsiiyo ka jawaaba su'aalaha.

1. sheekada taariikhda ah ee korka lagu soo bandhigay xidhiidhka ka dhexeeya wakhtiga shaqada iyo horumarka qaab sidee ah ayaa loo sharaxay koox-koox uga wada xaajooda?
2. Dhibaatadii xaafadii dhibtani soo waajahday side loo xaliyay?
3. Si deegaanka daryeelkiisa loo sugo talaabooyinka la qaadi karo sharax.

Wakhtiga shaqada iyo horumarka xidhiidhkoodu marka uu qorshe iyo ujeeddooyin ku salaysan yahay natiijo wacan ayaa laga helaya. Wakhtigu waa shay dabeeci ah oo qofka bini'aadamka ah loogu deeqay islamarkaana aan lacag laga siisanin, waa hanti dadka oo dhan la siiyey oo loogu talagalay in si siman looga wada faa'iidaysto. Dadku iyaga oo goobta iyo saacadaha ay ka shaqaynayaan iyaga oo wakhtigoodii u kala qaybinaya xilli shaqo, xilli nasasho iyo xili ay seexdaan. Horumarka u dal gaadho wuxuu ku xidhan yahay kolba tixgelinta ay bulshadu siiso wakhtiga iyo isticmaalkiisa. Bulshada ixtiraanta wakhtigeeda kana faa'iidaysata horumar fiican ayay dalkooda iyo naftoodaba u horseedayaan.

## Hawl-galka 4aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Waa maxay sababta loo yidhaahdo ardeygu waa in uu wakhtigiisa qorshe u samaysto?
2. Sidee loo sharaxaa xidhiidhka u dhexeeya wakhtiga iyo horumarka dalka?
3. Qof muwaadin ah haddii uu wakhtigiisa si habboon uga faa'iidaysan waayo sidee u waxyeelayn karaa horumarka dalkiisa?

### 7.1.3. Shaqo gaar ahaaneed iyo tu wadareed oo dhinac walba leh oo wakhtigeeda la fuliyo si tayo lehna loo fuliyo.



Jaantuska 7.2. dad si wada jir ah hawl qaran u wada fulinaya

- Dadka sawirka ka muuqda maxay samaynayaan?
- Shaqo si gaar ahaaneed loo fuliyey iyo mid si wadar ahaaneed loo fuliyey siday natiijo ahaan u kala wanaagsan yihiin?

Marwo Cudbi dugsi urur leeyahay oo ah mid dhexe ayey maamule ka tahay. Shaqadeeda maamulka ah iyo isticmaalka wakhtiga ayey aad ugu can baxday. Maadaama ay aaminsan tahay shaqada gaar ahaaneed iyo ta wadareedba iyada

oo la kaashanaysa barayaasha kale iyo shaqaalaha ayaa waxay dadaal weyn u gashay sidii ay dugsiga isbedel tayo wacan leh ugu samayn lahayd. Maadaama ay mudnaan weyn siiso isticmaalka. Wakhtiga shaqada la qabanayo in sidii loo qorsheeyey iyo wakhtigii loo cayimay lagu fuliyo waa dhaqan dugsigu caan ku yahay islamarkaana lagu yaqaano. Iyada oo lagu salaynayo qorshaha wakhtiga ee dugsiga hawlaha dugsigu fulin doono sanadka oo dhan ayaa kooxo kala duwan loogu xilsaaray islamarkaana bilaabay dhaq-dhaqaaq ay ku fulinayaan masuuliyadahooda. Maadaama la gaadhay xiligii la xusayey xaflad lagu soo bandhigo waxqabadka dugsiga waxaa la diyaariyey kooxo kala duwan oo ay ka mid yihiin; kooxda isboortiga, kooxdariwaayadaha iyo madadaalooyinka, kooxda qoraalada iyo cilmibaadhista, kooxda muusikada IWM dhammaantood kooxaha shaqo ee ay ka tirsan yihiin ayey si wada jir ah diyaargaraw ugu jiraan.

Dugsiyada dariska la ah dugsiga ay marwo Cudbi maamulaha ka tahay ayaa laga sugayaa in ay ka yimaadiin kooxo lagu macsuumay xafladan ka socda dugsiyada, shaqsiyaad aad looga yaqaano deegaanka, dhalinyarada iyo ururka haweenka. Marwo CUDBI natiijooyinka waxqabadka dugsiyadu ay ka wada siman yihiin iyo shaqooyinka hadhan si loo qiimeeyo wakhtigii ama xiligii ay shirka u qabatay in la galo islamarkaana dadka ay isugu yeedhay in ay diyaar soo noqdeen iyo in kale si ay u xaqiijiso waxay qaaday talaabooyinkan soo socda. "Hawshan gaar ahaaneed ee aynu u xilsaaranahay oo sideeda looga soo baxo waxay ka dhigan tahay hawsha wada jirka ah oo si haboon loo guto.

Xiligan hada la joogo barayaasha iyo ardayda dugsigu xiliga loo qorsheeyay si ay u isticmaalaan waxay ku jiraan diyaargaraw aad u xoogan.

## Hawl-galka 5aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Shaqada gaarka ah shaqada wadarta ah saamaynta ay leedahay waa maxay?
2. Shaqo gaar ah iyo tu wadar ah midkay doonto ha ahaatee marka si tayo leh loo fuliyo islamarkaana wakhtigii loogu talagalay lagu fuliyo maxay faa'iido leedahay?
3. Ardaydu shaqooyinka ay si wada jir ah u fulin karaan maxay yihiin? Labo tusaale sheeg.

Shaqadu nooc kasta ha ahaatee mid gaar ahaaneed iyo mid wadar ahaaneedba haddii si tayo leh loo fuliyo islamarkaana wakhtigii loogu talagalay lagu fuliyo macnaheedu waxaa weeyaan masuuliyada oo si habboon loo guto ama looga soo baxo. Shaqo kasta natiijada ka soo baxda waxaa lagu qiimeeyaa tayadeeda oo kali ah ma ahee waxaa kale oo lagu qiimeeyaa wakhtiga lagu fuliyo kolba inta uu dhan yahay.

Si talaabo talaabo ah ayuu geedi-socodka shaqada gaarka ah natiijadeedu door muhiim ah ugu yeelataa natiijada shaqo wadareedka (shaqo kooxeedka). Shaqo gaar ahaaneed iyo mid wadar ahaaneed marka si tayo leh loo fuliyo laguna dhamaystiro wakhtigaloogu talagalay saamayn aad u heer sareysa ayey ku leeyihiin horumarinta dalka, waxayna kor u qaadayaan nolosha bulshada iyo ta qofka ama kooxda fulinaysa.

Waxtarka shaqada gaarka ah iyo ta kooxda oo si tayo leh loo fuliyo laguna fuliyo wakhtigii loogu talo galay waxaa kale oo ka mid ah horumarka iyo dhaqaalaha dalka oo kaalin muhiim ah ka qaataan. Maadaama shaqadu u baahan tahay in bulshada oo dhani si fir-fircoon uga qayb-gasho shaqada gaar ahaaneed iyo ta koox ahaaneed oo wakhtigeedii lagu fuliyo si tayo lehna loo fuliyo natiijada laga gaadho way fiicnaanaysaa.

Natiijada shaqada ka soo baxda waxaa lagu miisaamaa kolba dadaalka iyo wakhtiga lagu fuliyo inta ay le'egyihiin. Shaqada oo la qabto wakhtiga nasashada ama firaaqada la yahay maadaama ay tahay in aad shaqo kale oo dheeri ah u diyaargarawdo natiijada, midhaha ama macaashka oo kor loo qaado weeyaan.

Sidii aynu korka ku soo tilmaamnay shaqada gaarka ah iyo ta koox ahaaneedba waxaa natiijo wanaagsan laga gaadhi karaa marka si tayo leh loo fuliyo islamarkaana wakhtigii loo qorsheeyey lagu fuliyo. Sidaa daraadeed, shaqaalaha waxaa looga baahan yahay in wakhtiga shaqada farsamada loo fulinayo iyo midhaha la filayo in ay ka soo baxdo mudnaan gaar ah ay siiyaan. Tanina waxay asaas u noqonaysaa horumar iyo kobaca dalka.

### Hawl-galka 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaab.

1. Waa maxay sababaha hal shaqo loogu tilmaamo in ay natiijo wanaagsan tahay?
2. Natiijo wanaaga shaqada waxaa lagu miisaamo waa midhaha ka soo baxa xiliyada fasaxa dadaalo shaqo oo la fuliyo. Maxaad u malaynaysiin in ay tahay sababta loo yidhi?

## 7.2. Nolasha Mashaq aystaha

### 7.2.1. Ma shaqaystuhu wuxuu lid ku yahay dhaqaalaha horumarka iyo koboca dalka

- Waa maxay sababaha loo yidhi iyada oo aan la shaqaysanin in la noolaado waxay lidi ku tahay dhaqaalaha, horumarka iyo kor u kaca hab nololeedka?

In iyada oo aan la shaqaysan in la noolaado waxay caqabad ku tahay kobaca dhaqaalaha iyo horumarinta waxaana ta marag u ah odhaahda tidhaahda "Nimaan shaqaysanin shaah ma cabo". Waa odhaah sax ah islamarkaana run ah. Nimaan shaqaysanin in uu shaah cabo ama cunto cuno ma aha maadaama qofka shaqaysta u naftiisa iyo noloshiisa dammaanad u qaadi karo shaqadu qofka bini'aadamka waxaa kale oo ay kobcisaa xubnaha iyo maskaxdiisa ama garaadkiisa. Sidaa daraadeedna, waxaa habboon in qofku gacmihiisa u kala bixiyo shaqada si uu sharaftiisa iyo magaciisa u ilaashado.qofku inta uu shaqaynayo ama marka uu aad u shaqeeyo noloshiisa iyo nolosha dadka kale in uu wax ka bedelo ayuu karti ama awood u leeyahay. Qofka nool isaga oo aan shaqaysanin naftiisa kali ah dhib uma gaysanayo qoyska, bulshada iyo dalka ayuu waxyeelo soo gaadhsiinayaa. Dadka oo dhan haddii ay si fir-fircoon u shaqaystaan islamarkaana muujiyaan hawl-karnimo waxay awood u helayaan in ay noloshooda siiyaan. Haddii laakiin bulshada si hawl karnimo leh u gudan waayaan waxay waxyeelo soo gaadhsiinayaan horumarka iyo kobaca dhaqaale ee dadka iyo dalka.

## Hawl-galka 7aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Shakhsiga oo si hawl karnimo leh u shaqaysta sida ay xidhiidh ula yeelan karto. Horumarka bulshada iyo dalka sharax?
2. Barihiina kala sheekaysta waxyeelada ay leedahay in la noolaado iyada oo aan la shaqaysanin.

### 7.2.2. Ujeeddooyinka Dhaqaale ee uu Dhigayo Dastuurka Dawlada Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya

- Maxaa sababay in dastuurka dawlada lagu qeexo ujeeddooyinka dhaqaale?

#### Haweenayda Xoolo dhaqatada

Marwo Xaawo Cabdilaahi oo ku nool ismaamulka deegaanka Canfarta waxay noqotay qofka ugu hawlkarsan ee ka tirsan xoolo dhaqatada deegaanka ka jirta ee ku guulaysatay abaalmarin ama abaalgud meedhaalia ah. Saddex sano ka hor waxay ka qayb gashay dhaqashada lo'da waxay ka qayb-qaadatay waxbarasho beeraha la xidhiidha kadibna aqoon ku filan markii ay ka heshay waxaa la siiyey dhul beereed dhan hal hiktaar oo ay markiiba bilawday in ay falato kadibna waxay ku guulaysatay in ay midho aad u wanaagsan kala soo baxdo. Dhulkii la siiyey waxaa kale oo ay ku beertay midho iyo khudaar kala duwan iyo waliba caws ku filan lo'deeda. Waxayna isla dhulka ka abuurtay dakhli iyo ilo dakhli ka soo galo. Shaqadan waxaa kale oo bar-bar socday iyada oo ku salaynaysa qorshihii ay dejisatay waxay ku biirtay suuqa ganacsiga kadibna waxay hada dhismo labo qol ah ka bilawday magaalada la yidhaahdo Asayta oo ka tirsan ismaamulka Canfarta.

## Hawl-galka 8aad

Idinka oo sheekada korka ku xusan ku salaynaya ka jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Marwo Xaawo Cabdilaahi noloshan wanaagsan ee hadda ay ku nooshahay maxay ku gaadhay?
2. Sida Mawro Xaawo Cabdilaahi oo kale in shaqo wanaaga abaalgud lagu helo maxay faa'iido leedahay?

Ujeeddooyinka dhaqaale ee dustuurka dawlada dimuqraadiyada federaalka Itoobiya lagu muujiyey waxay mudnaanta koobaad siinayaan sidii danaha ama rabitaanka aasaasiga ah ee bulshada loo buuxin lahaa. Waxaa looga dan leeyahay in lagu sugo horumarka dalka iyo barwaaqayntiisa. Hasa yeeshee, ujeeddooyinka iyo dhaqaalaha dalkeenu ku talaabsanayo waa mid lagu sugayo horumarka dalkeena islamarkaana suuq dhaqaale oo xor ah looga abuuri lahaa dalkeena weeyaan. Nidaamka dhaqaale ee xorta ah waxaa weeye muwaadiniintu nidaamka dhaqaale ee dalkooda ka jira in si xor ah qofba waxaa uu rabo in uu ka ganacsado doorto iyo in rabitaanka bulshada iyada oo lagu salaynayo la abuuro nidaam dakhli lagu helo. Sida ku cad sharciga dawlada dimuqraadiyada federaalka Itoobiya dhaq-dhaqaaqa horumarineed ee ka socda dalka ujeeddadiisa ugu muhiimsani waa sidii horumarka dhaqaale ee muwaadinka iyo rabitaanka aasaasiga ah loo buuxin lahaa.

## Hawl-galka 9aad

Su'aalahan soo socda ka wada hadla;

1. Sidee dalkeena kobac dhaqaale oo deg-deg ah lagu gaadhsiin karaa?

2. Nidaamka dawliga ah si loogu abuuro fursado shaqo waa maxay talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado?

## 7.3. Xirfada iyo Anshaxa Xirfadeed

### 7.3.1. Xidhiidhka ka Dhexeeya Kobcinta Kartida Xirfadeed iyo Wax Soo Saarka

- Xirfadu waa maxay? khibradiisu maxay tahay?

Kartida khibradeed iyo xirfadaada oo la kobciyo waxay aas'aas u yihiin wax soo saarka. Sida la wada garanayo khibrada shaqo lagu fuliyo waa mid mudo dheer oo shaqada lagu jiray ama tababar lagu helo sumcada khibraduna waa dabeecad ama dhaqan looga baahan yahay in qofka khibrada leh yeesho. Aqoonyahanadiin si ay u helaan khibrad xirfadeedka shaqada ay u ka tirsan yihiin waxaa jira sumcado looga baahan yahay in ay yeeshaan. Sumcada khibrada macnaheedu waxaa weeye aqoonyahan kasta inta uuna bilaabin bixinta adeegyada muhiimka ah hab dhaqameed looga baahan yahay in uu huwanaado weeyaan. Tusaale ahaan waxaa jirta sumcad iyo anshax looga baahan yahay in uu baruhu lahaado, mid looga baahan yahay in uu yeesho qofka dhakhtarka ahi. Hase yeeshee, aaminimo, masuul ka noqoshada, wakhtiga iyo balanta oo la qadariyo IWM waxay ka mid yihiin anshaxa/sumcad looga baahan yahay in uu yeesho qof kasta oo aqoon yahan ah islamarkaana leh khibrad ama takhasus khibrado shaqo laguna qiimeeyo dhammaystirnaanta iyo tayo wanaaga khibrada shaqo khibrada shaqada iyo anshaxa khibrad inta la iswaafajiyo haddii aan la shaqaynin natiijo wax tar leh lama gaadhayo.

**Hawl-galka 10aad**

Ka jawaaba su'aalahan

1. Qodobeeya dhammaan anshaxa iyo sumcadaha looga baahan yahay in ay yeeshaan dhammaan aqoonyahanada leh khibradaha shaqo ee kala duwan.
2. In natiijo wanaagsan laga soo hooyo shaqo karti khibradeed oo kali ah kuma filna sababta loo yidhi waa maxay?

## Gunaanadka Cutubka 7aad

Sida aad horey ugu soo barateen cutubkan dhaxdiisa, waxaa muhiim ah in la qabto hawl ama waxqabad wanaagsan oo waxtar u yeelan karta nolosha gaarka ah, tan qoyska iyo guud ahaan kobaca dhaqaale ee dalka. Waxaana haboon in hawlaha shaqo lagu salgooyo wakhtiga si ay hawlaha waxqabad u noqdaan kuwo habaysan oo leh qorshayaal iyo jadwalo lagu xisaabtami karo ka midha dhalinta hawl kasta oo la rabo in laga gaadho natiijo iyo yool wanaagsan. Marka shaqa kasta laga soo hooyo natiijo waxtar leh, waxaa ruux ama qof kasta oo ka dambeeyay guushaas shaqo noqdaa mid yeesha sumcad iyo magac wanaagsan, islamarkaana kasbada amaan, bogaadin iyo mahad naq looga soo jeediyo deegaanka & dalka guud ahaan. Wuxuuna noqdaa mid tusaale wanaagsan u noqda bulshada qaybaheeda kale.

Dhinaca kale, waxaan horey u soo baranay waxyeelada & dhibaatooyinka ay leeyihiin ficilada xun ee caajiska iyo fadhi ku dirirnimada shaqa-quudhsi ama mashaqeysi u leeyihiin heerka nolosha gaar ahaaneed, tan qoys iyo tan guud ee dalka . Dhaqamada noocan ahina waa kuwo ka dhan ah hawlaha horumar ee lagu doonayo in lagu cidhibtiro saboolnimada iyo dib u hadhnimada dhaqaale ee dalka la degtay mudada fog. Shaqsiyaadka noocan ahina waa kuwo ku dambeyn doona dulsaarnimo iyo faqri ay dugsadaan. Haddaba, waxaa loo baahan yahay in laga foojignaado ficilada mashaqeystanimo iyo tan shaqa-quudhsi ee lidka ku ah wax soo saarka & dhaqaalaha dalkaba.

Dhanka kale, dalkan Itoobiya waa mid muddo dheer ay la degeen dagaalo, abaaro iyo dib u dhacnimo dhaqaale, taasina waxay ku reebtay raad xun oo u soo jiiday sumcad & magac xun indhaha caalamka horteeda. Sidaas awgeed, waxaa la dejiyay qorshayaal iyo barnaamijyo horumarineed oo meesha lagaga saarayo magaca xun ee dalka lagu yaqaano ee saboolnimada iyo dib u hadhnimada. Haddaba, waxaa dastuurka J.D.F.I lagu xusay ujeeddooyinka lagu hagayo dhaqaalaha & horumarka dalka si bulshada looga haqab-tiro baahida dhaqaale iyo ta bulsho ee ay qabaan, islamarkaana loo gaadhsiiyo si siman dhammaan qaybaha dalka oo dhan. Fulinteedana wuxuu xil gaar ah ka saran yahay xukuumada. Sidoo kalena, waxaa shacabka laga sugayaa inay ku garab-galaan xukuumada hirgalinta ujeeddooyinkaas kor lagu xusay iyo waliba sidii looga midha dhalin lahaa.

## Layliska Guud ee Cutubka 7aad

### I. Ku qor "Run" ama "Been".

1. Waxaa haboon in xirfad kasta iyo xirfadlayaasha oo dhan la siiyo qiimo & xurmo isku mid ah.
2. Dalka ay dadkiisu leeyihiin kartida iyo adkaysiga shaqo, waxaa yaraanaysa khatarta/halista masiibooyinka aadamigu sababo ay leedahay.
3. Koritaanka dalka waxaa la heli karaa oo kaliya marka la abuuro xirfado farsamo oo aad u sareeya.
4. Ma haboona inaad xirfado kale ka soo korodhsato dad kale.

### II. Isku aaddi erayada ku kala hoos qoran xarfaha "B" iyo "T".

| B | T |
|---|---|
| 1. Boggaadin | b) Faa'iidada camalka wanaagsan ee la qabto. |
| 2. Karti | t) Xil gudasho la'aan |
| 3. qooma'mayn | j) Ilmaha ugu horeeya |
| 4. Ajar (Liibaan) wanaagsan. | x) Ammaan loo fidiyo soo hoynta natiijo |
| 5. Dhicis | kh) Khibrada & Aqoonta laga helo xirfadaha shaqo. |
| | d) Wax dhammaaday ama dhaafay oo laga shalaayo. |

### III. Buuxiya Meelaha Banaan.

1. Hortaba waxaa loo baahan yahay in la sameysto _______ lagu hawl galo si loo fuliyo shaqada wakhtiga loogu tala galay.
2. _____ iyo _____ waa caadooyin xun xun oo waxyeela ku keeni kara horumarka dalka guud ahaan.

### IV. Ka dooro jawaabta saxda ah.

1. Koritaanka dalka si loo xaqiijiyo
   - b) waa in la ogaadaa shaqa la'aan la iska noolaado uuni inay tahay caado (dhaqan) xun.
   - t) Dhammaan muwaadiniintu waa inay helaan fursada shaqo oo siman.
   - j) ujeeddooyinka dhaqaale waa in ficil lagu muujiyaa.
   - x) Dhammaan.

2. Marka la leeyahay muwaadinku wuxuu qabtay shaqo lagu dayan karo

    b) Waa marka u magac & sumcad lagu faani karo u soo hooyo ummadiisa & dalkaba.

    t) Waa marka uu hay'ad samafal aas'aaso.

    j) Waa marka uu ka qayb-galo tartanka ciyaaraha Olombika.

    X) Waa marka magaciisa si deg-deg ah looga maqlo Raadiyaha iyo Jaraa'idka.

3 Saldhiga ujeeddooyinka dhaqaale ee dalka waa;

    b) Bulshada oo si isku mid ah looga faa'iideeyo hantida dalka.

    t) Taakulo gaar ah oo loo fidiyo qowmiyadaha dib uga dhacay xaga horumarka

    j) Xaalada dhaqaalaha dadweynaha dalka oo kor loo qaado.

    x) Dhammaan.

## V. Ka bixiya Jawaabo kooban:-

1. Marka la leeyahay shaqadu ma laha mid yar iyo tu wayn maxay tahay?
2. Maxaa lagu qeexi karaa dulsaarnimada?
3. Maxaa loola jeedaa marka la leeyahay wakhtiga sida ugu haboon ha looga faa'iidaysto?

CUTUBKA 8

# ISKU-FILNAANSHAHA

Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-


- Garanayaan ku tiirsanaantu xumaanta ay leedahay.
- Qeexayaan faa'iidada ku jirta in aad kartidaada ogaatid.
- Dareemayaan muhhiimada ay leedahay shaqada iyo natiijooyinkeeda oo la sharfo iyo isku kalsooni la yeesho.

## 8.1. In la yeesho dhaqan isku-filaansho ah

### 8.1.1. In lagu dadaalo sidii dulsaarnimada looga bixi lahaa.



Jaantuska 8.1. dad dulsaar ku ah Dad kale.



Jaantuska 8.2 Dadaal isku filaansho

- Labada sawir midkee muujinaya isku-filaansho?
- Sidee dulsaarnimada looga baxaa?

Dulsaarnimadu waa da'kasta oo qofku gaadhsiisan yahay mid ku salaysan kolba awooda qofku leeyahay inta ay dhan tahay waxyaabo uuna naftiisaba la rabin raba in ay dad kale u qabtaan. Haddii aynu hadalka si kale u dhigno, dulsaarnimadu waa qofka oo cid kale ku tiirsanaada isaga oo awood u leh in uu shaqaysto uuna helo dakhli uu noloshiisa ku maamulo. Waxaa haddaba lagama maarmaan ah in aynu sida ugu habboon uga faa'iidaysano wakhtiga u dhexeeya laga soo bilaabo caruurnimadeena ee aynu dugsiga iyo guryaheena u dhaxayno oo ah xili nalooga baahan yahay in aynu si habboon wax u barano si aan uga baxno dulsaarnimada xiliga aynu da'yarta nahay ama aan yar-yarnahay haddii aan intii kartideena ah shaqaysan weyno mustaqbalka waxaa aynu la weynaanaynaa dhaqan xun oo noo horseeda in aynu cidlo ku dhacno barito kadibna aan dulsaar ku noqono cid kale islamarkaana culays dulsaarno. Sidaa daraadeed, dulsaarnimadu maadaama ay caqabad ku noqon karto in aynu isu-kalsoonaano islamarkaana iskeen isu-maamulno, waxaa lagama maarmaan ah inaga oo ku salayna awooda aynu leenahay in aynu shaqaysano islamarkaana nafteena ka saarno dulsaarnimada.

**Hawl-galka 1aad**

Ka shaqeeya su'aalahan soo socda.

1. Waa maxay hawlaha aynu awoodi karno in aan ka shaqayno ee ka jira guryaheena iyo dugsiyadeena? Hawlahan oo la qaban waayo sidee dulsaarnimada loogu sharixi karaa?

## 8.1.2. Dulsaarnimada iyo ka Ganacsiga Koontarabaanka



Jaantuska 8.3. Alaabo si qarsoodi ah dalka looga saaro & kala qaadashada laaluushka

- Sawirka Koontarabaanka maxaad ka fahanteen?

### Tacab-Khasaar

Hooyo Qumman in ay tahay qof ka ganacsata alaabada koontarabaanka ah bulshada xaafada ku nool oo dhani way ogaayeen. Alaabta ay gado oo dhan maadaama ay si sharci daro ah u soo galiso ma'ayna bixin jirin canshuurta sharciga ah. Maadaama uu koontarabaanku yahay ganacsi aan sharciyeysnayn ma bixin jirin cashuuraha kala duwan ee dawladu ka qaado ganacsadayaasha sharciga ah. Waxaa kale oo waliba intaa dheer, marka ay alaabta dalka soo galinayaan maadaama tayadeeda aan la qiimaynin waxay ku gadaa qiimo aad u hooseeya. Sidoo kale, maadaama dadka xaafada ku nooli ayna faham buuxa ka haysanin wax yeelada koontarabaanku leeyahay si ay alaabtooda qiimo yar ugu gadaan waxay u iibgeeyaan suuq loo yaqaano Ashawa.

Hooyo Qumman waxay ka ganacsiga alaabta koontarabaanka ah sii wadataba, waxaa jiray Nin basaas ah oo dariskeeda ahaa oo had iyo jeer ka daba shaqayn jiray. Ninkan basaaska ah oo magaciisa la odhan jiray "Cali-coon" wuxuu ahaa qofka dalka ugu saboolsan. Islamarkaana dhaqan iyo aragti dib u dhacnimo leh.

Maalin maalmaha ka mid ah wuxuu maqlay Hooyo Qumman oo tilifoon kula sheekaysanaysa qof kale oo leh baabuurada xamuulka ah ku soo galiya alaabada. Wuxuu ogaaday in ay tahay alaab koontarabaan ah oo hada la soo galinayo dalka. Kadibna si deg-deg ah ayuu uga wargeliyay booliska mudo markii ay ku daba jireen ayaa ciidamada boolisku waxay qabteen alaabtii ay hooyo "Qumman" soo galinaysay dalka. Kadibna, waxaa baadhitaan lagu sameeyey gurigeedii waxaana lagala wareegay alaab iyo lacag aad u badan oo ay mudo dheer ururinaysay. Halkaana waxay mar kali ah ku weyday hanti sanado badan ay dhaqaysay. Hooyo Quman sidaa uun laguma daynine waxaa la soo horjoojiyey sharciga kadibna waxaa lagu xakumay todoba sano oo xadhig ah.

Cali-coon laakiin maadaama uu dadaal weyn u galay sidii looga hortagi lahaa koontarabaanka wuxuu ka mid noqday ciidamada ka hortaga koontarabaan waxaana abaal gud loo siiyey lacag aad u badan.

### Hawl-galka 2aad

Idinka oo ku salaynaya sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Taariikhda hooyo Quman maxaad ka barateen?
2. Ka ganacsiga koontarabaanka maxaa loogu tilmaamay in uu yahay tacab khasaar?
3. Sheekada ku saabsan koontarabaanka ee

kor ku xusan riwaayad ku soo bandhiga fasalka dhexdiisa. Ugu dambayna koox ahaan ama si wada jir ah uga wada hadla.

Koontarabaanku wuxuu waxyeelo u gaystaa horumarka dalka iyo kobcinta dhaqaalaha waana fal sharci daro ah.

Hawshan koontarabaanka ah ee sharci darada ah waxay burburisaa awooda dhaqaale ee dawlada iyo barnaamijyada horumarinta oo ay si weyn u dhaawacdo. Alaabada koontarabaanka ah ee sida qarsoodiga ah xuduudaha dalka looga soo galinayo waxay sabab u noqotaa in ay dawladu weydo dakhliga dhaqaale ee dalka dibadiisa iyo gudihiisaba ay ka hesho. Ganacsiga koontarabaanku wuxuu jabiyaa qiimaha alaabada ganacsadayaasha sharciga ah ay soo galiyaan kadibna waxay sabab u noqdaan in ganacsato sharci ah ay kacaan kadib marka ay suuq u waayaan alaabadooda. Ganacsiga koontarabaanku wuxuu sabab u noqdaa in hub sharci daro ah xuduudaha dalka laga soo galiyo. Kadibna, hubku wuxuu u gacan gala dad aan loogu talagalin oo budhcadnimo iyo arrimo nabadiidnimo ah ku kaca. Nabadiidnimaduna waxay khalkhal iyo deganaansho la'aan ku keentaa bulshada waxayna meesha ka saartaa nidaamka iyo kala dambaynta ka jirta dalka. Nabaddiidku wuxuu halis geliyaa nolosha muwaadiniinta islamarkaana awaxay horseedaa dhibaatooyinka hor yimaada fulinta adeegyada aas'aasiga ah ee bulshada sida caafimaadka, nabadgelyada, dhaqaalaha IWM.

**Hawl-galka 3aad**

Ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Koontarabaan sababaha loo yidhi wuxuu waxyeelo u gaysta nabadgelyada dalka, nolosha bulshada iyo caafimaadku waa maxay?
2. Idinkuse haddii aad la kulantaan cid ka ganacsata koontarabaanka maxaad ku samaynaysiin?

## 8.2. Natiija Shaqo Wanaaga oo Mudnaan la siiyo

- Look at the people in the picture and recall and describe such people who you know have been given awards in different professions.



Sawirka 8.4. Dad waxtarkooda looga abaal gudayo

- Dadka sawirka ka muuqda si fiican ugu fiirsada kadibna sheega magacda aqoonyahano kale oo shaqo wanaag ay muujiyeen abaal-marin lagu siiyey kadibna sharaxa.

Natiijo wanaaga shaqo wuxuu ku xidhan yahay kolba aragtida aan ka qabno, dadaalka aan u galno fulinteeda iyo xilka aan iska saarno. Shaqada aynu ka shaqaynayno haddii aynu garano sababta ama ujeeddada aynu u qabanayno iyo sida aynu u qabanayno in aynu natiijo wanaagsan ka gaadhi doono ayaa hubaal ah. haddaba, waa in aynu ka baaraandegno, kana faa'iidaysano waayo aragnimada aan ka helno dadka kale ee nooga aqoon badan islamarkaana si wanaagsan uga faa'iidaysano aqoonta aynu ka hello waxbarashada aan ku jirno. Natiijooyinka shaqooyinka aan qabano waxtar weyn bay yeelanayaan.

Marka aynu dhinac kale ka fiirino, nuxurka natiijo wanaaga shaqo waxay salka ku haysaa tartan. In ay ka natiijo wanaagsanaato kuwa kale iyo midhaha ka soo baxa si gaar ah naftaada, qoyskaaga iyo dalkaagaba aad uga faa'iidayso ayaa meesha ku jirta.

### Hawl-galka 4aad

1. Si natiijo wanaagsan aad uga soo saarto shaqada maxaa loo baahan yahay in aad samayso?
2. Natiijo wanaaga shaqada siduu dareen tartan uga jiro sharaxa.

## 8.3. Isku-kalsooni in aad yeelatid

### 8.3.1. Isku-kalsoonidu kaalinta ay ka qaadato natiijo wanaaga shaqada.

- Isku-kalsoonidu siday natiijada shaqada u wanaajiso?

#### Qoys aragti wanaag ku saaxiibay.

Jaamac Xirsi wuxuu ku dhashay gobolka Jig-jiga. Waxbarashada tooska ahna wuxuu ka gaadhay ilaa iyo fasalka 12aad oo uu dhamaystiray. Aw Jaamac 1967.IT wuxuu ka qayb-qaatay olole waxbarasho iyo kuwo shaqo. Hase yeeshee, Imtixaankii gabagabada fasalka 12aad markuu qaatay natiijo wanaagsani ugama soo bixin.

Dhibaatada soo gaadhay isaga oo aan ka argagixin ayaa inta uu fadhiistay qiimayn ku sameeyey awoodiisa aqooneed iyo tan dhaqaale iyo waliba waxyaabaha uu qaban karo oo uu u kuurgalo. Xiliga waxaa uu lahaa aqoon yar oo la xidhiidha cilmiga beeraha oo uu qoyskooda ka bartay. Wuxuu go'aan ku gaadhay in haddii uu aqoontaa yare e casriga ah dugsiyada ka biirsado islamarkaana ku shaqaysto in uu nolol fiican ku gaadhidoono. Waxaa kale oo uu aaminay in uu aragtiyada dib u dhacnimada ka bedali karo qaraabadiisa ku nool miyiga islamarkaana nidaamka ay wax u cunaan ka bedali karo. Dadkii xiligaa jiray nin wax bartay in uu Xafiis dawladeed ka shaqeeyo mooyaane ma aaminsanayn in uu miyiga tego kadibna beero fasho. Sidaa daraadeedna, dadkii xiligaa joogay waxay aad ula yaabeen go'aanka uu qaatay Jaamac. Laakiin Jaamac wuxuu sii watay falashada beeraha sidii uu horayba go'aan ugu gaadhay. Markii uu dhammaystiray waxbarashada fasalka 12aad kadib wuxuu u baxay miyiga kadibna wuxuu guursaday gabadh ka mid ah dadka beeralayda ah oo magaceeda la yidhaahdo Buuxo.

Jaamac iyo marwo Buuxo iyaga oo ku salaynaya natiijadii uga soo baxday qiimayntii ay ku sameeyeen aqoontooda iyo kartidooda waxay natiijo wanaagsan ka gaadheen falashada beeraha maadaama ay isu-kalsooni iyo shaqo wanaag muujiyeen. Naftooda, qoyskooda iyo bulshada agagaarkooda ayey shaqo waxtar leh u qabteen. 1997.IT waxay ku guulaysteen abaalmarino kala duwan oo ay heleen kadib markii ay kaalinta sadexaad galeen tartankii waxqabadka ee ay ka qayb-qaateen.

### Hawl-galka 5aad

Idinka oo ku salaynayha sheekada korka ku xusan ka jawaaba su'aalahan soo socda;

1. Mudane Jaamac iyo Marwo Buuxo maxay ku heleen isu-kalsoonida ay muujiyeen?

2. Mudane Jaamac iyo marwo Buuxo go'aanka ku aadan miyiga ma aha mid ay si wanaagsan uga baaraandegeen? Sidee? Idinka oo sababo adeegsanaya sharaxaad ka bixiya?

Dhaqanka isku-kalsoonida ma aha mid dabeeci ah oo lagu soo dhasho. Laakiin marka aynu dhalano kadib dabeecad ama dhaqan aynu siyaabo ama xaalado kala gedisan aynu ku hanano weeyaan. Shakhsi walba laga bilaabo xiliga uu/ay soo dhasho ama dhalato xidhiidhka uu la leeyahay waalidiinta, bulshada agagaarka degan iyo bulshada kala duwan ee dugsiyada waxbarashada tooska ah iyo waliba aqoonta uu ka dhaxlo dugsiyada mid ka soo dheeganta ama ka soo aas'aasanta weeyaan isu-kalsoonidu. Iyada oo ay aas'aas u tahay aqoonta qofku leeyahay waxaa jira waxyaabo qofku awoodi karo iyo waxyaabo uuna awoodi Karin in uu qabto. Sidoo kale, adkaanshaha xubno ahaaneed oo ku yimaada geedi socodka nolosha ayaa ah mid tusaale u noqon kara kartideena. Sidaa daraadeed, dareenka isu-kalsoonida ee qofku wuxuu ka soo aas'aasmaa awoodahan iyo kartiyadan la kala saaro islamarkaana la ogaado. Haddii uu qofku isu-kalsooni yeesho wuxuu awood u helayaa in uu sii xoojiyo dhinacyadiisa ad-adag islamarkaana soo dhiso dhinacyadiisa liita.

### Hawl-galka 6aad

Kawada hadla su'aalahan soo socda idinka oo koox-koox u wada shaqaynaya.

1. Dareenka isu-kalsoonida side loo hanta?
2. Qofka naftiisa ku kalsoon dabeecado sidee ah ayuu leeyahay?

## 8.3.2. Dulqaad oo aad u Muujiso Aragtiyada Sidoo kalena Aragtida kuwa kalena aad difaacdo

- Waa maxay macnaha in aad ku talaabsatid aragtidaada kuu gaarka ah?

Aragtida iyo fikradaha dadka kale oo si cad-cadaansho leh islamarkaana si habboon loo qadariyo kuna socoto aragtidaada iyo aamin-sanaantaada waxay ka timaadaa dareenka isu-kalsoonida ee kuu gaarka ah. Tani oo ah nidaam aas'aas u ah qofka oo fahma naftiisa waxay door muhiim ah ku leedahay hanashada nolol wanaagsan. Sababtu waa maxay haddii la yidhaahdo dhibaatooyinka soo foodsaara dad badan waxaa sabab u ah iyaga oo aan lahayn awood ay ku gartaan kartidooda gaar ahaaneed ama waxyaabaha ay awoodi karaan ama ayna awoodi Karin in ay fuliyaan oo ayna kala garan Karin. Qof walba intii awoodiisa ah wuxuu garanayaa xidhiidhka waxbarashada rasmiga ah iyo kuwa kale. Haddii uu baadhitaan ku sameeyo islamarkaana fahmo arrintan wuxuu leeyahay awood uu ku heli karo isu-kalsooni. Qofka leh isu-kalsooniduna maadaama uu kala saari karo islamarkaana garanayo dhaliilaha iyo dadaalada uu samaynayo wuxuu ku dadaalayaa sidii uu kor ugu qaadi lahaa ama u sixi lahaa dhaliilihiisa.

Marka aan dhinac kale ka fiirinana natiijada isu-darka awoodahan waxay sababayaan isu-dheelitirnaansho. Iyada oo isu-dheelitinaanshuhu sabab u yahay adiga oo isu-kalsoonaada waxay ku horseedaysaa in aad abuurtid xidhiidh caafimaad qab iyo is-dhegaysi leh . Haddii aynu yeelano isu-kalsooni in aan dadka kale is-dhegaysano

caqabadaha inaga hor istaagi kara waxaa ka mid ah waa dareen la xidhiidha weynida iyo kala yarida da' ahaaneed iyo dareen cabsi ah oo nala soo gudboonaada.

Sababta oo ah sida aragtida dadka kale aynu ku ilaalin karno isla markaana aragtideena gaar ahaaneed ku toosin karayna waa marka aan inagu noqono dad isu-kalsooni qaba.

Si aad aragtidaada u kobcisid islamarkaana aragtida dadka kale u dhegaysatid si miisaamana u qaadatid ama u diidid waxaa lagama maarmaan ah in marka hore aynu inagu noqono dad qaba isu-kalsooni. Si hadaba aad isu-kalsooni u hanatid waa in aad waxbarashada siisid mudnaanta koobaad. Waxbarashadu waxay na dhaxalsiinaysaa aqoon aragtidana way dhistaa. Waxay awood ku siinaysaa in aad shakhsiyadaada fahamtid. Markaan shakhsiyadeena garanana waxaan helaynaa isu-kalsooni. Markaan isu-kalsooni helana waxaan noqonaynaa dad isu-miisaaman kadibna, waxaan awoodaynaa in aan dadka kale dhegaysano islamarkaana ka faa'iidaysano dadkii aynu dhegaysanay. Aragtida iyo fikradaha dadka kale si habboon u dhegayso una miisaano haddii aynu fahamno in ay waxtar leedahay in aynu ixtiraamno islamarkaana ficil u bedelno ayaa loo baahan yahay haddii laakiin ayna waxtar lahayn inaga oo aan aflagaado iyo yasid kula kicin waxaan xor u nahay in aynu qaadano go'aan aragtideena aynu ku soconayno islamarkaana si habboon oo ixtiraam leh dadka kale ugu qancino in ay go'aankeena nagu raacaan. Tanina waa aragtida iyo fikradaha dadka casrigan jira ay ku dhaqmaan.

## Hawl-galka 7aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Xidhiidhka dadka kale aan la leenahay sideen mid miisaaman uga dhigi karnaa?
2. Si uu qofku u helo isu-kalsooni waa in uu marka hore awoodiisa garto. Sabab?

## Layliska Guud ee Cutubka 8aad

### I. Weedhahan soo socda ka dooro xarafka su'aasha ku saxda ah:-

1. Iskufilaansho marka aan leenahay;
   - B) Waa adiga oo naftaada kaliya ka fikira.
   - T) Waa adiga oo istakoora.
   - J) Waa adiga oo isjeclaada
   - X) Waa adiga oo ka xorooba kaalmada.
2. Kuwaan soo socda teeba ah falalka uu sameeyo ardayga fasalka ku jira ee aan iskukalsoonayni;
   - B) Marka su'aasha lawaydiiyo oo ka jawaabo.
   - T) Xiliga imtixaanka lagu jiro oo sameeyo dhaqdhaqaaq iyo eegasho
   - J) Sharaxaada macalinka oo uu si fiican u dhagaysto.
   - X) In uu sifiican oo xasilan anshaxna leh wax u barto.
3. Maxay ina tusaysaa odhaahdani "Qof aan qaraabada nahay haddii ay ku dhacdo gaajo iyo rafaad arkimaayo".
   - B) Naftayda oo aan ku kalsoonaado.
   - T) Kaalmada qaraabada oo aan ku noolaado.
   - J) Kudul noolaansho
   - X) Isxurmayn.

### II. Weedhahan soo socda tii run ah, run dheh, tii been ahna been dheh

1. Dadka oo aad wax kabarato, waxna aad barto waxay keenaysaa horumarka dalka _________
2. Qofka leh aqoon ama xirfad uu ku shaqaysto, dhibaato badani kama soo gaadhayso in uu naftiisa gaadhsiiyo iskufilnaansho.___________________.
3. Haddii ay qoomiyad kasta iskeed iskugu filnaato dalka waxay u keenaysaa horumar ___________________.

### III. Weedhahan soo socda meesha madhan buuxi.

1. Qofku marka uu leeyahay anigu waxaan dhaamaa kuwa kale dareenkaasi waxa uu yahay________________________.

# ISKU-FILNAANSHAHA

2. Adiga oo talooyinka dadka dhagaysta kalsoonidaadiina qaba rabana in aad ka xorowdo waxaa la yidhaa ________________.

## IV. Erayada ku hoos qoran xarafka (B) ku aadki Ereyada saxda ku ah xarafka (T).

| B | T |
|---|---|
| 1. Dareen ishoosaysiin | B. Dadka oo aad kaalmo waydiisato |
| 2. Kalsooni la'aan | T. Shaki iyo walwal |
| | J. Adigoo kufikira in ay dadka kale kaa fiican yihiin. |
| | X. Dhibaato isfahan la'aan ah. |

## V. Jawaabo gaaban ka bixi su'aalahan soo socda:

1. Maxaan uga jeedna marka aan leenahay karaamee ama tixgalin naftaada?
2. Maxay tahay macnaha marka aan leenahay dareen sinnaansho?
3. Qof yari kursiga uu ku faadhiyo haddii uu qof ka wayn uga kaco, muxuu yahay dareenka ka soo baxa halkaa?

CUTUBKA 9

# KAYDSASHADA

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Gartaan in ay jiraan habab kala duwan oo wax loo kaydsado.
- Sharaxaan muhiimada ay leedahay in naftaada iyo qoyskaba kolba sida ay taagtoodu saamaxdo si wafaaqsan loo maamulo.
- Dareemaan muhiimada ay leedahay in qorshe lagu dhaqmo dhaqanka kaydsigana la yeeso.

## 9.1. Noocyada Kaydsashada

- Kaydsashadu maxay muhiim u noqotey?

Dad badan waxay qabaan ama aminsanyihiin in waxaa la kaydsado ay tahay lacag oo kali ah . Hase ahaatee, aragtidani waa mid khaldan. Hantida la kaydiyo haddii ay tahay lacag kali ah kaydinta iyo arrimaha la xidhiidhaa waxaa kali ah ka warami karaa dadka maal-qabeenka ah iyo ganacsatada. Laakiin macnaha ama nuxurka kaydintu wuu ka ballaadhan yahay.

Sida ka jirta wadano badan oo ka tirsan dunida, dadku marka ay dhaafaan dhalinyaranimada islamarkaana waayeelaan waxaa la soo gudboonaada dhibaatooyin badan. Sababta oo ah marki ay dhalinyaraayeen islamarkaana karti iyo awoodda ay lahaayeen si habboon uma isticmaali jirin hantidooda, xoogooda iyo waliba wakhtigooda. Waxay culayska saari jireen nololmaal-meedkooda. Kama fikiri jirin bari iyo wakhtiga ka sii dambeeya. Dhab ahaan waxaa loo baahanyahay in si hagar la'aan ah loo shaqeeyo. Hantida la helo ama dakhliga ku soo gala wixii ka soo hadha kharashka ku baxay waxyaabaha muhiimka u ah nololmaalmeedka shakhsiga ama qoyska waa in la kaydsado sababta oo ah waxay ku anfacaysa mustaqbalka dambe.

Dadka ama aqoonyahanada u kuurgala arrimaha dhaqan dhaaqale waxay sheegeen in kaydintu ahayn waxaa maanta aadan u baahnayn u dhigo baritoole ama adiga iyo qoyskaagu maanta dhibaataada barina hanti yeesha o dadban. Dadbadana qaba ama aminsan in kaydku yahay sidan aynu korka ku soo sheegnay.

Hasa ahaatee, runtu sidaas way ka duwan tahay, kor u kaca nolosha ama nololsha oo sidi hore ee ay ahayd sika fiican kor loogu qaado in ay tahay dadaal wanaagsan dadka oo dhan way aminsanyihiin.

### Hawl-galka 1aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Bakhaylnimada iyo kaydsashadu ma isku-midba mise wey kala duwan yihiin? sabab?

2. Maxaad ka fahamtay odhaahda tidhaahda " shaqada bariba loo dhigta, raashin dhigashaduna waxay ku anficidoonta bari".

### 9.1.1. Kaydsiga noocyada ku salaysan.

Hantida ama khayraadka dabiiciga ah la kaydsado waxaa ka mid ah macdanaha kala duwan sida dhirta, xoolaha nool, biyaha, gaaska dabeeciga ah, xamagta, fooxa, milixdaamacusbada, ---iwm. Iyada oo la adeegsanayo khayraadka noocyadiisa kala gedisan, miisaankeedana la ilaalinayo waxay suurto galinaysa in nolosha adamigu noqoto mid wanaagsan. Hase ahaatee, xiligan xaadirka ah daafaha adduunyada waxaa ku sii yaraanaya khayraadka dabeeciga ah tusaale ahaan, khayraadka dhirta ee Itoobiya wuxuu ka badna boqolkiiba afartan (40%) inta hada jirta. Laakiin hada guud ahaan dalka boqolkiiba 2.5% oo kali ah ayaa leh dhir. Sidaas daraadeed, dhirta oo la jaro, biyaha oo si aan sabab u noqdaan in ay dabar go'aan duurjoog tiro badan . Arrimahanina dalkeena Itoobiya iyo dalalka dunida oo dhan wal-wal weyn ayey ku haysa.

**Hawl-galka 2aad**

1. Faah-faahinta bixiya xayawaanka duur joogta ah iyo noocyada dhirta ah ee Itoobiya oo kali ah laga helo.
2. Waxaad sharaxdaan xidhiidhka u dhexeeya xayawaanka duurjoogta iyo dhirta.

### 9.1.2. Kaydsiga Lacagta.



Jaantuska 9.1. Abuurista dhaqaalaha

Lacagtu waa sheyga wax lagu bedeshoamagato. Adeeg iyo alaab waxaa aad heli karta marka aad lacag haysatid. Lacagtu kaalin muhiim ah ayey ka qaadata nolol maal-meedka shakhsiga, qoyska iyo bulshada guud ahaanteed.

***Ufiirso Jaantuuskan.***

| *Waxyaabaha lacagta adeegsado* | *Kuwan midka aan qoyskiina khusayn waa kee?* | *Waxyaabaha lacagta loo adeegsado* | *Kuwan midkee qoyskiina khusayn?* |
|---|---|---|---|
| *Cunto* | | *Tilifoon* | |
| *Dhar* | | *Shidaal* | |
| *Kiro guri* | | *Qaboojiye* | |
| *Qalab wax lagu qoro lagu gato* | | *cuntada caruurta* | |
| *Dugsiga lagaga bixiyo carruurta* | | *mushahar shaqaale* | |
| *Jimisiga in lagu bixiyo* | | *Faanuus ama shamac* | |
| *Biyaha iyo laydhka.* | | *Tilifishin, dhiish, gaadhi.* | |

*Fiiro-gaar ah. "Kharashka aan khusaynin qoyskiina waa kee? "su'aasha ah waa mid ku salaysan heerka nolosha iyo kala duwanaanshaha meelba meesha kala ay ka duwan .*

## 9.1.3. Kaydsiga Wakhtiga.

Wakhtigu qayb muhiim ahamaweyn ayuu ka qaata nolol maal-meelka qofka bini adamka ah . Haddiii uu amaay si fiican uga faa'iidaysan weydoamawaayo una isticmaali weydoamawaayo waxaa uuamaay noqonaya ama noqonaysaa qof isku-dhiibayamatay saboolnimada . Mustaqbalkana noloshiisku ma yeelanayso wax rajo a h. Waxaad ka soo qaada adiga oo wakhtiga dugsiga aad tegi lahayd dib uga dhaca kadibna imtixaan muhiim ah ku dhaafo. Sidu noqonaya dareenkaagu? maxaase waxyeelo ah oo ku immaan karaa waxbarashadaada?

### Hawl-galka 3[aad]

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Wakhtigu waa sida seefta oo kale haddii aadan adigu jarin adiga ayuu ku jaraya. Odhaahda tidhaahda sharax nuxurka ay xambaarsantahay.

Ardeyda fasalka sideedaad si ay imtixaanka heerka qaran uga gudbaan mid walba wuxuu barahoodu siiyey siyaabaha casharada loo darsiyo ama wax loo akhristo iyo isticmaalka wakhtiga si ay u helaan faham wanaagsan ama ku filan. Ardey walba wuxuu siiyey wakhti hal bil ah iyo sidii ay u isticmaali lahaayeen. Qaar ka mid ah waxyaabaha uu u soo diyaariyey waa sidan soo socota:

| Tirada | Hawlaha la fulinayo | Wakhtiga loo qoondeeyey | |
|---|---|---|---|
| | | Ardeyga (B) | Ardeyga (T) |
| 1. | akhriska | 2:00 | 2:00 |
| 2. | Mudada dugsiga la joogayo ama maqnaanayo | 6:00 - 7:00 | 6:00 - 7:00 |
| 3. | Wakhtiga hurdada | 12:00 | 9:00 |
| 4. | Wakhtiga ciyaarta ama fasaxa | 2:00 | - |
| 5. | Wakhtiga shaqada guriga la qabanayo | 1:00 | 2:00 |
| 6. | Wakhtiga akhriska buugta | - | 1:00 |
| 7. | Wargaysyada, raadhiyoonka iyo tilifisionks lsls soconayo. | - | 2:00 |

*Qorshaha isticmaalka wakhtiga ee jaantuuska korka lagu soo badhigay ujeedadiisku ma aha dadka oo dhan si isku-mid ah ayey u wada adeegsanaysaan. Qof walba sida uuamaay wakhtiga u adeegsanayoamaso ama sida jadwalkiisaamakeeda u dejisanayoamaso waxay ku xidhan tahay kolba goobta uuamaay joogoamato iyo nooca shaqada uu ama ay hayoamaso sida uu yahay. Tusaale ahaan, ardey reer guuraa ah saacadaha uuna dugsiga lahayn waxaa suurto gal ah in uu gurigooda ilaaliyo, xoolaha raaco, ama arrooriyo, reerka la oodo abihi, ama dixaha u dabaal tego--iwm. Sidaas daraadeed, jadwal u gaar ah oo ku saabsan sida uu wakhtigiisa u isticmaalayo wuu yeelan karaa.*

## 9.2. Hab-dhaqanka kaydsiga

Waa maxay baahida keentay in wax la kaydsado? Aqoonyahanada u kuur-gala arrimaha dhaqaaluhu waxay tilmaameen in kaydinta dadku wax kaydsado salka kuhayso ama sabab u yihiin labo arrimod oo kala ah:

B. Dhibaatooyinka ama dhacdooyinka la filayo iyo kuwa aan la filaynin oo loo adeegsado.

Lacagaha ama kharashka lagu bixiyo arrimaha ama dhibaatooyinka lama filaanka ah xanuunka, geerida, abaaraha, --iwm. Kuwa la filayo ama la rajaynayo in ay dhacaan ama la fuliyo waxaa ka mid ah arrimaha salka ku haya baahida asaasiga ah la xidhiidhaa nolol maal-meedka qofka, qoyska ama bulshada sida cuntada, caafimaadka, waxbarashada, dharka, caroosyada, ciidaha, dhismaha guryahaalaab la soo gato---iwm.'

Haddii qofka/qoysku yahay mid ladan ama leh hanti badan waxay ku dadaalaan in ay sii laban laabaan tayada iyo tirada maalkooda si uu u sii jiro mudo dheer islamarkaana carruurtoodu ka dhaxasho. Waxaana ka mid ah in ay guryo dhistaan, beero qotaanamabeertaan, macdan ay ka ganacsadaan, gaadhiyo gataan, xoolo nool dhaqaan, urur ama kambani samaystaan --iwm ayeynu tusaalooyin u soo qaadan karna.

### Hawl-galka 4aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Waxyaabaha hoos ku xusan u kala saar arrimaha ku khuseeya iyo kuwa aan ku khusaynin islamarkaana ah kuwa la filayo iyo kuwa aan la filaynin.

***Fiiro-gaar ah.*** Labadaba ( kuwa la filayo iyo kuwa aan la filaynin) qaar ku khuseeya in aad kala kulantiin ayaa laga yaaba.

| Waxyaabaha lama filanka | kuwa la filayo | kuwa aan la filaynin | Unexpected |
|---|---|---|---|
| Guurka | | | |
| Geerida | | | |
| Urur | | | |
| Martida | | | |
| Dal xiis goobaha dhaqan iyo taari | | | |
| Dhalashada | | | |
| Dawada | | | |
| Maaweelo | | | |
| Taageero | | | |
| Balwadaha kala duwan | | | |
| Baro kac | | | |

## 9.3 Planning

Natiijada kaydsiga waxaa looga jeeda qofka kharashka ku baxa nolol maal-meedkiisa iyo dhacdooyinka lama filaanka ah wixii ka soo hadha marka uu kaydsado mudo dheer iyo mudo gaaban faa'iidooyinka uu ka helayo in la tilmaamo weeyaan. Waxaa jira labo natiijo ama faa'iido oo ka laga helo kaydsiga.

## Hawl-galka 5aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Sidee ayaa qorshahaaga u fulin kartaa?
2. Qof haduu rabo guri inuu dhiso maxaa looga baahanyahay marka u horeesa inuu

## 9.3.1. Saamaynta ay Leedahay Dakhligaaga oo Aad Ka Badsatid

" Kuwa wax kaydsaday way faa'iideen kuwa aan kaydsanina way khasaareen"

Waxaa jiray labo nin oo jaar ahaa waxya ka wada shaqeeyaan isku-meel. Waxayna ahayd warshad ay labaduba shaqaale u ahaayeen. Ninka u horeeya oo la yidhaahdo Rooble wuxuu leeyahay lix carruur ah. Rooble kuma faraxsana noloshan uu ku noolyahay. Maadaama uu yahay nin balwado badan leh qoyskiisa dhexdiisa nabadi kama jirto. Wuxuu adaaamatega meelaha lagu caweeyo wuxuuna ciyaara turub lacag lagu ciyaaro. Inta badan lacagaha uu helo wuxuu ku lumiya ciyaarahan iyo balwadihiisa kala duwan . Waxaa waliba inta dheer alaabo kala duwan oo qoyskiisku ku adeegan jireen oo uu ka mid yahay Baaskiil ayuu ku bixiyey dayn lagu yeeshay ama dayn lagu lahaa ayaa looga qaatay. Sidaas daraadeed, iska daa in uu carruurtiisa si hagaagsan wax u bare cuntada ama dhuuniga ay quutaan ayaa gabaabsi ku noqda. Xaaskiiskuna maadaama ay si joogto ah isaga dabadhasho waxay noqotay qof aad u taagyar islamarkaana caato ah.

Ninka labaad oo la yidhaahdo Cusmaan xaaskiisku waxay ka qayb qaadata waxbarashada habeenka. Waxay dhaleen afar carruur ah. Maadaama uu ka tirsan yahay urur iskaashato ah oo lacag isku-darsada islamarkaana kaydsada mushaharadiisa bisha marka saddex meelood loo qaybsho meel ahaan ayey kayd ahaan u dhigtaan . Maadaama carruurtiisa ka bixiyo lacago ay wax ku bartaan sida ugu fiican ayey wax u bartaan.

## Hawl-galka 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Waa maxay faraqa u dhexeeya Rooble iyo Cusmaan?
2. Kharashka uu ku bixiyo dugsiyada iyo carruurta ma wax uu mustaqbalka ugu talagalaya mise ma aha? sabab?
3. Siyaabahaamafarsamooyinka dhaqan ahaaneed ee wax loo kaydsado ee ka jira goobaha aad ku nooshihiin ugu yaraan saddex ka mid ah . Sheeg kadibna sharaxaad ka bixi dhinacyada dooda wanaagsan iyo dhaliilahooda.

## 9.3.2. dhibaatooyinka ka dhalankara in Qorshe la'aan lagu Shaqeeyo

Waxaa kaydsiga ka soo horjeeda ama lidiga ku ah waa khasaarin. Lacagta wakhtiga , hantidaamakhayraadka dabeeciga iyo ta dadku so saaroamasammeeyo haddi aan qorshe loo sammaynin ama sida ugu habboon aan loo isticmaalin waxaa suurto gal ah in ay khasaaraan. Khasaaruhu waa natiijo ka dhalatay qorshe- la'aan in lacag ama hanti kala duwan la isticmaalo. Khasaaraha waxaa sabab, u noqda marka la awoodi waayo in la kala saaro waxyaabaha loo

baahanyahay in mudnaanta koobaad la siiiyo iyo kuwa kale, waxyaabaha lagama maar maanka ah ama baahida ugu weyn loo qabo iyo kuwa kale oo la kala saari waayo. Guud ahaan khasaaruhu wuxuu ka yimmaada marka qorshaha lagu darsan waayo lana kaydin waayo waxyaabaha bari ama mustaqbalka loo baahan doono islamarkaana loo adegsado in lagu daboolo baahida maantaamahada taagan oo kali ah skheedada soo socota ayaan ku fahmi karna waxaa uu yahay khasaaruhu.

***" Iyada oo aan haysan waxay xidhato ayey raadinaysaa waxay huwato"***

Mudane Cali oo ku noolaa degmo ayaa wuxuu lahaan jiray labo ilood ama meelood oo dhaqaale ka heloamaka soo galo. labadan iloodwaxay kala yihiin, lacagaha hawl gabka oo uu qaadan jiray iyo xawaarad uu lahaa kuna shaqaysan jiray . Cali sanad kasta wuxuu sammaysan jiray xaflado kala gedisan oo uu ku casuumi jiray xoolihiisa. Tusaale ahaan, bilawga bisha safar jaarkiisku waxay ku ducaysan jireen lacag yar laakiin Cali wuxuu qali jiray wan weyn, sharaab farabadana wuu soo gadi jiray , wuxuu amri jiray in la dubo kibis-magaal, kadibna waxaa loo yeedhi jiray dadka jidka maraya si ay xaflada uga qayb galaan. Lacagta uu ku sammaynayo xafladana horray ayu usii diyaarsan jira.

Reerka uu la daganyahay waxaa ka jiray jamacyo kala duwan wuxuuna ka tirsana labo jamac ama urur oo ah iskaashato lacag dhigta ama kaydsada. Todobaadkan waxaa ka xummaatay xawaaradi islamarkaana waxaa la weydiiyey in uu bixiyo ama kaga qaybqaato lacag jid ama wado laga sammaynayo deegaanka uu ku noolyahay. Laakiin, Cali waxyaabahan uma arko waxyaabo muhiim ah mudnaantana ma siiyo. Waxaa kale oo jirtay gabadh walaashi ah oo bisha sane jaamacad ka qalin jabinaysa islamarkaana la rabo in xaflad loo sammeeyo qoyskooda oo deganaa miyigana ma jirin wax ay ka rejaynaysay. Si hadaba gabadha uu abtiga u yahay xaflad wanaagsan ugu qabto wuxuu isku-dayey in uu lacag soo daynsado.

### Hawl-galka 7aad

1. Ma jiraa hab aad wax u kaydsato? haddii uu jiro si habboon uga hadal?.

## Gunaanadka Cutubka 9aad

Sida lawada ogsoonyahay waxaa jira khayraad dabiici iyo hanti kalaba oo ah kuwo aad u kooban xajmi (cadad) ahaan marka loo eego baahida aan xadidnayn ee bani aadamku u qabo. Haddaba, si looga faa'iidaysto khayraadkan kooban waxaa muhiim ah in fiiro gaar ah la siiyo ilaalinta & xanaaneynta kh/dabiiciga ah, ee ka jira dunidan aynu ku noolahay korkeeda. Sababtoo ah nolosha & jiritaanka dadka iyo noolaha kaleba. Waa mid ku xidhan kh/dabiiciga ah. Sidaas awgeed, waxaa haboon in khayraadka aynu haysano laga ilaaliyo israafka, islamarkaana la tashiilo sida ugu haboon. Israafka khayraadka ama hantida waxaa ka dhalan kara khasaare hanti lumis ah oo horseedi kara saboolnimo iyo macaluul nagu habsata. Sidoo kale, waxaa loo baahan yahay in khayraadka ama hantida la kaydsado si loo isticmaalo mustaqbalka dhaw & kan fogba. Nidaamka wax kaydsashaduna waa sida kaliya ee lagaga fursan karo israafnimo & khasaare maal oo ku soo gaadhi kara dhaqaale ahaan.

Haddaba, in la yeesho hab-dhaqan wax-kaydsasho, waxaa muhiim ah in la helo qorshayn haboon oo waxtar u leh bulshada & dhaqaalaha. Qorshuhu, wuxuu ruuxa ka caawiyaa inuu si fudud u maareeyo noloshiisa gaarka ah iyo waliba tan qoyskiisa, islamarkaana wuxuu qorshuhu u sahlaa ruuxa inuu ka hortago khatar qalalaase dhaqaale oo ku habsan karta qofka. Markaas, ardayeey, qorshe la'aantu waa nidaam daro, waxyeelo ku keeni karta bulshada oo u horseedi doonta faqri iyo qalalaase dhaqaaleba, haddii aan si haboon loo maarayn khayraadka aynu haysano.

## Layliska Guud Ee Cutubka 9[aad]

### I. Ku qor 'Run' ama "Been" su'aalaha soo socda hadba ta ku haboon.

1. Waxkaydsadhadu waa mid khasaare iyo faa'iidaba u leh qofka/ruuxa.
2. Ruuxu hadduu yaqaano siyaabaha lagu tijaaro, wuxuu gartay bay ka dhigan tahay waxkaydsashadu waxay tahay.
3. Khayraadka dabiiciga ah ma'aha mid dhammaan kara.
4. Xeeladaha nolol-maalmeedka wanaagsan waa marka la yeesho xeelado kharash bixin iyo dakhli isku dheeli tiran.

### II. Isku aaddi erayada ku kala hoos qoran xarfaha "B" iyo "T".

| B | T |
|---|---|
| 1. Khayraadka dabiiciga ah | b) wax-dhigasho |
| 2. bakhaylnimo | t) hanti lumin |
| 3. Sharaf | j) macdanta |
| 4. Kaydsasho | x) xilkasnimo |
| 5. Israaf | kh) fikradaha wanaagsan |
| | d) fikradaha guracan |
| | r) waxba ma hurid |

### III. Jawaabo kookooban ka bixiya su'aalaha soo socda;

1. Israafka iyo faxalnimadu maxay ku kala duwan yihiin?
2. Bakhayrnimada & kaydsashadu sidey iskula jaanqaadi karaan?
3. kh/dabiicigu waa maxay?

CUTUBKA 10

# KA QAYB GALKA FIR-FIRCOON EE BULSHADA

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Fahmaan in arrimaha deegaan ahaaneed iyo kuwa bulshaba in si fir-fircoon looga qayb qaato waxtarka ay leedahay.
- Dareemaan kaalinta ururada shacabku ay leeyihiin
- Gartaan faa'iidada ay leedahay in ururada shacabka ah laga qayb qamudane.

## 10.1. Arrimaha Deegaanka oo si firfircoon looga qaybgalo.

### 10.1.1. Ololoha horumarinta deegaanka oo si firfircoon looga qayb qaato.



Jaantuska 10.1. Deegaanadeena si wada jir ah aynu daryeelo.

- Idinka oo soo koobaya sharaxa waxyaabaha uu sawirka muujinayo.
- Faah-faahin ka bixiya dadka ka dhexmuuqda sawirka waxyaabaha ay shaqada ku fulinayaan ama qabanayaan.

#### Hawlaha Horrumarinta ee Bulshada Degmadeenu Fulisay.

Bulshada degan degmadeenu waxay fulisay hawlo horrumarineed ama maal-galineed oo ay ku baxday maaliyad ka badan saddex milyan. Si loo fudaydiyo tirada xad-dhaafka ah ee Ardayda fasalka , bulshadu waxay dhistay 28 fasal oo wax lagu barto. Lacago ay bixisay bulshadu iyo gargaar lacageed oo ay bixiyeen ururada bulshada dhexdeeda ka jira ayaa lagu dhisay fasalada dugsiga. Shaqaalaha dawladdu lacago ay ka jareen musharka bisha ay qaataan ka sokow, waxay bulshada ku caawiyeen xirfado kala duwan oo ay u hureen bulshada. Sagaal iyo sodon xaafadood oo ah beero qodoto ayaa inta ay iskaashadeen sammeeyey wado gaadhiyadu maraan oo isku xidha magaalo madaxda degmada iyo magaalo ku xigta oo dhan 248 km islamarkaana hada gaadhiyadu bilaabeen in ay maraan.

Degmada guud ahaan waxaa la qoday islamarkaana diyaar ah 1415 biyo xidheno ah. Waxaa kale oo la joojiyey islamarkaana la xanaanaynayaa labo milyan oo geedo ah. Dhalinyarada, gabadhaha, ardeyda, dadka waayeelka ah iyo qaybaha kala duwan ee bulshada degmadu mid walba wdaxbu ku tadarucay.

Dawladduna kharashka ku baxaya boqolkiiba 30 ayey bixisay ama dabooshay.

Sanadan waxbarashada dugsiyada degmada oo markii hore labo jeer ama labo qaybood ardeydu ku kala baran jirtay ( qayb galinka hore iyo qayb galinka dambe dhigata) hada  maalinta oo dhan ayey wax bartaan sababta oo ah waxay bulshada degmadu dhisatay dugsiyo badan ama fasalo tiro badan sidii aynu karkaba ku soo sheegnay . Ardey ka badan 1200, carruur ah ayaa markii ugu horaysay helay fursado ay wax ku bartaan. Hada ka hor waxyaabihii beeraha ka soo go'ayey ee marka suuq loo waayo khasaari jiray hada waxaa loo iib geeya magaalooyinka agagaarka maadaama wado baabuuradu maraan ay bulshada degmadu dhisatay. Taasina waxay bulshaddii degmada fursad u siisay in ay nololmaal-meedkoodi kor u kaco islamarkaana nolol wanaagsan ku noolaadaan. Dhalinyaradu si ay noloshooda kor ugu sii qaadaan wdaxay heleen gaadiid casri ah oo ku kala gooshaan ama kolba goobta ay rabaan ku tegaan . Maadaama ay fursad u heleen in ay isticmaalaan .

Kolba sida firfircoon ee bulshadu uga qaybqaadato hawlaha horrumarinta ee agagaarka ayaa cadaynaysa ama muujinaysa waxaa uu yahay rabitaankeedu. Waa hawlaha lagu fuliyo is-xilqaan dhammaystiran iyo go'aan si gaar ah ay u gaadho bulsho kadibna la fuliyo khayraadka ka faa'iidaysiga deegaan ahaaneed iyo ta dal ahaaneed ee muwaadiniinta waxaa asaas u ah si firfircoon uga qayb qaadashada bulshada . Bulshada oo kaga qayb qaadata lacagahaan, xoogahaan, aqoon ahaan, taloamafikir ahaan iyo siyaabo kala oo looga qayb galo ayaa lagu fulin karaa hawlaha horrumarinta ayaa natiijo fiican la gaadhi karaaa ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshadu hawlo la fuliyo oo natiijo wanaagsan laga gaadhay oo kali ah ma aha . Waxaa kale barbar socda in si wada jir ah wakhtiga muhiimka ee hawsha loogu talagalay in lagu fuliyo iyo geedi socodka hawlaha oo la illaliyo, si tartiib ah oo waafaqsan qaabka shaqada loogu talagalay oo loo dhaqdhaqaaqo, iyo waliba in hawlahaamashaqada la joogteeyo ayaa lagama maar-maan ah .

## Hawl-galka 1aad

Su'aalaha soo socda ka jawaab.

1. Ka qaybqaadashada firfircoon ee bulshadu muujiso ama la timmaado waxyaabaha ay sammayso ee lagu sharaxi karo waa maxay ? maxaa ka mid ah?
2. Qor afar hawlood oo lagu tilmaami karo kuwa si firfircoon uga qaadatay (ama lagu xaqiijin ka qaybqaadashada firfircoon ee bulshada.

### 10.1.2. Xoojinta Nidaamka Dimuqraadiyada


Jaantusta 10.2. Guddiga horumarinta oo shiraya


Jaantuska 10.3. Doorasho dimuqradi ah.

- Sawirada korka ka muuqda waxyaabaha aad ka fahamtay sharax.
- Doorashada in si diimuqraadi ah loo qabtay iyo in kale maxaa lagu garanayaa?

# KA QAYB GALKA FIR-FIRCOON EE BULSHADA

## Magaalada Wajaale

Wajaale waa meel dadbadan deganyihiin laakiin biyo la'aan iyo haraad aad dadku ula rafaadsan yihiin. Beri dhaw uunbay ahayd markii la sheegay in dhibaatooyinki biyo la'aantu yaraatay islamarkaana rejo fiican dadka ku abbuurantay. Saddex sanadood ka hor doorasho la qabtay gudi la wareegay ma'suuliyada hawlaha lagu horrumarinayo magaalada ayaa mudnaanta koobaad wuxuu siiyey sidii dhibaatooyinka xaga biyaha ka haysta wax ka qabto islaamrkaana bilaabay dadaalo biyo loogu helo magaalada. Gaar ahaan, mudane waajso oo ahaa maamulaha magaalada dadaal gaar ahaaneed oo uu sammeeyey wuxuu ku helay daraasad ay sammaysay shirkad wayn islamarkaana lacag aad u badan loogu qoondeeyey in magaalada biyo loogu soo galiyo oo in mudo ah taalay lana illoobay . Sabab dhawr ah dartood. Maamulaha magaaladu wuxuu isku dayey in u gudiga horrumarinta ee magaalada si uu uga ansixiyo islamarkaana mashruuca loo fuliyo. Hase yeeshee, si weyn ayaa looga soo hor jeestay fikirkiisi. Sababaha ay uga soo hor jeesteena waxay ahayd dadka degan goobta la rabo in laga qodo biyaha waxay amminsanyihiin in dadki ay ka soo tafiirmeen lagu aasi jiray islamarkaana ayna suurto gal ahayn in ceel biyo ah laga qodo. Odayga waajso laakiin ku adkaysiga fikirka uu qabo ka sokow, maadaama talada uu soo jeediyey ka soo jeedo kuwi hore ee gaboobay islamarkaana bulshada maanta jirta ayna ka qabalaynin lacagtannada la helay in ayna habboonayn islamarkaana uu ka noqdo fikirkiisi ayey xubnihii kale ee gudigu ku qanciyeen .

Xiliga kadib, mashruuci lagu soo saarayey biyaha waxaa la siiiyey shirkad ku guulaysatay tartankii kadibna mudo labo sano ah ayaa lagu guda jiray fulintiisa. In kasta oo shaqadi biyaha lagu soo bixinayey ku dhawdahay gabagabo odaygi madaxa u ahaa magaalada ayaa is hortaagay kadibna cabsi weyn ayaa ku dhalatay bulshaddii magaalada deganayd maadaama la wadi kari waayey hawshi shir bulshada magaaladu lahayd ayaa odaygi waajso lagu hor weydiiyey kadibna waxaa dhacday in shaqadi laga fadhiisiiyo mashruuci biyaha lagu qodayeyna waxaa lagu biiriyey lacag kale kadibna waxaa la go'aamiyey in la soo gabagabeeyo . Magaaladi wajaalena in ay biyo la'aan ku sii jirto mudo dhawr sano oo dambe ah ayaa qasab noqotay.

## Hawl-galka 2aad

Idinka oo ku salaynaya sheekada aynu korka ku soo marnay su'aalahan soo socda ka jawaab.

1. Khasaaraha weyn ee soo gaadhay ayaa ka mas'uul ah ama sabab u ah?
2. Odayga magaciisa layidhaahdo waajso mashruucan aadka u weyn sababaha uu ugu guul daraystay in uu fuliyo waxaa ka maqnayd ka qaybgalka bulshada magaalada, ma taageersantihiin? sababtu waa maxay?
3. Geedi-socodka nidaamka lagu dhisayo dimuqraadiyada waxtarka ay leedahay ka qayb qadashada firfircoon ee bulshadu casharada laga baran karo maxay noqonayaan? ama maxaa cilmi ah ama aqoon ah oo laga buran karaa?

### 10.1.3. Itoobiya Dadaalada Ay ugu jirto sidii Barnaamijyo Horumarineed oo Deg-dega looga Hirgalin lahaa oo ka qayb galka Bulshada lagu xoojiyo.

- In kasta oo labaduba horrumar ama waxtar leeyihiin horrumarkooduamakoritaankoodu in uu darajooyin kala duwan leeyahay way cadahay. Sharax faraqa ama waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin darajooyinku .

#### Xasan Qoyskooda

Xasan magaaladi uu u yimid in uu wax ka barto wuu ka noqday marki uu gaadhay fasax weynihi dugsiyada wuxuuna u tegay qoyskiisi oo uu hada la jooga. Iyaga oo faanuus u shidmayo iskuna arkaya ayey si diiran arrimo muhiim ah uga wada sheekaysanayaan. Waxaana goobta iskug yimid xubnihi qoyska oo dhan. Xasan in kasta oo uu aminsana in hadalada abihii ku hadlayo ayna sax ahayn islamarkaana ka doodayey , hadana, laakiin, ma inkiraynin in qoyskoodu isbedelo ama u baahanyahay in nolosha qoyska kor koo qaado. Hase-yeeshee, isbedelka nolosha qoyska waxtarkaamafaa'iidada uu keenayo ayaana u cuntamin ama uuna ku qanacsanayn . Xubnaha kale ee qoysku laakiin waxay taageersan yihiin taladaamahadalka abahood islamarkaana wey difaacayaan . Xubnaha kale ee qoyska sida ay qabaan, waxay isbedel fiican u arkaan marka midho badan uga soo go'aan beerta, qoysku helo cunto ku filan 12ka bilood ee sanad, inta ka soo hadha qosyka la gado kadibna qoyska oo dhan dhar cusub loo soo gado; la tir-tiro dhibaatooyinkii ama baahidi ka jirtay cusbada iyo sammuun la'aanta; ka kaaftoomaan in ay gacmaha hoos dhigtaan amadad kale baryaan; awoodu helaan in ay wiilasha qosyka oo dhan dugsiyada waxbarashada ku daraan ---lwm. Waxaa kale oo ay rejaynayaan in mustaqbalka marka uu Xassan waxbarashaddiiisa dhammeeyo sida magaalooyin ka u noolaan doonaan . Isbedelaadan horrumar ahaaneed ee qoysku rejaynayo in ayna wax suurto gal ahamawanaagsanayn in uu fahamsiiyo ayuu ku doodaya.

Xasan wali doodbu ka qaba fikirka ku saabsan nolol maal-meedka qoyskooda gaar talooyinka ay isku-waafaqsanyihiin reerkoodu. Sida hadalkiisa ka muuqata dhab ahaan hab nololeedkii hore ee qoyskoodu hada aadbu isku-bedelaay. Waxyaabo badan ayey isbedel wanaagsan ku sammeeyeen.

Hase-ahaatee , horrayba saboolnimo aad u daran ayaan ku soo noolayn ayuu leeyahay Xassan. Wuxuu ku doodaya in maantana ayna wali ka bixin saboolnimadi horayba ay ugu soo jireen. Waxaa loo baahan yahay in aynu dejino ama helno farsamo aan saboolnimada xun ugaga bixi karno ayuu leeyahay islamarkaana tusaale ahaan ugu soo dhigay . Waxaa kale oo uu tusaale ahaan ugu soo qaatayama qosy uu dugsiga ku bartay oo la odhan jiray Anji loon. Qoyskanina sida qoyskooda oo kale mid saboolnimo xun ku nolaan jiray weeyaan. Hada laakiin kuma noola oo kali ah nolol ka fiican tii hore waxay doorteen midho lacag badan ay ku helaan islamarkaana suuqa aad loogaga baahanyahay kadibna way beertaan. Inta ay qadaan midhaha u baxa ayey wax kasta oo ay rabaan ku soo ibsadaan . Sidi baryihii hore midhaha u soo go'a sanadkiiba mar kali ah hada ma aha. Maanta waxay rabaan in ay magaalada guri ka dhistaan .

Carruurtoodana wiilal iyo gabdhaha in ay wax baraan ayey awood u heleen. Beeraha ay falanayaan waxay u isticmaalaan maangado ay wabi u dhaw ka soo weecsadeen. Waxaa kale oo ay dhaqadaan shini malab usamaysa. L'o iyo

wanan inta ay dhaqdaan islamarkaana naaxiyaan ayey gadaan lacag badana ka helaan qof aan waxbarasho ku jirin oo ka mid ah carruurtoodana shaqo ganacsi ah ayey magaalada uga sammeeyeen. Wiil ugu weyn qoyska reer-Anjiloona waxay u gadeen gaadhi weyn oo ah kuwa xammuulka kadibna wuxuu u shaqeeya waaxda taraansboortiga. Hadaba ma noqoteen qoys maal-galin ku sammayn karaa islamarkaana carruurtooda fursado ay ku shaqaystaan u abbuura? Bal u fiirsada sida uu yahay isbedel ka noloshoodul. Waxay sammeeyeen isbedel asaasi u ah noloshooda kadibna waxay ka baxayaan xerada saboolnimada .

Sidi aan idiin sheegay marka aynu helnoamagaadhno isbedel asaasi ah oo noocan oo kale ah xaaladi saboolnimada in aan ku soo laabano iska daayo in aynu noqono qoys maal-qabeen ah ayaa lagama maar-maan ah . Sida in aynu awoodi doonana wax shiki ah kuma jiro ayuu ku yidhi islamarkaana si fiican u fahamsiiyey. Dhammaantood waxay u bogeen bislaanshaha Xasan kadibna rejo fiican ayey dareemeen. Doodiina halkaasa lagu soo gabagabeeyey kadibna qof walba wuxuu tegay goobti uuamaay seexannayeyamaseexanaysay.

## Hawl-galka 3aad

Idinka oo ku salaynaya sheekada ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Labadan qoys faraqa u dhexeeya ee ku saabsan horrumarka ay noloshooda ku sammeeyeen haddii loo bedelo labo dal isbedel horrumarineed ee ka muuqda islamarkaana ay ku kala duwan yihiin sidee loo sharixi karaaa?
2. Haddii la yidhaahdo sida ugu dhaqsaha badan ee saboolnimada lagaga bixi karo waa mashruucyada horrumarineed oo kali ah weeyaan ma taageersan tihiin? sabab?

Haddii halka dalkeenu taaganyahay ay tahay meelaad u hoosaysa wuxuu ku jira darajada saboolnimada iyo dib u dhacmmada. Hase yeeshee, bulshada oo dhan haddii ay kacdo muujiso karti ama hawlkarnimo islamarkaana si fiican u shaqeeyaan ma jiraan sababo looga bixi kari waayo saboolnimada iyo dib u dhaca hada bulshadu ku jirto. Maadaama dalkeenu ku jiro saboolnimo iyo dib u dhac waxaa lagama maarmaan ah in meel looga soo wada jeesto islamarkaana mar kali ah saboolnimada looga tirtiro dalkeena. Sidaa darteed , sida ka muuqata wadanada kale isbedel yar Itoobiya ma gaadhi karto. Si kastaba ha ahaatee isbedelaada soo socda in ay degdeg noqdaan ayaa qasab ah . Si looga baxo saboolnimada iyo dib u dhaca waxaa laga maar-maan ah in la fuliyo mashruucyo horrumarineed oo deg-deg ah . Nolol maal-meedka bulshada oo isbedelka fiican ka hada ay ku jirto wakhti kooban gudihi lagu keeno ayaa ah fursad kale oo muhiim ah, si isbedel deg-deg ah loo gaadho waxaa qasab ah in bulshadu si firfircoon, karti iyo is-xilqaan ku dheehantahay uga qayb gasho islamarkaana garab gasho dawlada. Ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshadu wuxuu fure u yahay in la fuliyo mashruucyo horrumarineed oo deg-deg ah , nolosha bulshada oo heer sare lagaadhsiiyo, dalka oo saboolnimada iyo dib u dhaca laga saaro --lwm.

## Hawl-galka 4aad

Ka wada doodaka su'aalahan soo socda

1. Itoobiya waxay ku sugan tahay xaalad adag oo saboolnimo iyo dib u dhac fikirka leh ka wada hadla.
2. Sida kali ah ee dalku kaga bixi karo saboolnimada iyo dib u dhaca waa mashruucyada horrumarineed ee deg-deg ah oo lagu xoojiyo ka qaybqaadasha firfircoon ee bulshada. Fikiradan ma taageersantihiin?

## 10.2. Hawlaha Ururada Bulshada Rayidku ay Qabtaan

### 10.2.1. Ururada Shacabka ah oo la xoojiyo Dar-dargalinta ka qayb galka fir-fircoon Bulshada Waxtarka ay u leedahay



Sawir 10.4. sanad guuraha ururada bisha cas iyo dayaxa casharci

- Ururada bisha cas iyo dayaxa cas waa maxay hawlaha qabtaan: ama maxay qabtaan?
- Ururka bisha cas oo adeegsanaysa ka qayb galka firfircoon ee bulshada hawlaha fulin karaaan sharax.

Si ikhtiyaar ama iskaa oo aad xanuunka Aydhiska iskaga baadhid.

Gobalkeena waxbarashada ku saabsan siyaabaha cudurka Aydhiska la iskaga illaaliyo ayaa aad u xoogaysatay . Sidaa daraadeedna, dadka iskood ama rabitaan dhankooda ka yimiday awgeed looga baadho xanuunka Aydhisku tiro ahaan marba marka ka dambeeyo way sii biirayaan . Waaxda u qaabilsan ka hortaga cudurka Aydhisku sanadki hore wuxuu sammeeyey shaybaadh lagu baadho Aydhiska oo bilaash ah.

Marka lixdi bilood ee ugu horaysay dadkii iskood isku-baadhay waay tiro ahaan dhan yihiin 300 oo qof , kadibna waxbarashada ku saabsan cudurka Aydhiska ee dadka la baro waxaa la xoojiyey siyaabihi loo gaadhsiin lahaa dad kala duwan iyo waliba meelo kala duwan . Kadibna waxbarashaddii Aydhiska ayaa aad u xoogaysatay. Kadib wareega labaad ee baadhitaanka lixda bilood ee ugu horaysay dadka rabitaankooda isku-baadhay tiradoodu waxay gaadhay 1700. oo qof korodhkana waxaa ugu muhiimsan ee sababta u ahaa wuxuu ahaa ururka oo dadaal badan ugalay sidii uu kor ugu qaadi lahaa fahamka bulshada ee la xidhiidhaa cudurka kadibna guulo dhaxal gal ah uu ka gaadhay.

Gobalka waxaa la siiiyey waxbarasho taabanaysa dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada iyo mudo aad u dheer oo la siiiyey . Isaga oo ururku taageersanaya ururada dhalinyarada wuxuu asaasay goobo lagaga wada doodao. Dabadeetana waxaa la bilaabay in dadka la nool fayraska Aydhiska dhaliyana taageero iyo daryeel la siiiyo. Si loo adkeeyo waxbarashada cudurka Aydhiska ku saabsan dugsi walba waxaa laga asaasay waax yar oo warbaahin oo kale ah . Iyada oo ururada kala duwan wakiil u yihiin waxaa ardeyda laga caawiyey sidii ay faham buuxa uga heli lahaayeen xanuunka Aydhiska iyo siyaabaha la iskaga illaalinayo.

Goobaha ka baxsan dugsiyadana waxaa lagu ururiyey qalab iyo qoraalo kala gedisan oo ku saabsan xanuunka. Waxaa waliba inta dheer 565 goobood oo ah goob, warbaahin ah oo loo sammeeyo ururo dhalinyaro ah oo mas'uul ka noqda iyo abaabulayaasha goobaha barayaasha iyo odayaasha dalka tababaro gaagaaban oo la xidhiidhaa cudurka Aydhiska la siiiyey. Dadka la nool fayraska dhaliya xanuunka Aydhiskana waxaa lagu taageera bishi 150.birr oo mushahar ahaan loo siiyo ka sokow ardeyda tirada badan ee ururada ku soo biiraysa in badanba bilawday in ay warbaahinada dugsiyada dhexdooda ku yaala adeegsadaan kana faa'iidaystaan.

Agagaarada la deganyahay dhalinyarada goobaha loogu talagalay in lagaga wada doodao cudurka Aydhiska iyaga oo ururo ah ayay ka wada hawlgalaan waxayna ka caawiyaan baadhitaanada

dhiiga iyo xanuunada. Guud ahaana waxaa la suurto galiyey in kor loo qaado fahamka bulshada ee ku saabsan Aydhiska iyo in uu qof walba naftiisa illaaliyo, in qof walba is-xilqaamo , xannuunada baadhitaankooda la dhiiri galiyo in la siii noolaadana rejadooda kor loo sii qaado, iyo in qof walba isku filnaansho gaadho--Iwm.

## Hawl-galka 5aad

Idinka oo ku salaynaya qoraalka ama sheekada korka ku xusan su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Sheekada dhexdeeda ururka ka hawlay magaciisa sheeg. Qof walbaana waxyaabaha xasuusta gaar ka ah kugu reebay waa maxay?
2. Sheekada ka soo saar wax tusaale u ah sida firfircoon ee bulshadu uga qaybgashay waxyaabaha sababta u ahaa.
3. Ururada bulshada ee lagu tilmaamay sheekada dhexdeeda idinku midkeed ka qayb qaadan karaaysaan? ka qayb gal noocee ah ama sidee ah ayaad awoodi karaaysaan?

### Sheeko Kooxeed.

Hawl-galkan kor ku xusan kadib kooxo ka kooban lix xubnood sammeeya.

Koox walba ha isku-qaybiso labo qaybood kadibna qodobada hoos ku xusan mid ka mid ah inta doorataan ayaad ka doodaysiin. Kadib marka ay doodu dhammaato koox walba waxyaabaha muhiim ka ah ee ay ka baratayamafaa'iidaysatay ardeyda fasalka qof aad wakiilateen ha u soo bandhigo. Fasalka ha ka doodo ama ka wada hadlo kadibna doodu nuxur ay xambaarsantahay inta la kala saaro cilmigaamaaqoonta laga baranayo hal la tilmaamo.

### Qodobka laga doodayo.

1. Ururada shicibka ah ma waxay adeegsadaan bulshada mise xubnaha iyaga ka tirsan?
2. Ka mid noqoshada ururada shicibka ah ma tahay muhiim mise ma aha?

Ururada shicibka ah waa dad ay bulshadu iska soo dhex dooratay si ay u maamulaan kadibna si wada jir ah heshiisay in ay maamulka u qabtaan . Waaxuhu si ay u maamulaan, waxay bulshadu ugu dheeqday xoogeedi, lacagteedi, aqoonteedi iyo waxkhtigeedi islamarkaana la asaasay;weeyaan. Haddii aynu si kale u dhigno, ururada shicibku waa kuwo ay bulshadu soo dooratay islamarkaana u wakiilatay in ay maamulka u hayaan. Waa ururo shicib ah oo bulshadu sammaystay kadibna ugu deeqday xoogeedi, lacagteedi aqoonteedi iyo wakhtigeediiba. Marka kadib, waxaa laga yaaba in ay ururada kale ka helaan taageero.

Adeegyada ay bulshada siinayaanina ma aha kuwo kooban ama dheeri ku ah bulshada . Laakiin waa adeegyo ay wax kaga qabanayaan arrimaha bulsho, dhaqaale iyo kuwa siyaasadeed ee dalka ama deegaanka. Ururada shicibka ah waa in ay ka madax banaanaadaan diimaha, siyaabsadaha iyo arrimo militari. Waa ururo sharciga dawlada iyo sharciyada kale ee muhiimka ah ixtiraama kuna shaqeeya sharciga dalka islamarkaana si sharci ah u duwaan gashan lehna xoriyad ama madaxbanaani ay ku shaqeeyaan . Ururada shicibka ah waxaa lagama maar-maan u ah islamarkaana sammayn weyn ku leh koritaankooda ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshada rayadka ah. Ururada shicibka ah ee kartidaamawaxtarka leh maadama ay asaas ka dhigtaan waxyaabaha ay bulshada rayadka ah danaynayso islamarkaana u hawlgaliyaan si aan toos ahayn waxay kor u qaadaan ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshada. Sidi horayba aan u soo tilmaamnay, xoojinta ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshadu wuxuu door weyn ka qaata dhisida nidaamka dimuqraadiyadeed iyo in maamul suuban la sammeeyo.

# KA QAYB GALKA FIR-FIRCOON EE BULSHADA

## Hawl-galka 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba.

1. Ururada shicibka ah bulshada ay la shaqeeyaan ama ay ku adeegtaan waa maxay xidhiidhka looga baahan yahay in ay la yeeshaan?
2. Iyada oo laga duulayo ama ujeedada tahay in la abbuuro lana xoojiyo ka qayb qaadashada firfircoon ee bulshada, maxaad u malaynaysiin in ay tahay kaalinta ay bulshadu ku leedahay?

## Gabagabada Cutubka Tobnaad

Ka qaybqaadashada firfircoon ee bushadu waa shakhsiyaad si wada jir ah deegaankooda iyo dalkoodaba uga wada faa'iidaysanaya iyaga oo adeegsanaysa rabitaankooda iyo is-xilqaan xagooda ka yimiday dhaqdhaqaaq ay sammeeyaan weeyaan. Si dhaqdhaqaaqyadan looga midha dhaliyo, waxaa lagama maar-maan ah in bulsho ahaan ama si wada jir ah loo fuliyo . Sida darteed, ururada shicibka ah waa kuwo rabitaanka iyo isxilqaanka bulshada lagu abbuuro oo ka madaxbanaan siyaasad, diimo iyo nidaam militari ah . Islamarkaana aan loo asaasin in dakhli dheeri ah lagu helo, laakiin loogu talagalay in ay bulshada u adeegaan. Ururada shicibka ah dhankoodana waxaa looga baahanyahay u faa'iideeyaan bulshadooda . Iyaga oo rabitaankooda ku shaqaynaya waxay bulshada ku dhiiri galinayaan in ay si firfircoon ula shaqeeyaan. Marka ay sidan bulshada u soo jeediyaan wax ay xoojinayaan ka qayb qaadashada bulshada.

Si loo adkeeyo nidaamka dimuqraadiyadeed ee dalkeena islamarkaana saboolnimda iyo dib u dhaca xun ee bulshadu ku jirto looga saaro waa in mashruucyada horrumarineed la de-dejiyo kadibna kor loo qaado ka qayb galka firfircoon ee bulshadeena. Haddii aynu sammayno urur shicib ah oo sida ugu habboon fuliyo hawl kasta oo ah lagama maar-maan bulshada ku dhiirigaliya in ay si firfircoon ugala qayb qaataan deegaanadeedna iyo bulshadeenaba waan uga faa'iidayn karna. Kadibna waxaan abbuuri karno dimuqraadiyada xoogan oo horrumar dhinac walba leh lagu gaadhi karo.

## Erayada Muhiimka ah

***Mashruucyada Horrumarinta Deegaanka-*** Xaafada ama goobaha la dego oo laga dhaqan galiyo dadaalo ama barnaamijyo kor loogu qaadayo tayada bulsho ahaaneed iyo xaalada dhaqaale ahaaneed natiijada laga gaadho.

***Qorshe:-*** Hawl ama barnaamij la rabo in si waxtar leh loo dhaqan galiyo hantida ama lacagta, qalabka, xooga dadka, wakhtiga –lwm ee ay haysato cidda fulinaysa oo si habboon la iskugu habbeeyo kadibna loo dhaqan galiyo nidaam muujinayaama la isku-gu xidho weeyaan.

***Qiimayn:*** Waa farsamo lagu jarabo, falanqeeyo laguna baadho faa'iidooyinka, khasaaraha laga helay ama lagagala kulmay, waxaa sababay khasaaraha islamarkaana lagu raadiyo siyaabo lagu xaliyo hibaatooyinki lala soo kulmay iyo sidii looga hortagi lahaa nidaam loo adeegsado weeyaan.

## Layliska Guud ee Cutubkan 10aad

I. Weedhaha soo socda kuwa runta ah ku qor "Run" kuwa beenta ahna ku qor "Ben" .

B. Dadaalada lagu horrumarinayo deegaanadaamaagagaarada si natiijo waxtar leh looga gaadho waa in la xoojiyo ka qayb galka firfircoon ee bulshada.

T. Hal dal barnaamijyada horrumarineed ee deegaanada laga dhaqan galinayo cidda kali ah ee iska leh waa dawlada ay bulshadu wakiilatay ama wakiilka ka ah bulshada.

J. Dadka u xil-saaran hirgalinta barnaamijyada horrumarinta deegaanada haddii wakhtigi loo baahna ee shaqada la fulinayo ixtiraami ama illaalin waaya ee sida ku hadhaamamaqnaada wuxuu caajis galinaya ka qayb galka firfircoon ee bulshada.

X. Ururka shicibka ah maadaama uu dawlada ka madax banaan yahay looma baahna in waax ama urur kasta oo ka mid ah dawladdu duwaan galiyo islamarkaana ogaado.

Kh. Ka qayb galka firfircoon ee bulshadu in uu dhiso ama fuliyo barnaamijyada horrumarinta deegaanka mooyeamamaahine, wax saammayn ah kuma leh ama kaalin fiican kama ciyaari karo adkaynta nidaamka dimuqraadiyadeed.

II. Qaybta "B" iyo qaybta "T" sida ay iskugu habboon yihiin iskugu aadiya.

| "B" | "T" |
|---|---|
| 1. Ururka ganacsatada | B. Ujeedo mid ah oo urur la iskugu keeno. |
| 2. Ururka dhalin yarada . | T. Hawlo dhaqaale iyo bulsho oo xaafad laga fuliyo. |
| 3. Barnaamijyada lagu maal galiyo deegaanka | J. Saammayn aqoon ahaaneed |
| 4. Mid ka mid ah bayaanada bulshada ee firfircoon. | X. Dad iskugu soo ururay maadaama xirfado ku saabsan ka qayb galka shaqo oo isku mid ah leeyihiin. |
| | Kh. Urur aan ahayn shicib |
| | D. Hal urur oo tusaale u ah urur shicib ah. |
| | R. Dad iskugu soo ururay in ay si wada jir ah go'aan ay ka midaysan yihiin oo nooc kasta ah fuliyaan. |

III. Su'aalahan soo socda ee ku salaysan sheekada korka ku xusan mid walba u doorta jawaabtaada ku habboon ama saxda ah.

1. Maadaama ururada shicibka ah ka madaxbanaan yihiin dawlada.
   - B. Kuma qasbana in lagu maamulo sharciga dawlada .
   - T. Waxaa waajib ku ah in si sharciga dawlada waafaqsan loo duwaan galiyo islamarkaana qaataan ogoolaanshaha dawlada ama sharciga ogolaanshaha.
   - J. Iyaga oo fulinaya barnaamijyada horrumarinta deegaanka waxay u madaxbanaanyihiin in ay ujeedooyinkooda siyaasadeed ama diimeed ku tallaabsadaan.
   - X. Jawaab ma laha su'aashan;

2. Barnaamijyada horrumarinta deegaanka bulshada fuliso oo dawlada kaligeed aan looga tegin
   - B. Waxaa looga dan leeyahay in bulshada lagu abbuuro dareenka lahaanshaha barnaamijyada horrumarinta deegaanka iyo natiijada ka soo baxdaba.
   - T. Dhanka bulshada waa si loo koriyo ama kobciyo dareenka dulsaarnimada ama ku tiirsanaanta.
   - J. Barnaamijyada horrumarinta deegaanka waxaa la joogtayn karaaa kali ah marka ay dawladdu fuliso.
   - X. Dhammaantoodba waa sax.
3. In bulsho dhexdeeda uu ka jiro ka qayb gal firfircoon oo bulshadu sammayso waxaa lagu sharaxi karaa ( caddayn karaa ) mid ka mid ah waxyaabahan soo socda.
   - B. Xiliyada la fulinayo barnaamijyada horrumarinta deegaanka oo si rasmi ah uga soo qayb gasho ama laga dhex muqdo .
   - T. Xiliga la fulinayo barnaamijyada horrumarinta deegaanka oo xooga lagaga qayb qaato.
   - J. Goobta laga fulinayo barnaamijyada horrumarinta deegaanka oo la tego kadibna la dhiiri galiyo dadka ka qayb qaadanaya.
   - X. Dhammaantood waa sax.
4. Barnaamijyada horrumarinta deegaanka ee urur shicib ah fulinayo marxalad xubnaha ururka looga baahanyahay in ay si firfircoon bulshada uga soo qayb gashaan waa marxaladee?
   - B. Marka qorshaha la dejinayo
   - T. Marka qorshaha la fulinayo.
   - J. Marka la qiimaynayo dhaqan galinti qorshaha.
   - X. Dhammaantood waa sax.
5. Barnaamij ka mid ah kuwa horrumarinta deegaanka oo ay lagama maar maan tahay ka qayb qaadashada bulshadu ugu yaraan waxyaabaha ay qaban karaaan mid ka mid ah waxaa uu yahay______________.
   - B.
   - T. Tirada dadka ka qayb galaya oo la badiyo.
   - J. Shaqada oo la fuliyo kali ah ma ahee waa in ay noqoto mid midho dhal ahamanatiijo wanaagsan lagagaadho.
   - X. Dhammaantood waa sax.

## IV. Meelaha banaan ee soo socda ku buuxiya erayada ama weedhaha saxda ah.

1. Bulshada rayadka ah dhexdeeda ururka dardar galiyaamaxoojiya ka qayb galka firfircoon ee bulshada kana madax banaan dawlada waxaa loogu yeedhee___________________________________.
2. Si loo xaqiijiyo joogtaynta barnaamijyada horrumarinta deegaanka bulshadana looga baahanyahay in ay si firfircoon uga qayb galaan shaqada waa in loo daayo ________________ oo kali ah .

CUTUBKA 11

# BAADI GOOBKA XIKMADA AQOONTA

Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Dareemaan in aqoontu asaas u tahay barnaamijyada horrumarinta, cilmi-baadhista iyo hal-abuurka ama in waxyaabo cusub la abbuuro.
- Fahmaan xogtu ama warbixinta caddaynta ah muhiiada iyo faa'iidada ay leedahay.
- Gartaan hababka ama tabaha xogaha loo kaydsado loona isticmaalo iyo illaha laga helo xogaha caddaymaha ah.


## 11.1. Muhiimada Uu Leeyahay Cilmiga Saynisku



Jaantuska 11.1. Cilmi baadhis ( sheybaadh)



Jaantuska11.2. C/baadhista dhaxalka



Jaantuska11.3 Gabadh Macalimad ah oo arday wax bara ysa



Jaantuska 11.4. Gabadh ardayad ah oo jawabeysa

Sawiradan korka ku xussan maxaad ka fahmaysaan.

- Sawirka muujinaya qofka shaybaadh dhexdiisa ku jira idinka sheegaya aragtida ku saabsan cilmisayniska? ( Aragtid cilmisay nis ahaaneed ee qofka shaybaadha ku jira idiin muujinayo waa maxay?).

### Shinbirta FIIDMEERTA

Bari hore goob ama deegaan ay ku noolayd shimbirta la yidhaahdo fiid-meer ayaa waxaa ku dhacday abaar iyo macaluul aad u daran. Shimbirihii iyo xayawaanadi kale ee deegaanka ku noolaa oo dhan waxaa si xun u taabtay macaluushi ama gaajadi ka dhacday goobta. Si la isaga difaaco ama illaaliyo macaluusha waxay bilaabeen in ay kuwa wax haysta ka sii daynsadaan waxyaabo ay cunaan kadibna mustaqbalka ama xiliga laga baxo macaluusha dib ugu celiyaan daynkii ay qaateen. Shimbiraha daynka qaadanaya mid ka mid ah ayaa ahayd shimbirta "Fiid-meerta" shimbiro kala duwan ayay cunto badan ka daynsan jirtay. Marki ay dhaafeen maalintii ama xiligi macaluusha xun soo foodsaartay laakiin shimbirihii kale oo dhan wixii amaah lagu lahaa oo dhan way iska bixiyeen. Laakiin shimbirti fiid-meerta ahayd waxyaabihi ay amaahatay islamarkaana ay cuntay in ay iska bixiso way awoodi weyday.

Ugu dambaynti shimbirihii cuntada dayminamaAmaahin jiray dhammaantood waxay bilaabeen in ay raadiyaan shimbirti fiid-meerta ahayd si ay uga qaataan cuntadi ay amaahiyeen. Fiid-meerti laakiin waxay go'aan ku gaadhay in ay dhuumato kadibna baxsato . Sida

darateed, sida shimbiraha kale ay maalinti ula duuliamalaliamajirtay way joojisay kadibna si ay cunto u raadsato waxaa qasab ku noqotay in ay duusho magacdaray ama loogu bixiyey magaca fiid-meer.

( waxaa laga helay taariikhaha afka laga sheego ee aan qornayn).

## Hawl-galka 1aad

Idinka oo ku salanaya sheekada korka ku xusan su'aalahan soo socda ka jawabaa.

1. Qoraalka ku saabsan "shimbirta fiidmeerta ah" ma mid xaalad dhab ah ama run ah laga soo diyaariyeyamalaga sammeeyey kadibna la soo bandhigayba? sabab?
2. Su'aasha hore qodobka koobaad ee jawaabta aad bixiseen idinka oo ka dhaqaaqaya maadaama ayna ahayn aragti cilmi saynis ah maxaad ka fahmaysaan?

## Geela

Geelu wuu ka weynyahay farsaka. Qaab ahaanamamuuqaal ahaanamaxubno-ahaano xayawaanada kale dheereramajoog u gaar ah ama ka duwan ayuu leeyahay. Marka la rarayo iyo marka rarka laga furayana wuu kambaadhuudhsadaamakada loobsada. Xiliga uu damco in uu istaagoamakor u kaco labada lugood ee dambe ayuu kor u qaada. Iyada oo qof ama dad saaranyahayamafuushanyahay marka uu kaco qofka haddii uu si wanaagsan u qabsanin ama u xajisanin waxaa dhici karta in uu dhanka hore ee madaxiisa ku soo dhaco. Maadaama geelu aad u xoog badanyahay wuxuu dhabarka ku qaadi karaa alaab culus ama aad u badan.

Bariga dalka hindiya ( ) idalalka carabta, Afrika, gaar ahaana dalalka saxaaraha ah ayuu geelu waxtar weyn ku leeyahay . Wuxuu awood u leeyahay in uu biyo la'aan ama wax biyo ah cabinamau baahanin socdaal ku jiro afar illaa iyo shan maal-mood . Qaar kooban ayaa abuur ahaan ama hido-ahaan dhabarka ku leh tuur kali ah ; halka kuwo kalena leeyihiin labo tuurood ama kurusharci Geelu isaga oo aan cunto cunin haddii uu fadhiyo maal-mo, maaliba maalinta ka dambaysa kurisku wuu sii naaqusma ama sii yaraada. Haddii uuna xata cuntaba cunin kuruska ayaa cunto u noqonaya sida darteedna gaajo ma qabanayso weeyaan macnuhu.



Sawir 11.5 Geel

Lugaha geelu way waa weynyihiin, bal-ballaadhan yihiin waxaana isku-hayaamaku dhajisan harag buuran ama qaro weyn leh. Caguhu waxay u fudaydiyaan in meelaha saxaaraha ah ee leh cadaadka ama habaaska si sahlan ugu tallaabsado. Geelu marka uu na garab socdo ama na dhaafayo iskuma amino. Sanka geelu wuxuu leeyahay jeex ama in yar oo dhuubanbu faruuranyahay sida

darteedna si sahlan ayuu u furmi karaa una xidhmi karaa. Inta uu cadaadka ka dhex nuugo hawada islamarkaana jiibsado iskuna xidhoamadaboolo sanka ayuu cadaadka isku-dhex aasaamaqariya. Sanku meel fog in uu biyaha ka uriyo ayaa ka caawiya. Mararka qaar marka jidadku xumaadaan ama la gooyo meelo gaaban intu ka wareego ayuu gaadhaa goobta biyaha leh. Xaaladu marka ay sidan tahay dadka safarka ah in ay si sahlan goobaha biyaha leh ugaadhaan ayuu ka caawiya.

## Hawl-galka 2aad

Su'aalahan soo socda ka wada hadla.

1. Qoraalkan ku saabsan geela qofka qoraaga ah ee noo soo diyaariyey waxyaabahanamawararkan ama fikradahan uu noo sheegayo in ay run yihiin iyo in kale ma la hubin karaabaad leedihiin? sidee?
2. Idinka oo ku salaynaya ama ka dhaqaaqaya xaaladaha illaa iyo hada aad ka soo fikirayseenamabaraandegayseen marka la soo qaado aragtida cilmi saynis ahaaneed maxaad fahamtiin? kooxo isku qaybiyaaa kadibna ka wada hadlaamaxaajooda. Fikradaamago'aanka ama waxyaabaha aad islagarataan kuna soo gunaanadaan wada hadalka u soo bandhiga ardeyda fasalka intooda kale.

Ka faa'iidaysiga aqoontu in ay tahay dabeecad abbuur ah oo dadku leeyahay waa la wdada garanaya . Marka hadaba la raadinayo aqoon ama cilmi waxay leedahay geedi-socod ama nidaam ay ku salaysantahay kuna socoto oo ah aragti cilmisaynis ama faham ama aragtida qofka cilmiga raadinaya uuamaay ka qaboamaqabto waxaa uu yahay cilmisaynisku aragtidaamafikradaha saynis ahaaneed: fikirka ama aragtida aan shakhsi-ahaanteena ka haysanoamasida aan isku-aragno, fahamka ama dareenka aynu ka qabno deegaanadeena iyo ujeedo ku salaysan oo faham dhab ah iyoamaaqon weeyaan.

Aragtidan aynu soo sheegnayna warar ka ama warbixinada aynu siyaabaha kala duwan u helno baaxadooda iyo gun dheeridooda kolba inta ay le'egyihiinamagaadhsiisanyihiin ayey ku xidhan tahay . Marka sidan la leeyahay waxaa loo jeeda cimrigeena, khibradaha ama waayo aragnimadeena iyo kolba heerka wdaxbarashadeenu gaadhsiisantahay xogoamawarbixino aynu ku helno ku salaysan oo ah hanti dareen ahaaneed ayaa la yidhaahdaa aqoonamacilmi weeyaan macnaheedu. Haddii aynu si kale u dhigno hadalka aragtida saynis ahaaneed ee aynu qabno in ay tahay mid adag ama dhab ah oo lagu kalsoonaan karo iyo in kale waxaa lagu qiimayn karaa kolba caddaymahaamawarbixinada lagu xoojinayo dhabamarun ahaantooda iyo kolba sida ficil loogu muujinamabedeli karo ayaa lagu miisaamaya ama lagu xaqiijinaya. Kolba sida loogu kalsoonaan karo warbixinada ama xogaha lagu caddaynayo iyo sida loo dhaqan galin karo ayey ku xidhan tahay.

Aqoonamacilmi badan oo aynu yeelano wuxuu noo fudaydinaya in aynu go'aano sax ahamalagu kalsoonaan karo gaadhno; kartideena hal abuurnimo oo aynu sii kobcino, barnaamijyada horrumarineed oo aynu dedejino iyo in aynu isku-filnaansho gaadhno ---lwm waxay ka mid yihiin faa'iidooyinka kale ee aqoontuamacilmigu leeyahay . Qof haddii uuamaay hal mawduuc iyo waxyaabaha la xidhiidhaa aqoon weynamaaad u ballaadhan u yeesho ama u yeelato in uuamaay mawduucaa isaga ah go'aano waxtar leh ama la taaban karo ka gaadho dhib kuma yeelanayso

ama kuma adkaanayso . Tusaale ahaan, sawirka korka ka muuqda ee guriga shaybaadhka dhexdiisa gabadha cilmi baadhista sammaynaysa marka ay kemiko kala duwan siyaabo cilmi saynis ahaaneed u kala furfurto ama u kala saarto kadib; kemikooyinkana u habbaysoamau diyaariso nidaam daawo ahaan loogu adeegsan karo ama sabuun sidii looga sammaysan lahaa u soo bandhigto ama in waxyaabaha midkoodna laga sammayn karaaynin si sahlan go'aan uga soo saari karto.

Aqoonta oo la jarabo lana darso khibradaamacilmiga ay kobcinayso ka sokow, in uuamaay shaqooyin kala duwan si firfircoonaan iyo is-xilqaan leh ugu hawl galoamagasho maadaama ay ku dhiirigalinayso, dad ku inta ay dhaafaan ka faa'iidaysiga ama isticmaalka shaqooyinki kale ee ay qabteen waxyaaboamafikrado cusub ama horay aan loo aqoonin in ay abuuraanamasoo saaraan ayey jid u furta ama ka taageerta.

Tusaale ahaan, qofka aqoon dheeri ah ama buuxda u leh xirfada muhandisnimada, Adeegsigaamaisticmaalka qorshaha dadku u dejisteen garahooda ka sokow, waxay awood u leeyihiin in ay abbuuraan ama sammeeyaan qorsheyaal iyaga ugaar ah oo ay u sammeeyeen guryo cusub. Dal dadkiisku wuxuu horrumar fiican ama dhab ah gaadhsiinkaraa marka ay sida ugu gaadhsiinkaraa marka ay sida ugu dwanaagsan wax ugu bartaan ama bulshada ku dhaqani cilmi dhammaystiran u barato. Marka la leeyahay muwaadiniintu aqoon heer sare ah ayey yeesheen: fikrado cusub ayaa la soo saaray, waayo aragnimoamakhibrado dadka noloshoda ay kor ugu qaadi karaaan ayaa la soo saaray iyo waliba muwaadin galeen weeyaan macnaheeda. Tiknoolojigaygu wuu koray: Tiknooloojigu marka uu xoogaystana farsamooyinka wax soo saarka ayaa badanaya. Si aan shiki ku jirin ayuu wax soo saarkaygu u kocaya --lwm ayaa la odhan karaaa.

### Hawl-galka 3aad

Cinwaanadan soo socda mida cilmi saynis ahaan loo aqbali karo waa midee? waa maxay sababta aad saynis ahaan ugu aqbasheen ? qodob kasta sida uu yahay idinka oo u fiirinaya soo bandhiga sababaha .

1. Dayaxu waa xubin ama waax aan iftiin ugaar ah lahayn.
2. Dunida aynu ku nool nahay goobo (wareeg) ma aha laakiin waa wax fidsan .
3. Si looga hortegoamala iskaga illaaliyo xanuunka Ayda laga qaado waa in dabagal lagu sammeeyo ayda islamarkaana taktaalamadaawo ka hor teg'ah la siiiyo.
4. Hilaacu waa rasaas illahay ku ganaysi uu u dilo shaydaanka.

## 11.2. Illaha laga hello Xogaha Warbixinada ah iyo Siyaabaha loo Adeegsado

### 11.2.1. Wararka Xogaha ah halkee laga helaa?



Jaantuska 11.6. Ilaha Wararka

- Taswiiraha aad korka ku arkaysiin wdax tusaale ah oo la xidhiidhaa warbixinada caddaymaha ah ma idin siinayaan? maxaa ka mid ah?

- Haddii aynu isnidhaahno illahan warar ka sida ay u kala waxtar badan yihiin ay han u soo kala hor dhigno, midee ugu soo horaynaysa? mideese ku xigaysa? Ta ugu dambaynaysase waa tee? ayaad odhan lahaydeen? maxayse tahay sababta aad sidaa ugu soo kala hor dhigteen?

Ugu horrayn waxaa jira hal qodob oo lagama maar -maan ah in aynu. Marka aynu nidhaahno warbixin ma aha in aynu u fahamno wax yar oo kooban. Waxaan u baahanahay warbixino ku filan oo cadaymo u ah waxbarashaddiiina ama buug qoran oo tilmaamaya waxbarashaddiiina. Warbixin ama xog ka warbixinaysa waxbarashaddiina ayaan u baahanay weeyaan ujeedadu. Marka aynu rabno in aan ogaano goortaamaxiliga dugsiga la furayo, maado walba waxyaabaha aynu ka baran doono, wakhtiga imtixaanka la qaadi doono, warbixino cadaynaya ama tilmaamaya waxyaabaha aynu soo sheegnay ayaan u baahanahay in aynu helno. Xaalada cilmilada ee deegaankeena, gobalkeena iyo waliba dalkeena xaaladahiisa siyaasadeed, dhaqaale iyo dhaqdhaqaayada bulshada dhammaantoodba waxaa lagama maar-maan ah in aynu helno warbixino ama warar dhammaystiran oo ka xog waramaya waxyaabahan aynu soo sheegnay oo dhan. Sido kale waxaa adeegsan karna tilifoon, raadiyoon, jaraa'idadaamawargaysyada, tilifishinada, iyo cajalado fiidiyoo ah oo aynu fiirsano. Warbixino ballaadhan, baaxad iyo qoto dheer si aynu helno waxaa si weyn innooga caawinaya buugta dabaacan ee waxbarashada kala duwan. Sidaa darteedna waxaa loo baahanyahay in aynu tegno meelaha buugta lagu kaydsho ee labareeriyada ah kadibna akhrismo buugta kala duwan.

Wararka aynu u baahano in aan helno waxaan ku heli karna inaga oo shakhsi ahaanteena istijaabinayna islamarkaana wararka dhismaha waxbarashada , qoraalada kala duwan ee la akhrisan karo; raadiyoonka iyo tilifishinada iyo waliba dad aynu waraysano, ayaan ka soo ururdone karna wararka aan u baahan nahay. Haddii aynu si kooban u dhigno : Fikradaha, aragtida ama fahamka aynu ka haysano cilmisayniska waxaa aynu adeegsan karna shanta dareemayaal ee qofka bini adamku leeyahay iyo waliba kuwo kale oo si wanaagsan ama sax ah loo dhigo ama daraasad cilmibaadhis ah oo aynu adeegsano waxaa aynu heli karna warar run ah laguna kalsoonaan karo. Wararka aan laf-ahaanteenu isku-tijaabinay ee aan ururkanay aya inta badan ah ka rasmiga ah.Hase-yeeshee wararka aynu iskeen u ururkanay waxaad aad uga habboon ugana waxtar badan warbixinada aynu ka helno dugsiyada ama dugsiyadu na siiyaaan laba sababood ayaana keenay. Waxayna kala yihiin sidan soo socota:

1. Maadaama barayaasha dugsiyadu khibradahooda shaqo si buuxda u kobciyaan waxbixinada ay bixiyaan waxay noqonayaan kuwo habboon islamarkaana rasmi ah.
2. Maadaama cashirada ay bixiyaan ay ku saleeyaan da'da, aqoonta iyo nolol maal-meedka ardeyda warbixinta ay siiyaaanamalaga helo waxay noqonaysaa mid dhab ah islamarkaana tayo leh. Sido oo kale iyaga oo ku salaynaya kolba warka la rabo waxaa uu yahay waxay ka soo diyaarinayaan buugta la xidhiidhaa ee dabaacan kadibna way soo bandhigayaan. Haddii aynu si kale u dhigno maadaama barayaashu mar walba aqoontooda kor u qaadaan islamarkaana diyaarsadaan casharo ku salaysan da'da ama awoodda, aqoonta iyo nolol maal-meedkooda,

waxay leeyihiin khibrado wanaagsan oo ay ku bixiyaan warar dhab ah oo lagu kalsoonyahay islamarkaana ka hufan buun-buumis iyo maalo awaal. Si kastaba ha ahaatee, wararka dugsiga ku saabsan waa in mudnaan ku filan ama ku habboon la siiiyo.

### 11.2.2. Warbixinada Sidee Loo Adeegsadaa?

- Wararka maalin walba la helo ama aad heshaan sideed u kaydsataan ama u haysateen?
- Wararka aad siyaabo kala duwan xasuus ahaan ugu haysataan sideed u isticmaashiin ama uga faa'iidaystiin?

Hadalada xaadirka ah: << wararku waa nolol>> odhaahda tidhaahda dhaqanadina ma ku jirtaamadhaqan ma u leedihiin: ujeedo ama sabab la'aan looma odhan . Waxay muujinaysa in noloshan xaadirka ah qofka ku nool wararku aad muhiim ugu yihiin. Sababta oo ah xiligan dad ku nool meelo aad u kala fog iyo xaalado aad u kala gedisan ayaa hadana noloshoodu midba midka kale ku xidhan tahay. Xaaladaha iyo goobaha kale fog ee lagu noolyahay qofna kaligi uma noolaan karo tusaale. Itoobiya iyo dalka shinuhu waa laba dal oo aad u kala fog oo ka tirsan wadanada dunida. Laakiin ganacsiga, siyaasada, arrimaha bulshada iyo xidhiidhka dhaqaale ay leeyihiin ama u dhexeeya waa in ay si wada jir ah uga wada shaqeeyaan, waana shaqadooda.

Hase yeeshee, si aynu nolosheena kor ugu qaadno islamarkaana u noqono muwaadiniin wanaagsan waxaa lagama maar-maan ah in aynu si joogto ah isku-weydaarsano wararka malin walba aynu helno. Si aynu u helno xoriyada ama xuquuqaheena bini adamnimo dalkana horrumar la taaban karo ugaadhsiino waa in aynu helno warar buuxa ama dhab ah kadibna kolba sida uu yahay uga faa'iidaysano.

Hase-yeeshee warbixino la helo oo kali ah naguma filna. Waxaa jira arrimo guud oo dhan saddex lana xidhiidhaa wararka aynu helno islamarkaana lagama maar-maanka ah in laga digtoonaado. Arrinta koobaad warkasta oo aynu helno in sanad-ahaan loo ururiyo weeyaan. Tusaale idinka ardeyda dugiina wax ka barata oo dhan intaad u kala saarteen lab iyo dhaddiig, da'ahaan iyo darajo ay waxbarashada kaga jiraan ma duwaan galiseen? xaalada cilmilada deeganadiinase miyad la socotiin islamarkaana duwaan galisiin? . Qoysahaan iyo shakhsi ahaan xaaladihiina caafimaad sida ay yihiin xili kasta wax xasuus ah ma kala hadhiin ama ma ka reeba taan? waxyaabahan oo dhan in ay yihiin warar waxtar badan ama lagama-maar-maan yihiin ha illoobina.

Arrinta ama qodobka labaad ee muhiimka ah waxaa weeye: marka aynu qaadanayno ama urursanayo wararka waa in aynu hubino ama xaqiijino illaha aynu ka helnay wararka in ay yihiin muhiim ama kuwo sax ah ama lagu kalsoonaan karo . Tusaale ahaan: Haddii aynu rabnoamau baahano in aynu ogaano sida ay tahay xaaladaha cimilada gobaladeena ee xiliga aynu joogno, wdaxaa muhiim ah in aynu la xidhiidhno waaxda ama xafiisyada u qaabilsan saadaasha hawada . Shakhsiyaad haddiii ay si malo-awaal ah u yidhaahdaaan " waa lagayaaba in uu da'o looma baahna ama ma'aha wax suurto gal ah in aynu rummaysano islamarkaana amino.

Haddii ay xataa tahay waxbarashaddiiina marka aynu akhrisanayno buugta waa in aynu xaqiijino ama hubino in barayaal aqoon iyo khibrad wanaagsan u leh in ay qoreen iyo in kale. Sababta oo ah shakhsiyaadka qaarkood iyaga oo ujeedadoodu tahay in ay ka ganacsadaan ama mudnaanta siinaya lacagta shaqooyinka ay noo daabaacaan aqoon ama cilmi habboon

kama helayno. Arrinta saddexaad wuxuu ku saabsan yahay wararka aynu helno in aynu sida ugu habboon u kaydsano islamarkaana u adeegsano shaqada. Haddii wararku yihiin kuwo aan dadaaladeena gaar ahaaneed ama kuwa kalaba, wararka naloo soo gudbiyo nidaam ama hab wanaagsan oo leh anshax in aynu u qaadano islamarkaana uga faa'iidaysano ayaa loo baahanyahay . Wararku haddii ay yihiin kuwo sir ahaan in loo haysto loogu talagalayna waa in aynu noqono dad la amini karo islamarkaana illaaliya siraha ama aan bixinin siraha . Maadaama ay suurto gal tahay in ay dad kale xadaan, haleeyaan ama khasaariyaan waa in aynu si habboon u dhigno una xafidno .

Haddii wararku ay yihiin kuwa aynu waraysi ku ururinaya talo ahaan waxaa habboon in codka la duubo ama cajalad fiidiyoo ah lagu duubto islamarkaana meel habboon lagu kaydiyo. Hase yeeshee ardey daacad ah islamarkaana ah ardey si fiican wax u barta ama xariif ah wararka laga ururiyoamadiyaariyo iyo kuwa kaleba waa in la siiiyo mudnaan aad u saraysa.

### Hawl-galka 4aad

Su'aalaha soo socda jawaab ku habboon siiyaa.

1. Wararka illaha laga heli karo kuway ama maxay noqon karaaan? goobaha wararka ugu badanamafiican laga heli karose waa kuwa halkee ?
2. foojignaanta ama taxadarka loo baahanyahay in aynu la nimaadno ee barbar socda diyaarintaamahelida wararka maxay yihiin?
3. Waa maxay sababaha warku lagama-maarmaan ugu noqday nolol-maalmeedka xaadirka ah ee hada dadku ku noolyahay?

## 11.3. Aragtida dib-udhaca ah iyo odhaahyada rejo-xumada.

### 11.3.1. Odhaahyada deegaanka lagaga hadlo ee dib u dhacanimada iyo rejo-xumada muujiya.

- Qofka wuxuu leeyahay firkrado ama aragtiyo dib u dhacnimo marka aynu leenahay maxaan u jeedna?
- Goobaha aad ku nooshihiin ma jiraan dad aad isleedihiin waxay leeyihiin aragtiyo dib u dhacnimo ? Fikradaha ama aragtiyada dib u dhacnimo ee dadkaasi leeyihiin waxyaabo sidee ah ayey ku tacaluqaan ama ku saabsan yihiin ?

#### Aw-Xasan Cilmi iyo Hooyo Giniyo.

Aw-Xasan Cilmi iyo xaaskiisa hooyo Giniyo qof ama nin ay aminsanayeen in uu ka soo jeedo qabiil ama beel aan laandheere ahayn ayaa soo doonay gabadhooda kadibna weydiistay in ay siiyaaanamau dhisaan. Iskadaa in ay siiyaaana weydiisiga uu weydiistay gabadhooda ayeyba u arkeen sharaf dhac ama meel kaga dhac islamarkaana aad bay uga murugoodeen.

" sharaf-dhacnayey, dhego-dammeeraad baan ku maqalnay" ayey yidhaahdeen ree-Aw-Xasan .

" Maantana maxaad maqashay Aw-Xasanow?" ayey ku tidhi xaaskiisi.

"Kii juqunka ahaa ee lafoole ayaa gabadh ayda shamis baryay"

" Lafoole waa ina ayo, abihi waa kee?"

" Aabihii haddiii uu aniga iyo adigaba na bartay wuu nasiib badan yahay"

" Waa gaf ama xadgudub aad u weyn " ayuu ugu

jawaabay xaaskiisi Giniyo isaga oo cadhoonaya.

Marka kalena Aw xasan wuxuu yidhi : " oo ma ogtahay cilmi loofle gabadhaada isii in uu igu yidhi Giniyeey"

" Ee Aw-Xasan waa ina ayo ? "

" Aabihi qof ma aha; waa beero qodato"

" Waa maxay sideen u maqli waayey waan dhintaye " iyada oo leh ayey Giniyo is ciilbaday.



Jaantuska 11.7. Oday"70" jir ah iyo islaan "50" jir ah oo wada hadlaya.

<< Cilmi lafoole odayaal inta uu ii soo diray ayuu igu yidhi i sii gabadhaada; waa cajiib, aduunyada intaad nooshahay wax walba waad maqli ---

<< Waa ina ayo? >> ayey Giniyo weydii say saygeeda.

<< Aabihi wuxuu ahaa oday leh l'o badan, bila edeb ah islamarkaana aha ree-baadiye . Isagu intu dhaxlay xoolihi oo dhan kadibna u dhintay. Isaga oo moodaya in uu dadka la midyahay ayuu calooshiisa soo buuxiyey islamarkaana bilaabay in uu gabadhayadana baryo.

<< Ha ina baryo; sidi wax dalkan lagu xidh-xidhay waxaan kari weyn ay in aynu isaga baxno kadibna waxaan noqonay jidadka dadka ree-miyiga ah ay ka baxaan---iyada oo leh Giniyo ayey ku calaacalaysay.

<< Hadaba dadkan gabadhayda maan siya? Gabadha leenin; gilawdhoos gabadhiisa beera qodato; ganacsato maan-siiyaa? Haddii ay na arkin. In ayna i maqlin lafahoodu ima cananan ayaan? iguma gacan sayrayaan? -- Ayuu Aw-Xasan ku cartamay.

<< Odhaygu an siino haddii uu yidhaahdo aniga dhimashada ayaan ka dooranaya . Inta ay gabadhaydu guursanayso qofkan oo kale islamarkaana xummayn lahayd beesha waxaa dhaanta iyada oo weyda nin u dhigma kadibna sida ku guur weyda sharafteedu in ay sii biirto mooyaane marna ma naaqusmayso.

## Hawl-galka 5aad

Idinka oo ku salaynaya sheeko an korka aynu ku soo marnay su'aalahan soo socda jawaabo ku habboon ka bixiya.

1. Hadalada ay isweydaarsanayaan dadka sheekada ka qayb qaadanaya kuwa xambaarsan ama muujinaya fikrada oo gaboobay oo dib u dhacnimo waa hadalada? maxayse tahay sababta loogu tilmaamay fikradoamaaragtiyo duugoobay oo hada aan loo baahnayn in ay yihiin?.
2. Fikradahaamaaragtiyada Aw-Xasan iyo xaaskiisa Giniyo gabadha wax xuquuqdeeda ama xoriyadeeda meel kaga dhacaya ma idiinka muuqda? Sidee?
3. Sida ree-Aw -Xasan ay qabaan haddii ay run tahay, dadka bini adamka ah beel ama reer-ahaan way ku kala sareeyaan miyaa la odhan karaaa?

Fikradaha dib u socodnimadu inta badan dhaqa-nadi iyo waxyaabihi la aminsanaan jiray ee

odhaah ahaan iyo ficil ahaanba loo fulin jiray oo jiilba jiilki ka dambeeyey u soo gudbin jiray wax ka hadhay weeyaan. Tani macnaheedu waxaa weeye: awawyaashi ama dadkii jiray xiligi iyaga ka sii horreeyey waxyaabihi la akhrisan jiray iyo waxyaabihi la isku-maamulayey oo ka soo jeeday ama ku salaysna falsafada nolosha ama ku soo socday aragtiyada bulsho -ahaaneed oo laga illaalinayey in ay lumaan ama baaba'aan iyaga oo loo adeegsanayey odhaah ahaan iyo ficil ahaan loo adeegsan jiray oo la soo kala dhaxli jiray weeyaan. Laakiin fikradoamaaragtiyo badan oo xiliga la moodayey in la aqbalay dadka qarniyadi ka dambeeyey jiray maadaama uu ku noqonayo wax cusub ayna baranin in ay ahaayeenba laga yaaba.

Tusaale ahaan odhaahihii ay afka lahaayeen Aw-Xasan iyo Xaaskiisii Giniyo waxay ahaayeen wax ka soo jeeda falsafada noloshi xiligoodi jirtay oo bulshadu ku dhaqmi jirtay islamarkaana run loo haystay. Laakiin marka dareenka dadku sii biiro islamarkaana fikradaha ama aragtiyadu isbedbedallaan, waxaa hubaal ah in aragtiyadi horay u jiray noqonayaan kuwa ay ka buuxaan dib u socodnimo iyo rejo xumo ama xaqiraad. Xiligan hada aynu joogno gabadha qoyskeeda rabitaankooda nin looguma dhisi karo ayaan leenahay. Illaa iyo inta ay waxbarashadeeda ka dhammaysanayso iyo kadib waalidkeeda iyo cid kaliba ma qasbi karto iyadaana iska leh awood ay kaga tashato rabitaankeeda. Xiligan xaadirka ah qabiil la doorto ama lagu dhaqmo meelba laguma gaadhayo. Qof kasta oo ah muwaadiniin u dhashay Itoobiya sharciga hortiisa way simanyihiin . Xirfada iyo aqoontana waa la qadarinaya.

Goobaha aynu ku nool nahay maadaama ay jiraan waxyaabo badan oo dib u socodnimo ah waxaa habboon in aynu aad uga fiirsano. Si aan uga foojignaano islamarkaana u saxno waxaan u baahanahay fursad in aan helno. Waxyaabahan dib u socodka ah ee ka jira agagaarkeena siyaabo badan oo ay u faafaan ayaa jira waxaana ka mid ah sheeko-sheekada, googaalaysiga, kaftanka, waxyaababa kala duwan ee la aminsanyahay ---Iwm. Aragtida ah reerba reer ka laandheeraysan; qofba ka sareeyaamasharaf badan qof kale ayaa illaa iyo hada ama xiligan dad badani aminsanyihiin. Fikrada badan oo xataa shaqada la xidhiidhaa ayaa jira; Tusaale ahaan qabiilo dhawr ah oo kali ah in ay ku habboonyihiin beero qodato ama ganacsato in ay noqdaan, qabiilada laan dheeraha ah laakiin xirfadaha la xidhiidhaa shaqooyinkan aynu soo tilmaamnay in ayna u qalmin ama ay ka sharafbadan yihiin qaar aminsanba jira fikradahan oo dhan kuma salaysna cilmi saynis waxaana habboon in aynu u gudbin jilalka dambe lana tirtiro. Sababta oo ah waxay waxyeelo u gaysanayaan jacaylka iyo isku-filnaanshaha ama isfahamka u dhexeeya qoomiyadaha iyo beelaha kala duwan ee wada dega. Fikradaha xal ahaanta loo adeegsadana waxay xummaynayaan. Waxaa kale oo ay abbuuri karaaan dhibaatooyinka nabad u adeegsadaan aragtiyada dib u socodka ah?

3. Aragtiyadaamafikradaha saynis ahaaneed oo la kobciyo siday nooga caawin karaaan in aynu ka baxno fikradaha dib u socodka ah?

## 11.4 Akhrinta Buugaagta kala duwan

### 11.4.1. Dhaqanka akhrinta oo la yeesho lana xoojiyo.

- Akhrintu waa maxay Tahay ayaad is-leedihiin?

Akhrintuamaakhrisku waa qalabka aqoonta ama cilmiga . Waxyaabaha ay barayaashu noo sheegaan oo kali ah ma aha aqoonta ama cilmiga la barto. Akhrisku waa farsamoamanidaam kale oo aqoon ama cilmi ballaadhan aynu ku kasban karno. Sida darteed, waxaa na looga baahanyahay in aynu yeelano khibrado badan oo la xidhiidhaa akhriska. Akhrisku wuxuu leeyahay cilmi saynis u gaar ah . Waxyaabaha na looga baahanyahay in aynu akhrino ma aha cashirada barayaashu inoo dhigaan. Si aynu u helno aqoon dheeri ah wa ain aynu akhrisano buugta kala duwan haddii ay yihiin kuwa cashirada la xidhiidhaa iyo haddii kaleba. Tusaale ahaan, haddii baraheenu noo dhigo cashiro ku saabsan waxtarkaamafaa'iidada geelu leeyahay inta aan ka bixin fasalka buug kale oo ku saabsan Geela waa in aynu raadsano islamarkaana akhrisano. Sababta oo ah waxaa aynu awood u helayna in aynu helno aqoon buuxda ama faham buuxa oo la xidhiidhaa cashirada barayaasheenu ina baraan.

Waxaa kale oo muhiim ah in aynu akhrisano jaraaidada iyo wargaysyada . Laakiin wakhtiga iyo goobta lagu akhrisanayo in la g'aansado waa lagama-maar-maan . Hase yeeshee, looma baahna in aynu aad iskugu-culaysino kadibna ay nagu adkaato in aan helno fursado buugta kale ama cashiradeena ku akhrisano. Haddii aynu leenahay khibradaha akhrinta ama akhriska goob walba in aynu ku akhrisano waan karaayna. Tusaale Geedaha hoostooda; taksiga iyo basaska la raaco dhexdooda, fadhiga guryaha; Gogosha ama sariirta aynu ku seexano korkeeda iyo meelo kale oo badan in aynu wax ku akhrisano waan karna. Dadka aynu ku tilmaamno aqoonyahano waa weyn islamarkaana caanka ah ee dalkeena iyo dalaalka caalamka ku nool waxay darajooyinka iyo caamnimada ku gaadheen akhris badan oo ay sammeeyeen iyo dhacdooyin ama waxyaaboamaarrimo kala duwan oo daraasado cilmi baadhis ah ku sammeeyeen .

Si kale haddii aynu u dhigno: Maadaama ay si aad u qoto dheer islamarkaana cilmibaadhis badan oo waxyaabo kala duwan ku saabsan soo qsabteen, waxay noqdeen aqoon yahano caalmi ah oo adduunyada iyo dalalka gaar ahaaneedba ka jira lagana yaqaano. Idinkuna si aad magaca iyo sumcada dalkeena kor ugu qaadiin waa in aad hanataan khibradaha akhriska.

**Hawl-galka 6aad**

Su'aalaha soo socda ka wada hadlaamaxaajooda.

1. Akhrisku waa qalabka lagu kasbado aqoonta marka la leeyahay maxaa loo jeeda?
2. Si loo kasbadoamahanto khibradaha akhriska maxaa loo baahanyahay in la sammeeyo?

### 11.4.2. Xeeladaha Casharada loo Darsayo ama loo Akhristo oo la barto

- Idinku sideed cashiradiina u xifdidiinamaakhrisatiin?
- Bal idinka tix-raacayaamaku salaynaya taariikhda soo socota su'aalaha hoos ku xusan ka wada sheekaysta.

***Ismaaciil sida cashirada uu u Akhristo.***

Ardeygala yidhaahdo Ismaacil habeenki wakhti dhee rama saacado badan ayuu akhristaamaxifdiya cashiradiisa. Maalin maalina habbeenka oo dhanbu akhrista cashirada loo soo dhigo . Hase yeeshee " aniga oo sidaa wax u akhrisanaya hadana maxaan natiijo aad u fiican u keeni waayey" , inta uu yidhi ayuu aad u niyad xumaaday habeenki. Ujeedadiisku waxay ahayd in ardeyda ay isku-fasalka yihiin ee ka dhibco sareeya islamarkaana kaalinta koobaad gala in uu la ficiltamo. Laakiinse uma noqon ama kuma guulaysan in uu gaadho sidii uu rabay. Markii dambe laakiin Ismaaciil nidaamki uu cashiradiisa u xifdiyayeyamaakhrisanayey in uu bedelo ayuu go'aansaday. Inta uu iska daayey sidii hore ee uu maalinti saacado badan maado kali ah akhrisan jiray, wuxuu sammaystayamadiyaarsaday qorshe wuxuu bilaabay in maado walba dhawr saacadood oo kali ah xifdiyoamaakhristo.

Sida uu qorshihiisa u diyaarsaday, maadooyinka isaga ku adag oo ay ka mid yihiin maadada xisaabta iyo maadada sayniska ah wakhti badanbu u qoondeeyey . Waxaa waliba intaa dheer maadooyinkan ku adag maalin walba dhawr saacadood in uu akhristo ayuu go'aansaday . Gaar ahaan maadada xisaabta inta uuna ka soo bixin dugsiga ama islamarkaana uu dugsiga ka yimmaado wuxuu bilaaba in uu dhawr jeer dulmaro cashiradi uu soo qaatay waana go'aan ka mid ah kuwa u qorshaysan. Hadaba Ismaaciil farsamadan dambe ee uu qorshaystay wuxuu u horseeday in uu gaadho ujeedooyinki uu horay u beegsan jiray ama ugu taami jiray in uu ku guulaysto hanashadooda. Maadaama islasanadki uu qorshaha dambe adeegsadayba fasalkoodi uu qofka koobaad u baxay aad iyo aad ayuu u farxay.

## Hawl-galka7[aad]

Idinka oo ku salaynaya sheekada aad korka ku soo akhrideena su'aalahan hoos ku xusan jawaabo ku habboon ka bixiya.

1. Siyaabaha Ismaaciil cashiradiisa uu u akhrista maxaad ka baranaysiin?
2. Hal maado intaad ka dooratid maadooyinka kale kadibna aad akhrisatid ama maalinti saacado badan in aad akhrisatid ma waxaad leedihiin natiijo wanaagsanbaan ku gaadhayna? sabab?
3. Faa'iido ma leeyahay qorshaha cashirada la akhristo ee la dejisto? waa maxay faa'iidada uu leeyahay?

Marka aynu ka hadlayno akhriska cashirada waxaa ugu horreeya ee loo baahanyahay in aynu soo qaadano waa faa'iidada ama waxtarka uu leeyahay. Waxtarka ugu muhiimsan ee akhrisku leeyahay maadaama uu yahayamatahay habka aqoon dhaxal gal oo mustaqbalkana anfacaysa aynu ku kasbanoamahanano ayaan mudnaanta koobaad u siinay una soo qaadanay. Qofka aqoon dhab ah oo badan lehna heer wanaagsan ayuu waxbarashada ka gaadhaya. Aqoon taasina naftiisa iyo dalkiisa ayuu sida ugu habboon ugu faa'iidaynaya. Marka aynu leenahay naftiisku ugu faa'iidaynaya waxaan u jeedna waxbarashaddiisa ayuu natiijo wanaagsan ka gaadhaya, wuxuuna heli karaaa shaqo uu dakhli wanaagsan ka helo weeyaan ujeedadayadu. Dhinaca kale wuxuu noqon karaaa dhakhtar, bare aqoonyahan ah, ama qof bulshada hogaamiya oo siyaasi ah adag ah.

## BAADI GOOBKA XIKMADA AQOONTA

Si hadaba aqoon tayo leh oo dhammaystiran loo helo hawsha ugu weyn ee loo baahanyahay in la fuliyo ama la qabto waa in si adag wax loo akhristo loona xafido. Xafidaaduna ma aha in ay noqoto mid bakhtiyaanasiib ah. Laakiin waa in ay noqoto mid qorshe ku salaysan. Marka aan rabno in aan helno aqoon guud iyo warar sida aynu wax u akhriyeyno iyo marka aan akhrisanayno cashirada ama maadooyinka aynu dugsiyada ku barano faraqba u dhexeeya. Marka aan rabno in aan helno aqoon guud ama warbixinoamawarar cusub qasab ma aha in la dejisto farsamooyin kala duwan oo loo akhriyo. Laakiin marka aan cashirada xafidayno waa in aynu qorshe diyaarsano. Waa in aynu waliba ku dhaqano ama adeegsano qorshaha aynu diyaarsanay.

Guud ahaan marka aynu ka hadlayno xafidaada cashirada arrimaha muhiimka ah waa in dhinacyo kala duwan ka fiirino. Inaga oo ku sii socona waxyaabaha aynu xafidaynoamaakhrisanayno aynu u fiirsano waxyaabahan hoos ku xusan.

1. Faa'iidada wakhtiga oo la gartoamafahmo sida barayaasheenu nagula talinayaan marka aynu rabno in aan cashiradeena akhrisanoamaxafidno waxaa lagama-maar maan ah in aynu doorano wakhtiga ugu habboon ee aynu wax akhrisan karo. Tusaale ahaan, waxaa muhiim ah in marka ay luulo nahaysoama aynu daalanahay ama caajisanahay in aynaan wax akhrisan . Hase yeeshee, waxaa wanaagsan in aynu kala soocno wakhtiyadaamasaacadaha hurdayno rasmiga ah ee aynu garano kadibna seexano. Akhriska waa in aynu jawi cusub, wanaagsan fulino. Waa in marka aynu firfircoonahay kuna talagalnay wax akhrisano. Arrin kale oo lagama maar-maan ah in aynu wax ka tilmaamno waa dheerer ka ama wakhtiga aynu wax akhrisano inta uu yahayamadhanyahay . Wakhtiy aad u dheer haddii aynu akhrisano sifiican ayaan cashiradeena u fahmayna in aynu nidhaahno waa khalad.

2. In la yeeshoamala barto la shaqaynta dadka kale. In koox ahaan loo wada akhristo, wada hadloama xaajoodo islamarkaana loo wada doodo in ay wax akhriskaamaxafidaada cashirada aad ugu waxtar badan tahay ayey barayaasheenu inoo sheegayaan: Marka ay saaxiibadeen ina faham siinayaan ama aan fahamsiinayno saaxiibadeen waxaa aynu hananayna aqoon dhab ah islamarkaana faah-faahsan.

3. Goob ku habboon akhriska ama xafidaada cashirada oo la doorto. Haddii aynu si gaar ahaaneed ama rabno in aan kali wax ku akhrisano waxaa habboon in aynu dooranoamahelno goob aan wax shannqadh ah ama rabshad iyo buuq lahayn. sababta oo ah waa in aynu ka fogaano waxyaabo kale oo qalbigeena mashquuliya ama carqalad ku noqda in aan si taxadar leh u xafidno cashiradeena. Marka hadaba aynu xafidayno cashiradeena waxaana lagula talinaya in aan ka dheeraano meelaha sawiradaamataswiiro ku yaalaan ama ur ama waxyaabo kala duwani ka urayaan sababta oo ah waxyaabaha kala duwan ee aad urinayso niyaada ayey kaa baahinayaan. Goobtu waa in ay yeelato intiif ku filan iyo hawo nadiif ah . Labiska aad xidhantahay laftigiisku waa in uu kaa difaaco qabawga ama kulaylka xun ee goobta ka jiri karaa. Kursiga ama shayga aynu ku fadhiisanayno waa in uuna noqonin mid adag, qalaf ah ama jilicsan oo si habboon aan ugu fadhiisan karin.

4. Qorshe la diyaarsado:- Sida wax loo akhrisanayo oo la diyaarsado shaqada xafidaada waxtar aad u badan ayuu leeyahay . Qorshuhu wuxuu inaga caawinaya sidii aynu uga digtoonaan lahayn waxyaabaha carqalad ku noqon karaa akhriska cashiradeena . Waxaa kale

oo uu qorshuhu inoo tilmaamaya cashirka ama maadada u baahan in wakhti badan akhrino ama saacado badan siino. Maadooyinka oo dhan in aan wakhti isku-mid ah u qoondaynoamaakhrino suurto-gal ma noqonayo. Maadaba -maadada ay ka adagtahay waa in aynu wakhti badan u qoondayno . Qorshaha ayaana naga caawinaya in aynu sidan wax u akhrisano.

5. TallaabooyinkaamaGeedi-socodka wakhtiga wax akhriska oo la fahmo.

Akhriska dulmarka ah: Ugu horrayn marka aynu bilaabayno akhriska si deg-deg ah ayaan u dulmarayna qodobada guud ee cashirku ama maadadu ka kooban tahay. Si deg-degh ah ayaan ishaamaindhaha u dulmarinayna qodobada muhiimka ah ee maadada aynu xafidayno. Farsamadani waxay tilmaan naga siinaysa qalabyada aynu ubaahan karno waxaa ay yihiin, waxyaabaha dheeriga ah ee ay tahay in aan soo buuxsano --Iwm.

In su'aalo la isweydiiyo:- Marka aynu indhaha dulmarinayno qodobada ay maadada ka koobantahay, inta aan ku jiro akhrinta cashirkan ama maadadan su'aashan waa in aan jawaab ku habboon u helo tidhaahdid kana dhigatid bartaamahalka aad ka dhaqaaqaysid. Jawaab intee le'eg marka aan ka bixiyo ayaan akhriska soo gabagabaynaya.

Akhriska oo la galoamabilaabo:- Hada shaqadi akhriskaamaxafidaada ee ugu muhiimsanayd ayaan galnay. Waa darajada ama marxalada nuxurada kala gadisan, tilmaamaha iyo tusaalooyinka falan qaynaynaynay. Waa in aynu isku-dayno in aan fahamno, ka baraandegno qodobada muhiimada ay xambaarsanyihiin .

In la fiiriyo meelaha ficilka lagu muujin karaaamafal ahaan in loo qabto loogu talagalay .

Qodobada muhiimka marka la fahmo waa in laga fikiro siyaabaha nolosheena loogu adeegsan karo ayaa loo baahanyahay . Tusaale ahaan cashirada ama maadada aynu xafidayno haddii ay ku saabsantahay Geedka bunka ah si aan u helno dakhli wanaagsan saynis ahaan sida bun tayo leh u saari karno waa in aynu ka fikirno, Si aynu u qiimayno heerka uu fahamkeena gaadhsiisanyahay waa in aynu miisaano awoodda aynu u leenahay in aan ficil ku bedelno waxaa aan fahamanay.

## Hawl-galka 8aad

Su'aalaha soo socda ka jawaaba.

1. Geedi socodka waxbarashada akhriska kaalinta uu ku leeyahay waa maxay bad leedihiin?
2. Si loo akhristo ma qasaba in meelo dhawr ah uun la go'aansado lana doorto? Sidee?
3. Akhriska dhexdiisa marka la leeyahay faa'iidada wakhtiga waa in la garto maxaa loo jeeda?
4. Illaa iyo maanta waxyaabo ka baxsan waxbarashaddiiina oo aad akhrideen ma garanaysiin? Haddii aad akhrideense maxaad faa'iidooyinka hesheen?
5. Xiliyada aad wax akhrisanaysiin marxaladahan soo socda marka aad maraysan maxaa la idinka baahna in aad sammaysaan?

B. Akhriska indhaha deg-deg loo dulmariyo.

T. Su'aal aad isweydiiso ( su'aal isweydiin).

J. In la fiiriyo meelaha la adeegsan karo ama nolol-maal-meedka loo adeegs

## Gabagabada Cutubka Kow iyo Tobnaad

Fikradahaamaaragtida saynis ahaaneed ama la xidhiidhaa cilmi-sayniska waxaa laga helaa waxbarashada dugsiyada, akhriska buugta kala duwan ee daabacan, daraasado cilmibaadhis ah oo la sammeeyo--Iwm. Fikradaha saynisku waa alada ugu muhiimsan ee aynu ku horrumarin karno shakhsi ahaanteena iyo deegaanadeenaba. Wararka malo-awaalka ah ama dhaqanadaamadabeecadaha aan cilmi ku salaysnayn ee dadka qaarkood caadaystaan iyo waliba aragtiyada dib u socodka ah waxaa habboon in laga digtoonaado laguna dadaalo sidii looga tirtiri-lahaa bulshadeena islamarkaana kuwo wanaagsan rejo fiican iyo horrumar la taaban karo u horseeda lagu abbuuro. Looma baahna in la iska dhaadhiciyo fikradaha cawaanimada iyo dib u socodnimada ku salaysan kadibna lagu dhaqmo.

Tusaale ahaan, waa jaahilnimo in la amino reer ama beelba beel kale ka laan dheeraysan, ardeyda aan isku-fasalka nahay aniga ayaa ugu firfircoon ama ugu xariifsan , aniga ugu liita, kana laangaab ah, kana laan dheere ah , si kasta oo aan u dadaalo una xafido cashirada marnaba kaalin fiican kama galayo ama natiijo fiican ma keenayo, raga ayaa ka aqoon badan, ka garaad fiican dumarka . Waxbarashada gabdhuhu faa'iido ma laha, --Iwm.Haddii aynu leenahay ama aminsanahay fikradahan oo kale si kasta oo aynu u dadaalo waxaa adkaanaysa in aan lafaheena iyo dalkeenaba isbedel horrumarineed oo lagu dhiiran karo u horseedno. Akhrisku waa nidaan aynu ku hanan karo aqoon ama cilmi dhab ah oo dalkeena iyo dadkeenaba horumar iyo barwaaqo ku gaadhsiin karno. Akhriska cashiradeena si aan natiijo wanaagsan uga gaadhno waa in uu noqdo wax qorshaysan lehna himilooyinamaujeedooyin cayimaan oo la hiigsanayo. In aynu helno ama raadsano waxyaabaha inoo fudaydin karaa akhriska cashiraduna waxtar weynbay noo leeyihiin .

Mar kasta oo aynu wax akhrisano ama dhammaystirno xafidaada cashirada . Waa in aynu miisaano aqoonta aynu ka baranay islamarkaana u adeegsano nolol maal-meedkeena, marka aynu sidan sammayno waxaan awood u heli karna in aan aqoonta iyo cilmiyada aan barano ficil ku muujino uguna adeegsano kobcinta xaalad nololeedka bulshadeena.Q

## Layliska Guud ee Cutubka 11aad

I. Weedhaha soo socda tii run ah ku qor "Run" tii been ahna ku qor "Been" waa in ay ku salaysnaadaan sheekooyinka korka aynu ku soo marnay.

1. Aragtiyadaamafikradaha dib u socodka ah ta ugu horraysa waa rejo xumoamayasid ama isqaaliyeyn.
2. Cilmi-sayniska iyo aqoontu marka ay sii biirta ba fikradaha islaweynida ama xaqiraada ku salaysanina way barbar socdaan.
3. In nolosha si ka fiicanamadhaanta sidii hore loo maamulo waxaa lagama-maar maan ah in la helo aqoon saynis ah .
4. Akhrisku wuxuu dhisa ama kobciya sumcada aynu ku leenahay fasalada dhexdooda.
5. Looma baahna in maado kali ah saacado badan la akhristo.

II. Qaybta "B" iyo qaybta "T" kolba sida iskugu habboon yihiin iskugu aadiya.

| "B" | "T" |
|---|---|
| 1. Shayga ama waxaa ugu horreeya ee fikradaha saynis ahaaneed ka soo asaasmaan. | B. Waxbarashadu gabdhuhu dadka oo dhan bay waxtar u leedahay. |
| 2. Faa'iidada akhriska deg-deg indhaha loo mariyo cashirka | T. Waa shaqo lagu garto aqoonta rasmiga ah ee waxbarashadu xambaarsan tahay |
| 3. Qorshaha xafidaada akhriska cashirada | J. Wuxuu gacan ka gaysta in nuxurka cashirka la fahmo. |
| 4. In indhaha si deg-deg ah loo dul mariyo cashirada. | X. Wuxuu naga caawiya sidii aan wakhtiga xafidadda si habboon uga faa'iidaysan lahayn |
| | Kh. Hab ama farsamo naga caawisa in aan si foojigan ama taxadar leh u akhrisano cashiradeena |
| | D. Dugsiga. |

III. Su'aalaha soo socda mid walba jawaabta ku habboon u dooro.

1. Goorma la bedeli karaa fikradaha isla weynidaamayasida ama xaqiraada.
   B. Da'du marka ay qaadato fikradaha saynis ahaaneed .
   T. Marka sayniska iyo tiknoloojiyada xoogaystaan.
   J. Marka dugsiyada la ballaadhiyo.
   X. Dhammaan.
2. Qorshaha akhriska marka loo fiiriyo midkee saxah?
   B. Marka aynu u baahanayno inaan qorshe aynu wax ku akhrisano diyaarsano waa marka dugsiga dhexdiisa aynu wax ku akhrisanayno oo kali ah.
   T. Si waxbarashada loogu diyaar garoobo , waa todobaadyada ama mudada imtixaanada la marayo oo kali ah .
   J. Waa in uu noqdo mid aan adegsan karno in aynu waxbarashada ku jirno .
   X. Looma baahna in aynu yeelano dabeecad aan saaxiibadeen wax ula akhrisan karno.
3. Waxyaabaha soo socda waxaa ka mida ahee warar badan oo aynu akhrisan karno ama si ballaadhan u akhrisan karno waa kee?
   B. Tilifishinka
   T. Raadiyaha
   J. Labareeriga
   X. Wargaysyada ama wargayska .
4. Marka cashir la xafidayo, darsiyayo in waxyaabo xasuus ah la haysto ama la sammaysto waxtarka ay leedahay waa maxay?
   B. Sidi qodobada aynaan fahmin ama fahmi kari weyno aan ugala hadalnoamaxaajoono dad kale.
   T. Sidii aynu u miisaanoamaxaqiijino ama u hubino aqoonta ama cilmiga aan ka baranay cashirada inta uu le'egyahay .
   J. Jawaabta waa B iyo J.
5. Waxyaabaha soo socda ka dooro midka ama waxaa dhalin karaa ama keeni karaa fikradaha islaweynida ama is-xaqiraada .
   B. Waxbarashada gabdhuhu dad oo dhan ayey wax u taraysa.
   T. Gabadha oo wax la baro waxay ugu faa'iidaynaysa ninka ama reerka ay u dhaxdo. Sida darteed inta gabadh wax la barayo waxaa ka wanaagsan in geel laga qaato.
   J. Dhamaan.

IV. Su'aalaha soo socda jawaabo kooban ka bixi.

1. Faa'iidooyinka asaasiga ah ee ay leedahay aqoonta saynisku waa maxay?
2. Fikradaha dib u soconimadu siday u waxyeeleeyan dalka iyo nabadgalyada ?
3. Si loo tirtiro dib u socodnimada kaalinta dhalin yaradu waa maxay?